IFTIIN
XAGGA SARE
KA YIMID

IFTIIN XAGGA SARE KA YIMID

BANDHIGID LOO BOGAY, EE CAQIIDADA MASIIXIYADA

ALFRED W. KOEHLER

L. H. F.
Macomb, Michigan

"Light From Above" Somali translation.

Originally published in the U.S.A. under the title:
Light From Above
Copyright © 1960, 1988 Concordia Publishing House
3558 S. Jefferson St. Louis, Missouri 63118 – USA
www.cph.org

Iftiin Xagga Sare ka Yimid
Copyright © 2004, Lutheran Heritage Foundation

Faafinta 1aad ee af Soomaaliga 2005
First Somali edition May 2005, 1000 copies
Faafinta 2aad ee af Soomaaliga 2012
Second Somali edition May 2012 1000 copies
Lutheran Heritage Foundation

Aayadaha Kitaabka Qudduuska waxaa laga soo xigtay:
Kitaabka Qudduuska ah
Axdigii Hore
© SIM 1979

Axdiga Cusub
© United Bible Societies, 1976, 1979

Tarjumadda iyo daabacaadda kitaabkan waxaa iska leh, Lutheran Heritage Foundation. Xuquuqda kitaabkani dhammaanteed way dhawran tahay, loomana rogi karo waji kale sida: muuqaal sawiran; jilid; iwm. lamana daabici karo qayb ahaan ama gabi ahaanba iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga helin faafiyaha oo ah:

Lutheran Heritage Foundation
51474 Romeo Plank Road
Macomb, Michigan 48042 USA

www.LHFmissions.org

Kitaabkan waxaad ka heli kartaa shabakadaha kala ah:
www.somalimasiixi.org
www.somalimisson.org

TUSMADA KITAABKA

	Ararta Qoraha	7
1.	Ahaanshaha Qof Diimeed	9
2.	Kitaabka Qudduuska ah	15
3.	Rabbiga Eebbaheenna ah	23
4.	Waxaa Abuuray oo Nooleeya Eebbe	34
5.	Dembi, Xumeeyihii Weynaa	44
6.	Aqoonta Dembiga ee Xagga Sharciga	49
7.	Badbaado Waxay ka Timaaddaa Eebbe	80
8.	Sida aan ku Noqonno Masiixi	98
9.	Cafiska Dembiyada	105
10.	Tukashadu Waa Wadnaha Iimaanka	110
11.	Muusigga Nolosha	119
12.	Sharcigu Waa Hagaha Tasrifka Masiixiga	125
13.	Dhibaatada iyo Saliibka Masiixiga	132
14.	Kaniisadda Masiixiga	138
15.	Karaamooyinka	144
16.	Dhimashada iyo Nolosha Aakhiro	149
17.	Waxaan Goostay	162

ARARTA QORAHA

Qoritaanka kitaabkan, qoraagu wuxuu raadiyey inuu ku soo bandhigo wax ku saabsan fikirka nolosha iyo baahida qalbiyada ee dadka oo dhan.

Mahad Eebbaa lehe, waxa jira xaqiiqooyin la socda waqtiga casriga ah ee fac kasta. Xaaladaha ka dibadda ah ama isbeddellada jawi iyo fekerada damaaciga aadanuhu kuma aysan yeelan wax saamayn ah xaqiiqada asalka u ah daa'imnimada Ereyga Eebbe. Ereyga Eebbe wuxuu u taagan yahay oo mar kasta loo adeegsan karaa dhibaatooyinka nolosha iyo xal u heliddooda.

Kitaabkan Erayga Eebbe ayaa lagu sharxayaa; oo waxaa loo adeegsanayaa nolol maalmeedka. Idanka Ilaahay ha noqdo mid ay ku barakoobaan kuwo badan oo raadinaya inay ogaadaan dantii uu Eebbe ka lahaa nolosha!

ALFRED W. KOEHLER
Oakland, California, Juun 15, 1959

CUTUBKA 1
AHAANSHAHA QOF DIIMEED

Dhammaan aadanuhu si dabiici ah ayey u yihiin dad diimeed. Daraasad lagu sameeyey dabeecadda dadka ayaana taasi muujisay. Waxaa suurtowda inaysan lug ku lahayn urur diimeed ama diintooda aysan ku qaabayn hab caqiidooyin ama xeer akhlaaqeed, laakiinse si kastaba ha ahaadeene dadka oo idil waa reero diimeed. Diinta lama qaato; waa wax inagu dhex dhasha. Waa wax u dabiici ah sida noloshuba ay u tahay.

Diinta dabiiciga ah ee ay dadku haystaan waa mid ku salaysan aqoonta dabiiciga ah ee qofka ee Eebbe iyo sharciga Eebbe. Shuqullada samaawiga ah ee abuurista, wuxuu qofku si dabiici ah uga gartay in uu jiro axad waligii jira oo ah Eebbe awood badan, kan wax abuuray, kan wax nooleeya, oo ah taliyaha caalamka. Garashadaas waxaa sidoo kale laga soo dhiraandhiriyaa hawlgalka joogtada ah ee Eebbe ee dhinacyada dabeecadda iyo aadanaha labadaba. Bal is barbardhig, Rooma 1:20; Falimaha Rasuullada 14:15-17; Falimaha Rasuullada 17:26-28. Taas waxaa dheer, sharciga samaawiga ah ee Eebbe waxaa lagu qoray dhammaan qalbiyada dadka. Sidaa daraadeed, Eebbe wuxuu qofka ka haleelaa gudaha qofka laf ahaantiisa, isagoo isugu muujinaya isagu inuu yahay Eebbaha qudduuska ah oo xaqa ah, kaasoo doona oo u abaalguda wanaagga, oo xukuma ciqaabana sharka. Bal isbarbardhig Rooma 1:32; Rooma 2:14,15.

Aqoonta dabiiciga ah ee Eebbe waa mid aan ku dhalano, sidoo kale waxaan aqoontaan si wayn u sii helnaa marka aynu eegno xaaladda dabeecadda oo aynu ka gungaadhno waxyaalaha aan aragno. Xaqiiqadaas aawadeedna dadka oo dhamu si dabiici ah ayay u yihiin kuwo diimeed.

GUUD AHAAN DIINTA

Diintu ma ahan wax si dhib yar loo qeexi karo, balse meelaha ay ka hawlgashaa waa kuwo si fiican u muuqda. Diintu waxay danaysaa xidhiidhka ka dhexeeya qofka iyo Eebbihii iyo xidhiidhka ka dhexeeya qofka iyo dadka kale. Kuwa cawaanka ah iyo Masiixiguba way adeegsadaan ereyga “Diin”. Maadaama cawaanku ay ereygaasi waafajiyaan aragtidooda cawaanka ah, oo Masiixiguna ay waafajiyaan aragtidooda Masiixinimada ah, way adag tahay in la helo qaab loo qeexo diinta, oo si buuxa uga wada dhaxaysiin kara

dhammaan noocyada diimeed iyagoo laga dhigayo hal heer oo ah mid uu ka raali noqdo Eebbe.

Hase yeeshee, si guud ahaan diin waa loo qeexi karaa. Si guud diin waxaan ku qeexi karnaa in ay tahay wax la rumaysan yahay, fikrad ama rayi asaasi ah oo dad noloshooda ay ku nool yihiin. Guud ahaan taas waxaa ka mid ah ogaansho ama aaminid ay dadku aaminsan yhiin, in ay jirto awood sare, taas oo qofka ku xanbaarta inuu raaco nooc asluub ah oo loo qeexay si waafaqsan rayigaasi aasaasiga u ah.

Nasiib daro dad badan waxay u qaataan diin kasta oo ku haboon qaabka qeexitaankaasi in ay tahay mid uu ka raali noqon Eebbe. Go'aan qaadashada noocaas ahina ma aha, haba yaraatee mid qiil yeelan karta, sababtoo ah diin uu Eebbe ka raali noqdo qeexideedu waa ay ka wayn tahay intaas. Si kastaba ha ahaatee, qeexidaas way jirtaa marka aan diin si guud u tixgalino.

SIDA UU KU YIMID KU DHAQANKA DIINTA EE QOFKA DABIICIGA AH

Marka aynu darisno habdhaqanka aadanaha ee dunida oo idil, waxaan arkaynaa in diinta qofka dabiiciga ahu, iyadoo aanay saamayn ku yeelan Masiixa iyo Injiiku, ay u kortay qaabab kala duwan, munaasabado, hab-dhaqanno iyo rumaysiyo. Waxaa suurtoowda in arimaha qaarkood ay isaga ekaadaan, laakiin dhinacyo kale ayay aad uga kala duwanaan karaan. Taasi waxay si wayn ugu xidhan tahay koboca garaadka, mala'awaalka dadka, halka ay ka soo jeeddo, taariikhda iyo deegaanka qofka. Arimahaas ayaana xukuma qaabka daacadnimada diineed, xurmaynteeda iyo caabudaada. Diimaha qaarkood waxaa mudnaan la siiyaa isxaqirida iyo naf huridda, qaar kalena dhawrsanaanta, asluub u dhaqanka, naftoo dhibka loo carbiyo ayaa ku wayn. Diimaha qaarkood noocyo ka mid ah cuntada ayaa ka xaaraan ah, kuwo kalena waxaa muhiim u ah in xilli cayiman xaj ahaan loo tago meelo ay ku sheegaan in ay karaamaysan yihiin. Waxaa suurtoowda in arimahaas qaarkood ay ka mid yihiin diinta uu qof ku dhaqmo, laakiin aysan ka mid ahayn qof kale tiisa. Tusaale ahaan: Mayti caabudku waa qayb wayn oo ka mid ah diinta Shiinaha. Hindiya dadka ku nool ee haysta diinta Hinduugu waxay aaminsan yihiin xoolaha qaarkood inay yihiin kuwo karaamaysan. Muslimiinta waxaa ka xaaraan ah isticmaalka khamriga. Dadka wax daaweeyaa waa qayb ka mid ah diimaha Afrika qaarkood.

FIKIRKA QOFKA DABIICIGA AH EE EEBBE

Waxaa suurtoowda diinta qofka dabiiciga ahu in ay qofka u horseeddo inuu ka fikiro jiritaanka Awood Saraysa isagoo dhawr siyaabood midkood u

malaynaya. Dadka qaar waxay rumaysan yihiin hal Ilaah oo kaliya (monotheism), kuwana Ilaahyo badan (polytheism) oo waliba kuwo kalena waxay yidhaahdaan wax kasta waa ilaah (pantheism). Qaar waxay ku adkaystaan in fikradaha kala duwan ee Eebbe laga haystaa aysan macno lahayn, maadaama ay iyagu aaminsan yihiin in dadka kala duwanu ay isku ilaah uun siyaabo kala duwan u sawirtaan, oo xaaladdo kala duwan u sameeyaan, sidii iyadoo ay tahay arin aragti kala duwanaasho. Waxaa jira kuwo kaleeto oo aaminsan ilaah shakhsiyeed, kaas oo ay u haystaan inuusan wax saamayn ah ku lahayn dadka ama dunida uu isagu abuuray (deism).

KAAFIRIINTA IYO MUNAAFIQIINTU DIIN MIYAY HAYSTAAN

Kaafir waa qof dafirsan jiritaanka Eebbe. Munaafaq wuxuu ku adkaystaa in aysan suurto gal ahayn in la ogaado jiritaanka Eebbe, oo wuu laba wajiileeyaa, markaan kor ka aragno waxaa la moodaa kaafiriinta iyo munaafiqiintu inaysan diin haysan, maadaama aysan wax diin ah qiran ama aysan ka tirsanayn diin la yaqaano. Hasa yeeshee, iyaga qudhoodu way leeyihiin diin, noloshooda waxaa haga xeerar, jacayllo, iyo tarbiyad ay aaminsan yihiin, oo waa taas diintooduna. Ma jiro qof dunida ku nool oo aan wax caabudin. Haddii uusan caabudin Eebbaha runta ah, wuxuu caabudi wax kale, xataa ha noqoto naftiisa uu isla wayn yahaye.

QOFKA AQOONTIISA DABIICIGA AH EE EEBBE MA HABBOONA

Diinta qofka dabiiciga ahu waxay ku salaysan tahay qofka aqoontiisa dabiiciga ah ee Eebbe. Sida uu qoraalku ina barayo, aqoonta dabiiciga ah ee aynu naqaano Eebbe ma aha mid inagu filan si aan u hello diinta saxda ah. Iyadoo qofka dabiiciga ah uu yaqaano wax ku saabsan Eebbe (Rooma 1:19-20) haddana, isagu waa mid si dabiici ah u mootan ruux ahaan (1 Korintos 2:14), sidaa daraadeed ma awoodo in caqligiisa ama awoodiisa uu ku caabudo Eebbaha runta ah. Qofka dabiiciga ahu wuxuu istusaa fikirkiisa ku salaysan aqoontiisa kooban ee uu u leeyahay Eebbe, oo fikirkiisaasi wuxuu ku xanbaaray isaga in uu u cibaadaysto sida uu yeelo. Sida uu qofka dabiiciga ahu diintiisa ugu dhaqmo wax badan oo xagga runta ah ayaa ka khaldan; run kasta oo qofka dabiiciga ahu uu haysto waa mid uu si khalad ah u macnaystay oo u adeegsaday. Tusaale ahaan: muuqaalka Eebbe waa uu ka wayn yahay inta aqoonta dabiiciga ah ee qofku ay ku waddo Eebbe. Tusaale ahaan: qofka waxaa loo nisbeeyaa wanaag iyo asluub mug wayn oo khilaafsan xaqiiqda jirta.

Tan kale, naf-jeclaysigu waa danta qofka dabiiciga ah marka uu ku dhaqmayo diintiisa. Arintaas diimaha oo dhamu, marka laga reebo Masiixiga, way ka siman yihiin. Iyadoo qaababka iyo adeegsiga diimaha qofka dabiiciga ahu ay ku kala duwan yihiin dadka dhexdooda iyo waddamada kala duwan, haddana dantoodu waa isku mid dhamaantood. Dantoodu waa naf-jeclaysi iyo qab, ay weheliyaan sugnaansho darri, shaki, khuraafaad, isxaqsiin, iyo cabsi. Markasta qofka dabiiciga ahu wuxuu raadiyaa inuu helo xidhiidh toosan oo uu la yeesho wuxuu u haysto wanaaggiisa ugu sareeya, ama ilaahiisa, isagoo adeegsanaya dadaal xaq iska dhigid ah.

Qof kasta oo aaminsan inuu qof ahaantiisa Eebbe kula heshiin karo, gabi ahaanba ama qayb ahaan, dadaal uu isagu sameeyo, kaasu waa mid raacsan fikirka diimeed ee cawaanka ah, isaguna waa cawaan, hadduu yahay mid dad isaga oo kale ah la nool ama uu yahay mid ku nool waddan lagu magacaabo waddan Masiixi ah.

Sidaas oo ay tahay waa arin si caam ah loo aaminsan yahay, in dhammaan adeegsiga diintu ay si uun u tahay waji ka mid ah diinta runta ah ee xaqa ah. Kaasi waa fikir khalad ah. Ma jiro qaab ka mid ah diinta qofka dabiiciga ah oo marnaba noqon kara diinta saxda ah, sababtoo ah wixii saxda ahaa ee ku jiray qofka aqoontiisa dabiiciga ah ee Eebbe waxaa dhalan rogay aragtida ka timid fikirka qofka.

DAACADNIMO KUMA FILLA

Waxaan maqallaa dadka oo leh qof hadii u daacad yahay waa la badbaadin. Oo sidaasaa waxaa la aaminsan yahay in diin ay wanaagsan tahay haddii kuwa raacsan ay daacad yihiin. Taasi waa khalad ku badan dadka dhexdiisa. Daacadnimada iimaanku ma xaqiijiso in dadka diintoodu ay run tahay. Dadku iyagoo daacad ah ayay khaldanaan karaan. “Waxaa jira waddo dadka la hagaagsan, laakiinse dhammaadkeedu waa waddooyinka dhimashada” (Maahmaahyadii 14:12). Daacadnimadu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah haysashada diinta saxda ah, laakiin iyadu marnaba ma noqon karto wax lagu qiimeeyo saxnimada diin. Waa sidaas, waayo daacadnimadu ma ahan qayb ka mid ah diinta lafteeda, laakiin waa sifo uu qofku leeyahay.

Aragti kale oo been ah oo iyana fidday ayaa waxay tahay fikirka ah in wax farqi ah aysan samaynayn waxa uu qofku aaminsan yahay, marba haddii uu aaminsan yahay wax ku saabsan Eebbe, iyo wanaagsanaanta asluubta dadka. Haddii waxa uu qofku aaminsan yahay aanay wax farqi ah samaynayn, marka wax kasta oo la rumaysto ama nooc kasta oo nolol ah waa la aqbali karaa iyadoo sabab looga dhigayo diin. In la qaato in nooc kasta oo iimaan ahu uu na caawinayo oo na badbaadinayo waa doqonnimo la mid ah in la yidhaahdo wax kasta oo uu qofku cuno way nafaqaynayaan.

Waxaa kaloo khalad ah fikirka odhanaya macno malaha waxa uu qofku rumaysan yahay mar hadday qofka noloshiisu sax tahay. Taas waxaan ka leenahay: Habka loo nool yahay waa mid ka yimaadda waxa la aaminsan yahay. Ciise ayaa yidhi: "Si aan micno lahayn ayay ii caabudaan, iyagoo dadka wax ku baraya amarada dadka." (Matayos 15:9).

DIIN AHAAN, QOFKA DABIICIGA AHU WAA GARGAAR LAAWE

Waa xaqiiqo murugo leh, balse waa run in qofka dabiiciga ahu uusan isaga lafahaantiisu garan karin diinta saxda ah. Isagu dadaal kiis ah kuma garan karo Eebbaha runta ah iyo wuxuu u muujiyay dadka. Oo dadaal kiis ah kuma uu soo kordhin karo aqoontaas oo kale sida uusan wax ugu kordhin isagu marka uu jir ahaan dhalanayay. "Ninka nafta raacaa ma aqbalo waxyaalaha ruuxa Ilaah." (1 Korintos 2:14). Asal ahaan diimaha dadka dabeecaddu waxay dhammaantood ku wareegaystaan shuqullada dadku qabtaan, nafhurida ay dadku sameeyaan, xaqnimada ay dadku isku dayaan in ay gaadhaan iyagoo raacaya darajooyinka ay iyagu samaysteen, isxaqiridda ay dadku ku kacaan. Waxyaalahaas aasaasiga ahi ma aha kuwa gundhigga u ah diinta Masiixiga. Sidaas darteed, qofna isaga laf ahaantiisu ma heli karo diinta saxda ah.

WAA MUHIIM AASAASKA SAXDA AH EE IIMAANKU

Diinta runta ah ee toosanu waxay ku xidhan tahay saxnimad iyo runnimada waxa aan aaminsannahay iyo waxa aan iimaankeenna iyo kalsoonideenna siino. Haddii aan rumaysanno wax khaldan, waxaa hubaal ah in diinteenu ay noqon mid been ah, wax macno ahna ma samaynayso si kasta oo aan daacad u nahay. Haddii aan rumaysano wax sax ah, diinteenu waxay noqon mid sax ah. Ciise ayaana taasi si wanaagsan ugu sheegay Wacdigiisii Buurta, markuu ka hadlayay doqonnimada iyo khasaaraha ka imaan marka guri laga dhisto meel bacaad ah, iyo xigmadda iyo ammaanka ku jira in guri laga dhisto jamalka dushiisa. Bal eeg Matayos 7:24-27).

Si uu Masiixi u ahaado, waa in qofku uu ku dhisnaado ereyada Masiixa. Ciise ayaa yidhi: "Haddii nin i jecel yahay, hadalkayguu xajin doona." (Yooxanaa 14:23).

MASIIXIYADU WAA DIINTA KALIYA EE RUNTA AH

Masiixiyadu waa diinta runta ah, sababta oo ah waa diinta kaliya ee dadka uga timid xage Eebbe, oo aasaasaheeda iyo asalkeedaba uu isagu yahay.

Waana diinta kaliya ee Eebbe uu u muujiyey dadka, isaga oo ugu muujiyey eraygiisa oo hibo ahaanna uu siiyey. Masiixiyadu waa iftiin xagga sare ka yimid. Waxaa la inoogu sheegay Kitaabka Qudduuska, oo waxay dadka tusaysaa in uu Eebbe kula heshiiyey dunidii danbiga lahayd xagga Ciise Masiix, oo ah kan danbiga ka badbaadiya dadka oo idil, "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa kaliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolasha waligeed ah .(Yooxanaa 3:16) "Diinta Masiixigu waa iimaanka Injiilka, taas oo ah in aan aamino fariinta Eebbe in ku raali ahaanshaha xagga wakiilnimada Masiixa ay dadka oo dhamu kula heshiiyeen Eebbahooda". (Aabe Pieper). Bal eeg Galatiya 2:16. Diinta Masiixiyada oo kaliya ayaa muujinaysa inuu Eebbe jecel yahay dadka. Waxay ina tusaysaa arinta salka u ah jacaylkaas iyo waliba sida jacaylkaas loo soo bandhigay. Sida ay qabto diinta Masiixigu, Eebbe ayaa sameeyey wax kasta oo uu ku badbaadinayo dadka , dadkuse waxba ma aysan samayn. Ciise Masiix, Wiilka daa'imka ah ee Eebbe, oo ah Ilaah run ah oo ka yimid Ilaah run ah, ayaa ku qaatay dabeecad bini aadam ahaanshihiisii Ilaahnimo, oo dadka aawadood dunidan ugu noolaaday, oo dadka u buuxiyey shuruudihii dadka Eebbe, oo guday danbigii ay dadku galeen. Diinta Masiixiga Eebbe wuxuu ugu xaqiijiyey dadka in uu xaqnimadii Masiixa u tixgelin doono dadka. Taasi waa wax yaab leh oo aad u xiise badan, oo ka duwan fikirka qofka dabiiciga ah ee ah in uu isagu la heshiiyo oo raali galiyo Eebbe. Waxaana taasi la yiraahdaa "Injiilka," oo macnihiisu yahay "warsan." Haddii aynu jeclaanno diinta Masiixiyada, waxaynu nahay dad diimeed run ah, oo sax ah, waayo waxaan waafaqnay Eebbe sida uu isagu rabo.

CUTUBKA 2
KITAABKA QUDDUUSKA

Kitaabka Qudduusku waa qoraalka ilaha u ah Masiixiyada. Oo isaga ayuu Eebbe inoogu muujiyey diinta saxda ah. Oo maragfurka Kitaabka Qudduuska qudhiisa ayaa runtaasi markhaati u ah. "Wax- yaalahan waxaa loo qoray in aad rumaysataan inuu Ciise yahay Masiixa Wiilka Ilaah iyo in aad nolosha ku lahaataan magaciisa idinkoo rumaysanaya (Yooxanaa 20:31). Qorniinka Qudduuska ah oo badbaadada kugu garansiin kara rumaysadka Ciise Masiix lagu rumaysto. Qorniin kasta wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda, iyo canaanashada, iyo hagaajinta iyo edbinta xagga xaqnimada, in ninka Ilaah uu ahaado mid dhan oo aad loogu diyaariyey shuqul kasta oo wanaagsan." (2 Timoteyos 3:15-17).

Kitaabka Qudduusku isaga ayaa sida ugu wanaagsan isugu doodaya. Isaga ayaa runnimadiisa muujinaya, isaga ayaana isu markhaati furaya. Kitaabka Qudduusku inooma uu sheegayo oo kaliya inuu yahay Erayga Eebbe, laakiin waxaa kale oo uu si wanaagsan inoo barayaa sida uu ku noqday Erayga Eebbe, taas oo ah inuu yahay waxyi ka yimid Eebbe. Bal eeg 2 Timoteyos 3:16; 2 Butros 1:20,21. Maragfurkaas Kitaabka Qudduusan ee ku saabsan isaga qudhiisu wuxuu wataa qancin rabbaani ah. Ma jirto xaqiijin kale oo dibadda ka ah oo la barbardhigi karo caddaynta ku jirta Kitaabka Qudduuska gudihiisa ee isaga u markhaati furaysa. Kitaabka Qudduuska caqiidadiisa isku kalsoon iyo xeerarkiisa asluubtu waxay markhaati ka yihiin runnimada diinta ay sheegayaan. Kitaabka Qudduusku wuxuu qofka u qeexayaa iftiinka runta ah, oo wuxuu barayaa in badbaadada qofku ay ka timaaddo Eebbe qudhiisa.

SIDEEN U TIXGELINAA KUTUBTA KALE EE LAGU TILMAAMO IN AY KARAAMAYSAN YIHIIN?

Kutubta kale ee lagu sheego in ay karaamaysan yihiin ee diimaha adduunku ma ahan waxyi ka yimid Eebbe, taasna waxaa muujinaya waxbaridda kutubtaasi ku jirta. Kutubtaasi waa wax ka dhashay uun male awaalka dad, waxayna soo bandhigayaan gabagabo aan sabab iyo qiil toona lahayn, taas oo ay keentay aqoonta dabiiciga ah ee qofka oo xadidan isla markaana ah mid aan habboonayn. Waxaa hore loo yidhi: "Haddii ay waafaqaan sida uu Kitaabka Qudduusku dhigayo, muhiim ma ahan iyagu;

haddii aysan waafaqin sida uu Kitaabka Qudduusku dhigayo waa in iyaga la diido." Taasina waxay khusaysaa Qur'aanka Muslimka, Kitaabka Mormon ee Awliyada Maalmahan Dambe, Sayniska iyo Caafimaadka wata Furaha Qorniinka ee Saynisyahannada Masiixiyada, iyo dhammaan kutubta kale ee la yidhi way karaamaysan yihiin ee ay dadku samaysteen. Dhammaan kutubtaasi waxay barayaan in qofku uu isagu sameeyo xidhiidh toosan oo uu la yeesho xoogga noocuu doono ha ahaadee uu u yaqaan inuu yahay ilaah. Waxa la iska rabo ee aasaaska u ah dhammaantoodna waxaa weeye badbaado uu qofku ku helo dadaal kiis ah, ama in ficilladiisa uu qofku kula heshiiyo Eebbe. Kutubtaasi waa kuwo si buuxa uga soo jeeda dad oo ma ahan kuwo la aamini karo xagga iimaanka iyo noloshaba. Kitaabka Qudduusanu ma sheegin kitaab kale oo ah waxyi ka yimid Eebbe.

XAQIIQOOYIN KU SAABSAN KITAABKA QUDDUUSKA AH

1. Dulucda kaliya ee Kitaabka Qudduusku waa badbaadada qofka dambiilaha ahu uu ku helayo Ciise Masiix. Dulucda Axdigii Hore, oo ka kooban soddon iyo sagaal kitaab, laguna qoray markiisii hore afka Cibraanigu, waa: Badbaado lagu ballanqaaday in lagu heli Masiixa. Dulucda Axdiga Cusub, oo ka kooban labaatan iyo toddoba kitaab, markiisii horena lagu qoray afka Giriiggu, waa: Badbaado uu sameeyay Masiixu.

2. Eebbe ayaa ah qoraha dhabta ah ee Kitaabka Qudduuska oo dhan. Kitaabka Qudduuska macnaheedu waa "qoraal." Waana ururin lixdan iyo lix kitaab, oo la qoray wakhtiyo kala duwan intii u dhaxaysay sannadadii 1500 C.H. iyo 100 S.M. Qoritaankiisana waxaa qayb ka qaatay qiyaastii afartan qoraa. Hase yeeshee, Eebbe ayaa ah qoraagiisa dhabta ah, sababtoo ah dad ayuu waxyigiisa ku soo dajiyay si ay u qoraan Kitaabka Qudduuska. "Dad Ruuxa Qudduuska ahu waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay." (2 Butros 1:21). "Waxyaalahaas ayaannu ku hadalnaa, kumase hadalno hadallo la baro ee ah xigmadda dadka, laakiin waxa Ruuxu baro, annaga oo waxyaalaha ruuxa ah ku simayna waxyaalaha ruuxa ah." (1 Korintos 2:13)

3. Labada caqiido ee aasaasiga ah, ee sida dhabta ah ay uga siman yihiin kutubta Kitaabka Qudduusku, waa sharciga iyo Injiilka. Labadubana waa Eraygii Eebbe. Oo labadooda asalahaanba midba kan kale wuu ka duwan yahay marka la eego waxa uu ka kooban yahay, ujeedadiisa iyo saamayntiisuba, waana in si taxadar leh loo kala sooco labada. Sharcigu waa caqiidada Kitaabka Qudduusan ee Eebbe uu inoogu sheegay sida uu inaga rabo inaan noqonno iyo waxa la rabo in aan samayno iyo waxa aysan ahayn in aan samayno. Injiilku waa caqiidada Kitaabka Qudduusan ee Eebbe uu inoogu sheegay warka san ee badbaadadeenna aan ku hellay Ciise Masiix.

KITAABKA QUDDUUSKU WAA KITAABKA EEBBE

Kitaabka Qudduuska qudhiisu wuxuu isku sheegayaa inuu yahay Erayga Eebbe. Wax ku saabsan qoraalka Axdigii Hore waxaan ka akhriyaynaa 2 Timotiyos 3:16 oo leh, "Qorniin kastaa wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah." Qorayaashii Axdiga Cusubna Rasuul Bawlos ayaa leh: "Markii aad naga hesheen hadalkii Ilaah oo aad naga maqasheen, in aydnaan u aqbalin sidii dad hadalkiis, laakiinse siduu run u yahay hadalkii Ilaah." 1 Tesaloniika 2:13. Sida badan wuxuu Ciise dhagaystayaashiisa ugu soo halqabsan jiray Axdigii Hore isagoo halqabsigiisa ku billaabi jiray erayada ah: "Miyaydaan akhriyin idinku?"

Xaqiijinta ugu weyn ee in Kitaabka Qudduusku yahay waxyi ka yimid Eebbe waxay ku jirtaa isaga qudhiisa. Marka ugu horaysa Qorniinku wuxuu inoo sheegayaa inuu yahay waxyi ka yimid Eebbe. Tan kale, maragfurka xagga gudaheenna ee Ruuxa Qudduuska ayaa inoo xaqiijiya in Kitaabka Qudduusku uu yahay Eray ka yimid Eebbe. Xaqiijintaas waxay gabi ahaanba ka timaaddaa Eebbe. Haddaba kan rumaysta Eebbaha runta ah oo kaliya ayaa ogaada in Kitaabka Qudduusku uu yahay Erayga Eebbe, oo qofkuna inuu aqbalo runtaas oo kaliya ayuu ku xaqiijin karaa in Kitaabka Qudduusku uu yahay Erayga Eebbe.

Hase yeeshee, waxaa jira oo kale, caddaymo adag oo ka baxsan Kitaabka Qudduuska, oo u qalma in aan tixgelin siinno marka aan ka hadlayno Kitaabka Qudduusku inuu yahay waxyi Eebbe u muujiyay dadka. Waxyaabahaas markhaatiga ah waxaa ka mid ah awoodda uu Kitaabka Qudduusku u yeeshay inuu nabadgalo oo waaro iyadoo uu jiro dadaal badan oo loo galay sidii loo burburin lahaa oo loo waayi lahaa. Waxaa iyana caddayn kale ah awoodda uu Kitaabka Qudduusku u leeyahay inuu baddalo nolosha dadka. Saamaynta barakaysan ee Kitaabka Qudduusku uu ku yeesho dadka iyana waa markhaati awood badan; kitaab haysta awoodda Eebbe dhab ahaantii waa inuu yahay kitaabka Eebbe. Dhamaystiridda risaaladii uu Kitaabka Qudduusku sii sheegay, gaar ahaan tii khusaysay Ciise Masiix, iyana waxay markhaati wayn u tahay in Kitaabka Qudduusku uu yahay waxyi uu Eebbe inoo muujiyay.

MACNAHA WAXYI

Erayga "waxyi" macnahiisu wa "ku neefsi". "Waxyi Rabbaani ah" macnaheeduna waa "Eebbaa ku neefsaday." Marka aan ka hadlayno Kitaabka Qudduusku in uu yahay waxyi ka yimid Eebbe, waxaan ula jeednaa in qorayaasha uu Eebbe siiyay kartida, ama quwadda ay ku shaqeeyeen, si ay wax u qoraan; oo waxay u qoreen siduu Eebbe rabay inay u qoraan; oo waxay

adeegsadeen qaabka erayadii uu Eebbe rabay in uu ku muujiyo fekerkiisa rabbaniga ah. Taas waxaa la yidhaahda "Waxyi odhaaheed." Eebbe ayaa qorayaasha ku dhaqaajiyay markii ay wax qori lahaayeen,, wixii ay qori lahaayeen, iyo sidii ay u qori lahaayeenba. Sida uu Eebbe u siiyay qorayaashaas waxyiga, taas la inooma sheegin. Isagoo raacaya tilmaanta Ruuxa, haddana qoraa kasta wuxuu ahaa gaarkiisa isagoo adeegsaday hibadiisa shakhsi ahaaneed, qeexitaan, aqoon guud, iyo hab, kaasoo u gaar ahaa isaga.

SIDA LOO AQOONSADAY KUTUBTA WAXYIGA

Soddon iyo sagaalka kitaab ee Axdigii Hore uu ka kooban yahay waxa wakhtiga Masiixa la odhan jiray "Qorniinka;" waxayna dadkii Cibraaniyaddu u tixgelin jireen in ay yihiin kutub ka yimid xagga Eebbe. Waxayna ku magacaabeen iyaga "Erayga Eebbe." Ciise lafahaantiisu sidaas ayuu u aqoonsanaa iyaga. Wuxuu yidhi: "Qorniinka ayaad baadhaan waayo, waxaad u malaynaysaan inaad nolosha waligeed ah ka helaysaan, waana iyaga kuwa ii maragfurayaa." (Yooxanaa 5: 39).

Haddii Cibraaniyiintu ay ku khaldameen kutubtooda sharciga ee qiimaha weyn u leh (kutub la isu ururiyay oo loo haysto inay kuwo dhab ah yihiin oo ah Qorniin Qudduusan oo waxyi Eebbe ah), ama haddii ay been abuur ku sameeyeen, Masiixu ma uusan dadka ugu tilmaameen si shuruud la'aan ah oo aan xad lahayn Qorniinkaasi ku jiray gacanta Cibraaniyiinta oo uma xaqiijiyeen inaan iyaga la jabin oo lagu xadgudbin. Bal eeg Luukos 16:29; Luukos 24: 44. Cibraaniyiintu waxay caado ahaan yidhaahdaan Cesraa ayaa dhammaystiray ururinta. Waxaa hubaal ah laga soo billaabo wakhtigii la dhibaateeyay Makaabiyiintii (165 C. H.) in uu Axdiga Hore u muuqday mid dhammaystiran.

Markii qoraallada rasuulladii iyo Injiilleyaashii ay ku soo baxeen Axdiga cusub, waxaa iyana si tartiib ah loogu daray Qoriinkii Axidgii Hore oo iyana sidaas oo kale waxaa loo citiqaadiyay inay yihiin kuwo karaamaysan. Waxaana loo qaatay inay yihiin aasaaska iimaanka. Efesos 2: 20 wuxuu Bawlos ku yidhi: "Oo waxaa laydinka dul dhisay aasaaskii rasuullada iyo nebiyada." Masiixa tukashadiisii (Yooxanaa 17: 20) wadaadnimada sare ahayd waxay Erayga nebiyadii aasaaska iimaanka uga dhigtay dhammaan wakhitga Axdiga cusub. Rasuullada lafahaantoodu waxay inoo tilmaameen Qorniinkooda. Eeg 1 Yooxanaa 1: 3, 4; 2 Tesaloniika 2: 15 – Ansixintii rasmiga ahayd ee labaatan iyo toddobada kitaab ee Axdiga cusub, sida ay maanta yihiin, waxaa lagu sameeyay shirkii Karteej (Carthage), ee dhacay sannadkii 397 CD; taasi waxay uun sii xaqiijisay wixii ay kaniisaddu hore ugu qaadatay inuu noqdo xukun aan marna la baddali doonin.

AMRANIDA KITAABKA QUDDUUSKA

Amranida Kitaabka Qudduusku waxay ku jirtaa Eebbaha sareeya, oo ka dambeeya odhaah kasta, caqiido kasta, ballanqaad kasta, iyo amar kasta oo ku jiŕa Kitaabka Qudduuska. “Ilaah wuxuu… kula hadlay nebiyadii.” (Cibraaniyada 1:1). “Waxyaalahaan idiin soo qoray inay yihiin qaynuunka Rabbiga.”

Amranidan ma jiraan wax kale oo ka sarayn karaa. “Haddii nin wax ku daro iyaga, Ilaah wuxuu isaga ku dari doonaa belaayooyinka kitaabkan ku qoran; oo haddu nin wax ka qaado erayadii kitaabka wax-sii-sheegiddan, isna Ilaah baa qaybtiisa ka qaadi doona geedka nolosha iyo magaalada qudduuska ah iyo waxyaalaha kitaabkan ku qoran.” (Muujintii 22:18, 19). Qofna Kitaabka Qudduuska wax kuma dari karo, waxna kama qaadi karo. Innagu kuma dhacno inaan khaladno Erayga Eebbe inagoo qoraalka u macnaynayna sida aan doonno, oo iskuma dayi karno inaan dhahno Eebbaa yidhi wax aynu innagu nidhi. Qof kasta oo dafira, tixgelin waaya, diida, tirtira, ama canbaareeya Qorniinka Qudduusan, wuxuu ceebeeyay Boqorka Eebbe, maadaama uu Eebbe amarkiisa ka hor yimid. Taasna Masiixu wuu ka digay; “Ku i diida oo aan erayadayda aqbalin, wuxuu haystaa mid xukuma. Hadalkaan ku hadlay baa xukumi doona isaga maalinta u dambaysa."”(Yooxanaa 12: 48).

Kitaabka Qudduusku wax kasta run buu ku yahay. Maadaama uu Eebbe u waxyooday, in Kitaabka Qudduuska la qoro, khalad kasta oo suurtogal noqon lahaa, ha noqoto xagga soo bandhigidda caqiidada aasaasiga ah, amaseba xagga tilmaamaha la xidhiidha dabeecadda iyo taariikhda, waa laga ilaaliyay markii ugu horaysay ee la dejinayayba. “Hadalkaagu waa run.” (Yooxanaa 17:17)

MIYAAN RAJAYNAYNAA MUUJIN CUSUB OO DHEERI AH?

Baahi looma qabo muujin cusub ama dheeraad ah oo aan ka hello Eebbe. Taladii Eebbe oo dhan waxay ku jirtaa Kitaabka Qudduuska. Waana ay ku filan tahay in ay ina siiso caqli aan ku gaadhno badbaadada iyo in ay ina barto oo inoo carbiso xaqnimada xagga nolosha. Ma jiro ballanqaad ku saabsan muujin dheeraad ah. Taasi in aanay jirinna, Eebbe wuxuu dhammaan Masiixiyiinta ku hagay oo ku xidhay illaa maalinta qiyaamaha Eraygii rasuullada iyo nabiyada. Eraygan ayaana lagu soo gabagabeeyay wakhtgii muujinta Eebbe. Dhammaan Masiixiyiintu illaa inta uu wakhitu ka dhammaado waxay ku helayaan iimaan Erayga rasuulladii (Yooxanaa 17: 20). Kaniisadda waxaa lagu dhisay oo aasaas u ah rasuuladii iyo nabiyadii (Efesos

2: 20). Ma jiraan wax ka maqan Kitaabka Qudduuska oo looga baahan yahay muujinno cusub ama caqiidooyin cusub oo la abuuro.

WAA MAXAY MACNAHA IN LA FASIRO QORNIINKU?

In la fasiro Qorniinka macnaheedu waa in aan innagu erayo kuween ah kaga bixino sharaxaad iyo faalayn xoojin ah waxa uu qoraalka Kitaabka Qudduusku dhaba ahaan sheegayo ama ina barayo. Qorniinku wuxuu leeyahay oo loola jeeday hal u jeeddo iyo macno oo kaliya. Waxaa ku xusan Luukos 24: 27, fasiraad uu Kitaabka Qudduuska ka bixiyay Ciise mar uu Qorniinka Axdigii Hore u sharxayay labadii xerow ee reer Emma'uus.

Masiixiyiintu waxay xaq u leeyihiin oo ku waajib ah inay dadka tusaan waxa uu Kitaabka Qudduusku barayo iyo sida uu Kitaabka Qudduusku isu fasirayo isagu. Hase yeeshee, waa in la diido in dadku ay awoodaan inay noocay rabaan iyo qaabkay rabaan ugu tagri falaan Erayga.

Waxaa kaloo loo baahan yahay inaan maskaxda ku hayno in aanay Kitaabka Qudduuska ku qornayn wax kasta oo uu sameeyay ama uu Eebbe yidhi tan iyo waligeed. Sidoo kale Kitaabka Qudduuska kuma jirto muujin kaamil ah oo ku saabsan wax kasta oo aan rabno inaan ka ogaanno Eebbe ahaanshihiisa, xukunadiisa, iyo ujeedooyinkiisa. Hase yeeshee, dhammaan wixii lagama maarmaanka ahaa ee innaga faa'iidada inoo lahaa inaan ogaanno, Eebbe wuu ina ogaysiiyay.

Qorniinka Qudduusanu wuxuu ka kooban yahay arimo aanay fahmi karin garashada aadanuhu. Tusaale ahaan: caqiidada saddexanka, caqiidada Axadka Masiixa, iwm. Waxa aanu caqligu garan karin, iimaanka ayaa garta, "oo fikir kasta maxbuus baannu ka dhignaa, si uu Masiixa u addeeco" (2 Korintos 10:5). Marka fariinta ah, badbaadada lagu helo Masiixa lagu wacdiyo dadka, waxay u tahay iyaga "wax lagu turunturoodo iyo nacasnimo" (1 Korintos 1: 23), oo "ninka nafta raacaa ma aqbalo waxyaalaha ruuxa Ilaah, waayo nacasnimo bay u yihiin" (1 Korintos 2: 14). Ma jiro qof isagu ku garan kara awood tiis ah fasiraadda dhabta ah ee Qorniinka Quddusan. Hal xaraf oo ka mid ah Qorniinka lama fahmi karo haddii aanu Ruuxa Qudduusku inoo ifinin. Qof wuxuu ku rumaystaa waa awoodda Ruuxa Eebbe. Eebbe, jacaylka weyn ee uu u qabo dadka waxa uu ku garansiiyo ee ugu xaqiijiyo ma ahan inuu adeegsado awoodaha dabiiciga ah ee dadka, laakiinse wuxuu ku abuuraa iimaan uu ku qabo jacaylka Eebbe marka lagu wacdiyo Injiilka. Eeg Rooma 10:17.

Iyadoo aan la fahmin waxyaabo badan oo Kitaabka Qudduusku uu ina barayo ayaa sabab u noqota in la dayaco ama la iska daayo akhrinta iyo barashada Kitaabka Qudduuska. Haddii aan Kitaabka Qudduuska u akhrino si

wanaagsan, wax badan oo uu ina barayo ayaa bayaan inoo noqon oo aan fahmaynaa. Marka ay inaga madow yihiin, ma ahan aayadaha adag ee Qorniinku inay ina wareeriyaan, laakiin waa inay inoo horseedaan inaan u sii barano Qorniinka si taxadar iyo tukasho leh.

UJEEDADA KITAABKA QUDDUUSKA

Eebbe wuxuu Eraygiisa inoo siiyay inuu inoogu muujiyo in Masiix yahay kan kaliya ee dambi lagaga badbaado. Sidaas awgeedna sharcigu wuxuu ina tusayaa dambiyadeenna, marka nolosheenna loo eego waxaa uu ina farayo (Rooma 3:20), oo Injiilkuna wuxuu inoo horseedayaa inaan Ciise Masiix u rumayno inuu yahay badbaadiyaheenna (2 Timotiyos 3: 15; Yooxanaa 5: 39; Yooxanaa 20: 31). Waxaa kale oo Kitaabka Qudduusku inoo muujinayaa doonista qudduuska ah ee Eebbe ee la xidhiidha nolosheenna, taas oo ah, sida inaga oo ah caruurtiisu aan u noolaanayno (Sabuurada 119: 9, 105; 2 Timotiyos 3: 16, 17). Ujeedada ugu dambaysa ee Kitaabka Qudduuska caqiidooyinkiisu waa in Eebbe lagu ammaano wax kasta.

In aan aaminno ballanqaadyada Eebbe waxay inoo keeni barakada aan u baahan nahay ee Eebbena uu rabo inaan ku raaxaysanno. Haddii aan rabno inaan ka salgaadhno iimaanka iyo rumaynta Masiixiyada, waa in aan barano oo ogaanno waxa uu Kitaabka Qudduusku in barayo.

Dadka oo dhamu waa inay akhriyaan oo bartaan Erayga Eebbe. Waa inaan ku khalaawayno waxa aan akhrinay ee aan baranay; oo markaan ku khalaawayno macnihii runta ku jirta Qorniinka ayaa inoo dhaadhici oo si buuxda maskaxdeenna u gali, oo hoos ugu sii dhaadhici qalbiyadeenna. Waa inaan aaminno in Erayga Eebbe uu run yahay, oo aan ku muujinno nolosheenna. Sidoo kalena waa in aan Erayga Eebbe barno kuwa aan wali helin, si iyaguna, ay u helaan caqli ay ku badbaadaan. Eeg Matayos 28: 19, 20.

Faa'iido aad u weyn ayay leedahay in la xafido qaar ka mid ah aayadaha Kitaabka Qudduuska, maadaama waxa aan xafidno ee mar mar maskaxdeennu ay soo xusuusataa uu noqon kayd rasmi ah, kaasoo aan kayd u ahayn maskaxda oo kaliya laakiinse sidoo kale kayd u noqon qalbiga. Inaan xafidsannahay aayado muhiim ahu waxay si wanaagsan inooga caawin xagga qalbiqaboojinta marka dhib jiro iyo xagga xoog siinta marka la ina jirrabo.

Faa'iidooyinka laga helo adeegsiga Kitaabka Qudduusku way badan yihiin oo kala duwan yihiin. Marka hore, Kitaabka Qudduusku wuxuu ina siiyaa caqli aan ku hello badbaado. Barashada Eraygu waxay inagu xafiddaa xigmaddaas. Dhammaanteen waan jecelnahay, inaan hello badbaado. Marka labaad, Kitaabka Qudduusku wuxuu inoo tilmaamaa sidaan dunidan ugu noolaan lahayn. Mid kasta oo innaga inaga mid ahu waa inuu doonaa inuu ku

noolaado nolol Eebbe raalli galisa. Kitaabka Qudduuska qudhiisu wuxuu inagu boorinayaa inaan si taxadar leh oo joogto ah u barano Erayga si aan u gaadhno heer aan si buuxda u fahamno waxa uu ina barayo oo aan awood ugu yeelanno inaan si wanaagsan nolosheenna ugu dabakhno. Waa in aynu dhammaanteen la dhahno qoraha sabuurka (Sab. 19:10) Erayga Eebbe in uu yahay, "wax xataa dahab laga sii jeclaado, haah, xataa dahab badan oo saafi ah, oo waliba wuu ka sii macaan yahay malab iyo xabagbarshada malabka." Aynu mar walba xusuusanno siduu Masiixu u faaniyay Maryama, oo fadhiday cagihiisa oo dhagaysanaysay Eragygiisa!

Kitaabka Qudduusku waa ilaha ay ka timaaddo dhammaan caqiidada Masiixiyadu. Kitaabka Qudduusku waa kan wax lagu hubsado, oo si aan khalad uga baadhno dhammaan waxyaalaha duniga ah ee aan barano waa in aan ka hubsanno Erayga Eebbe. Sidoo kale waa in aan Kitaabka Qudduuska u adeegsanno inaan ka baranno nolosheennu dhinaca iyo sida ay ugu baahan tahay sixid iyo hagaajin. Oo xagga tilmaanta iyo tababarka la xidhiidha xaqnimada ma jiro kitaab kale oo la barbar dhigo Kitaabka Qudduuska. Waxaa kale oo aan u adeesanaynaa qalbiqaboojin, maadaama dunidan dhibaatada badan aan u baahan nahay xaqiijinta ilaalinta Eebbe iyo ballanqaadka nimcadiisa iyo jacaylkiisa.

AWOODDA KITAABKA QUDDUUSKA

Kitaabka Qudduusku wuxuu leeyahay awood saamayn. Wuxuu saamayn ku yeelan karaa qalbiyada dadka. Eebbe Ruuxiisa oo ku jira Eraygiisa ayaa ka dhex shaqeeya qalbiyada dadka. Sharcigu wuxuu ina siiyaa aqoon ku saabsan dambiga iyo qoomamada qalbiga "Sharciga ayaa lagu gartaa dembiga" (Rooma 3:20). Injiilka Masiixa ka xishoon maayo, maxaa yeelay, waa u xoogga Ilaah ee xagga badbaadinta ku alla kii rumaysta" (Rooma 1:16). Sidaasaana Qorniinku, oo ah Kitaabka Qudduuska, uu awood ugu leeyahay inuu dadka ka dhigo kuwo leh caqli ay ku badbaadaan xagga rumaynta Masiixa Ciise. Kitaabka Qudduuska Eebbe wuxuu inoogu muujiyay sidaan xidhiidh sax ah ula yeelan lahayn oo aan u adkayn lahayn xidhidhkaas aan la leenahay Rabbiga ina uumay.

CUTUBKA 3
RABBIGA EEBBAHEENA AH

Waa mid dadka dunidu ay ka siman yihiin aaminaadda ah inuu jiro mid Sareeyaa. Waddan kasta iyo dhammaan dadyowga oo idil dhexdooda waxaa jirta in la rumaysan yahay inuu jiro mid wax kasta xukuma oo dadkana la xisaabtami doona. Way adag tahay in dadyowgu ay dafiraan jiritaanka Awood sarraysa, sababtoo ah waxaa la rumaysan yahay in uusan muuqan. Jiritaanka Eebbe oo la diido sida badan waa qiilka garasho liidata. Wax layaab leh ma ahan in Sabuurka 14 uu nagu adkeeyo in kii doqon ah oo kaliyu uu odhan, "Ilaah ma jiro."

Maadaama qofku uu si dabiici ah u yaqaanno in uu jiro Eebbe oo uu garowsan yahay inuu la xisaabtami doono, wuu raadin inuu helo Eebbahaas. Taas awgeedna wuxuu had iyo goor qofku samaystaa sanam. Aqoonta dabiiciga ah ee qofka ee Eebbe iyo sharcigiisu awood uma ay laha inay qofka garansiiyaan oo uu caabudo Eebbaha runta ah. Sida kaliya ee qofku uu ku heli karo aqoonta Masiixiyada ee Eebbe waa inuu aqbalo waxa uu Kitaabka Qudduusku barayo, sidaas ayuuna ku garan karaa kuna caabudi karaa Eebbaha kaliya ee runta ah.

Ilaahyada uu qofka dabiiciga ahu sheegto waa uun kuwo ka dhashay male'awaalka qofka. Oo male'awaalkiisaas ayuu qofka dabiiciga ahu ku haystaa fikir aad u yar oo ku saabsan Eebbe, oo wuxuuna raadiyaa wax uu ku cabbiro fikirkaas yar. Qofka dabiiciga ahu wuxuu u nuglaaday inuu Eebbe u yareeyo in la'eg cabbirka uu isagu yahay si uu uga dhigo mid la iska celin karo. Wuxuuna ilaahiisa u qaabayn, sida ay dadku wax u qurxiyaan, isagoo ku muunaynaya, tayooyin ay qaar yihiin kuwa dadka oo qaarna ay yihiin kuwo ka sareeya dadka. Sidooda wuxuu leeyahay galdaloolada dadka oo kale. Male'awaalka dadka ee Eebbe waxaa tusaale innoogu filan asnaamtii hore ee taariikhiga ah ee diimihii Giriigta iyo Roomanka.

CAWAANKU SIDA AY U ARKAAN EEBBE

Shiinuhu waxay leeyihiin ilaahyo badan oo mid walibaa uu leeyahay suurooyin kala duwan, kuwaas oo ay u caabudaan siyaabo kala duwan. Diintoodu waxay isugu jirtaa saddex iimaan oo kala duwan oo ah: Konfiyushist, Taa'oist, iyo Budhist. Ilaahyada kala duduwan ee Shiinuhu ay leeyihiin waxaa ka mid ah kuwa yaryar ee "ilaahyada jikada." Kuwani waa uun suurooyin laga sameeyay warqad oo la kor saaro kabadhada jikada. Jikadu

waa meesha si wanaagsan nolosha looga arko. Wakhitiyada qaarkood qoysku waa in ay gubaan ilaahooda yar si uu ugu noqdo jannada oo warbixin uga dhiibo qoyskaasi wixii ay dambi sameeyeen. Marka la gaadho wakhtigii la gubi lahaa, si ay u xaqiijiyaan in uu warbixin fiican ka dhubo, Shiinuhu waxay suuradaas warqadda laga sameeyay afka u mariyaan malab. Sidaasna waxay ku macaaneeyaan warbixinta uu reerka ka bixin doono.

Waxaa la sheegay Hindiya inay jiraan ilaahyo ka badan dadka. Ilaaha ugu wayn ee Hinduga, waa diinta Hindiya e, waxaa la yidhaahdaa Birahma, kaas oo aysan jirin suuro isaga lagu matalaayu, sababta oo ah waxay aaminsan yihiin inaan lagu gaadhi karin feker iyo tukasho toona. Fishnu iyo Sifa, oo iyana ah labada Birahma ku xiga xagga darajada, waxaa la aaminsan yahay inay leeyihiin qaab walxeed.

Muslimka ilaahoodu waa Allah, oo loo haysto inuu yahay mid si toos ah wax walba u xukuma, kaasoo maalinna wax u naxariista maalinta xigtana aan wax u naxariisan. Muslimku waxay Ilaahay uga fekeraan oo ka eegaan dhinaca awoodda. Waxay qabaan Allah in uu naxariistiisa iyo raxmaddiisa ku muujiyo awood ee uusan ku muujin jacayl.

Dhulalka cawaanka, sida doqonnimada ah ee dadku ay u male'awaalayaan Eebbe, waa mid nagu kallifi in aan ku maadsanno. Haddiiba aan u malayno in dadka aan wada joognaa ay aad uga duwan yihiin kuwaas, waa in aan xusuusannaa in ay jiraan kuwo badan oo juhalo ah, oo ku nool waddankeenna, kuwaas oo Ilaahay ka qaba fikir khaldan oo aan caadi ahayn. Sida ay qaarkood qabaan ama aaminsan yihiin, qofku wuu ku dhawaan karaa heerka Eebbe, ama wuu noqon karaa sida Eebbe, isagoo hagaajinaya ama kor u qaadaya asluubtiisa iyo dhaqankiisa.

Sida dadka cawaanka ah diintooda oo kale, waxaa iyana aaminsan qofku in uu dhaqan iyo asluub wanaag uu ku gaadhi karo ilaahnimo, ama "uu kor u soo saari karo ilaah" isaga ku jira, diinta Mormon, diinta Badbaadada Xeerka Dahabiga, diinta Sayniska Masiixiyada, iyo kuwo kale. Xaqiiqada ah, falal diimeedkoodu in aysan u dhiiranayn, oo aanay u kala hufnayn sida kuwaas kale ee cawaanta ah iyo inay si joogto ah u adeegsadaan eray bixinta iyo hab-bandhigeedka Masiixiyiinta, ma ahan mid ka reebi qaygaha khaldan ee fikirkooda beenta ku salaysan ee ay ka haystaan Eebbe, kaas oo aan sidoo kale ka dhex aragno dadyowga cawaanka ah ee meelaha kale.

MA EEBBE ISKU MID AH OO QAABAB KALA DUWAN BAA?

Waxaa jira dad badan oo aaminsan in dadyowga kala duwani ay uga fekeraan Eebbaha runta ah siyaabo kala duwan, oo dhammaantoodna ay sharfaan oo caabudan ilaah run ah oo isku mid ah. Dadkaasi waxay qabaan

Eebbaha Masiixiyiinta, ilaahyada Hindida, Allaha Muslimka, iyo kuwa kale, in isku si loo tixgeliyo in ay yihiin Sareeyaha Ilaah oo magacyada uun loo kala duduway, si kala duwanna loo arko, oo qolo kastaa Eebbihii runta ahaa ay dhinacooda ka arkaan ama si iyaga u gaar u arkaan. Taas haddii aan dhinac ka eegno, ma aha in la yidhaahdo ama cid lagu sheego in ilaahoodu uu been yahay; sababta oo ah taasi waxay xumayn dhammaan xidhiidhkii saaxiibtinimo ee dadku wada lahaa, waana xaqiiqo aanay ku socon karin walaaltinimada dadyowga adduunku.

Si qarsoon ama si badheedh ahba waxaa marar badan Masiixiyiinta lagu canbaareeyaa in ay u tagaan dhulal shisheeye "inay rabsheeyaan ama qasaan" dadyowga dhulalkaasi iimaankooda u gaarka ah. Waxayna taasi sabab uga dhigaan, iyaga oo leh, si kasta oo uu yahay fikirkooda ay Eebbe ka haystaani, haddana waa uun qaab ka mid ah qaababka ay dadku u haystaan Eebbaha kaliya ee runta ah. Malahaasi khalad sanaa!

DHAMMAAN ILAAHYADA MALE'AWAALKA AHU WAA SANAMYO

Sanam caabudid waa laga helayaa meel kasta oo dadku ay Ilaahay male'awaalaan. Ma aan male'awaali karno Ilaaha runta ah. Waa wax aan suurtogal ahayn in la male'awaalo wax si nadiif ah, oo kaamil ah, u ah ruuxi. Maskaxdeenna koobani sinaba uma fahmi karto Eebbaha aan xadka lahayn. Ilaah kasta oo ka dhashay male'awaal dad waxaa hubaal ah inuu yahay sanam, kaas oo ah ilaah been ah.

DABEECADDU WAXAY MUUJISAA WAXYAABO KU SAABSAN EEBBE

Qofka dabiiciga ah dabeecadda ayaa u xaqiijisa jiritaanka Eebbe. "Wixii Ilaah laga garan karo waa ka dhex muuqataa iyaga, waayo, Ilaah waa u muujiyay iyaga. Tan iyo abuurniinta dunida waxyaalihiisii aan la arki karin ayaa bayaan loo arkaa, iyagoo laga garto waxyaalihii la sameeyay, xattaa xooggiisa daa'imka ah iyo Ilaahnimadiisa, si ayan marmarsiinyo u lahaan" (Rooma 1: 19 – 20). Asalkeedii halka ay ka timid iyo hab-socodka jiritaanka dunidan midna si lagu qanco looma sharxi karo haddii aanay jirin Sabab Awal ah oo abuurtay, iyo Awood sare oo jiritaankeeda joogtaysa oo maamusha. "Guri walba mid baa dhisay, laakiin kan wax walba dhisay waa Ilaah" (Cibraaniyada 3:4).

Dabeecaddu waxay muujisaa Eebbe awooddiisa, laakiin ma muujiso kan uu yahay Eebbaha runta ahu. Aqoonta dabiiciga ah ee qofku uu u leeyahay Eebbe waa mid ku kooban qaar ka mid ah dabeecadaha iyo tayooyinka Eebbe. Awoodda Eebbe way inoo muuqataa marka aan darisno

dadka, xayawaanka, dhirta, habka cadceedda, isudheelitiranka dabeecadda, iwm. Xigmadda Eebbe way inoo muuqataa marka aan darisno habka ay isugu xidhan yihiin ee ay u shaqeeyaan murqaha iyo qaab-dhismeedka lafaha dadka iyo xayawaanka, awoodda abuurku uu ku soo biqlo, hawsha dareemayaasha, iwm. Wanaagga Eebbe kuma garawsanno oo kaliya waxyaalaha nolosha lagama maarmaanka u ah ee uu ina siiyay, laakiinse waxaa kale oo uu ina siiyay waxyaabo badan oo ina siiya farxad, sida ubaxyada udgoon, heesaha shimbiraha, iwm. Nidaamka iyo muwaafaqada yaabka leh ee aan ka argno dabeecaddu waxay si adag u muujinaysaa hal caqli oo sareeyaa in uu qorsheeyay iyo in hal doonis oo saraysaa ay maamusho adduunkan. Qof ayaa yidhi: "Jiritaanka Eebbe waxaa lagu xaqiijin karaa tirikoob ahaan. Soo qaado jidhka dadka oo kaliya, fursadda ah dhammaan dhaqadhaqaaqa xubnaha ee shakhsigu in ay mar wada dhacaan waa wax tirikoob ahaan aad u weyn oo u yaab badan."

Marka uu qofku, isagoo ku salaynaya waxa uu dabeecad ahaan ka yagaano Ilaahay, isku dayo inuu go'aamiyo kan uu yahay Ilaah, wuxuu, isagoo isku dayaya inuu tilmaamo Eebbe, hadba sameeyaa sanam uu Isaga ku matalayo, kaas oo noqon kara wax male'awaal ah oo uu maskaxda ku haysto ama shay walxeed uu siiyo sifo ilaahnimo. "Dadyowga ilaahyadooda oo dhamu waa sanamyo, laakiinse Rabbigu isagaa sameeyay samooyinka"(Sabuur 96: 5). Aqoonta dabiiciga ah ee loo leeyahay Eebbe uma muujinayso qofka magaca Eebbe ama doonista Eebbe ama qorshaha nimcaysan ee badbaadada. Sidaa darteed ma ahan mid haqabtiri karta baahida qofka.

GARASHADU WAY XAQIIJISAA JIRITAANKA EEBBE

Qofka, in uu Eebbe jiro, waxaa u xaqiijiya isaga qudhiisa. Garashadiisa oo isaga u sheegaysa in ay la xisaabtami doonto cid awood isaga ka saraysa lihi, waxay muujinaysaa in uu jiro Ilaah. "Waxay muujiyaan shuqulka sharciga oo qalbiyadooda ku qoran, iyagoo garashadoodu u markhaati furayso, oo fikiradoodu midba midka kale ashtakaynayo ama marmarsiinyo samaysanayo" (Rooma 2: 15); Fikirada dadku waxay ku ashtakaynayaan ama ku ansixinayaan ficillada dadka Awood jirta horteeda, awooddaas jirta oo ay dareemayaan in ay la xisaabtami doonto. Hase yeeshee, garashadu ma muujiso kan uu yahay Eebbaha runta ahu.

KITAABKA QUDDUUSKA AYAA MUUJIYA EEBBAHA RUNTA AH

Eebbaha runta ahu wuxuu si aad u dhammaystiran isugu muujiyay Kitaabka Qudduuska. Iyagoo dabeecadda iyo garashadu ay inoo sheegayaan inuu jifo Eebbe, Kitaabka Qudduuskuna wuxuu inoo sheegayaa kan uu yahay

Eebba haasu. Iyagoo dabeecadda iyo garashadu ay inoo sheegayaan gaar badan oo ka mid ah tayooyinka iyo sifooyinka Eebbe, haddan waa Kitaabka Qudduuska kan arimahaasi sida wanaagsan inoogu faahfaahinaya, oo waliba inoo sheegaya jacaylka Eebbe iyo nimcado aan ku hellay Masiixa iyo badbaadada ee Eebbe inoo diyaariyay.

Waan u baahan nahay inaan naqaanno Eebbe. Uma baahnin inaan ogaanno xaqūgooyin ku saabsan isaga iyo sifooyinksa, laakūn waxaan u baahan nahay inaan ogaanno xogta hoose ee qorshihūsa innaga inagu saabsan iyo waxa uu inala inala doonayo. Agoontaas aan u yeelanno Eebbe ma ahan mid aan ka helayno waxyaalo aan maskaxda ku gabanno uun, balse waa halka aan ka helayno nolosha dhabta ah ee Eebbe oo ah tan kaliya ee aan ku barakoobayno. "Tanu waa nolosha waligeed ah inay ku gartaan, adoo ah Ilaaha runta ah oo kaliya, iyo inay gartaan cise masiix, kii aad soo dirtay" (Yooxanaa 17:3).

Kitaabka Qudduusku wuxuu ina barayaa in Eebbe uu "yahay" (Jiro), kaamil yahay, oo sareeye yahay (Baxniintii 3:14). In uu yahay ruux (Yooxanaa 4:24), aanu lahayn walax dabiici ah, oo uu yahay oo waligiina jiray (Ishacyaah 44:6; Yooxanaa 5:26). Mar kasta oo Kitaabka Qudduusku uu Eebbe uga hadlo sidii isaga oo ah bani aadan, oo leh gacmo, faro, waji, wuxuu adeegsanayaa hadal tilmaameed si uu ugu qaato fikirka ku saabsan Eebbe oo uu u dhacsiiyo caqligeenna kooban, oo aan garan karin ama qaadan karin dabeecadda ruuxiga ah ee Eebbaha daa'imka ah.

SIFOOYINKA EEBBE

Eebbe waa mid. Eebbe heerkiisu waa mid u gaar ah. Ma jiri karo ilaah kale oo Eebbe lala simaa. "Waxaan ahay Rabbiga, oo mid kale ma jiro, aniga mooyaane ilaah kale ma jiro" (Ishacyaah 45:5). "Oo aan ilaah jirin mid mooyaane" (1 Korintos 8:4). "Rabbiga Ilaaheenna ahu waa Rabbi keliya" (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4). Sidaas darteed: Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan" (Baxniintii 20:3), oo "waa inaad caabuddo Rabbiga Ilaahaaga ah oo waa inaad isaga keliya u adeegto" (Matayos 4:10). Caqiidada kalinimada Eebbe waa mid muhiim ah. Haddii uu isagu ina barakadeeyo, ilaah kaleetaayu inama habaari karo. "Haddii Ilaah inala gees yahay, yaa inaga gees ah?" (Rooma 8:31). Laakiin haddii Eebbe inaga gees yahay, "ma jiro mid gacantaada iga samato bixinaya" (Ayuub 10:7).

Eebbe ma qaybsamo. Isagu kama koobna qaybo, ama walxo. Eebbe waa asli aan qaybsamin. "Anigu waxaan ahay kaan ahay." (Baxniintii 3:14).

Eebbe isma beddelo. Eebbe iskama beddelo aslinimadiisa. Sabuurada 102:26, 27 ayaa waxay si wanaagsan u sharxayaan isbeddelka iyo bololka ay

abuurka oo idili dhaxlaan iyo doorsoon la'aanta Eebbe:"Iyagu way baabi'i doonaan, adiguse waad sii waari doontaa.. Way beddelmi doonaan; laakiinse adigu isku si uun baad tahay had iyo goorba, oo sannadahaaguna ma idlaan doonaan." Eebbe waa sida uu yahay, sidii uu waligii ahaa, oo sidaa ayuu waligii ahaan. Eeg Malaaki 3:6. Sidoo kale Eebbe iskama beddelo sifooyinkiisa oo dhan; tusaale ahaan, naxariistiisa (Ishacyaah 54:10), cadhadiisa (Yooxanaa 3:36), doonistiisa (Maahmaahyadii 19:21). Kitaabka Qudduusku wuxuu cashar labanlaaban inaga siinayaa doorsoon la'aanta Eebbe: (1) inuu u digo kuwa sharka leh, waayo cadhada Eebbe isma beddesho (Markos 9:44); (2) innuu u qalbiqaboojiyo kuwa aaminka ah, waayo nimcada Eebbe waligood ka tegi mayso (Ishacyaah 54:10).

Eebbe waa Xadilaawe. Isagu ma lahan xad iyo wax celiya toona. Meel kasta wuu joogaa. "Xataa samada iyo samada samooyinku kuma qaadi karaan" (1 Boqorradii 8:27). "In kastoo uusan ka fogayn midkeen kasta; maxaa yeelay, isagaynu ku nool nahay, kuna soconnaa, kuna jirnaa" (Falimaha Rasuullada 17:2, 28). "Miyaa cidi isku qarin kartaa meelo qarsoon oo aanan ka arki karin? Waxaa kaloo uu Rabbigu leeyahay, "Anigu soo kama buuxo cirka iyo dhulkaba?" (Yeremyaah 23: 24). "Rabbiga indhihiisu meel kastay jiraan, iyagoo fiirinaya kuwa xun iyo kuwa wanaagsan' (Maahmaahyadii 15:3). Aayadahaasu waxay inooga digayaan in aynaan Eebbe waxba ka qarsan karin. "Kii xadgudubyadiisa qariyaa ma liibaani doono" (Maahmaahyadii 28:13). Waxay tani inoo tahay qalbiqaboojin in aan garawsanno in Eebbe uu ogyahay murugadeenna iyo dhibaatadeenna oo uu diyaar u yahay inuu inoo gargaaro. Rabbigu wuu yidhi: "Ninkan waan fiirinayaa kaasoo ah miskiin, ruuxiisuna jaban yahay, eraygaygana ka gariira." (Ishacyaah 66:2).

Eebbe waa caaqil. "Isagu wuxuu leeyahay xigmad iyo xoog, oo wuxuu leeyahay talo iyo waxgarasho" (Ayuub 12: 13). Caaqilnimada Eebbe waxay ka muuqataa dabeecadda. Waxaa si gaar ah looga arki karaa hawsha furashadeenna iyo badbaadadeenna. Caaqilnimada Eebbe waa mid aad uga saraysa garashada dadka. "Mool dheeraa hodantinimada iyo xigmadda iyo aqoonta Ilaah!" (Rooma 11: 33). Caaqilnimada Eebbe waxay inoo macnaynaysaa in Eebbe uu garanayo arin kasta wuxuu ka yeeli lahaa iyo siduu u yeel lahaa, siduu u muujin lahaa oo u amri lahaa asbaab kasta iyo saamayntooda ku wajahan siday u fuli lahaayeen ujeedooyinkiisu. Eebbe wuu yaqaanaa dhammaan jawaabaha ama xalka dhibaatooyinkeenna oo dhan, oo wax kasta oo uu go'aamiyo way wanaagsan yihiin.

Eebbe wuxuu leeyahay doonis. Eebbe falalkiisa si ula kac ah isagoo garanaya ayuu durba u fuliyaa, oo si uu hubo ayuu u fuliyaa ujeedooyinkiisa. "Taladaydu way hagaagi doontaa, oo waxaan jeclahay oo dhanna waan wada samayn doonaa… Waan ku hadlay, oo waliba waan oofin doonaa." (Ishacyaah

46;10, 11). Hase ahaatee Eebbe inta badan fekerkiisa inama ogaysiiyo. Doonistiisa qudduusan ee uu inoo muujiyay Eebbe waa sharciga, ama Tobanka Amar, oo uu Eebbe inoogu sheegayo waxa aan samaynayno iyo waxa aynaan samaynayn, iyo sida ay tahay inaan ahaanno ama aynaan ahaanin. Doonista nimcada badan ee Eebbe waa Injiilka, oo uu Eebbe inoogu sheegay inuu dadka oo dhan badbaadin doono, oo garansiin doono runta; taasina waa doonistiisa uu inoogu sheegay Tukasheda Rabbiga: "Doonistaada ha looga yeelo dhulka sida looga yeelo jannada."

Eebbe waa quddus. Wuu diidaa oo neceb yahay nooc kasta oo xumaan iyo dambi ah. "Qudduus, qudduus, qudduus waxaa ah Rabbiga ciidamada, oo dhulka oo dhanna waxaa ka buuxda ammaantiisa" (Ishacyaah 6:3). "Adigu ma ihid Ilaah xumaanta ku farxa, oo shar adiga kula jiri maayo." (Sabuur 5:4).

Eebbe waa caadil iyo xaq. Wax kastoo uu Eebbe sameeyo waa sax. Isagu wuu ka baxsan yahay oo ka sareeyaa sharci oo idil. Wax kasta oo uu jeclaado in uu sameeyo ama uusan samaynin waa cadaalad iyo xaq. "Isagu waa Ilaah aamin ah, oo aan xumaan lahayn, Isagu waa xaq, waana caadil" (Sharciga ku Noqoshadiisa 32:4). Mararka qaar sida uu Ilaah waxyeelo waxay dadka ugu muuqataa caddaalad daro, sababta oo ah dadku waxay ku qiimeeyaan qiimayntooda aadaminimo, waxaase habboon inaga oo aan waxba iska waydiinin inaan u aqballo inay yihiin jidadka Eebbe ee Caaqilka ah. "Rabbiga wuxuu leeyahay, fikiradaydu fikiradiinna ma aha, oo jidadkiinuna jidadkayga ma aha. Maxaa yeelay, sida samooyinku ay dhulka uga sareeyaan ayay jidadkaygu jidadkiinna uga sareeyaan, oo ay fikiradaydu fikiradiinna uga sareeyaan" (Ishacyaah 55:8 – 9). Wax kasta oo Eebbe uu go'aamiyo waa wanaagsan yihiin waana xaq.

Eebbe waa run sheege. Erayadiisa iyo ballanqaadyadiisu waxay runtii muujiyaan doonistiisa. Erayga Rabbigu wuu toosan yahay; oo shuqulkiisa oo dhanna waxa lagu sameeyay aaminnimo" (Sabuur 33: 4). "Ilaah been ma sheego" (Tiitos 1:2). Run lownimada dhabta ah ee Eebbe waxay ka mid tahay dhammaan waxa lagu qoray Eraygiisa. "Hadalkaagu waa rune" (Yooxanaa 17:17). Ballanqaadka Eebbe ma baaqdo.

Eebbe waa wax walba awoode (omnipotent). Wuxuu leeyahay awood oo dhan, oo wuu samayn karaa, oo wuuna sameeyay wax kasta oo uu doono inuu sameeyo. "Wax alla wixii uu doonayayna wuu sameeyay" (Sabuur 115: 3). Awoodda Eebbe marnaba ma daasho. "Wax aan Ilaah kari doonin ma jiro" (Luukos 1:37). Taa macnaheedu ma ahan Eebbe in uu samayn wax keeni kara iskhilaaf oo isagu uu is burin. Eebbe awooddiisa si toos ah ayuu u adeegsan karaa, ama wuu adeegsan karaa isla markiiba, isagoo isticmaalaya waxyaalo dabiici ah, tusaale ahaan, marka uu inagu noolaynayo cuntada. In aan ogaanno in Eebbe uu awood u leeyahay wax kasta oo aan malayn karno si ka weyn cida

kasta waxay raaxo wayn u tahay mid kasta oo rumaysan Masiixa. Ma jirto dhibaato aad u weyn, ma jiro wax aan aad ugu baahan nahay, ma jirto culaab aad u culus, waayo Eebbaheenna ayaa inoo xallin kara innaga.

Eebbe wuu wanaagsan yahay. Isaga wanaaggiisu waa mid kaamil ah; Isagu ma lahan khalad iyo ceeb toona; Isagu dhinac kasta waa kaamil. "Waxaa jira mid wanaagsan, kaas oo ah Eebbe' (Matayos 19: 17). Eebbe wuu u wanaagsan yahay oo u naxariistaa uunkiisa; Isagu waa u deeqsi oo wuxuu jecel yahay inuu barakeeyo iyaga. "Rabbigu wax kasta wuu u roon yahay, naxariistiisuna waxay ka saraysaa shuqulladiisa oo dhan" (Sabuur 145:9). Eebbe waa jacayl, wuxuuna rabaa caruurta lunsan ee aadanaha inuu ku soo dabbaalo inay isaga xidhiidh la wadaagaan. "Waxaan kugu jeclaaday jacayl daa'im ah, oo sidaas daraadeed raxmad baan kugu soo jiitay" (Yeremyaah 31:3). "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyay Wiilkiisa kaliya oo dhasay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha waligeed ah" (Yooxanaa 3:16). Eebbe wuu raxmad badan yahay; wuu u naxariistaa kuwa dhibaataysan oo wuu barakadeeyaa iyaga. Eebbe wuu nimco badan yahay, sida uu u siiyo oo ugu manaysto barakadiisa xisaab la'aan isaga oo aan u eegin inay mudan yihiin iyo in aanay mudnayn kuwa uu siinayaayu. Eebbe wuu dulqaad badan yahay, cadhana wuu u gaabiyaa. "Waxaan ahay Rabbiga, oo ah Ilaah raxmad iyo roonaan badan, oo cadho u gaabiya, oo naxaiis iyo run badan, oo kumaankun u naxariista, oo xumaanta iyo xadguduka iyo dembiga dhaafa" (Baxniintii 34: 6, 7). Wanaagga Eebbe waa mid qalbigiisa ah. Wanaagga Eebbe aawadii dhammaan sifooyinka kale ee Eebbe waa kuwo inaga inoo danaynaya oo waxay inaga inoo yihiin qalbiqaboojin aad u weyn. Awoodda Eebbe, caaqilnimada Eebbe, iyo dhammaan sifooyinka kale ee Eebbe waa kuwo aad inoogu qalbiqaboojin innaga sababta kaliya oo ah wanaagga Eebbe iyo isaga oo ina jecel.

EEBBAHA SADDEXAN

Kitaabka Qudduusku wuxuu ina barayaa in Eebbaha runta ahu uu yahay mid aan qaybsanayn oo aan qabsami karin oo asli ah, oo ay ku jiraan saddex Axad oo kala duwanu, kuwaasoo ah Aabaha, Wiilka, iyo Ruuxa Qudduusan. Erayga "Saddexan" macnihiisu waa "Saddex midaysan". Kitaabka Qudduusku wuxuu ina barayaa oo ku adkaysanayaa in Eebbe uu yahay mid, taas oo ah in uu jiro hal Eebbe oo kali ahu. Waxaa kale oo uu ina barayaa in saddex ay ku jiraan midkaasi. Matayos 3:16, 17 Waxaa lagu sheegay saddexda Axad ee saddexanka Qudduusan. Matayos 28: 19 waxaan ka akhriyaynaa: "Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabaha iyo kan Wiilka iyo kan Ruuxa Qudduuska."

Kitaabka Qudduusku wuxuu inoo sheegayaa in mid kasta oo ka mid ah Saddexda Axad ee Saddexanka aan u aqoonsanno in uu yahay Eebbe; laakiin wuxuu haddan inoo sheegayaa in saddexdaas Axad ay isku yihiin hal Eebbe oo kaliya. Aabbuhu waa Eebbe run ah. "Laakiin innagu waxaynu leenahay Ilaah keliya, oo Aabbaha ah, kan wax walba ka yimaadeen oo inagana isagaa ina leh" (1 Korintos 8:6).

Ciise Masiix, Wiilku, waa Eebbe run ah. 1 Yooxanaa 5:20 waxay leedahay Ciise "waa Ilaaha runta ah iyo nolosha weligeed ah." Rooma 9:5 waxaa lagu sheegay in Ciise uu yahay "Kan wax walba ka sareeya oo ah Ilaaha ammaanta leh weligiis." Ruuxa Qudduusku waa Eebbe run ah. Falimaha Rasuullada 5:3, 4 Ruuxa Qudduuska waxaa lagu sheegay inuu yahay Eebbe, oo 1 Korintos 3:16 waxaa Masiixiyiinta lagu magacaabay "Macbudka Eebbe" sababta oo ah waxaa iyaga ku dhex nool oo ku jira Ruuxa Qudduuska ah.

INNAGU MA FAHMI KARNO SIDA UU EEBBE YAHAY

Caqiidada Saddexanka waxaa lagu fahmi karaa oo lagu xaqiijin karaa oo kaliya Erayga Eebbe. Sidaa darteen, waxaan Eebbe faallayn karnaa illaa xadka sida uu isagu inoo sheegay inuu yahay. Eebbe isaga ayuun baa is og; wuxuu isagu ku "dhex jiraa nuurka aan loo dhawaan karin, oo aan ninna arkin, lana arki karin" (1 Timoteyos 6:16). "Ninna ma arkin Ilaah marnaba" (Yooxanaa 1: 18b). Laakiin Eebbe isaga ayaa isu muujiyay dadka si dadku, illaa xad, ay u ogaadaan Eebbe. Wuxuu dadka isugu muujiyay dabeecadda xiisaha badan, oo ah halka laga helo aqoonta sida dabiiciga ah loo aqoodo Eebbe. Wuxuu isku muujiyay Eraygiisa, oo ah halka laga helo aqoonta lagu badbaado ee Eebbe. "Wiilka keliya oo laabta Aabbaha ku jira kaasaa inoo sheegay." (Yooxanaa 1:18t). Masiixiyiinta oo kaliya ayaa si caqli ah uga hadli kara waxa uu Eebbe dhab ahaantii yahay, sida uu dul ahaan isugu muujiyay abuurkiisa iyo doonistiisa ku wajahan dadka ee ku saabsan badbaadintooda. Waxaas oo dhanna waxaa iyaga loogu sheegay Ruuxa Qudduuska, oo ugu muujiya uguna sheega xagga Eraygiisa.

Eebbe asalnimadiisa iyo sifooyinkiisu waa kuwo isku mid ah oo aan innaba kala duwanayn, oo dhamaystiran, waayo Eebbe wakhitgiisu xad malaha oo wuuna ka sareeyaan wax walba (1 Boqorradii 8:27) oo wuu ka sareeyaa wakhti (Sabuurada 90:2, 4). Caqligeenna dad ee xadaysanu ma fahmi karo Eebbaha aan xadka lahayn ee kaamilka ah, ee wax ku laaqani aysan jirin. Marka uu Eebbe Eraygiisa inagu barayo inaan kala soocno asalnimada iyo siyoofinka Eebbe, wuxuu qaatay habka aynu innagu u fekerno oo wuxuu tixgelin siiyay xeerka habka fekerka ee dadka, ama waxa macquul la noqon kara dadka. Aqoonteena aan u leenahay Eebbe waa mid xadaysan oo aan

faallayn karin Eebbe. Aqoontuu Aadan u lahaa Eebbe ee dabiiciga ahayd, xattaa markii uu ku jiray xaaladda dhammayska ah, way xadaysnayd. Masiixiyiinta aqoontooda lagu cusboonaysiiyay xagga Masiixa marka ay rumayteen iyana sidoo kale way xadaysan tahay. Inta badan xogta ku saabsan Eebbe way ka dahsoon tahay dareenka iyo garashada dadka. Waynu la yaabaynaa sidii soofar: "War miyaad baadhi kartaa Ilaah axwaalkiisa moolka dheer? Miyaadse Ilaaha Qaadirka ah si kaamil ah u garan kartaa?" (Ayuub 11:7). Oo Qorniinku wuu la guuxay dahsoonaanta Eebbe (Wacdiyaha 8:17; Ishacyaaha 40;28; Rooma 11:33, 34). Garashadeenna kooban ee aan dhammayni ma garan karto Eebbaha kaamilka ah ee aan xadka lahayn.

Wali Agostin ayaa maalin xeebta ku lagaynayay; isagoo ka fekeraya caqiidada Saddexanka Quddusan. "Saddex Axad oo ku jira hal Eebbe oo asli ah," ayuu askula hadlay, "oo leh awood rabbaani ah, ammaan, iyo boqornimo siman, oo haddana ah hal Eebbe oo kaliya. Siday taasi ku ahaatay? Isagoo aan garan karin haddana wuxuu isku dayayay inuu baadho dahsoonaanta Eebbe, wuxuu arkay ilmo yar oo xeebta ku ciyaaraya. Caroog midabyo leh oo uu gacanta ku haystay ayuu ilmihii yaraa god kaga qoday bacaadkii xeebta, markaasuu u orday xaggii mawjadaha, oo carooggii biyo ka soo buuxiyay, oo intuu soo noqday biyihii caroogga ku jiray ku shubay godkii. "Maxaad rabtaa inaad samayso?" Ayuu Agostin waydiiyay wiilkii yaraa. "Waxaan rabaa biyaha badda inaan godkan ku shubo," ayuu ilmihii ku jawaabay. "Haah," ayuu ku fekeray Agostin, "Taasi dhab ahaantii waa waxa aan rabay inaan sameeyo, aniga oo taagan xeebta wakhtiga ee badweynta aan xadka lahayn ee waligeed ah ee Eebbe oo isku dayayay inaan iyada ku qabto maskaxdayda kooban."

CAQIIDADA SADDEXANKU WAA LAGAMA MAARMAAN

Caqiidada Saddexanku waa mid gebi ahaanba lagama maarmaan u ah diinta Masiixiyada. Qofka diida caqiidadan looma tixgelin karo inuu yahay Masiixi. Dad badan ayaa aaminsan inay Masiixiyiin yihiin sababta oo ah waxay aaminsan yihiin ilaah, laakiin ma aaminsana Eebbaha Saddexan. Dadkaas Masiixu wuxuu u yahay oo kaliya nin namuun ahaan ah, oo ay tahay inaan ku dayano si aan u hello badbaado. Dadka noocaas ahu ma ahan Masiixiyiin, sababta oo ah ma aysan aqbalin waxa uu Kitaabka Qudduusku inaga barayo Eebbe, Eebbaha Saddexan, oo sidaas darteed sidoo kale ma aysan aqbalin caqiidada madaxfurashada iyo badbaadinta sida uu ina barayo Kitaabka Qudduusku.

Aaminidda Eebbaha runta ahu way ka macno weyn tahay in la aqbalo waxbarid qaawan ee Saddex Axad oo ku jira Asli qudha oo rabbani ah.

Waxaase ka mid ah in lagu tiirsanaado oo lagu kalsoonaado hawsha badbaadada ee Saddexanka, sida uu Aabbuhu ugu soo diray Ciise, oo ah Wiilka, dunida si uu ugu furto aadanaha oo dambiile ah noloshiisii aan iinta lahayn iyo inuu silcay oo dhintay isaga oo nadiif ka ah dambi dhammaantii iyo sida uu Ruuxa Qudduusku inoo siiyo iimaanka Masiixiyada iyo inaan la jirno Eebbe. "In dadka oo dhamu Wiilka murweeyo siday Aabbaha u murweeyaan. Kii aan Wiilka murweyn, ma murweeyo Aabbaha soo diray. Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, kii hadalkayga maqla oo rumaysta kii i so diray, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, xukunna geli maayo, laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha u soo gudbay." (Yooxanaa 5:23, 24). Oo Ciise ayaa yidhi: "Aniguna Aabbahaan baryi doonaa, isna wuxuu idin siin doonaa Gargaare kale inuu idinla jiro waligiin, waxaana weeye Ruuxa runta ah ee aanay dunidu qaadan karin, waayo, ma aragto, garanna mayso, idinkuse waad garanaysaan, waayo, wuu idinla jiraa, wuuna idinku jiri doonaa" (Yooxanaa 14:16 – 17). Si aan ugu garanno in Eebbe uu yahay Aabbaheen oo Cūse Masiix uu yahay Badbaadiyaheena, waxaan u baahan nahay inuu inagu jiro Ruuxa Qudduuska ahu. Caqiidada Saddexanka Qudduusanu waa qodob aasaasi u ah iimaankeenna Masiixinimada.

CUTUBKA 4
WAXAA ABUURAY OO NOOLEEYA EEBBE

Waxaynu ku nool nahay duni yaab badan, oo ay ka buuxaan waxyaabo nool iyo kuwo aan noolayn, oo ina xiise galiya, oo kiciya dareenkeenna male'awaal ee ku wajahan asalkooda iyo noloshooda. Dadku waxay jawaabo u raadiyeen su'aalaha ku saabsan asalka, koritaanka iyo noolaanshaha waxyaalaha dunidan. Waxay qodeen ciidda, waxay baadheen lakabyada dhulka, waxay darseen xaaladihii ilbaxnimo ee dadyowga dhulka, waxay isbarbardhig ku sameeyen qaab-dhismeedka (anatomy) nolosha dhirta, tan xayawaanka, iyo tan dadka. Natiijadii baadhitaankoodu wuxuu noqday tiraab aad u badan oo ay soo bandhigeen.

Qisada Kitaabka Qudduuska ee ku saabsan abuuristii meel ugama bannaana tiraab kasta oo ku saabsan in uunku (creation) uu ku yimid koboc (evolution). Wax kasta oo Eebbaha awoodda luhu uu wax inooga sheegay, wixii kale ee la sheego ee taas khilaafsan waa hubaal inay khaldan yihiin.

WUXUU EEBBE KA SHEEGAY ABUURISTA

Kitaabka Billowgii cutubada 1 iyo 2, waxaan ka helaynaa wixii uu Eebbe qudhiisu ka sheegay shaqadiisa. Si fudud oo xaqiiqo ah wuxuu Kitaabka Qudduusku inoogu sheegayaa; "Billowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray" (Billowgii 1:1). Oo kitaabka ugu dambeeya ee Kitaabka Qudduuska waxaan isna ka akhriyaynaa: "Rabbigayagow, Ilaahayagow, adigu waad istaahishaa inaad heshid ammaanta iyo cisada iyo xoogga, waayo, wax kasta adaa abuuray, maxaa yeelay, doonistaada aawadeed ayay ku ahaadeen oo abuurmeen." (Muujintii 4:11). Abuuristu waxay ahayd fal uu si xor ah oo uu raali ka yahay u sameeyay Eebbe. Kitaabka Qudduusku wuxuu ka hadlayaa abuuristii dunidan aynu hadda ku nool nahay. Balse in uu Eebbe abuuray, ama uu wali abuurayo, duniyo kale waa su'aal macno daro ah.

MACNAHA ABUURIS

Erayga ah "abuuris" wuxuu macne ahaan Kitaabka Qudduusku ula jeedaa in Eebbe uu sameeyay ama sababay in uu jiro. Eebbe wuxuu dunida ka abuuray meel madhan. Ma jirin walax nooc ay doonto ha ahaatee uu Eebbe u

adeegsaday inuu sameeyo caalamka. Abuurista ka hor Eebbe oo kaliya ayaa jiray. “Isagu wax kasta wuu ka horeyaa, oo wax kastaaba isagay isku haystaan” (Kolosay 1:17). “Intaan buuruhu dhalan ka hor, iyo intaanad samayn dhulka iyo dunida, iyo xattaa weligeed iyo weligeedba adigu waxaad tahay Ilaah” (Sabuur 90:2). Awooddiisa weyn ayuu Eebbe ugu yeedhay wax walbaa inay ahaadaan (inay jiraan).

ABUURISTU MIYAY WAAFAQAYSAA FIKIRKA AADANAHA

Jiritaanka dunida, abuuristeedii iyo noolaynteedu, uma ahan qofka Masiixiga ah, arin ku timid qiyaas iyo malayn. Uma ahan arin uu ku oggolaaday caqli. Waase arin ku timid rumayn uu rumaystay qisada abuurista ee uu Eebbe sheegay. Masiixigu ma raadiyo qisada abuurista ee ku qoran Billowgii in uu waafajiyo fekerka aadanaha, laakiinse si fudud ayuu u aqbalaa hadalka Eebbe, in Erayga awoodda badan ee Eebbe uu wax walba ugu yeedhay inuu meel madhan ka abuurmo, oo uu abuuray wax aan hore u sii jirin. “Rumaysad ayaynu ku garanaynaa in duniyooyinka lagu abuuray hadalka Ilaah, sidaas daraadeed waxa la arko lagama samayn waxa muuqda.” (Cibraaniyada 11:3).

XILLIGII ABUURISTA

Eebbaha awoodda badanu uma uusan baahnayn wax xilli wakhtiyeed ah, ha dheeraado ama ha gaabnaadee, oo uu ku dhamaystiro hawshiisa abuurista. Waxaa suurtogal ah dunidan aan maanta joogno in uu ku abuuray ilbiriqsi.

Waxaa suurtogal ah inuu u daayay inay iyadu korto xilli wakhiyeed aad u dheer. Laakiinse wuxuu Eebbe si qeexan inoogu sheegayaa inuu isagu billaabay oo dhammaystiray hawsha abuurista lix maalmood oo xidhiidh ah gudahood. Odhaahda ah “fiidkii iyo subaxdii” ee ku jira Billowgii waxay calaamo u yihiin in maalmaha abuuristu ay ahaayeen maalmo caadi ah. Laga soo billaabo maalintii afraad (Billowgii 1: 14 – 19), habka cadceedda ee maantu wuu shaqaynayay, in qoraxdu ay xukunto maalinta oo dayuxuna uu xukumo habeenka.

Maalintii koowaad, Eebbe wuxuu abuuray walax isku jirta: Samada, dhulka, biyaha, iyo walax ilays ah. Bal eeg Billowgii 1: 1 – 5.

Maalintii labaad, Eebbe wuxuu abuuray meesha bannaan si ay u qaybiso oo u kala soocdo biyaha hoose iyo biyaha ka sareeya meesha bannaan. Baleeg Billowgii 1: 6 – 8.

Maalintii saddexaad, Eebbe wuxuu kala soocay dhulkii iyo baddii, oo wuxuu ka dhigay in dhulku uu soo bixiyo caws, dhir abuur dhasha, iyo geedo midho dhala, oo iniinahoodu ay ku dhex jiraan. Bal eeg Billowgii 1: 9 – 13.

Maalintii afraad, Eebbe wuxuu sameeyay qoraxda, dayaxa, iyo xiddigaha tirada badan, isagoo ku meeleeyay iyaga dahaadhka samada. Waxayna noqdeen kuwo leh nuurkii uu Eebbe abuuray maalintii koowaad. Walaxdii ilayska ahayd waxaa markaa lagu xoojiyay ifayaashaas samada. Ujeedadooduna waa inay siiyaan dhulka iftiin, oo ay wakhtiga u qaybiyaan maalmo, xilliyo iyo sannado. Bal eeg Billowgū 1: 14 – 19.

Maalintii shanaad, Eebbe wuxuu amray inay abuurmaan noocyo badan oo kala duduwan oo ah kalluun, xayawaanaadka badda, iyo shimbiro, oo wuu barakeeyay iyaga, oo ka dhigay inay dhulka ku tarmaan. Bal eeg Billowgii 1: 20 – 23.

Maalintii lixaad, Eebbe wuxuu amray in dhulku uu soo saaro nooc kasta oo noole ah, lo'da iyo bahallada iyo xayawaanka xamaaratada ah, oo mid kasta uu noociisa dhalo, wuxuuna ku barakadeeyay iyaga inay awoodaan inay isdhalaan oo tarmaan. Ugu dambaystiina Eebbe wuxuu sameeyay abuurkiisa kan ugu sharaf badnaa, kaasoo isaga dartii, si uu uga faa'iidaysto, u isticmaalo, oo ugu raaxaysto loogu abuuray uunka intiisa kale oo idil, wuxuuna Eebbe sameeyay nin. Bal eeg Billowgii1: 24 – 28.

"Maalintii toddobaadna, Ilaah wuu dhammeeyay shuqulkiisii uu sameeyay; oo maalintii toddobaad ayuu ka nastay shuqulkiisii uu sameeyay oo dhanba" (Billowgii 2: 2). Taasi macnaheed waa in Eebbe uu ka nastay inuu abuuro waxyaalo cusub oo kale.

ABUURISTII NINKA

Faahfaahinta laga bixiyay abuuristii ninku, waxay isaga ka dhigaysaa kan ugu muhiimsan ee ugu horeeya dhammaanba waxa muuqda ee la abuuray. Siday ahayd, Eebbe ma uusan doonin oo kaliya inuu nin abuuro, laakiinse wuxuu ka sameeyay jidhka ninka, waa Aadan e, dhoobadii dhulka, oo wuxuu dulalka sanka kaga afuufay neeftii nolosha (Billowgii 2:7), wuxuuna siiyay naf caqli leh iyo garasho, oo wuxuu isaga ka abuuray suuradiisa. Isla maalintaas, wuxuu Eebbe abuuray naag, taas oo ah Xaawo, oo wuxuu ka abuuray iyada feedh uu ka soo bixiyay Aadan (Billowgii 2: 21, 22). Ninka waxaa loo abuuray inuu Eebbe dunida u xukumo. Eebbe ayaana ka saraysiiyay wax kasta oo nool oo dunida korkeeda ka dhaqaaqa (Billowgii 1: 28).

Qofku waa shakhsi dhammaystiran oo ka kooban naf iyo jidh (Billowgii 2:7; Wacdiyaha 12:7). Jidhka qofku wuxuu ka samaysan yahay dhoobada dhulka (Billowgū 2:7), taasoo uu u noqon doono wakhtiga uu dhinto

(Billowgū 3:10). Nafta qofku ma ahan walax laakiinse waa ruuxi asal ah, oo qaab-dhismeedkeeduna ma ahan mid aynu garan karno. Waxay ku jirtaa jidhka (Falimaha Rasuullada 20:10), Waxayna nolol siisa jidhka, oo waxay inoo adeejisaa xubnaha kala duwan ee jidhka si waafaqsan dantii iyaga loogu talagalay. Xidhiidhka iyo falgalka ka dhexeeya nafta iyo jidhku waa cilmi si weyn inooga dahsoon.

Qofku wax wuu baran karaa, wuu fekeri karaa, wuuna walaaci karaa. Isagu waa uun ama noole asluubeed, oo leh kis aqoon ku saabsan Eebbe iyo sharcigiisa ah (Billowgū 2: 16, 17). Wuxuu leeyahay qofku garasho, taas oo ku boorisa in uu raaco sharciga, oo haddana ka dhigta eedaysane haddii uu kari waayo inuu fuliyo sharciga.

Garashadu waa awood xoog badan oo hagta qofka noloshiisa, oo qofka ku boorisa inuu sameeyo ama uusan samayn waxa qofka laf ahaantiisu uu aaminsan yahay in ay sax yihiin ama ay khalad yihiin. Garashadu ma ahan wax la yeesho dhalashada ka dib, waase qayb si dabiici ah uga mid ah qofka. Waxayna qofka ka soocdaa xayawaanka. Iyadu la mid ma ahan aqoonta uu qofku u leeyahay asluubta; sidoo kale laguma soo qaban karo aqoonta uu dabiici ahaan u leeyahay sharciga. Garashadu waa sida xaakin oo kale, oo aqoonta debiiciga ah ee saxda iyo khaladkuna waa sharciga ay wax ku xukunto. Garashadu ma hubsato in uu sax yahay fikirkeennu; wax kasta oo fikirkeennu uu yahay, garashadu waxay inagu boorisaa inaan isaga raacno oo nolosheenna waafajinno, oo sidaas ayay falalkeenana u xukuntaa. Sidaa darteed, garashada waxaa lagu qeexi karaa in ay tahay “dareen aan ku khasban nahay.” Oo wixii aan dareenno inuu sax yahay waa inaan samayno, oo wixii aan dareenno inuu khalad yahay waa inaan ka dheeraanno.

Garashadu waxay firfircoon tahay oo kaliya marka fikirkeenna mooraalku uu xumaado; markaasay inagu khasabtaa garashadu inaan u hoggaansanno fikirkeennii. Sidaa darteed, garashadu wax kasta oo aan samayno ama way aqbashaa, ama waxay inagu eedaysaa inaan khaldan nahay mar kasta oo aan yeeli wayno wixii aan wanaagga u haysannay.

In kastoo aysan ahayn in garashada la quudhsado, haddana iyadu ma ahan hage aan khaldamin, sababta oo ah, haddii garashadeenna uu xukum xeer ama sharci khaldanu; waxay inagu boorin in aan raacno xeerkaas khaldan. Wali Bawlos markuu dhibaatayn jiray Masiixiyiinta wuxuu raacayay garashadiisii, taas oo uu xukumay fikirkiisii khaldanaa ee ahaa in uu ugu adeegayo Eebbe dhibaatadii uu u gaysanayay iyaga. Markii dambe, ee uu raacay Masiixa, wuxuu haddana yeelayay wixii ay garashadiisu siisay, kaas oo uu xukumay fahamkii iyo aqoontii uu ka helay nuurka waxa uu Eebbe isaga ka doonayay. Runtii ma jiro wax la yidhaahdo garasho khaldan ama garasho shakisan; khalad kastaa wuxuu ku jiraa fekerka qofka, oo shaki kastaa wuxuu

ku jiraa fahamka. Sidaa darteed, garashadu ma ahan hage aan khaldami; haddii aan rabno in garashadeennu ay inagu boorido inaan wax sax ah samayno, waxay taasu ku xidhan tahay sida uu hadba sax u yahay fekerkeennu.

Aadan iyo Xaawo waxaa la abuuray iyaga oo leh faham dhammaystiran oo ku saabsan doonista Eebbe iyo garasho waafaqaysay fahamkaasi. Haddana waxaa iyaga ka suurto gashay in ay khilaafaan garashadoodii, sababta oo ah waxay lahaayeen doonis xor ah. Markii la uumay, iyagoo ku jira xaaladdii dhammayska ahayd, waxay lahaayeen doonis xor ah oo ay ku diidaan ama ku yeelaan jirrabaadda. Taasi waxaa markhaati u ah xaqiiqada ah in Eebbe uu dhigay geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta Beertii Ceeden dhexdeeda oo uu siiyay Aadan iyo Xaawo faahfaahin qeexan oo ku saabsan isticmaalka geedkaasi. Eebbe wuxuu geedka halkaasi u dhigay inuu ku tijaabiyo sida ay dadku u adeecaan doonistii la yaqaanay ee Eebbe. Bal eeg Billowgii 2: 17.

Eebbe wuxuu ninka u abuuray inuu isagu is muujiyo. Billowgii Eebbe wuxuu abuuray hal nin iyo hal naag oo wuu isu guuriyay iyaga inay noqdaan hal jidh (Billowii 2:18, 21 – 24),oo ay midho dhalaan oo tarmaan oo sidaa ay dhulka ku buuxiyaan (Billowgū 1: 27, 28). Eebbe "quruun kasta oo bani aadmi ah ayuu isaga mid dhigay inay dunida dusheeda oo dhan degganaadaan." (Falimaha Rasuullada 17; 26).

XAALADDII HORAYSAY EE QOFKA

Asal ahaan xaalka qofku wuxuu ahaa mid wanaagsan dhan kastaba. Xaaladda duleed ee jidhkiisu wuxuu ahaa kaamil (Billowii 2:17; Rooma 5:12). Awoodaha kala duwan ee naftiisu waxay ahaayeen kaamil. Xidhiidhka ruuxiga ah ee qofku uu la lahaa Eebbe wuxuu ahaa kaamil; muuqa Eebbe ee qofka laga abuuray, wuxuu ahaa u ekaanshaha ruuxiga ah ee Eebbe, oo ku salaysnaa qofka naftiisa, oo ka muuqday noloshiisana. Sharciga mooraalka wuxuu Eebbe qofka siiyay markuu abuurya. Eebbe wuxuu Aadan iyo Xaawo abuuray iyaga oo leh aqoon dabiici ah ee sharciga, oo aqoontaasuna waxay ahayd mid kaamil ah. Bal eeg Billowgii 1: 26; Billowgii 2:16; Billowgii 3:3. Waalidiinteenii koowaad waxay si wanaagsan u yaqaaneen waxa sax ah iyo waxa khaladka ah. Wacdiyaha 7:29 waxaan ka akhriyaynaa "Bal eeg, waxan keliya oo aan soo ogaaday in Ilaah binu aadmiga sameeyay iyagoo qumman, laakiinse waxay doondooneen hindisooyin badan." Wax kasta oo wanaag ah oo ku jira qofka wuxuu ka yimid Eebbe; dambi badnaantiisa iyo doqonnimadiisuse waxay ka timid qofka. Masiixiyiinta waxaa lagu booriyay dhaqan wanaag la mid ah kii waalidiinteennii koowaad markay kaamilka ahaayeen; Eeg Kolosay 3:10; Efesos 4:24.

Xidhiidhkii kalgacal ee ka dhexeeyay ninka iyo naagtu wuxuu ahaa mid aad u habboon, mid kastaana si buuxda ayuu u fahmayay oo u ilaalinayay waxa waajib ku ah iyo waxa ka reeban isaga, oo mid kastaa wuxuu kan kale u tixgelinayay inuu yahay hadiyad qaali ah oo uu ka helya Eebbihii abuuray iyaga. Xidhiidhka ka dhexeeyay qofka iyo uunka kale ee dhulka joogay wuxuu ahaa mid sarayn iyo xukumid. Eeg Billowgii 1: 28, 29; Billowgii 2:15.

MALAA'IGTU WAA ABUURKA UGU MUHIIMSAN EE KUWA AAN LA ARKIN

Abuurka Eebbe ee aan la arkin waxaa ugu muhiimsan malaa'igta. Wax jiritaankooda ka maragkacaya kama aragno dabeecadda, sababtoo ah wax xidhiidh dáreen ah lama lihin iyaga. Waxaan ka ogaanay in malaa'ig jirto Kitaabka Qudduuska. Eeg Daanyeel 7:10; Sabuurada 103:20, 21; Luukos 2: 13. Erayga malaa'ig macnihiisu waa "farii qaade."

Malaa'igtu waa uun ruuxi ah oo duwan (Sabuur 104: 4; Cibraaniyada 1:14), oo aan lahayn jidh ay ku noolyihiin, laakiinse u dhamaystiran dabcigooda ruuxiga ah. Waa uun shakhisyeed (Luukos 1:19), garasho u leh jiritaankooda iyo shakhsiyadoodaba. Waa uun fikir iyo go'aan qaadasho leh (Luukos 15:10), oo leh aqoon iyo xigmad (2 Samuu'eel 14:20), oo xoog leh (Sabuur 103:20), laakiin ma ahan kuwo wax walba awooda, oo leh aqoon oo idil (Markos 13:23). Malaa'igtu ma lahan jinsi lab ama dheddig oo isma guursadaan mana tarmaan (Matayos 22: 30). Ma dhintaan (Luukos 20:36).

Dhamman malaa'igtu waxay asalkoodii ahaayeen kuwo wanaagsan. Walina qaar badan ayaa fiican. Iyagu waa qudduus (Matayos 25:31; Luukos 9:26) oo waxay ku raaxaystaan raaxo waligeed ah iyo Eebbe la jiriddiisa (Matayos 18:10), oo ay ku helaan raalli ahaansho iyo farxad ay ugu adeegaan Eebbe. Waxay ammaanaan Eebbe (Luukos 2: 13, 14) oo way fuliyaan amaradiisa (Sabuurada 103: 20, 21). Hawshoodu waa inay u adeegan dhammaan kuwa ka baqa Eebbe ee jidadkiisa ku socda (Sabuurrada 34: 7; Sabuurrada 91:11), waana daryeelayaasha gaar ahaan caruurta (Matayos 18:10). Waxaa jira tiro badan oo malaa'igta wanaagsan ah (Luukos 2:13; Daanyeel 7:10), waxayna leeyihiin awood wayn (Sabuurrada 103: 20).

Masiixiyiinta waxaa qalbiqaboojin weyn u ah inay ogaadaan in malaa'igta Eebbe ay ilaaliso iyaga (Sabuurrada 91:11, 12), oo waa inaan aad isugu dayno inaan u noolaano sidii caruurta Eebbe si aynaan weligeen u waayin ilaalinta farriin qaadayaashaas jannada, oo aynu mar walba u yeelanno xaqa iyo fursadda tukashada: "Oo malaggaaga qudduusanu ha ila jiro si cadawga sharka luhu uusan awood iigu yeelan aniga!" Si kastaba ha ahaatee, waa in aynaan caabudin malaa'igta. (Kolosay 2: 18; Muujintii 22: 8, 9).

Qaar ka mid ah malaa'igtii wanaagsanayd ayaa noqday sharlayaal. Way dambaabeen (2 Burtros 2: 4; Yooxanaa 8: 44; Yuudas 6) iyagoo si ulakac ah u xumeeyay doonistoodii. Innagu ma naqaanno nooca uu ahaa dambigoodu iyo wakhtigii ay dambaabeen; waxaa suurtogal ah inay ahayd kadib maalintii lixaad ee abuurista iyo ka hor intuusan ibliisku jirabin waalidiinteenii koowaad. Malaa'igta sharka leh, oo uu madax u yahay shaydaanku (Matayos 25: 41; Muujintū 12: 9), hadda Eebbe wuu dayriyay oo waligood dib ugu soon noqon mahayaan xaggiisa (Matayos 25: 41). Waxaa jira malaa'ig badan oo shar leh (Markos 5:9), oo awood leh (Efesos 6:12). Malaa'gta sharka luhu gebi ahaanba waa kuwo dhaqan xun, oo shar leh, oo la dayriyay (Markos 1:23). Iyagu waa nacabka Eebbe iyo dadkaba, oo waxay isku dayaan inay burburiyaan hawlaha Eebbe oo ay ka hortagaan qorshaha nimcada ee uu Eebbe ugu talagalay dadka, sida aan ka aragnay jirrabaaddii Beerta Ceeden (Billowgii 3) iyo jirrabaadii Masiixa (Matayos 4: 1 –11) laakiin iyagu ka guulaysan mahayaan kaniisadda Ciise (Matayos 16: 18; Rooma 16:20). Waa in ay u adeegaan ujeedooyinka Eebbe u oggolaaday inay ku sameeyaan Ayuub, iyo waliba inay ciqaabaan kuwa sharka leh. (Sabuurrada 78: 49)

EEBBE AYAA WALI MAAMULA DUNIDA

Eebbe wuxuu si joogto ah oo firfircoon ula joogaa dhammaan waxa uu abuuray oo dhan, isagoo xafida oo jirsiiya, tilmaamaya, oo maamulaya iyaga. "Wax kastaba isagaa uumay…oo wax kastaaba isagay isku haystaan." (Kolosay 1:16,17) "Oo wax walba wuxuu ku hayaa Erayga xooggiitsa." (Cibraaniyada 1:3)

Eebbe wuxuu uunkiisa u adeegsadaa inay is taakuleeyaan oo midba uu kan kale ka caawiyo jiritaankiisa. Dhirta duurka iyo midhaha geedaha waxaa dadka loo siiyay inay u adeegsadaan "cunto." (Billowgii 1:29) Kadib markuu dambigu yimid, taasi waa la ballaadhiyay waxaana lagu soo kordhiyay inay dadku cunaan hilibka xoolaha nool. Eeg Billowgii 9:3; Sabuurrada 104: 14, 15. Guud ahaan uunku waa hawl yaab leh oo uu qabtay Eebbe, taasoo dhammaanteed isku xidhan si uu midba midka kale u anfaco.

XEERARKA DABIICIGA AHU WAXAY HOOS TAGAAN EEBBE

Eebbe hawlihiisa la xidhiidha jiritaanka uunka wuxuu u adeegsadaa xoogagga iyo xeerarka dabeecadda. Isagu waa kan wax walba sababa. Taasi innaga macno dhab ah ayay inoo samaynaysaa, maadaama ay muujinayso xaqiiqada ah inuu Eebbe si dhib ah uga dhigo wax walibaa inay u adeegaan baahideenna. "Qoraxdiisa wuxuu u soo bixiyaa kuwa xun iyo kuwa wanaagsanba, roobna wuu u di'iyaa kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa

ahaynba" (Matayos 5:45). "Isagu wuxuu ka dhigaa in dooggu xoolaha u soo baxo, oo geedaha yaryarna wuxuu u soo bixiyay in dadku ku isticmaalo, inuu dhulka cunto ka soo bixiyo." (Sabuurrada 104: 14) Ma jiro uun, mid nool iyo mid aan noolaynba, oo ka xor ah Eebbe, sida uusan uun u jirin isagoo ka xor Eebbe. "Laba shimbirood miyaan beesad lagu iibin? Middoodna dhulka ku dhici mayso amarka Aabbihiin la'aantiis. Timaha madaxiinna oo dhan waa tirsan yihiin." (Matayos 10: 29-30)

DAWLADDA EEBBE

Eebbe sida ugu wanaagsan ayuu u amraa, u maamulaa oo u agaasimaa arrimaha iyo falalka dhammaan uunkiisa, taas oo waafaqsan xigmaddiisa, caddaaladdiisa, iyo wanaagga sharafta magaciisa iyo samaha dadka aawadeed. Eebbe wuxuu xukumaa xeerarka dabeecadda (Billowgii 8: 22; Matayos 5:45; Falimaha Rasuullada 14: 17), wuxuu maamulaa quruumuhu halka ay ku dambayn (Taariikhda Israa'iil), oo wuxuu amraa nolosha qofka shakhsiga ah. (Maahmaahyadii 16: 9; Sabuurrada 33: 13-15)

Inkasta oo Eebbe uu marmar oggolaado in shar la sameeyo oo dadku ay ku socdaan jidadkooda khaldan (Sabuurrada 81: 12; Falimaha Rasuullada 14: 163; Rooma 1: 24) Haddana isaga ayaa xukuma sharka dunida. (Falimaha Rasuullada 9; Sabuurrada 33:10; Billowgii 50: 20; Sabuurrada 91: 10-12) Eebbe ayaa ka go'aan gaadha illaa xadka ay jirayaan dadka sharka luhu, laakiin isagu ma doono shar; oo sidaa darteedna wuu xakameeyaa natiijada falalka sharka ah si ugu dambaysta wax kastaaba ay ugu adeegaan wanaagga carruurtiisa. Eeg Rooma 8:28

Eebbe ka masuul ma ahan sharka dadku ay falaan. Isagu ma jaclaysto xumaanta. "Midna yuu odhanin kolkii la jirrabo, xagga Ilaah baa layga jirrabay. Waayo, Ilaah laguma jirrabo shar, isaguna midna ma jirrabo. Mid kasta waxaa jirraba damaciisa sharka ah isagoo la jiidanayo oo la sasabayo." (Yacquub 1: 13,14)

AYAANSIGU MA WAAFAQSANA QORNIINKA

Ayaansigu waa caqiidada odhanaysa wax walba waxaa sababa nasiibka iyo xaaladda, oo waxba lagama qaban karo. Dadka aaminsan ayaansigu waxay qabaan in la is dhiibo, taasina ma ahan Masiixinimo. Qorniinku muxuu inooga iftiiminayaa ayaansiga?

Qorniinku wuxuu ina barayaa in wax walba ay ku yimaadeen si waafaqsan talada go'aanka leh ee Eebbe. Tusaale ahaan: Falimaha Rasuullada 4: 27, 28 iyo Matayos 26: 54 waxaan ka baranaynaa in Masiix shirqoolkii la

sirqoolay, siliciisii iyo dhimashadiisiiba ay ahaayeen wax uu hore Eebbe uga sii go'aan gaadhay.

Qorniinku wuxuu inoo sheegayaa Eebbe in uu dadka ugu yeedho kaniisadda Masiixa. (1 Butros 2: 9; 2; Timoteyos 1:9; 2 Tesaloniika 2: 14; Falimaha Rasuullada 2: 47) Sidaa darted, wax kastaaba waxay ku dhacaan sida uu Eebbe amray. Qof kasta waa in uu yidhaahdaa. "Wakhtigaygu gacantaaduu ku jiraa." (Sabuurrada 31: 15) Wax walbaa Eebbe gacantiisay ku jiraan, mana jiro wax uunka nool si kamma ah uga yimaadaa. Ma jirto shimbir dhulka ku soo dhacda isagoon raalli ka ahayn. Timaha madaxeeenu waa tirsan yihiin. Si waafaqsan xeerka Eebbe ee uu inagu daryeelo, kaasoo xukuma wax kasta, waa sax in la yidhaahdo wax kasta waxaa keena baahi, sababta oo ah waxaa inoo go'aamiya Eebbe.

Taasi waxaa ka soo baxaya su'aalo. Ma shardi baa wax kasta oo nolosha ku yimaadaa in ay noqdaan sida ay hadda u dhaceen? Miyayse dhici lahaayeen haddii dadku wax samayn lahaayeen? Haddii cimrigeennu kooban yahay, miyaan wax ka samayn karnaa, si aan u dheerayno ama u gaabinno oo aan u sababno in uu isbeddelo qorshaha uu dadku u samaysto nolosha iyo noolaanshaha? Qofka ayaansiga aaminsani wuxuu isu dhiibaa marka uu arko xaqiiqada ah natiijo ka soo bixi mayso, waana khasaare in la isku dayo in wax laga beddelo xaalad hore loo sii go'aamiyay.

Taasi waa aragti liddi ku ah Masiixinimada, maadaama ay diidan tahay in ay suurtowdo in xidhiidh shakhsi lala yeelan karo Eebbe, oo sidoo kale ma aysan tixgelin tilmaamaha kale ee Eebbe.

Isla Qorniinkaa ina baraya in wax kasta uu go'aamiyo Eebbe, ayaa haddana ina baraya in aan si kasta ugu dadaalno sidii aan si wanaagsan oo taxadar leh ugu adeegsan lahayn fursadaha kala duwan ee uu Eebbe inoo siiyay inaan nolosheenna ku hagaajinno. Tusaale ahaa: Ciise isagoo qiranaya runta wuxuu isku dayay inuu Bilatos ka joojiyo inuu ku dhawaaqo xukun aan cadli ahayn. (Yooxanaa 19:11, 12) Isagoo qiraya inuu dambilaawe yahay, Masiix isuma uusan dhiibin cadawgiisii. Eebbe wuxuu nimcadiisa inoo siiyay inaan dunida ku guulaysanno Masiixa aawadii; waa inaan adeegsanno wax kasta oo uu Eebbe ina siiyay si aan u daryeello nolosheenna iyo jiritaankeenna. Marka aan jiranno waa inaan daawo raadsanno oo is daawayno. Marka aan dhisayno nolol Masiixinimo, waa inaan adeegsanno siyaabaha aan ku helno nimcada. Maadaama aan ognahay in Eebbe uu go'aamiyay wax walba inay ahaadaan sida ay yihiin, haddana ma ahan in aynaan mudnaan siin siyaabaha aynu ku helno waxyaabaha dhisa nolosheenna.

Xagga Eebbe wax walba hore ayaa loo sii qaddaray, laakiin xagga dadka waa inaan adeegsanno wax kasta oo uu Eebbe ina siiyay si aan nolol u samayno. Labadan arrimood ma ahan kuwo is khilaafsan, inkastoo hadalka hore u muuqdo inuu kan dambe meesha ka saarayo. Ayaansiga, oo xoog saaraya kan hore, isla markaana aan tixgelinin muhiimadda uu leeyahay kan labaad, waa fikir liddi ku ah tilmaamaha iyo waxbaridda Qorniinka.

DANTA UGU DAMBAYSA EE UU EEBBE KA LEEYAHAY UUNKIISA

Iyadoo gebi ahaanba abuuristu ay tahay muujinta xigmadda iyo awoodda wayn ee Eebbe, oo walxuhuna ay iyagu yihiin kuwo wanaagsan oo loogu talagalay isticmaalka iyo ka faa'iidaysiga qofka, haddana danta ugu dambaysa ee abuuristu waa sharafta iyo ammaanta Eebbe. "Rabbigayagow, Ilaahayagow, adigu waad istaahishaa inaad heshid ammaanta iyo cisada iyo xoogga, waayo, wax kasta adaa abuuray, maxaa yeelay, doonistaada aawadeed ayay u ahaadeed oo u abuurmeen." Habboonaa in qoraaga Sabuurka 148 uu uunka oo idil ugu yeedho inay Eebbe ammaanaan!

FIIRADA WAARTA EE NOLOSHA MASIIXINIMADA

Nolosha Masiixinimadu hal ujeedo oo kaliya ayay leedahay. Waana in waxa kaliya ee si gaar ah loogu fiirsado waligeed uu ahaado in nolosheenna oo dhan aan ammaanno Eebbe. Waa taas tan uu u jeeday qoraha Sabuurku markuu lahaa: "Wax kasta oo neef luhuba Rabbiga ha ammaaneen." (Sabuurrada 150: 6) Naftu ha ku dhiiranaato oo ha ku boqranaato ammaanta! Nolosheenna–Sabuur, Sabuur ammaan ah! Waa taas nolol caraf qudduusan leh, oo raali galin Eebbe.

Marka hore Eebbe aan ku sharafno waxa uu isagu yahay. Waxaan ka akhriyaynaa Sabuurrada 89:6: "Bal yaa cirka ku jira oo Rabbiga lala simi karaa? Balse yaa ku dhex jira wiilasha kuwa xoogga badan oo Rabbiga la mid ah?" Haybadda Eebbe oo kaliya ayaa u qalanta inaan u hurno ammaan. Eebbe waa kan ina uumay, waana Rabbigeenna.

Tirada iyo qaalinimada barakooyinka uu Eebbe ina siiyay iyana waa tan labaad ee sababta u noqonaysa inaan ammaano Eebbe. Barakooyinka uu Eebbe ina siiyay jidhahaan iyo nafahaa aad ayay u badan yihiin. Taas aawadeedna, Eebbe wuxuu inaga mudan yahay ammaan aan xad lahayn. Qof kasa oo Masiixi ahu waa inuu sida Sabuuryahanka ku dhawaaqo: "Bal maxaan Rabbiga ugu celin waxyaalihii uu ii taray oo dhan?… Rabbiga ayaan u oofin doonaa nidaradaydii, oo waliba waxaan ku bixin doonaa dadkiisa oo dhan hortooda." (Sabuurrada 116: 12,14).

CUTUBKA 5
DEMBI, XUMEEYIHII WEYNAA

Dunidan aadka u fiican ee aan ku noolnahay, waxaa kharibay dambi. Iyadoo dunida uu dambi buuxshay, haddana erayga “dembi” aad looma soo hadal qaado. Dadku maba jecla inay maqlaan, ama wayba fududaystaan.

QEEXIDDA DEMBI

Dambi waa samaynta wax Eebbe xaaraameeyay, ama samayn la’aanta wax uu amray. Waa in Eebbe laga hor yimaaddo oo la caasiyo. Maadaama xeerka asluubtu uu ina barayo waxa Eebbe uu rabo inaan samayno iyo waxa uusan rabin inaan samayno, “Dambigu wuxuu yahay caasinimo”(1 Yooxanaa 3:4). Dambigu ma ahan wax soo mara qof kasta inta uu ku jiro heerka koritaanka.

Xadgudub kasta oo lagu sameeyo sharciga, ha yaraado ama ha waynaado, ha la ogaado ama ha la moogaado, ha ahaado fikir, erayo ama ficillo, waa dambi. Sidoo kale ficil kasta oo si xilkasnimo la’aan ah loo sameeyo waa dambi haddii uu lidi ku yahay doonista Eebbe. Su’aasha ah in wax uu dambi yahay iyo in kale ma ahan mid go’aan lagaga gaadhi karo waxa innaga ama dadka kale aan u malaynayno, laakiinse waxaa lagaga go’aan qaadan sida uu rabo sharciga Eebbe. Dhanka kale, ra’yiga iyo fikirka dadku wax kama dhigi karo dambi haddii waxaasu uusan liddi ku ahayn doonista Eebbe. Dambigu marnaba sax ma ahan, dembigu waa xaalad, waana fal. Eebbe waligii ma sahlin dembi, oo innaguna ma aha inaan sahlanno.

ASALKII DEMBIGA

Dambiga asalkiisu kama iman Eebbe ama qof. Ibliis ayuu ahaa kii ugu horeeyay ee dambaaba, oo isaga ayaa dambiga keenay dunidan. Dambi kii ugu horeeyay waxaa sababay ibliiska. Xataa wakhtigaa ka hor Eebbe ayuu ku caasiyay. (1 Yooxanaa 3:8) Inkastoo markii hore la abuuray isagoo wanaagsan oo kaamil ah (2 Butros 2;4; Yooxanaa 8:44), ibliiska iyo qaar kale oo malaa’igta ka mid ahu waxay ku xadgudbeen qaar ka mid ah amarada Eebbe, oo sidaasuu sharkii ku yimid. Innagu ma garanayno dembiga gaarka ah ee ay galeen, laakiinse waxaan ognahay inay Eebbe ku caasiyeen oo ka horyimaadeen.

IBLIISKU WUXUU JIRRABAY AADAN IYO XAAWO

Dadka waxaa jirrabay ibliiska. Eeg Billowgii 3: 1-7. Si xor ah ayay raalli uga noqdeen Aadan iyo Xaawo jirrabaaddii shadaanka, oo sidaas aawadeed, waxay masuul ka ahaayeen xadgudubkoodii. Oo dhanka dadka waxay taasi ahayd fal uu gabi ahaanba u sameeyay si xor ah.

Xaaladdii dambi la'aanta ee asalka u ahayd dadka waxay dhammaatay markii uu dadku ku dhacay dambiga. Xadgudubkii ay ku sameeyeen amar muhiim ah, kaas oo ahaa in aanay cunin geed ku yaalay beerta, ayay Aadan iyo Xaawo ku dambaabeen iyagoo jabiyay dhammaan sharcigii (Yacquub 2:10), waayo, halkaas waxay ku jabiyeen gabi ahaanba sharcigii asluubta, ee uu Eebbe rabay in aysan ka bixin ee ay ku noolaadaan.

Natiijadii ugu horaysay ee dambigii uu dadku galay waxay ahayd isagoo waayay suuradii Eebbe. Maadaama uu dambaabay, dadku way waayeen qudduusnimadii; oo mar haddii dambiile uu noqday ma ahan daahir. Xidhiidhkii qudduusnaa ee dadku uu Ilaahay la lahaa wuu baaba'ay. (Billowgii 3:8, 10-12; Efesos 2:1)

Sidaa darteed, dadku waxay ku hoos dheceen cadhada iyo inkaarta cadliga ah ee Eebbe. "Laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta waa inaanad waxba ka cunin; waayo, maalintii aad wax ka cuntid hubaal waad dhiman doontaa." (Billowgii 2: 17)

Waxaa jiray natiijo kale oo ka dhalatay dadku dambigii uu falay. Xidhiidhkii asluubeed ee qofku la lahaa dariskiisa ayaa isna is beddelay, sida aan ka aragnay dilkii uu Qaabiil dilay Haabiil. Qofka waxaa ka lumay jacaylkii uu u qabay dariskiisa, oo wuxuu noqday mid naftiisa oo qudha jecel. Sarayntii uu qofku ka sareeyay dabeecaddana mudgi ayaa galay. Noloshiina waxay noqotay halgan adag. Dhammaan uunkiina waxaa hadheeyay qab iyo khiyaano (Rooma 8:20-22). Qaybaha maskaxda qofkuna waxay wayday kaamilnimadeedii asalka ahayd, oo dadkuna jidh ahaan way jilceen. Eeg Billowgii 3:16-19, 21; Rooma 5:12; Rooma 6: 23. Qofkii wuxuu noqday mid dhinta.

WAXAAN DHAXALLAY KHARAABNIMADII AADAM

Daacaddaradii waalidiinteennii ugu horeeyay ayaa dunida keentay dembiga, dembiguna wuxuu keenay dhibaato, silic, iyo dhimasho ku timaadda dadka. "Sidaa darteed, siduu dembigu nin keliya dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaaasaa dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan, waayo waa la wada dembaabay." (Rooma 5:12).

Dadka oo dhamu kharaabnimo ayay ka dhaxleen Aadam, taas oo saamaysay dhammaan dabeecaddii dadka. Kharaabnimadaasi waxay waalidka uga sii gudubtaa caruurtooda. Kharaabnimadaas aan dhaxallay waxaa la yidhahdaa "Aadamkii hore," ama "Ninkii hore" (Efesos 4:22), waxaa kaloo la yidhaahdaa, "jidhka" (Yooxanaa 3:6; Rooma 7:18) ama "dembigii asalka ahaa," waxaa sidaa loo yidhaahdaa waxay tilmaamaysaa asalkii dambingu halka uu ka soo galay dadka. Tanu ma ahan dembi aan gallay, laakiin waa xaaladda sharka leh ee dabeecaddeenna, taasoo aan ku dhalanno.

Qofna ma dhasho isagoo wanaag ku jiro. Qorniinku wuxuu ina barayaa in dadka oo idil ay si dabiici ah kharaab u yihiin. "Wixii ka dhashay jidh waa jidh" (Yooxanaa 3:6). "Bal eega, aniga waxaa laygu qabanqaabiyay xumaan, oo waxaa hooyaday igu uuraysatay dembi." (Sabuurradii 51:5)

DABEECAD AHAAN DADKU WAA CADAWGA EEBBE

Xaaladdaas sharka leh ee aan ku sugannahay aawadeed dhammaanteen waxaan si dabiici ah ugu sifaysan nahay shar, ruuxi ahaan waan indhala' nahay, waan dhimmannay, oo waxaan nahay cadawga Ilaah. "Waan ogahay inaan wax wanaagsanu igu dhex jirin, taas waxaan ula jeedaa, jidhkayga wax wanaagsanu kuma jiraan" (Rooma 3:11-12). Qofku dabeeci ahaan kama cabsado, ma jeclaado mana aamino Eebbe. Dadka oo doonistooda xorta ah kaga tagay Eebbe, haddana caqligiisa, xooggiisa iyo doonistiisa uguma noqon karo Eebbe. "Ninka nafta raacaa ma aqbalo waxyaalaha Ruuxa Ilaah, waayo, nacasnimo bay u yihiin, mana garan karo, maxaa yeelay, ruuxa ayaa lagu imtixaamaa" (1 Koritos 2:14). Masiixiyiintuna, sidoo kale, dabeecaddooda aawadeed "ayay ku dhinteen xadgudubyadooda iyo dembiyadooda." (Efesos 2:1)

DAACAD DARRADA FALEED

Dambigii asalka ahaa ayaa sababa in ay dadku galaan nooc kasta oo fal dambiyeed ah. "Geedkii xumina midho xun buu dhalaa" (Matayos 7:17). "Waxaa qalbiga ka soo baxa fikirada sharka leh iyo dilidda iyo sinada iyo galmada xaaraanta ah iyo tuugonimada iyo maragga beenta ah iyo cayda" (Matayos 15: 19). Fal Dambiyeed waa wax kasta oo ka soo horjeeda Amarada Ilaah, kaas oo ah fikir, damac, hadal, ama ficil. Waxaa kuwaas la yidhahdaa: fal dambiyeed. Looma yidhaahdo oo kaliya inay dhab u yihiin dambi ahaan, laakiin waxaa loo yidhaahdaa innaga ayaa falna, ama samaynna. Waxaana loogu yeedhaa kuwaas dambiyada la falay, sababta oo ah innaga ayaa galla.

Sidoo kale, dambigii asalka ahaayu wuxuu inoo horseedaa inaan dayacno wixii ay ahayd inaan samayno. Dambiyadan waxaa la yidhaahdaa dambiyada dayacaadda, sababta oo ah waxaan dayacnaa wixii ay ahayd inaan

samaynno. Wadaadkii iyo Laawigii ku jiray misaalkii ku saabsanaa ninkii reer Samaariya ee wanaagsanaa (Luukos 10: 30-37), ee dhinaca ka maray ninkii ay tuugadu dileen, waxay galeen dambiga dayacidda, waxay ku guuldaraysteen inay fursaddaas ka faa'iidaystaan oo ninkaas u gargaaraan. Ma jiro qof si dabeeci ah u damca inuu sameeyo waxa uu Eebbe isaga ka rabo; ma jirto xattaa raalli ahaansho ah in Eebbe la addeeco.

Natiijada qudha ee dhammaan waxaasi waa in qofka dabiiciga ahu uusan ilaalin karin xattaa wax yar oo ka mid ah amarada Eebbe. "Dhammaantood gees bay u wada leexdeen, oo way wada nijaasoobeen, mid wanaag falaa ma jiro, midnaba (Sabuurrada 14;3). "Waayo, dhulka laguma arag nin xaq ah oo wanaag fala, oo aan dambaabin" (Wacdiyaha 7:20) "Kulliganno waxaanu noqonnay sida wax aan nadiif ahayn, oo xaqnimadayada oo dhamuna waa sida dhar wasakh ah (Ishacyaaha 64:6). Kitaabka Qudduusku runtuu ka sheegayaa xaaladdeenna dabiiciga ah, sida baadhitaan kasta oo si daacad ah la isagu sameeyo laga arki karo. "Haddaynu nidhaahno, dembi ma lihin, nafsaddeenna ayaynu khiyaanaynaa, oo runtuna inaguna jirto" (1 Yooxanaa 1:8).

SAAMAYNTA DEMBIGA EE SHARCIGA EE AQOONTA DABIICIGA AH

Ku dhiciddii uu dadku ku dhacay dambigu waxay yaraysay aqoonta dabiiciga ah ee qofku u leeyahay sharciga; mase aysan tirtirin gebi ahaanteedba, wuu khafiifiyay, laakiin ma masixin guud ahaanba. Illaa iyo maanta dadku waxay u leeyihiin waxoogaa aqoon ah oo dabiici ah Eebbe sharcigiisa, taas oo garashadoodu ay ku xukunto fekerkooda, hadalkooda, iyo falalkooda. Eeg Rooma 2:14,15. Aqoontaas xagga sharciga ee dadka ku jirtaayu sidoo kale dhawr heer oo kala duwan ayay u khariban tahay, saamaynta caadooyin iyo dhaqammo dambi leh aawadood. Dadka "fikiradoodii waa xumaadeen, qalbigoodii garaadka lahaana waa madoobaaday" (Rooma 1:21) Eega Efesos 4:17-19.

Sidaas oo ay tahayna waxaa jira aqoon sharci oo ku filan dhammaan in dadka Ilaah hortiisa lagu eedeeyo dambiyadooda. Eeg Rooma 1:32; Rooma 3: 19,20. Xogtaasina inay jirto waxaa laga garanayaa diimaha qofka dabiiciga ah ee meel kasta ka jira.

MASIIBADA DEMBIGA

Dembigu waa masiibada ugu weyn ee nolosha dadka. Waxay wax aan suurtogal ahayn ka dhigtay in lagu noolaado si waafaqsan qorshihii Eebbe ee dhulkan, oo waxay dadka ka qaadday fursaddii ahayd inay Eebbe la noolaadaan nolosha dambe. Aadan iyo Xaawo hadday ku jiri lahaayeen

xaaladdii kaamilka ahayd, waxay noolaan lahayeen waligood. Taasina dembiga ayaa u baddalay dhimasho, dhimashada dunidan iyo dhimasho daa'im ah. "Nafta dembaabtaa way dhiman doontaa" (Yexesqeel 18:20). "Mushahaarada dembigu waa dhimashada" (Rooma 6:23). Ma dhici doonto inaan dembiga la abaal marin oo la ciqaabin. "Dembigu kolkuu weynaado wuxuu keenaa dhimasho" (Yacquub 1:15). Haddii uusan Masiixu aawadeen dhammaystiri lahayn sharciga Eebbe, ma aysan jirteen si looga baxsado masiibada uu keenay dambigu ee aan laga gudbi karin, la iskana tiri karin, ee inagu dhici lahayd. Dembigu waa xumaan ka ugu weyn.

CUTUBKA 6
AQOONTA DEMBIGA EE XAGGA SHARCIGA

Waxaa jira hal miisaan oo kaliya oo ay tahay in dadku ay noloshooda ku xukumaan. Kaas oo kaliya ayaana u muujin inta uu wanaaggiisa ama sharkiisu la'eg yahay. Miisaankanuna ma ahan mid uu dad sameeyay. Xaaladaha duleed ee dunida ama dareenka iyo aragtida isbeddelaya ee dadkuna waxba kama beddeli karaan. Wuxuuna ka yimid Eebbe, kan ina abuuray, oo waxaa lagu qoray sharciga, ama Tobanka Amar. Sharciyada dawladeed ama fikirada la isku raacsan yahay ee wanaagga dadka dhexdiisa ah midna ma go'aamin karo xaqnimada ama dambiilenimada qofka ee Eebbe hortiisa. Eebbe ayaa sameeyay miisaan, oo miisaankiisuna marna isma beddelo. Waligoodna dadku way soo adeegsanayeen. Miisaanka kaliya ee lagu cabbiro wanaagga dadkuna waa sharciga Eebbe.

SHARCIGA ASLUUBEED EE LA MUUJIYAY

Sharciga asluubeed ee ku jira Tobanka Amar waa mid ka yimid Eebbe oo loogu dhiibay Muuse Buurta Siinaay (Sharciga Ku Noqoshadiisa 4:13), kaasoo uu ku daabacay laba sallax oo dhagax ah (Baxniintii 31:18). Tobanka Amar waxay ku qoran yihiin Kitaabka Qudduuska, Baxniintii 20 iyo Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:6-22, waana dhammaystirka buuxa ee sharciga sida laga arko qalbiga qofka dabiiciga ah.

Awoodda wayn ee Eebbaha qudduuska ah ayaa daba joogta mid kasta oo ka mid ah Amarada. "Anigu waxaan ahay Rabbiga, Ilaahaaga ah" (Baxniintii 20:2) ayaa la socota Amarka koowaad, oo kana muuqata dhammaanba amarada. Mana jirto cid amaradaasi nasaqi kartaa.

Sharciga asluubtu dadka oo dhan ayuu koobayaa. "Waa inaad:" iyo " waa inaadan" ayaa lagu yidhi dhammaan dadka oo idil. Eebbe wuxuu ku adkaystay addeecid kaamil ah oo adag. Addeeciddu ma ahan ikhtiyaar, wax ku xidhan raalli ahaansho ama karidda dadka. Waa mid sharci ah. "Sidaas aawadeed u samaada sida Aabbihiinna jannadu u san yahay." (Matayos 5:48)

Eebbe wuxuu rabaa in amaradiisa loo xajiyo jacaylkiisa aawadiis. "Jacaylku waa oofinta sharciga" (Rooma 13:10). Haddaba, dan kasta oo kale, sida iyadoo laga cabsado ciqaab ama la doono sharaf iyo abaalgud, ma ahan

sharci oofin sida uu Eebbe inoogu amray. Eebbe waa "Ilaah masayra," taas oo macnaheedu yahay in uu rabo oo inaga doonayo daacadnimo buuxda iyo inaan isaga si buuxda u caabudno oo u addeecno (Matayos 4:10; Ishacyaah 42:8) iyo inuusan u dulqaadanayn oggolaynna in habayaraatee laga tago amaradiisa. Taasina waa mid taabanaysa fekerkeenna iyo damaceenna iyo sidoo kale hadalkeenna iyo falalkeenna.

HANJABAADDA IYO BALLANQAADKA EEBBE

Eebbe wuxuu leeyahay: "Aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah, waxaan ahay Ilaah masayra, oo xumaanta awoowayaasha waxaan soo gaadhsiiyaa caruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amaradayda xajiya" (Baxniintii 20: 5-6). Eebbe dadka wuxuu u ciqaabi dembiyadooda aawadeed, maadaama dembigu uu ceeb ku yahay Eebbaha qudduusan ee cadliga ah. "In alla intii shuqullada sharciga isku hallaysaa, inkaar bay ku hoos jiraan; waayo, waxaa qoran, waa inkaaran yahay ku kasta oo aan ku sii soconin inuu sameeyo wax kasta oo ku qoran kitaabka sharciga" (Galatiya 3:10). Inkaartaas waxaa ka mid ah nooc kasta oo ciqaab iyo silic ah oo noloshan iyo dhimasho daa'im ah iyo xukun aakhiro. "Mushahaarada dembigu waa dhimasho" (Rooma 6:23). Caruurta sharka leh ee ay dhaleen waalid shar luhu waxaa loo ciqaabi doonaa dembigii waalidkood inta ay dunida joogaan, oo haddii ay ku sii socdaa dembigooda, waxaa lagu ciqaabi doonaa aakhiro dembigooda aawadii; laakiin ma jiri doonto cid loo ciqaabi aakhiro dembi uu falay qof kale. Xattaa caruurta suubban ee ay dhaleen waalid shar luhu waxay dunida kula kulmayaan natiijo shar leh, sababta xumaantii waalidkood; taasise ma ahan ciqaab, laakiinse waa uun edbin, uu Eebbe u edbinayo wanaagga aakhiradooda. Dembiyada aabbayaashu waxay leeyihiin saamayn dambe, saamayntaasi kuma koobna oo kaliya nolosha aabbaha, laakiinse waxay u gudubtaa nolosha caruurtooda.

Eebbe si nimco iyo naxariis leh ayuu ugu abaalgudaa jidh iyo naf ahaanba dhammaan kuwa isaga jecel ee ilaaliya amaradisa. Balanqaadkani waa mid aynaan u qalmin.

TIRADA AMARADA

Rabbigu ma uusan sheegin habka ama tirada amarada. Amaradu si waafaqsan ujeedadooda ayay iyagu dabci ahaan isu qaybiyeen laba kooxood. Kuwa hore waxay ka kooban yihiin, kuwa ka hadlaya cibaadadeenna Eebbe, oo inaga raba in aan Eebbe jeclaanno. Eeg Matayos 22:37. Kuwa labaad waxay ka kooban yihiin, kuwa ku saabsan sida aan ugu adeegayno deriskeenna oo waa kuwo inaga raba inaan dadka u jeclaanno si la mid ah sida aan nafteenna u jecel nahay. Eeg Matayos 22:39

Habka tirada amaradu waa mid uu dadku u sameeyay. Kaniisadda Luteranku waxay adeegsatay hab ay israacisay sadddexda amar ee hore, oo isku dhan ah iyo toddobada amar ee kale oo iyana isku dhinac ah; tirintani waa hab ay isku raacsan yihiin inta badan dadyowga Masiixigu. Hase yeeshee; qaar ka mid ah Masiixiyiintu waxay amar saddexaad ka dhigeen faahfaahin ay ka bixinayaan amarka koowaad, oo sidaa darteed amarka annaga labaad noo ah wuxuu iyaga u yahay saddexaad, oo halka amaradeenna sagaal iyo toban iyagu intay labadaa isku dareen ayay ka dhigeen amarka tobnaad. Tirintu wax macne ah ma samaynayso mar haddiiba la garanayo sharciga Eebbe midka uu qofku ka hadlayo.

UJEEDADA KOOWAAD EE SHARCIGA ASLUUBTA

Ka hor inta uusan sharciga asluubtu inoo qaban ujeeddo kale–oo waxaa jira ujeedooyin kalee- waa inuu ina garansiiyo dembiyadeenna. Taasina waa ujeedadiisa koowaad, ee daruuriga ah, maadaama aynu nahay dabiici ahaan sida aynu nahay. Sida muraayad oo kale ayuu sharcigu inoo tusaa dembigeenna. Waa tuse kaamil ah, mid aan khalad ka sheegin waxba. Waxa laga arko muraayadda sharcigu waa qofka dembiilaha ah. “Sharciga ninna xaq ku noqon maayo Ilaah hortiisa” (Rooma 3: 20). “Dembi ma aanan garteen, sharcigaan ku gartay mooyaane” (Rooma 7:7). Haddii aynaan marka hore sharciga ku xidhnaan oo si daacad ah nafteenna u baadhin, wax badan oo wanaag ah inoo tari uu maayo.

Haddii aynaan garawsan, Ilaahay hortiisa in aynu ku nahay dembiilayaal, ma dareemi doono inaanu u baahan nahay badbaadiye. Masiixa, oo ah badbaadiyaheenna, ayaa inoo dhammaystiray sharciga oo guday dembiyadii xadgudubyadeenna. Nolosheenna oo aan ku eegno nuurka Tobanka Amar ayaa inoo muujin inaan nahay dembiilayaal u baahan badbaadin. “Haddaba sharcigu waa maxay? Waxaa loogu daray xadgudubyo aawadood… Qorniinku wax walba dembiguu ku hoos xidhay in ballanka rumaysadka ee Ciise Masiix la siiyo kuwa rumaystay” (Galatiya 3:19,24). Sharcigu wuxuu ina garansiiyaa dembigeenna, oo wuxuu ina dareensiiyaa mar kasta inaan u baahan nahay badbaadiye.

SHARCIGA IYO QALBIGA LA CUSBOONAYSIIYAY

“Masiixu wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga, isagoo inkaar inoo noqday, waayo, waxaa qoran, mid kasta oo geed ka soo deldelanu wuu inkaaran yahay, inay barakadu Ibraahin quruumaha ugu timaaddo Ciise Masiix; in aynu ballankii Ruuxa ku helno rumaysad” (Galatiya 3:13,14). Masiixa ayaa sharciga inoo kaamilay. Taasna waxaan ku ogaanay Injiilka, oo inoo sheegaya badbaadadeenna. Marka ruuxa Ilaah uu ina siiyo iimaan aan ku

aaminno Masiixa, waxaa kaloo uu ina siiyaa awood iyo karti aan ku fulinno amaradiisa; wuxuuna inagu abuuraa jacaylka Ilaahay iyo walaalaheen. "Waynu jecel nahay isaga, waayo, isagaa hore inoo jeclaaday" (1 Yooxanaa 4; 19) oo marka la eego xaqiiqada ah in dabiici ahaan aynaan si fiican u garan doonista qudduusan ee Ilaah, waxaan si joogto ah ugu baahan nahay camalka run ahaantii wanaagsan. Jacaylka Ilaah ee uu inagu beeray Ruuxa Ilaah ayaa ah midka ku boorinaya Masiixigu inuu addeeco sharciga.

WAAJIBAADKA XAGGA EEBBE WAA QAYBTA KOOWAAD EE SHARCIGA

Saddexda amar ee ugu horeeyaa waxay ka hadlayaan inaan Ilaahay caabudno iyo inaan sidoo kale jeclaano Ilaah. Waxaana soo koobaya erayadan Masiixa: "Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan iyo naftaada oo dhan iyo caqligaaga oo dhan." (Matayos 22:37)

AMARKA KOOWAAD

"Waa in aadan Ilaah kale yeelan aniga mooyee? Tanu waa tan ugu weyn amar oo dhan, oo waxaa ku jira waxa kale oo dhan, maadaama uu tan Ilaah inagaga rabo inaan isaga ka cabsanno oo jeclaanno, taas oo ah halka salka u ah in la addeeco dhammaan amarada ku jira labada qaybood ee sharciga. Ilaah wuxuu rabaa qalbigeenna, waxa aan nahay ama aan haysanno oo dhan.

"Anigu waxaan ahay Rabbiga, kaasuna waa magacayga, oo sharaftaydana mid kale ma siin doono, oo ammaantaydana sanamo xardhan innaba ma siin doono" (Ishacyaaha 42:8). Ilaahay wuxuu xaaraameeyay sanam la caabudo nooc kasta. Sanam waa ilaah been ah. Waxaa la inaga xaaraameeyay inaan u'tixgelinno oo u caabudno dad iyo walxo sidii ilaah.

In la rumeeyo Ilaahay, iyadoo aan la oggolaan in Masiixu uu yahay badbaadiyaha waa wax aan suurtogal ahayn. "In dadka oo dhamu Wiilka murweeyo siday Aabbaha u murweeyaan. Kii aan Wiilka murwayn, ma murweeyo Aabbaha soo diray" (Yooxanaa 5:23). In la caabudo waxyaado male'awaal ah sida allah oo Muslimku ay caabudaan ama ilaaha Unitarianka ama wax aanu ku jirin Masiixu, waxay lid ku tahay amarkan.. "Waa inaad caabuddo Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaad isaga keliya u adeegto" (Matayos 4:10). In loo caabudo dad ama walxo kale sidii Ilaah waxaa loo yaqaan sanam caabudid dhab ah, sababta oo ah si sahlan ayaa loo garan karaa.

Waxaa jira nooc kale oo sanam caabudid, oo ah mid loo badan yahay. Waxaana la yidhaahdaa sanam caabudida qurxoon, sababtoo ah si fudud looma garan karo. Waxaana lagu arkaa dad badan noloshooda oo dembi

ahaanna kama liidato sanam caabudida dhabta ah. Waxaana ka mid ah in loo tixgaliyo dad sidii loo tixgelin lahaa Illaah. Taas waxaan tusaale u soo qaadan karnaa, inaan xaqiiqada ku saabsan iimaanka, maskaxdeenna isku hallayno halkii aan si iimaan leh ku aqbali lahayn Erayga Eebbe. "Qalbigaaga dhammaantii Rabbiga ku aamin, oo waxgarashadaadana ha isku hallayn" (Maahmaahyadii 3:5). Waxaa tusaale kale ah, in cabsi dad aan ka baqayno aawadeed iimaankeennii uu xumaado halkii aan wax kasta u samayn lahayn cabsida iyo jacaylka Eebbe aawadii. "Ha ka baqin kuwa jidhka dila, laakiin aan karin inay nafta dilaan, waxaadse ka baqdaan kan jahannamada ku hallayn kara nafta iyo jidhkaba" (Matayos 10:28). Tusaale kalena waxaa weeye, in la jeclaysto jid nololeed dembi ah oo lagu noolaado, "Waayo, taas waad taqaaniin in dhillay, ama qof wasakh ah, ama nin damac xun oo sanam caabudaa, uusan innaba dhaxal ku lahayn boqortooyada Masiix iyo Ilaah" (Efesos 5:5). Tusaale kalena waa, in aan jeclaanno dad kale sidaan u jeclaan lahayn Ilaah. Ciise ayaa yidhi: "Kan aabbihiis iyo hooyadiis iga jecel, ima istaahilo, oo kan wiilkiisa iyo gabadhiisa iga jecel, ima istaahilo" (Matayos 10:37). Waxaa iyana tusaale kale ah, inaan u noolaanno hodantinimo iyo nolosha adduunkan, halkaan uga noolaan lahayn barakada ruuxiga ah ee Eebbe iyo aakhiro. Ninkii hodanka ahaa ee lagu sheegay misaalkii wuxuu u noolaa hodantinimo iyo inuu faa'iido (Luukos 16:19), waana la cadaabay, waayo, wuxuu ahaa mid maal u shaqaysta illaa uu ka dhintay. Ninkii dhallinyarada ahaa ee hodanka ahaa wuxuu ka jeclaa maalkiisa halkuu ka jeclaan lahaa Masiixa (Matayos 19:22), taasna waxaa markhaati ka ahaa diidmadii uu diiday Masiixa; taasina waxay ku booriday Masiixa inuu ka hadlo xumaanta maalka.

Dhanka wanaagsan ee amarkanu waa inaan ka cabsannaa, jeclaanno, oo aaminno Eebbe. 'In laga cabsado Eebbe" macnaheedu waa in laga cabsado cadhada xaqa ah ee Eebbe ee kuwa aan addeecin isaga, gaar ahaanna, waa inaan xurmayno oo ka baqno, oo sharafno, oo xiisayno oo isaga doonistiisa addeecno. "Inta dhulka joogta oo dhamu Rabbiga ha ka cabsadeen, inta dunida deggan oo dhamu isaga ha ka baqeen" (Sabuurrada 33:8). "Rabbiga ka cabsashadiisu waa in sharka la naco" (Maahmaahyadii 8:13). Saddexdii nin ee lagu tuuray foornad ololaysa Eebbe ayay aad uga cabsadeen ee kama aysan cabsan boqorkooda (Daanyeel 13).

Daanyeel siduu boqorka uga cabsanayay si ka weyn ayuu Eebbe uga cabsaday, oo wuxuu door bidayay in lagu tuuro xerada libaaxyada halkuu ka addeeci lahaa sharci ka soo horjeeda daacadiisa Eebbe (Daanyeel 6). Cabsida Eebbe ee toosan waxaa mar walba garab socda jacaylka Eebbe iyo aaminidda Eebbe. "In Eebbe la jeclaado" macnaheedu waa in ujeedadeena ugu weyn ee noloshu ay noqoto inaan la jirno Eebbe oo aan ku raali galinno adeeg jacayl leh; taasna waxaa ka mid ah inaan Eebbe ammaanno oo aan fulino amaradiisa.

Waa inaan Eebbe ku jeclaanno qalbigeenna oo dhan, nafteenna oo dhan, iyo maskaxdeenna oo dhan (Matayos 22:37). Ibraahin waxuu Ilaahay u jeclaa si ka weyn siduu u jeclaa wiilkiisa Isxaaq, kaas oo la faray inuu u saddaqeeyo Eebbe (Billowgii 22). "In Eebbe la aamino" macnaheedu waa in la rumeeyo eraygiisa oo lagu kalsoonaado ballanqadyadiisa; taasi waa in aynaan ka shakiyin Ilaahay, oo aynaan walwalin cabsaninna; oo waa inaan wax kastaba isaga isku hallayno nolosheena. Daa'uud wuxuu isku haleeyay Rabbiga markuu la dagaalamayay Goliyaat (1 Samuu'eel 17:37, 46, 47). "Intii dad lagu kalsoonaan lahaa, waxaa ka wanaagsan in Rabbiga laysku halleeyo" (Sabuurrada 118:8). Ka cabsashada, jeclaanta iyo aaminidda Eebbe way wada socdaan oo waa isku meel; mid kaliya intaan yeello kan kale kama tegi karno. Waa doonista Eebbe inaan isaga ugu adeegno qalbigeenna iyo nolosheenna oo dhan.

Amarkanu wuxuu dhammaanteen Ilaah hortiisa inaga dhigayaa dambiilayaal. Laakiinse mahad waxaa leh Eebbaha, u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix inuu inoo buuxiyo amarkan, oo inaga qaado dembiyadeenna iyo ciqaabtii xadgudubyadeena ku wajahan amarkan. (Haddaba ahaada kuwo ku dayda llaah idinkoo ah sida caruur la jecel yahay, jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa'. (Efesos 5:1,2).

AMARKA LABAAD

"Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si xun ugu hadal qaadin." Amarkan Ilaah wuxuu inagu farayaa inaan magaciisa sharafno. Wax kasta oo laga sheego ahaanshaha Ilaah iyo waxa Ilaah sameeyay iyo wuxuu samaynayo, waa isla magaca Ilaah. Waa in aynaan wax muujinaya Ilaah si xun ama si aan u qalmin u adeegsan. "Si xun" macnaheedu waa "ujeeddo aan u qalmin ama ku habboonayn." "Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magaciisa si been ah ugu hadal qaada" (Baxniintii 20:7). Sida loo mamnuucay inaan magaca Eebbe ugu adeegsanno macnodarro, sidoo kale ayaa la inagu amray inaan u adeegsanno magaca Eebbe si kasta oo faa'iido leh.

Siyaabaha ugu badan ee sida xun loogu adeegsado magaca Eebbe waxaa ka mid ah "magaca Eebbe oo wax lagu habaaro" iyo "magaca Eebbe oo lagu dhaarto." Kuwani caadi ma ahan, in kastoo dad badanu si khaldan ay ugu haystaan inay caadi iska yihiin.

"Habaarid" waa lidka "barakadayn" oo macnaheedu yahay in qof shar lala doonayo, taas oo ka soo horjeedda amarka shanaad oo ah "Waa inaanad qudh goyn." "Ku habaaridda magaca Eebbe" macnaheedu waa in Eebbe loogu yeedho inuu wax yeelo, ciqaabo, ama cadaabo qof, waxaa kaloo macnaheedu yahay in shar lagula hadlo Eebbe iyo in Eebbe lagu majaajiloodo. "Mid kasta oo habaara Ilaahay wuu qaadi doonaa

dembigeeda”(Laawiyiintii.24:15} “Isagaynu (carabka) ku ammaannaa Rabbiga iyo Aabbaha, oo isla isagaynu ku habaarnaa dadka Ilaah ekaantiisa laga abuuray. Isku af baa waxaa ka soo baxa ammaan iyo habaar. Walaalahayow, waxyaalahanu waa inaanay sidaas noqon” (Yacquub 3: 9,10). Butros wuxuu beentiisii ku xoojiyay habaar markuu rabay inuu qanciyo kuwii su’aalaha waydiinayay ee joogay barxadda wakhtigii la xukumayay Masiix, isagoo sheegay inuusan shaqo ku lahayn Masiix (Matayos 26:74). Waayadan dambe habaarku, ha ahaado mid lagu kabayo been ama runbae, kama duwana tukubka sheeko curyaantay. Waana mid ka mid ah dembiyada ku fiday waddankeenna.

“Magaca Eebbe in lagu dhaarto “ macnaheedu waa inaan ugu yeedhayno Eebbe inuu inoo ansixiyo runnimada waxa aan sheegayno ama ballanqaadayno. Tan waa la oggolyahay, waliba Ilaahay ayaa inaga raba, marka aanu samaynayo ammanta Ebbe iyo wanagga deriskeenna aawadood. Ciise laf ahaantiisa ayaa oggolaaday inay dawladdu dhaariso (Matayos 26:63, 64). Ibraahin danta guud aawadeed ayuu si wanaagsan u dhaariyay shaqaalihiisii (Billowgii 24:3). Rasuul Bawlos si sax ah ayuu u dhaartay (2 Korintos 1:23). Hase yeeshee, waa in aynaan innagu ku dhaaran magaca Eebbe marka aynu been sheegayno ama innagoo wax aan muhiim ahayn ka hadlayna. Butros wuxuu ku dhaartay been, ama wuxuu u dhaartay been, oo sidaas aawadeed wuxuu galay dembi culus (Matayos 26:72). “Oo waa in aydaan magacayga been ugu dhaaranin” (Laawiyiintii 19:12). Boqor Herodos wuu dambaabay markuu ku dhaartay inuu u samayndoono waxa ay rabto gabadhii Herodiyas, maadaama uusan ogayn waxa ay rabtay inay waydiisato ama muhiimadda uu lahaa codsigeedu (Matayos 14:6-9). In la iska dhaarto iyadoo aan laga fekerin iyo in lagu dhaarto wax aan muhiim ahayn waa dembiyada aad ugu badan waddankeenna.

Adeegsiga sixirka iyo in lagu dadaalo in la sameeyo wax khayrul caadi ah iyadoo la adeegsanayo kaalmo rabbaani ahu waa ku lid si habboon u adeegsiga magaca Eebbe. Tan waxaa ka mid noqonaya faalka, cilmi-falagga, ruuxaan adeegsiga, awoodda loo maleeyo inay leeyihiin kuwa wax daaweeya iyo sixroolayaasha, iwm. Boqor Saa’uul wuxuu gargaar waydiistay sixroolihii reer Ceyn Door (1Samuu’eel 28), oo taasna waa lagu cadaabay. Waxaa naxdin leh tirada lacagta maanta dadku ku bixiyo cilmi-falagga iyo faalka.

“Been ku sheegidda iyo ku khiyaamaynta magaca Eebbe” macnaheedu waa kas ama kamma in caqiido been ah la baro dad oo lagu sheego in ay tahay wax ka yimid xagga Eebbe. “Si aan micno lahayn ayay ii caabudaan, iyagoo dadka wax ka baraya amarada dadka” (Matayos 15:9). “Bal ogaada col baan ku ahay nebiyada carabkooda ku isticmaala oo yidhaahda, saasuu Rabbigu leeyahay” (Yeremyaah 23:31). Sida xun ee

magaca Rabbiga loo isticmaalo waxaa ka mid noqon in la qariyo qalbi aan iimaan lahayn iyo nolol dembi leh, iyadoo la muujinayo muuminnimo, taasina waa laba wajiilenimo. Ciise ayaa ka digay dembigan markuu lahaa: "Ma ahan qof kasta oo igu yidhaahda Rabbiyow, Rabbiyow, kuwa boqortooyada jannada gelayaa, laakiin kii sameeya doonista Aabbahayga jannada ku jira, kaasaa gelaya" (Matayos 7:21). Siduu Ciise qabay, kuwo badan oo ka mid ahaa qorayaashii iyo wadaadadii wakhtigiisii uu joogay dhulku waxay ahaayeen laba wajiilayaal (Matayos 23:13-33). Waagii kaniisaddii hore Anaaniyas iyo Safiira waxay damceen inay bakhaylnimadooda ku qariyaan deeq ay fidiyaan (Falimaha Rasuullada 5:1-11), oo Eebbana wuu dilay iyaga. Waxaa dhexdeenna ku badan kuwo sidii wadaadadii Faarisiinta oo kale ah. Sida badan laba wajiileyaashu waxay siraan dadka, way doonaan laakiinse ma siraan Ilaahay, waxayse mar walba siraan naftooda. Ciise ayaa yidhi isagoo ka hadlaya Faarisiinta: "Dadkanu bishimahooda ayay igu maamuusaan, laakiin qalbigoodu waa iga fog yahay" (Matayos 15:8).

Amarkan Eebbe wuxuu inagu farayaa inaan magaciisa u adeegsanno si wanaagsan,oo ku habboon oo joogto ah. Waa inaan Eebbe ugu wacanno tukasho, gaar ahaan marka ay dhibaato inagu timaaddo, marka ay tahay inaan si kalsooni iyo isku hallayn leh u hordhigno dhibaatadeena. "Oo i bari maalinta dhibi jirto, oo anna waan ku samato bixin doonaa, kolkaasaad i ammaani doontaa" (Sabuurrada 50:15). Sidoo kale wakhtiyada kalena waa inaan u tukanno Eebbe si iimaan leh, oo aan waydiisanno inuu ina siiyo deeqdiisa iyo barakadiisa, sida: kibisteenna maalin kastaba; qalbi waxgarad ah; shaqadeenna oo aan ku guulaysanno; iimaan xasilloon; awood aan ku noolaanno nolol Eebbe ka cabsi leh; iwm. "Waydiista oo waa laydin siin doonaa; doona oo waad heli doontaan; garaaca, oo waa laydinka furi doonaa" (Matayos 7:7). Waa inaan Eebbe ku mahadinno, oo ku ammaano weynaantiisa iyo wanaagsanaantiisa, shuqulladiisa jacaylka leh ee innaga inoo danta ah xag ruux iyo xag jidh ahaanba. Waxyaalahaas waa inaan dadka kale u sheegnaa. Mahadnaqeenna waa inaan Eebbe ugu sheegno tukasho, oo dadkana ku tusno inaan isaga ammaanno. "Naftaydoy, Rabbiga ammaan, oo inta igu jirta oo dhameey, ammaana magaciisa qudduuska ah. Naftaydoy, Rabbiga ammaan, oo ha illoobin wanaagga uu kuu sameeyo oo idil" (Sabuurrada 103:1-2). "Rabbiga ku mahad naqa, maxaa yeelay, isagu waa wanaagsan yahay, waayo, naxariistiisu weligeedba way waartaa" (Sabuurrada 118:1). Ciise wuu ka aqbalay kii ugu soo noqday inuu uga mahadnaqo bogsiintii uu bogsiiyay (Luukos 17:15-16). In la mutaysto xusuus lagu mahadnaqo waa ficil aad ugu weyn uguna badan Masiixiyiinta dhabta ah. U adeegsiga magaca Eebbe ee mahadnaqiddiisa iyo maamuusiddiisu waa mid iyadoo duco ah lagu soo celceliyay sabuurro badan. (Sabuurrada 146;148;149;150).

Amarkanu Ilaah hortiisa wuxuu dhammaanteen inaga dhigayaa dambiilayaal. Laakiin waxaa mahad leh Eebbaha u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix inuu inoo buuxiyo amarkan oo noqdo toobadda dembiileyaasha, oo uu qaado dembiyadii iyo ciqaabtii xadgudubyada dembiileyaasha ee amarkan. "Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah, idinkoo ah sida caruur la jecel yahay; jacayl ku socda, siduu Masiixuba idiin jeclaa." (Efesos 5:1-2).

AMARKA SADDEXAAD

"Xusuusta maalinta Sabtida, oo ka dhiga qudduus." Sharcigan wuxuu u gaar yahay oo kaliya dadka Yuhuudda oo ku hoos jiray Axdigii Hore. Ciise wuxuu kan ku daray oo la heer ka dhigay sharciyadii khuseeyay waaqdhaacinka, sida uu isna yeelay Bawlos (Kolosay 2:16,17). Eebbe wuxuu reer binu Israa'iil siiyay sharciyo adag oo ku saabsan sabtida. "Sabti ama Sabbath" macnaheedu waa "maalin nasasho." Maalinta toddobaad ee usbuuca ayaa looga dhigay maalin nasasho dadka Yuhuudda iyadoo lagu xusayo maalintii toddobaad ee usbuucii abuurista (Baxniintii 20:8,11) iyo ka siidayntii dadka Yuhuudda laga siidaayay addoonsigii Masar (Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:15). Hase yeeshee, shaqo ka fadhiisigu, macno ahaan wuxuu ahaa dhammaad ama dhammayn. Maalinta sabtidu waxay ahayd maalinta xuska jacaylka Eebbe iyo naxariistiisa, oo waxay ahayd in lagu dhiirigeliyo reer binu Israa'iil inay u mahadnaqaan oo ammaanaan Eebbe. Dadka Yuhuuddu waxay ku xusayeen sabtida inay shaqo oo dhan ka fadhiistaan maalintaas, oo isugu tagaan arimaha diinta iyo cibaadada. Laawiyiintii 23:3 iyo Baxniintii 12;16, waxaan ka akhriyaynaa in sabtidu ay ahayd "kulanka qudduusan" taas oo macnaheedu ahaa in Israa'iiliyiintu ay isugu ururaan cibaado darteed. Luukos 4:16, waxaan ka akhriyaynaa, in Ciise, sidii caadada u ahayd, uu tegay oo galay sinagoogga si uu uga qaybgalo jameecada, isagoo wax ka akhriyay qorniinka.

In kastoo Axdiga Cusub aysan ku jirin maalin gaar ah oo Ilaah u gooyay in la nasto ama la cibaadaysto, haddana Eebbe wuu inoo sheegay sidaan isaga u caabudi lahayn. Maalin kast ayaa innaga inoo ah maalin cibaado, oo aan Eebbe ku mahadinno. Laakiin haddana waa inaan la kulanno walaalaheenna Masiixiyiinta ah, oo si wadajir ah ula cibaadaysanno, maadaama uu qorniinku leeyahay: "Yaynaan iska daynin isku ururkeenna sida ay tahay caadada dadka qaarkood" (Cibraaniyada 10:25). Masiixiyiintii hore way isu ururi jireen si ay u cibaadaystaan. (Falimaha Rasuullada 2:42).

Ciise Masiix, oo ah Rabbiga wax kastaayu wuxuu ka amar weyn yahay sabtida (Matayos 12:8), wuuna baabi'iyay iyada iyo maalmihii kale ee qudduusnaa ee Axdigii Hore, kuwaas oo ahaa hooska nasashada fiican ee soo socotay. Nasashadan ruuxiga ahu waxay ku timid Masiixa iyo shuqulkiisii

madaxfurashada. Astaan ahaantii ay sabtidu lahayd macnaha "maalinta nasashada" ee Axdigii Hore way lumisay markuu Ciise, oo ah nasashada runta ah ee dembiilayaasha dhibaataysan, uu u yimid inuu ku furto dadkii dembiilayaasha ahaa noloshiisii aan dembiga lahayn iyo siliciisii dembi la'aanta ahaa iyo dhimashadiisii. Sidaa darteed, wuxuu Rasuul Bawlos yidhi: "Haddaba ninna yuusan idinku xukumin wax ku saabsan cunto ama cabid ama maalin iid ah ama bil dhalatay ama maalmaha sabtida; kuwaas oo ah hooska waxyaalaha iman doona, laakiinse jidhka waxaa iska leh Masiixa." (Kolosay 2:16,17). Markii uu jidhku yimid, hooskii wuu waayay jiritaankiisii. Waa sababtaas aawadeed midda aynaan hadda u xafidin sabtida.

Runtii Eebbe inaguma amrin inaan ilaalinno maalin gaar ah. Ilaalinta axaddu ma ahan mid ka timid amar Eebbe. Axadda waxaa doortay dadkii kaniisaddii hore, in ay noqoto maalinta toddobaadka la isugu yimaaddo cibaadada, dabcan waxayna ku xusayeen sarekiciddii Masiixa iyo Ruuxa Qudduuska oo soo degay maalintii Axadda Bentekost. Eeg Falimaha Rasuullada 20:7; 1Korintos 16:2. Sidaas ayayna kaniisadda caado ugu noqotay inay dadku cibaadaysi isugu yimaadaan maalinta Axadda. Xamaasadda maalin gaar ah oo koox wada cibaadaysato waa mid ku dhisan maalinta Rabbigeenna ee Axdiga Cusub. Hase yeeshee, maalintu waa inay u ahaato Masiixiyiinta maalin cibaado iyo adeeg, oo loo hibaynayo Rabbiga. Eeg Rooma 14:5,6; Galatiya 4:10, 11. Innaga Masiixiyiinta ahu waan u dooran karnaa maalintii aan rabno inaan u cibaadaysanno si jamac ah, mana aha muhiim in ay noqoto hal maalin oo ka mid ah toddobaadka.

Iyadoo uusan jirin amar Eebbe oo ina faraya inaan yeelano maalin gaar ahaaneed oo la isugu yimaaddo cibaadaysi, haddana waa doonista Eebbe in aynu isaga si wadajir ah u caabudno, innagoo la jirna walaalaheenna kale ee Masiixiyiinta ah. Wuu inoo sheegay Eebbe sidaan u caabudi lahayn. Waa in eraygiisa dadka lagu wacdiyo. Waa in la sameeyo karaamooyinka. Tukashada iyo ammaanta Eebbe ee loo dhan yahay waa inay noqdaan kuwo xiise leh. Taas haddii la rabo in la sameeyo, waxaa shardi ah in la yeesho maalin go'an iyo meel la isugu yimaaddo oo lagu cibaadaysto. Hawsha adeegga bulshada ee eraygu waxay ina tusaysaa in doonista Eebbe loo sameeyo si xurmo leh cibadaysiga bulshada dhexdeeda. Ciise qudhiisa ayaana taa laga bartay. Waxaa kale oo uu u sheegay xertiisii: "Kan idin maqlaa waa i maqlaa, kan idin diidaana waa i diidaa, kan i diidaana wuxuu diidaa kii i soo diray" (Luukos 10:16). Waxaa kale oo uu yidhi: "Waxaa barakadaysan kuwa hadalka Ilaah maqla oo xajiya" (Luukos 11:28), iyo "Kii Ilaah kuwiisa ka mid ah, erayada Ilaah ayuu maqlaa" (Yooxanaa 8:47). Masiixiyiintii horena waxaa laga hayaa: "Oo waxay ku sii adkaysteen rasuulladu waxay bari jireen iyo xidhiidhka ka dhexeeya iyaga, iyo kibista jebinteeda iyo tukasho" (Falimaha Rasuullada 2:42).

Amarkan wuxuu Eebbe inaga mamnuucay inaan dayacno eraygiisa, kan la wacdiyay iyo kan qoranba iyo karaamooyinka Baabtiiska Qudduusan iyo Qurbaanka Quddusan. Waa xaaraan in si aan laga fiirsan loo adeegsado erayga Eebbe, tusaale ahaan, marka aynaan niyad u hayn waxa aan ka baranayno erayga Eebbe, ama marka aynaan u noolaan si waafaqsan waxa uu ina farayo.

Dhinaca taban ee amarkanu wuxuu ina saarayaa xilka ah inaan erayga Eebbe u xajinno si qudduusan, oo aan si faraxsan u maqallo, una baranno. Waa inaan xafidno waxa uu Aabbaheenna ina jecel ee jannada ku jiraa inagu siiyay eraygiisa. "Markaad guriga Ilaah tegaysid is ilaali, waayo, inaad u dhawaatid si aad wax u maqashid way ka roon tahay inaad bixisid allabariga nacasyada oo kale; maxaa yeelay, iyagu ma oga inay wax shar ah samaynayaan" (Wacdiyaha 5:1); "is ilaali" macnaheedu waa inaan taxadarno si qalbigeenna aysan u galin wax inaga jeediya cibaadaysiga runta ah. Waa inaan kaniisadda u aadno danta ah inaan cibaadaysanno. Aabbaheenna jannadu wuxuu inoo hayaa wax muhiim ah oo uu inoo sheegi. Si daacad ah marka loo adeegsado erayga Ilaah waxaa laga helaa barako. Injiilka inaan aqballo waxaan ka helaynaa caqli aan ku badbaadno. Erayga Eebbe wuxuu inooga digaa khatarta nafta, wuxuu inoo carbiyaa nolol Eebbe ka cabsi leh, wuu inoo qalbi qaboojiyaa wakhtiga dhibaatada, oo wuxuu inagu xoojiyaa rajada nolosha waligeed ah. Maryan waxay fadhiisatay Ciise lugihiisa si ay u maqasho eraygiisa, oo Ciise ayaana yidhi, "waxay dooratay intii roonayd oo aan laga qaadi doonin." (Luukos 10:42).

Amarka waxaa kaloo ka mid ah inaan xurmayno oo caawino wacdiyayaasha iyo macallimiinta erayga Ilaah. Waa inaan dhiirigelinno oo qaadanno hadalka adeegayaasha Eebbe. Wuxuu Rasuul Bawlos u sheegay dhagaystayaashiisii: "Markii aad naga hesheen hadalkii Ilaah oo aad naga maqasheen, aydnaan u aqbalin sidii dad hadalkiis, laakiin siduu run u yahay hadalkii Ilaah" (1Tesaloniika 2:13). Waxaa la inoo sheegay inaan addeecno erayga, kaas oo ay inagu maamulaan wadaadadu, maadaama ay iyagu yihiin wakiilada Ilaah, oo uu la xisaabtami doono isagu. "Hoggaamiyayaashiina addeeca oo ka dambeeya, waayo, iyagu waxay ilaaliyaan naftiinna sidii iyagoo jawaab ka bixin doona. Taas farxad haku sameeyeen, oo yaanay qulubsanaan, waayo, taasu waxba idiin tari mayso" (Cibraaniyadda 13:17). Sidoo kale waa inaan kaalmayno oo deeq siinno. "Kan hadalka la baraa wax walba oo wanaagsan qayb ha ka siiyo ka wax bara." (Galatiya 6:6).

Amarkan waxaa kaloo ka mid ah inaan si hufan erayga Ilaah ugu fidinno adduunka oo idil. "Dunida oo dhan taga oo uunka oo dhan Injiilka ku wacdiya" (Markos 16:15). Tan waxaa ka mid ah, inaan si shakhsi ah dadka ku gaadhsiinno erayga iyo inaan bixinno kaalmada dhaqaale ee looga baahan

yahay hawsha fidinta Injiilka. Ciise ayaa ku booriyay carmaladdii inay kaalmayso xafidida macbudka iyo gargaaridda wadaadada. (Markos 12:41-44).

Noloshaada shakhsi ahaaneed ee gaarka ah waa inaad ku dabakhdaa oo "Qorniinka baadhaa, waayo, waxaad u malaynaysaan inaad nolosha waligeed ah ka helaysaan, waana iyaga kuwa ii maragfurayaa" (Yooxanaa 5:39). Dadkii reer Beroya waxaa laga sheegay wanaag, iyadoo la yidhi maalin walba waxay baadhaan qorniinka. (Falimaha Rasuullada 17:11).

Wax kasta oo amarkanu ina farayo natiijadiisu waa: "Oo erayga Masiixu ha idiinku jiro si badan xagga xigmadda oo dhan" (Kolosay 3:16), in aynu rumaysanno waxbaridda saxda ah oo aan si waafaqsan ugu noolaanno.

Amarka Ilaah hortiisa wuxuu dhammaanteen inaga dhigayaa dembiileyaal. Laakiin, mahad waxaa leh Eebbaha soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix, si uu u buuxiyo amarkan, isagoo ah kafaaragudka oo qaadaya dambiyadii iyo ciqaabtii xadgudubyada dambiileyaasha ee amarkan. "Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah, idinkoo ah sida carruur la jecel yahay. Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa." (Efesos 5:1-2).

XILKA INAGA SAARAN DERISKEENNA QAYBTA LABAAD EE SHARCIGA

Toddobada amar ee ugu dambeeyaa waxay ku saabsan yihiin sida aan ugu adeegayno deriskeenna iyo waliba iyagoo ina faraya inaan dadka jeclaanno. Waxaa lagu soo koobay erayadan uu yidhi Masiixu: 'Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada.' (Matayos 22:39).

Deriskeennu waa qof kasta oo u baahan jacaylkeenna, oo waxaana ka mid noqonaya qof kasta. Derisnimadu ma ahan mid meel laakiinse waxaa keena jacaylka. Misaalka ku saabsan ninkii wanaagsanaa ee reer Samaariya (Luukos 10:25-37) ayaa ka jawaabaya su'aasha ah "waa kuma deriskaygu?" Waan gefaynaa xubinta ugu muhiimsan ee qaybta labaad ee sharciga, haddii aynaan fahmin macnaha cidda ah deriskeenna.

Waa inaan deriskeenna u jeclaanno sida "nafteenna.' Dhammaanteen waan jecel nahay nafteenna. Eebbe wuu rabaa inaan nafteenna jeclaanno, oo aan yeelanno isku kalsooni buuxda. Waana inaan deriskeenna u jeclaanno si daacad ah, oo joogto ah sida aan nafteenna u jecel nahay. Waana inaan jacaylkaasi ku muujinno inaan wanaag badan u samayno dadka kale, kaas oo la'eg kan aan u samayno nafteenna, oo waa inaan u samayno deriskanna wanaaggii uu inoo samayn lahaa innaga. "Haddaba wax kasta oo aad doonaysaan in laydiin sameeyo, idinkuna sidaas oo kale u sameeya; waayo, kanu waa sharcigii iyo nebiyadii" (Matayos 7:12). Hase yeeshee, waa

inaynaan u jeclaan nafteenna ama deriskeenna si la mid ah, amaba ka badan, sidaan Eebbe u jeclaan lahayn. Mana ahan inaan deriskeenna u jeclaanno si damac ku jiro ama inaga oo rabna inaan wax kaga helno jacaylkeenna. Jacaylkeenna aan jeclaanayno deriskeenna waa inuu yahay mid ka yimid jacaylkeenna iyo cabsideenna xagga Eebbe ah.

AMARKA AFRAAD

"Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in Rabbiga Ilaahaaga ahu uu ka dhigo cimrigaagu inuu ku dheeraado dhulka." Amarkan wuxuu Eebbe ku ilaalinayaa sharafta iyo xilka masuuliyadeed ee uu isagu ina saaray, innaga oo ah wakiiladiisii. Awoodda, xukunka iyo baaxadda saamayn ee uu Eebbe siiyay masuuliyiintaasi waxay ku xidhan tahay meelaha noloshooda uu Eebbe u doortay. Sida uu qabo amarkana iyo odhaahyada kale ee qorniinka, waajibaad ayaa ina saaran innaga iyo iyagaba.

Amarka koowaad ayaa aasaas u ah amarada oo dhan. Amarka afraadna wuxuu sidii aasaas oo kale u yahay qaybta labaad ee sharciga, waayo si wanaagsan haddii loo fahmo macnaha masuuliyad, xuquuqda shakhsiyeed, xurmada iyo addeeciddu, waxay inaga caawin inaan samayno waxa ay inaga rabaan amarada kale ee ka dambeeyaa. Waxaa kale oo Eebbe uu raaciyay amarkan ballanqaad si aan ugu qanacno. Muhiimadda ballanqaadkanu ma ahan oo kaliya cimri dheeri, laakiin waa nolol wanaagsan oo aan ku noolaanno. Ballanqaadkanu waa mid aynaan u qalmin, oo la inoo siiyay si innaga oo raalli ah aan u xafidno amarkan iyo amarada soo socdaba.

Deriskeenna kuwa inoogu dhow ee inoogu qaalisanu waa waalidkeenna guriga inala jooga. Ilaahayna wuxuu iyaga saaray xilka ugu horeeya. Waxaa iyaga saaran masuuliyada ugu weyn iyo waajibka adeeg ee ugu ballaadhan inay bixiyaan. Masuuliyaddoodu waa mid gaadhsiisan meesha ugu saraysa, ilaa arimaha iyo nolosha shakhsiyadeed ee caruurtooda ay faragelin karaan. Waa inay dhaqaaleeyaan oo caruurtooda siiyaan nolol-maalmeedka waxay u baahan yihiin; laakiin si gaar ah waa inay nafta caruurtooda ugu quudiyaan kibista nolosha, maadaama ay tahay in ay caruurtooda "ku koriyaan edbinta iyo waanada Rabbiga" (Efesos 6:4).

Rabbigu wuxuu waalidka saaray waajibka ah inay ruux ahaan u carbiyaan caruurtooda. Waana inay tusaale Masiixinimo u noqoto noloshoodu, waa inay gurigooda ka abuuraan nolol Masiixinimo, iyo inay adkeeyaan inay addeecaan. Waxaas oo dhanna waalidka ayaa uga wakiil ah Eebbe. Maadaama ay darajadaas sare, ee saamaynta weyn leh leeyihiin, waa inaan xurmayno oo addeecno iyaga. "Caruurtaay, waalidkiinna ku addeeca xagga Rabbiga, waayo, taasu waa qumman tahay. Qaynuunkii koowaad oo ballan la jiraa waa kan, Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus inaad nabddoonaatid oo

cimrigaagu ka dheeraado dhulka. Aabbayaashow, caruurtiinna ha ka cadhaysiinina, laakiin waxaad ku korisaan edbinta iyo waanada Rabbiga" (Efesos 6:1-4). Eeg Kolosay 3:20.

Waa inaysan baabi'in jacaylka iyo xurmada aan u qabno waalidkeen inta ay dunida ku nool yihiin, da'deenna ama da'doodu waa inaysan taas hor istaagin. Waxaa iman wakhti aan iskeen u noolaanayno oo ka tagayno guriga, oo aan masuul ka noqon doonno falalkeenna; laakiin ma jiri doono wakhti aan joojin doonno jacaylka iyo xurmada aan u hayno waalidkeen. "Iyagu marka hore ha barteen inay dadkooda si cibaado leh kula macaamiloodan, waalidkoodna u cawilceliyaan, waayo taasu way wanaagsan tahay, waana mid Ilaah aqbali karo" (1Timoteyos 5:4). Sida uu wax kastaba inoogu ahaa, tanna Ciise ayaa tusaale inoo ah. Wuxuu ku hoos jiray Maryan iyo Yuusuf (Luukos 2:51). Wuuna dhaqaalayn jiray hooyadii.(Yooxanaa 19:26-27).

Marka guriga laga reebo, ma jirto dhulka korkiisa meel kale oo u barakaysan sida jameecada Masiixiyiinta, taas oo wadaadku uu yahay ilaaliyaha iyo adeegaha Eebbe ee jameecada muuminiinta. Waayadii hore, wakhtiyadii waalidiinteennii koowaad iyo anbiyadii, cibaadaysigu wuxuu ku ekaa qoyska, iyadoo aabbuhu uu ahaa kan kor ka ilaaliya cibaadaysiga. Wakhtiga cibaadaysiga la ballaadhiyay ee tiro qoysas ahu inay isugu yimaaddaan la billaabay ma ogin. Kaniisadda, wadaadada ayaa sida uu farayo xilkoodu, Eebbe ka rabaa inay dadka yar iyo weynba baraan talada Eebbe, u digaan oo toosiyaan, tilmaamaan oo u qalbiqaboojiyaan. Waa inay sameeyaan wax Ilaah raalli ka yahay oo aysan raacin xumaanta iyo dhalanteedka dadka. Eeg Tiitos 1:9 Darajooyinka muhiimka ah ee Ilaah siiyay aawadood, wadaadadu waxay xaq u leeyihiin inaan xurmayno oo u tukanno. "Waxaanna idinka baryaynaa, walaalayaalow, inaad maamuustaan kuwa idinka dhex hawshooda, oo xagga Rabbiga idinkaga sareeya, oo idinla taliya; oo aad iyaga aad iyo aad jacayl ugu darajaysaan shuqulkooda aawadiis" (1Tesaloniika 5:12-13). Aad ayay muhiim u tahay in la ilaaliyo sharafta xilka wadaadada, mana aha in hawsha Injiilka lagu carqaladeeyo shaki aan macno lahayn iyo in la baadhbaadho nolosha wadaadka. Way dhacdaa in wadaadada laga shakiyo iyo in la canbaareeyo, taas oo qayb ahaan ka timaadda masayr, qaybta kalena ka timaaddo jaahilnimada. Rasuul Bawlos wuxuu inoogu sheegay xeer ku saabsan eedaymaha wadaadada la eedeeyo 1Timoteyos 5:19. Eeg Sharciga ku Noqoshadiisa 19:15. Wadaadadu waxay hayaan jago xil sare. "Hoggaamiyayaashiinna addeeca oo ka dambeey, waayo, iyagu waxay ilaaliyaan naftiinna sidii iyagoo jawaab ka bixin doona. Taas farxad haku sameeyeen, oo yaanay qulubsanaan, waayo taasu waxba idiin tari mayso." (Cibraaniyada 13:17).

Sidoo kale, Dawladda ama xukuumadda dadku, waa masuul; waxay ka soo billaabatay guriga oo way sii ballaadhatay oo dad badan gaadhay markii noloshu ay sii fidday dadkuna ay tarmeen iyagoo wali isku xidhan. Xilka dawlad waa xidhiidhinta dadka, si dadka oo dhamu ay ugu wada noolaadaan nabad iyo xasilooni. Dawladaha waxaa leh Ilaah, maamulayaashuna waa adeegayaasha Eebbe. Waxaa xil ka saaran yahay iyaga inay dadka hoos jooga si xaq ah u maamulaan oo sugaan caddaaladda, ka hortagaan sharka, wanaaggana abaal mariyaan. Waxay maamulaan sharciga. Waxaan ka codsan karnaa maxkamadaha dalka inay ilaaliyaan xuquuqdeenna. Dawladuhu waxay u dhisan yihiin "inay ka aargudaan kuwa xumaanta sameeya oo ay ammaanaan kuwa samaanta fala" (1Butros 2:14). Waajibka ah inaan addeecno sharciyada waddanka, waxaa inagu leh Ilaahay iyo dadka; waxaana la inaga rabaa inaan samayno xattaa marka aysan cidi ina arkaynin. Waa inaan cashuurta bixinno oo samayno dhammaanba waajibaadka laga rabo muwaadinka fiican. "Haddaba Kaysar siiya wixii Kaysar leeyahay" (Matayos 22:27). "Naf waluba ha ka dambayso kuwa amarka sare leh, waayo amar ma jiro kan Ilaah ka yimaadda mooyaane. Kuwa jira Ilaah baa ka dhigay kuwo amar leh. Sidaas daraadeed, kii diida kan amarka le wuxuu hor joogsadaa amarka Ilaah, kuwa hor joogsadaana waxay naf ahaantooda u heli doonaan xuku… isagu wuxuu xaggaaga ku yahay midiidinka Ilaah inuu wanaag kuu sameeyo... sidaas daraadeed, waa in laga dambeeyo kan amarka leh, mana aha cadhada aawadeed oo kaliya, laakiinse waa niyadda aawadeedna. Waayo, sababtaas aawadeed waxaad u bixisaan canshuur, maxaa yeelay, iyagu waa midiidinadii Ilaah oo had iyo goor ka shaqeeya isla waxaas. Mid walba wuxuu idinku leeyahay siiya, kii baad idinku leh, baad siiya, kii canshuur idinku leh, canshuur siiya, kii laga cabsadana, ka cabsada, kii ciso lehna, ciseeya" (Rooma 13:1, 2- 4, 5-7. Eeg 1Timoteyos 2:1-4).

Barbaarinta asluubta iyo waxbarashada fanka iyo cilmiga oo markii hore si weyn uga soo askunmay qoyska agtiisa, markii dambe waxaa laga fulinayay dugsiyada, halkaasoo ay waalidiintu ilmahooda u soo direen oo macallimiinna ay ka hawlgaleen. Maanta waxaa jira dugsiyo ummadeed iyo dugsiyo kaniisadeed. Dugsiyada kaniisaduhu waxay xoogga saaraan aqoonta asluubta iyo diinta, oo wayna baraan fanka iyo cilmiga iyagoo ku baraya ardayda bay'ad Masiixinimo oo ay hagayaan macallimiin Masiixiyiin ahu. Dugsiyada ummaddu waxay sida badan ku kooban yihiin barida fanka iyo cilmiga. Macallimiinta dugsiyada ummadda waxaa xil ka saaran yahay inay ardaydooda baraan adaabta bulshada, akhlaaqda wanaagsan ee dadka midba uu kan kale kula dhaqmayo, shakhsi ahaan iyo guud ahaanba. Maadaama ay yihiin wakiilada dawladda, oo aan iyada xil ka saarayn waajibna aysan ku ahayn inay diin barto, dugsiyada ummaddu diin kuma darayaan manhajka waxbarashadooda, laakiin waa inay isku koobaan raadreebka asluubta iyo

wanaagga sida uu farayo sharciga dawladdu. Dhammaan dugsiyada, barayaashu waa inay noqdaan rag iyo dumar dabci asluub sare leh, oo ardaydooda ula dhaqma si daacad ah oo aan hagar lahayn, oo isku daya inay sida ugu wanaagsan wax u baraan ardaydooda. Macallinnimadu waa mid ka mid ah xirfadaha ugu sareeya. Macallimiintu waa in ay noqdaan tusaale wanaagsan oo asluub sare iyo akhlaaq wanaagsan, oo waa inay u feejignaadaan shaqadooda. Ardaydu waa in ay u feejignaadaan waxa la barayo, waa inay si wanaagsan u sameeyaan, oo ay raacaan talo kasta oo wanaagsan oo la siiyo; waana in ay xurmeeyaan macallinkooda.

Ganacsiga, horumarka baayacmushtarka iyo dhismaha warshadaha iyo xafiisyadu waa wixii ka soo baxay horumarka laga gaadhay fanka iyo cilmiga. Awoodda uu Eebbe siiyay dadku markay kobocday oo ay wax alliftay wax cusubna heshay, baayacmushtar iyo xirfado ayaa soo baxay, waxaa horumaray warshado, oo waxaa dhashay xidhiidh dabiici ah ee shaqaale iyo looshaqeeye. Looshaqeeyaha xil baa ka saaran kuwa u shaqeeya. Waana in ay si daacad ah u tixgeliyaan nolosha iyo samaanta shaqaalahooda. Waa in ay raadiyaan wanaagga iyo iskaashiga ka dhexeeya ee danta u ah looshaqeeyaha, shaqaalaha, iyo dadweynaha, oo ah kuwa ay ugu adeegayaan waxsoosaarkooda. Kuwa aan u shaqaynaa way inaga sareeyaan; masuuliyaddooduna waxay ku kooban tahay heshiiska shaqada. Waa inaan si daacad ah oo raalli ah ugu adeegno, “Adoomadoow, kuwa xagga jidhka sayidyadiinna ah ku addeeca cabsi iyo gariir iyo qalbi daacad ah sidaad Masiixa uga cabsataan oo kale. Ha ahaanina kuwo markii loo jeedo oo kaliya shaqeeya, sida kuwa dadka ka farxiya, laakiinse ahaada sida addoomada Masiixa, idinkoo doonista Ilaah xagga qalbiga ka samaynaya. Niyad wanaagsan ku adeega sidii idinkoo Rabbiga u adeegaya oo aan dad u adeegayn, idinkoo garanaya wax kasta oo wanaagsan oo mid kasta sameeyo inuu Rabbiga isla waxaas ka helayo hadduu yahay addoon iyo hadduu yahay xorba. Sayidyadow, idinkuna isla waxaas iyaga u sameeya, oo cabsiinta iska daaya, waayo, waad og tihiin inuu kan ah sayidkooda iyo kiinnaba jannada ku jiro, oo uusan dadka u kala eexan” (Efesos 6:5-9). Eeg 1Butros 2:18.

Wax kastoo uu yahay xidhiidhka inaga dhexeeyaa, waa in aynaan quudhsan masuuliyiinta inaga sareeya. Inaan quudhsanno, inaan ku majaajilloonno, inaan canjillo ama aan ceebayno ma bannaana. Waa in aynaan ka warsheekoon, oo aynaan amar diidin, oo ka hor imaan, oo mucaaradin. Kuwa masuuliyiinta inoo ahu waxay xaq u yeelanayaan in ay inoo cadhoodaan oo ina ciqaabaan illaa inta awoodoodu gaadhsiisan tahay.

Waa inaan xushmayno, u adeegno, aan addeecno,jeclaanno, dhiirigelinana masuuliyiinteenna. Waa inaan addeecno iyaga, haddii waxa ay ina farayaan uusan lid ku ahayn sharciga Eebbe, oo uusan ka baxsanayn xadka

masuuliyaddooda, “Waa inaan Ilaah addeecno intaannu dad addeeci lahayn” (Falimaha Rasuullada 5:29). Si wanaagsan inaan u tixgelinno amarkan, dhanka ku saabsan masuuliyiinteenna iyo dhanka inaga ina khuseeyaba, wuxuu aad inoogu fududayn inaan si wanaagsan u tixgelinno amarada kale ee soo socda ee qaybta labaad ee sharciga.

Amarkani wuxuu dhammaanteen inaga dhigayaa, Ilaah hortiisa dembiilayaal. Laakiin mahad waxaa leh Eebbaha u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix inuu inoo buuxiyo amarkan, isagoo ah kafaaragudka dembiileyaasha oo qaaday dembiyadii iyo ciqaabtii xadgudubyada dembiileyaasha jabiyay amarkan. “Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah, idinkoo ah sida caruur la jecel yahay. Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa” (Efesos 5:1-2).

AMARKA SHANAAD

“Waa inaanad qudh goyn.” Amarkan wuxuu Eebbe ku ilaalinayaa innaga nafteenna iyo tan deriskeennaba iyo samaanteenna. Nolosha dadku waa wax qudduusan; waa hibada Eebbe tan ugu qaalisan ee uu dadka ku siiyay dunida korkeeda. “Waxaa i sameeyay Ruuxa Ilaah, oo waxaa i noolaysa Ilaaha qaadirka ah neeftiisa”(Ayuub 33:4). Eeg Ayuub 10:8-12; Sabuurrada 139:13-16. Maadaama uu Rabbiga keligii bixiyo nolosha, isaga oo keliya ayaa xaq u leh inuu qaado. Eeg Falimaha Rasuullada 17:26; Ayuub 1:21. Ilaahay wuu qaadi naf markuu isagu doono. “Dadka waxaad ku soo celisaa baaba.… Waxaad iyaga u qaaddaa sida daadku wax u qaado.… Subaxda way cagaaraan, wayna soo baxaan, oo fiidkana waa la jaraa, wayna engegaan” (Sabuurrada 903, 5, 6). Dawladdu waxay xaq u leedahay inay ku fuliso ciqaab weyn kuwa dilaaga ah iyo in ay dagaal xaq ah u gasho difaaca dadka. Xukunku “wuxuu xaggaaga ku yahay midiidinka Ilaah inuu wanaag kuu sameeyo, laakiinse haddaad xumaan samaysid, cabso, waayo, isagu seefta uma sito sabab la’aan” (Rooma 13:4). Waan is difaaci karnaa haddii la ina soo weeraro; oo haddii inaga oo nafteenna difaacayna la inagu kallifo inaan wax dillo oo qudh goyno, sharciga dawladda iyo kan Eebbe midna dembi inoo qabsan maayo. Eeg Baxniintii 22:2.

Mark laga reebo arimaha gaarka ah ee kor ku xusan, waa la inaga xaaraantinimeeyay inaan naf goyno, ha noqoto nafteenna ama naf kaleba. “Kuwa seefo qaada oo dhamu seef bay ku halligmi doonaan” (Matayos 26;52). In lagu qeexo isdil kasta fal khayru masuuliyadeed ee qof waalan ama wareersan ma aha mid waafaqsan qorniinka. Dilka naxariista (euthanasia), oo ah in qofka cimrigiisa la soo gaabiyo iyadoo la dilayo si ula kac ah sabab cudur la yidhi lama daawayn karo oo xanuun badan ku haya qofka, iyana waa mid liddi ku ah amarkan; ma ahan in Masiixiyiintu ay si khalad ah kaga baxsadaan murugada, silica iyo jirrabaadda nolosha. Kuwa si aan ula kac

ahayn cimrigooda u soo gaabiya ama caafimaadkooda ku xumeega wax waxyeelo keenaya, iyana way ku xadgudbeen amarkan. Si xad dhaaf ah in wax loo cuno, loo cabbo, ama loo shaqeeyo iyana waa dembi.

La inooma fasixin inaan samayno ama ku hadalno wax kasta oo waxyeelo u gaysanaya, dilaya ama cimri degdeg ku ridaya nolosha deriskeenna, tusaale ahaan sidii, wiilashii Yacquub ay aabbahood nolosha ugu khadhaadheeyeen (Billowgii 42:36-38), ama wiilkii caasiga ahaa uu yeelay aabbihii (Luukos15:11 laga billaabo). Qaar ka mid ah dhibkan maskaxeed dad badanu uma arkaan inay yihiin gef weyn, waayo badanaa ma weheliyo fal gacanqaad ahu. Hase yeeshee, dil iyo silic badan ayay keenaan erayada naca luhu, kuwaas oo ka waxyeello badan xabbad la isku rido. Carabku wuxuu dilaa dad ka badan kan ay gacantu disho.

Xattaa marka ay dadku inoo gefaan, khalad dembi ah ayay inagu tahay inaan raadino aarsi. "Gacalliyayaalow, ha aarsanina, laakiin meel u banneeya cadhada Ilaah, waayo waxaa qoran, aarsasho anigaa leh; anaa u abaal marin, ayaa Rabbigu leegahay" (Rooma 12:19). Ilaah wuxuu inaga xaaraantinimeeyay inaan qofna qalbiga ugu hayno cadho iyo nacayb. "Laakiin waxaan idinku leeyahay, mid walba oo walaalkiis u cadhoodaa wuxuu galabsadaa xukunka" (Matayos 5:22). "Ku alla kii walaalkii neceb waa dhiigqabe, oo idinkuna waad og tihiin inaanu dhiigqabena lahayn nolosha waligeed ah oo ku sii jiraysa" (1 Yooxanaa 3:15). Dilka, dilka qudh goynta ah ee la falaa, wuxuu ka soo billowdaa qalbiga. "Waxaa qalbiga ka soo baxa fikirada sharka leh iyo dilidda iyo sinada iyo wasmada xaaraanta ah iyo tuuganimada iyo maragga beenta ah iyo cayda" (Matayos 15:19). Xattaa fikirka ah in shar la sameeyo, ama inaan jeclaysano in deriskeenna dhibaato gaadho, waa dembi. Cadhada aan shakhsi ahaan qof u cadhoono waa dembi. Waa inaan dembiga nacno, laakiin ma ahan inaan nacno qofka dembiga inagu sameeyay.

Waxaa kaloo uu amarkanu inoo sheegayaa in aynaan ka tegin samaynta waxyaalaha jacaylka leh. Inaan kari wayno inaan qof caawinno waxay inaga dhigaysaa dembiile sidii innagoo qofkaas waxyeello u gaysannay oo kale. Wadaadkii iyo Laawigii iska dhaafay ninkii ay tuugadu dileen ee ku jirtay misaalka ninkii reer Samaariya ee wanaagsanaa, waxay ahaayeen dembiilayaal, sababtoo ah waxay kari waayeen in ay ninka u gargaaran (Luukos 10:30-37). Ninkii taajirka ahaa ee misaalka ninkii taajirka ahaa iyo Laasarus wuxuu u taagan yahay xukunka Ciise, sababtuna ma aha inuu taajir ahaa ama wax kale oo uu sameeyay, laakiin waa wixii uu kari waayay inuu sameeyo, wuxuu awood u lahaa fursadna u helay inuu caawiyo Laasarus, laakiin qalbigiisa jacayl uu taas ku sameeyo kuma jirin (Luukos 16:19-31).

Qofka Ilaah, isagoo raacaya amarkan, wuu gargaari oo xiriir fiican la yeelan deriskiisa, oo wakhtiga dhibaatada wuxuu siin waxa uu jidh ahaan u baahan yahay, oo wuxuu ula dhaqmi sidii saxiib run ah marka la dayriyo ee uu cidloobo. Taasi cidda aan u samaynaynaa ma ahan saaxiibadeen oo kaliya laakiinse waa xittaa cadaawayaasheenna. "Laakiin haddii cadowgaagu gaajaysan yahay, cunno sii, hadduu haraadsan yahayna, waraabi, waayo, haddaad saas samayso waxaad madaxiisa ku kor ururin doontaa dhuxulo dab ah" (Rooma 12:20). Naxariistu cadawga way dhalaalin oo ka shiili toobad iyo jacayl. Ma ahan inaan tan samayno marka aan ka faa'iidayno oo keliya, laakiin waa inaan samayn xattaa marka aan la inoo gudayn abaalka naxariisteenna. Waa inaan deriskeenna u hayno naxariis dhab ah marka uu inoo baahan yahay. Eeg Matayos 5:7. Ciise ayaa ah tusaalaha ugu weyn ee aan ku dayano. Noloshiisii dunidan waxaa ka buuxay falal jacayl leh.

Sidoo kale waa inaan deriskeenna ugu naxariisanno hadalkeenna iyo macaamilkeenna, oo u dulqaadanno, u roonaano, oo aynaa si dhib yar ugu xanaaqin uguna cadhoon, xattaa marka deriskeennu ay nagu buuqaan ee na aflagaadeeyaan. "Waxaa barakadaysan kuwa camal qaboow, waayo dhulkay dhaxli doonaan" (Matayos 5:5). Kuwa camalka san ee cafiska badan, ee u dulqaata dhibka, ee sharka aan ku gudin shar, waxay heli doonaan oo ku raaxaysan doonaan barako nooc kasta ah dhulka korkiisa iyo aakhiroba taas oo iyaga u ah wanaagga ugu sareeya. Waa inaan mar kasta saamaxno wixii la inoo gaysto oo aynaan cuqdad caloosha ku haysan. Waa inaan u tukanno in xumaan falayaashu ay arkaan khaladkooda si ay u aqbalaan cafiskeenna Ciise dartii ah. In cafis la sameeyo macnaheedu ma ahan in xumaan la oggolaado ama in khaladka la iska indhotiro, laakiin waa in had iyo goor laga raalli noqdo oo loo diyaar noqdo in la saamaxo, oo la iskana illoobo marka khaladkii la saxo. Yuusuf waxaa addoon ahaan u iibiyay walaalihii (Billowgii 37:23-35); markii dambe ee ay u muujiyeen in ay qoomamaysan yihiin falkoodii, Yuusuf wuu saamaxay iyaga, oo wuuna u sheegay taas inkastoo ay iyagu xumaan ka wadeen, Eebbe ayaana sharkoodii khayr uga dhigay (Billowgii 45:1-16; Billowgii 50:15-21). Eeg Efesos 4:32. Matayos 18:15-18. Masiixu wuxuu inoogu sheegay tilmaan sida aan ka yeelayno qof kasta oo shar inagu sameeyay. Waxaan ku soo ururinaynaa, waa inaan ku dadaalno inaan samayno, inagoo ku adkaysanayna caadadeenna Masiixinimo, waxa uu Rasuul Bawlos inoo sheegay: "Hadday suurtowdo intaad kartaan, nabad kula jooga dadka oo dhan." (Rooma 12:18).

Haddii aan rabno inaan ogaanno qiimaha ay leedahay nolosha dadku iyo sida ay qaali u tahay, waa inaan aadno Kaalfari, halka uu Ilaah ku bixiyay qiimihiisa, si uu u furto mid kasta iyo dhammaan naflaha. Qiimaha furashadu wuxuu ahaa inuu u bixiyay Wiilkiisii inuu dhinto.

Amarkanu wuxuu dhammaanteen Ilaahay hortiisa inagu xukumayaa inaan nahay dembiileyaal. Laakiin waxaa mahad leh Eebbaha u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix inuu inoo buuxiyo amarkan, isagoo ah furashada dembiileyaasha iyo inuu qaado dembiyada iyo ciqaabta xadgudubyada dembiileyaasha ee amarkan. "Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah idinkoo ah sida caruur la jecel yahay. Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa." (Efesos 5:1-2).

AMARKA LIXAAD

"Waa in aanad sinaysan." Amarkan wuxuu Eebbe inagu farayaa in aan edbinno dareenkeenna jidhahaaneed kan ugu xoogga badan, kaas oo ah dareenka kacsiga. Ilaah ayaa inoo sameeyay kacsiga; isaga ayaa ugu talagalay; waana wax gebi ahaanba wanaagsan ee ma ahan in laga dhigo wax xun oo shar ah. Raaxada dhabta ah ee isutagga waxaa la helaa oo keliya marka loo adeegsado oo la raaco siduu Ilaahay ugu talagalay ee u qorsheeyay. Eeg 1Tesaloniika 4:1-5. Is fuulidda aan la kala lahayni waa wax caadi u ah xoolaha ama xayawaanka, laakiin ma aha dadku in ay sidaas oo kale noqdaan. Dadka, Eebbe wuxuu ugu talagalay oo u sameeyay inay isguursadaan.

Si gacan looga gaysto amarkan fulintiisa, waxaa lagu talinayaa in la si baro xidhiidhka jinsiga. Isutagga jinsigu waa arin la xidhiidha sharciga asluubta. Dareenka isa soo jiidasho ee dhabta ah ee jinsigu waa wax karaamaysan oo Ilaahay inagu abuuray. Marka la baranayo xidhiidhka jinsiga, waa in la helo macallin aqoon u leh, wakhtiga iyo marxaladda ku habboon, oo waa inuu qofka tilmaan wanaagsan oo sax ah ka siiyo isutaggu waxa uu yahay iyo kan habboon. Guriga ayaa ah macallinka ugu horeeya, oo aabbahuna waa macallinka ugu habboon ee wiilashiisa wax bari kara, oo hooyaduna waa macallimadda ugu habboon ee gabdheheeda. Ma fiicna marka caruurtu ay jinsiga iyo shaqadiisa ka bartaan ardayda kale ama suuqa. Marka waalidka laga reebo, kaniisadda iyo dadka takhasuska u leh caafimaadka ayaa iyana waxbari kara caruurta, taas oo la samayn karo marka uu ilmuhu baaluqayo, oo ah xilliga ilmuhu laboobo ama dhadigoodo. Waxaa iyana wanaagsan in marka uu ilmuhu qaan gaadho ka dib, la siiyo kitaab la hubiyay oo ka hadlaya xidhiidhka jinsiga iyo guurka.

Guurku waa midow weligiis ah ee hal nin iyo hal naag oo doonis kalgacal ku noqda isku jidh keliya. Eebbe ayaana ku aasaasay Beerta Ceeden, marka Eebbe si gaar ah isugu abuuray Xaawo iyo Aadan (Billowgii 2:18-24). Min badnida, oo ah naago badan in la isla guursado, waa ay ka soo horjeeddaa talagalka Eebbe. "Nin kastaa afadiisa oo qudha ha haysto, naag kastaana ninkeeda oo qudha ha haysato" (1Korintos 7:2). Aragtida dadka, guurku wuxuu ka billowdaa xafladda arooska. Guurka waxaa hordhac u ah doonanaan

toosan ama sax ah, oo ah in la samaysto ballan dhab ah oo daacad laga yahay iyo in la soo bandhigo in ay labada qof isu noqonayaan xaas. Waxaa tusaale inoo ah Maryan iyo Yuusuf (Matayos 1:18-25). Eeg Sharciga Ku Noqoshadiisa 22:23, 24. Guurku waa midow cimrigiis ah; wuxuuna ku buri karaa in labada qof, ninka ama naagta midkood uu dhinto (Room 7:2), oo ma sii jirayo, uma raacayo aakhiro (Matayos 22:30). Ninka ama naagta carmalka ahuna waa guursan karaan haddana. (Rooma 7:3).

Guurku wuxuu leeyahay dhawr ujeeddo oo xag Ilaah ka yimid. (1) Guurku waa xidhiidh wada noolaansho, oo is daryeel iyo isu adeeg kalgacal ku dhisan. Waxaa laga helaa is weheshi. "Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu yidhi, 'ma wanaagsana in ninku kaligiis ahaado; waxaan u samayn doonaa mid caawisa oo ku habboon'" (Billowgii 2:18). (2) Guurka waxaa loo sameeyay in lagu ballaadhiyo dadka, ama in la dhalo caruur. "Oo Ilaah baa barakadeeyay iyaga; oo wuxuu iyaga ku yidhi, 'wax badan dhala oo tarma, oo dhulka ka buuxsama'" (Billowgii 1:28). Waalidiintu ma dhalaan jidhka oo kaliya laakiin waxay dhalaan ilmo nool; sidaa darteed, sidoo kale naftana waxaa ilmaha u soo gudbiya waalidkooda. (3) Guurka waxaa loo sameeyay inuu jiro isutag habboon ee jinsi. "Laakiin si aan loo sinaysan, nin kastaa afadiisa oo qudha ha haysto, naag kastaana ninkeeda oo qudha ha haysato" (1Korintos 7:2). Guurku waa inuu ahaadaa mid daahirsan, oo aad loogu feejignaadaa sharafta asluubeed ee xidhiidhka. Dhammaan siyaabaha xunxun ee dembiga ah, isugalmoodka aan caadiga ahayn, waa in laga reebo, sida ay qabto 1Tesaloniika 4:4,5. Guurka waa in aan la xumaynin oo siyaabo aan caadi ahayn la isugu tegin. Ninka iyo afada Masiixiyiinta ahu waa in ay raacaan sida ay qorayso 1Butros 3:1-7.

Amarkan Eebbe wuxuu ku xaaraamaynayaa dhammaan fikirada, damacyada, hadallada iyo falalka aan daahirka ahayn ee la xidhiidha isutagga jinsiga. Isugalmoodku wuxuu noqon karaa sharci iyo xalaal marka la isqabo, wuxuuna noqon dembi iyo ceeb haddii aan la isqabin. Eeg Cibraaniyada 13:4. Falsafadaha asluub xumada iyo dhillaysiga wakhtigan aan ku jiro, ee kuwa isqaba iyo kuwa aan isqabinba, ma tirtirayaan mana joojinayaan xaaraamaynta uu Ilaah xaaraameeyay fisqiga. Falalka khaniisnimada, isutagga foosha xun, dhaqanxumada, isdullaynta, afxumada, kaftanka jinsiyeed ee ah dhillaynimada, dabada iyo jidhka kale oo si xun loo dhaqdhaqaajiyo, indhaha iyo wejiga oo si damacgelin ah loo muujiyo, iljebiska, labbis xumada ama isqaawinta loolajeedo in qof lagu soojiito, jeclaysiga fikiradda akhlaaqa xumada ah, damacyada xun ee qalbiga la gashado, dhammaantood waa xaaraan. "Waxaa qalbiga ka soo baxa fikradaha sharka leh iyo dilidda iyo sinada iyo wasmada xaaraanta ah iyo tuugonimada iyo maragga beenta ah iyo cayda" (Matayos 15:19). "Nin walba oo qof dumar ah damac u eegaa, durba qalbigiisuu kaga sinaystay" (Matayos 5:28). Tusaale: xaaskii Footiifar

(Billowgii 39:7-12). “Laakiinse sida ay qudduusiinta ugu eg tahay, marnaba yaan dhexdiinna laga sheegin sino, iyo wasakh oo dhan, iyo damaacinimo, iyo ceeb iyo hadal nacasnimo ah, iyo kaftan bilaash ah, oo aan idinku habboonayn, laakiinse waxaa idinku wacan mahadnaqid” (Efesos 5:3-4). “Ka fogaada damacyada jidhka oo nafta la dagaallama” (1Butros 2:11). Dhanka guurka: wuxuu Eebbe mamnuucay in la jabiyo axdiga guurka. “Haatan iyagu laba ma ahan, laakiin waa isku jidh. Haddaba wixii Ilaah isku xidhay ninna yuu kala furin.”(Matayos 19:6).

Sinadu waa xidhiidh isugalmood oo si xor ah uu qof xaas luhu u galmoodo qof kale oo aan ahayn tii ay isqabeen. Macsiduna waa isugalmoodka laba qof oo aanu midkoodna xaas lahayn; Kitaabka Qudduusku tani wuxuu ku darayaa sinada xattaa.

Eebbe wuxuu inaga doonayaa inaan ku noolaanno nolol xalaal ah oo ka nadiif ah fikir ahaan, damac ahaan, hadal ahaan iyo fal ahaanba. Waa inaan ku dadaalno inaan nadiif iyo daahir ka ahaanno qalbiga, asluub wanaagsan aan yeelanno, oo ficilkeenna iyo labbiskeennuna ay fiicnaadaan. Jidhkeennu waa macbudka Eebbe. “Wax kasta oo daahir ah… wax kasta oo wanaag laga sheego, haddii wanaag ku jiro iyo haddii ammaanu ku jirto, waxyaalahan ka fiirsada” (Filiboy 4:8). “Hadal qudhun ahu yuusan afkiinna ka soo bixin, laakiinse ku hadla waxa u wanaagsan dhisidda loo baahan yahay inay nimceeyaan kuwa maqlaa.” (Efesos 4:29) Dadka isqaba Eebbe wuxuu ka rabaa inay is xurmeeyaan oo is jeclaadaan midba kale, ninku waa inuu u xurmeeyaa xaaskiisu inay tahay gargaare Ilaah siiyay, oo naagtuna waa inay ninkeeda u xurmayso inuu yahay madaxeeda Ilaah siiyay. “Sida kaniisaddu uga dambayso Masiixa, afooyinkuna ha uga dambeeyaan nimankooda xagga wax kastaba. Nimankow, idinkuna afooyinkiinna u jeclaada siduu Masiixuba u jeclaaday kaniisadda oo uu nafsaddiisii u bixiyay iyada aawadeed.” (Efesos 5:24-25). Eeg 1Butros 3;6, 7; Kolosay 3:19; Efesos 5:22. Nninku waa inuusan noqon mid siduu doono yeela, mana aha in xaaska laga soo qaado sidii addoon oo kale; labadaba Eebbe ayaa kala xisaabtami sida ay u fuliyaan waajibaadka ka saaran xilalkooda kala duwan. Eeg 1Korintos 7:3-4.

In kastoo raalli ahaansho la isku guursado, haddana raalli ahaansho la iskuma furi karo. Sababtoo ah Ilaah ayaa isku xidhay ninka iyo afada oo mideeyay, midowgaas lama jabin karo haddii labada qof midkood uusan galin dembi aad u weyn. Guurku wuu buri karaa oo qofka daacadda ahu wuu iska furi karaa haddii kan kale uu galay dembi macsi (sino) ama uusan daacad u ahayn axdigii guurka (Matayos 19:9), ama uu si xumaan ku jirto uga tago kan kale oo dayaco (1Korintos 7:15). Tan oo kale marka ay dhacdo qofka eedlaawaha ahu wuxuu haystaa fasaxa Eebbe inuu si sharci ah isaga furo, oo wuxuu xor u noqonayaa inuu guursado qof kaleeto. Hase ahaatee, Eebbe

shardi kama dhigin in tallaabo noocaas ah la qaado. Furiin kale oo lagu sameeyay sabab kale oo aan ahayn kuwa aan soo sheegnay, waa laga yaabaa inuu waddankaaga sax ka yahay, laakiinse sax kama ahan Ilaahay hortiisa. Wax sharciga waddankaaga sax ku noqon kara ayaan shari iyo sax midna ku noqonayn Ilaahay hortiisa. Ma dhihi karno furniin baa qiil loo hayaa maadaama ay oggoshahay dawladda waddanku.

Waayadii uu badbaadiyuhu hawsha ka waday adduunka sharciga lagu maamulo furiinku wuxuu ahaa mid dabacsan. Ciise ayaana canaantay dabacsanaantaas sharciga; Eeg Matayos 19:4-9; Luukos 16:14-18. Wakhtigan aan joogno xaalku waxba taas kama wanaagsana. Ragga iyo haweenku way is kaxaystaan oo isla noolaadaan oo markii uu mid doonana kii kale iska caydhiyaa ama isaga tagaa. Dad badan oo badan ayaa ka tegaya sharcigii Ilaah ee ku saabsanaa guurka. Dhawr arimood ayaana taasi inay dhacdo xoojiyay. (1) Falsafadda "jacaylka xorta ah" ayaa lagu faafiyaa in badan oo ka mid ah waxa la akhristo maanta, riwaayadaha la dhigo iyo filimada laga daawado shineemooyinka iyo telefishinnada. Taas, oo ay weheliso falsafadda qaar ka mid ah dhakhaatiirta cilmi-nafsiga iyo la taliyeyaasha guurka oo sharciyeeyay guurka fudud iyo furniinka fudud. Isugalmoodka dhibka yar ee wakhtigan socda, iyo saamaynta ay ku yeelatay in aan qiime loo yeelin xidhiidhkii dabiiciga ahaa ee jinsiga, iyana waa arin aan la iska idhatiri karin. Edebdarri iyo sharcigii Eebbe oo aan waxba laga soo qaadin ayaa ah tan sababtay asluub xumada jinsiga ee lagu dhaqmo maanta. (2) Tan labaadna waa guurka fudud. Guuldarrada ah in aanu qofku si wanaagsan u baran qofka uu nolosha la qaybsan lahaa inta aysan isguursan ka hor, iyo in la oggolaado dareen jacayl oo dhalanteed ah lana doorto; waa khalad si weyn maanta dadku u sameeyo. Dadka oo dhamu waxay leeyihiin kartidooda iyo dhaliishooda, waxay leeyihiin wanaaggooda iyo xumaantooda, marka a qiimeeyo akhlaaqdooda iyo dabeecaddooda ay muujinayaan. Xaqiiqadan oo la garan waayaana waxay keentaa guurka oo xumaada, oo natiijaduna sida badan waa furiin marka aan dib isu sixid la samayn. Qof ayaa hore u yidhi, "Guurka ka hor labadaada indhoodba fur, oo guurka ka dibna hal il isku qabo." Waa inaan garawsannaa in guurka aan isku qaadanayno "shar iyo khayrba," oo waa inaan is waafajinno xaqiiqadaas. (3) Arinta saddexaadna waa dareenka kacsan ee isku buuqsan ee aan maanta ku nool nahay, oo aynaan wakhti fiican siin inaan wax dib u eegno oo ka fekerno. Natiijaduna waa fal iyo fal celin degdeg ah, go'aanno iyo gunaanad boobsiis ah. Dulqaadkii wuu yaraaday. Dadka isqabaa waa inay ogaadaan inay tahay inay ka shaqeeyaan sidii guurkoodu ku guulaysan lahaa ee ay isugu raagi lahaayeen.

Si looga guulaysto dhammaanba fikirada aan daahirka ahayn ee jinsiga (galmada) iyo damacyada, oo guurka loogu xajiyo udub dhexaad adag, waxaa qof kasta oo Ilaah aqood ah looga baahan inuu sameeyo dadaal. (1)

Aaladda ugu wanaagsanna waa in la adeegsado Erayga Ilaah iyo tukasho. Eebbe ka bari qalbi nadiif ah, oo midkiinba kan kale ha u tukado, gaar ahaan, qofka aan isqabno waa inaan u tukanno. (2) Aaladda kale ee lagaga hortagi karo dhaqanxumada iyo isu raalli ahaansho la'aantu waa inaan ku mashquullo shaqo. "Shaydaanku qof kasta ayuu jirrabaa, laakiin ninka shaqo laawaha ahu isaga ayaa jirraba shaydaanka," maahmaah ayaa sidaa odhanaysa. Daa'uud markuu shaqo laawaha ahaa, dembi ayuu galay oo wuxuu Uuriyaah ka kaxaystay naagtiisii (2Samuu'eel 11); siduu markii horeba yeeli jiray, hadduu ciidamadiisii dagaalka la aadi lahaa, fikirkaa sharka luhu uma uusan yimaadeen. (3) Qiyaas in wax loo cuno, loo cabbo iyana waa muhiim, waayo, haddii la iska badiyo shar ayay keentaa. Marka uu jidhku caajiso, saamayn shar leh ayuu ku yeeshaa maskaxda iyo habka fekerka. (4) Tan kale, waa in aynaan wax ku darsan wax jirrabaad inoo keeni kara, oo waa inaan ka fogaanno meelaha iyo xaaladaha aan kala kulmi karno in aan ku dhacno jirrabaadda dembiyada noocaas ah, oo ilaaqda iyo shukaansiga xun ina hiyi kicin karaan. Waayadan waxaa jira waxyaabo badan oo burin kara asluubta oo noqon kara fursad uu dembigu inagu haleelo.

Amarkanu Ilaah hortiisa wuxuu dhammaanteen inaga dhigayaa dembiilayaal. Laakiin waxaa mahad leh Ilaaha u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix inuu inoo kaamil yeelo amarkan isagoo ah furashada dembiilayaasha oo uu qaado gefkii iyo ciqaabtii xadgudubka dembiileyaasha ee amarkan. "Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah idinkoo ah sida caruur la jecel yahay. Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa." (Efesos 5:1-2)

Caruurta Ilaah waxay ku dadaalaan inay jaraan xididka ay ka soo baxaan dhammaan laamaha dembigu, maadaama ay ugu tukadaan Eebbe: "Eebbow, igu abuur qalbi nadiif ah, oo igu cusboonaysii ruuxa toosan."

AMARKA TODDOBAAD

"Waa inaanad waxba xadin." Amarkan Eebbe wuxuu ku ilaalinayaa xaqa uu qofku u leeyahay inuu yeesho hanti iyo walxo alaab ah. Barakada hantida, Eebbe ayaa u bixiya sida uu doono (Yeremyaah 27:5). Deeqda Eebbe ee hantida dadka qaar way ku hodmaan, qaarna sabool ayay ahaadaan (1Samuu'eel 2:7). Si aan amarkan u addeecno waa inaan ogaannaa in Eebbe uu yahay kan bixiya dhammaan barakada hantida, oo waa inaan waliba ogaanaa in aynaan ahayn kuwa iyagu dhab ahaan u leh laakiin in aan nahay adeegayaasha Eebbe, ee maamulaya xoolihiisa.

Eebbe sharci ayuu ku ilaaliyay hantideenna iyo tan deriskeenna sababtoo ah, dadku waa damaaci. Haddii aysan ilaalintaasi jirin warshadoleyda iyo tujaartu waxay u gacangeli lahaayeen mashaqaystayaasha iyo kuwa sharka leh.

Waxaa jira afar hab oo sharaf leh oo qofku uu ku yeelan karo hanti tiis ah: (1) In aan gadanay ama aan shaqaysannay; (2) In la inoo siiyay kaalmo ahaan ama aan dhaxal ku helnay; (3) In aan meel ka helnay oo ciddii lahaydna aynaan u celin karin; (4) In aan ku helnay ganacsi xalaal ah. Hab kasta oo kale oo hanti lagu halo waa tuugonimo.

Eebbe wuxuu xaaraameeyay nooc kasta oo dhac, tuugo iyo khiyaano ah, iyo waliba damaaciga, oo ah inaan si dembi ah ku doonno wax kasta oo uu leeyahay deriskeennu. Waxaana ka mid noqon siridda, ka faa'iidaysiga xun, dulsaar dheeri ah, mushaaro aan u qalmin oo shaqaale la siiyo, shaqadeenna oo aynaan daacad ka ahaan, caajisnimo, iwn. Eeg Efesos 4:28; Laawiyiintii 19:35, 36; Yeremyaah 22:13; Sabuurrada 37:21; Maahmaahyadii 29:24. In kastoo dad badanu khamaarka aysan u arag dembi weyn, oo waddamada qaarkoodna ay oggol yihiin noocyo ka mid ah khamaarka, haddana waa xadgudub toos ah ee lagu xadgudbayo amarkan.

Innaga oo ah adeegayaasha Eebbe waa inaan dhawraa sidaan hantida ku helayno iyo sidaan u isticmaalayno hantida aan haysanno. Waa inaan u adeegsanno inaan ku kaalmayno nafteenna iyo dariskeennaba. "Inaad wax wanaagsan samaysaan oo wax wada wadaagtaan ha illoobina; waayo allabaryada caynkaas ah Ilaah aad buu ugu farxaa" (Cibraaniyada 13:16). Eeg 1Timoteyos 5:8. Waa inaan hantideenna ku gargaarno kuwa u baahan. "Kii miskiinka u naxaa Rabbiguu wax amaahiyaa, oo wanaaggii uu sameeyayna wuu u celin doonaa" (Maahmaahyadii 19:17) Sidoo kale, hantideenna iyo lacagteenna waa inaan ku caawinno kaniisadda. "Kan hadalka la baraa wax walba oo wanaagsan qayb ha ka siiyo kan wax bara." (Galatiya 6:6).

Lahaanshuhu waa arin gaar ahaaneed. Dadka hortooda innaga ayaa iska leh oo maamulanna waxa aan si sharci ah u leenahay (Falimaha Rasuullada 5:4). Shuuciyadda, oo diidda lahaanshaha hanti gaar ahaaneed, wax taageero ah ama qiil ah kama haystaan amarkan amaba meel kaleba.

Eebbe wuxuu inaga doonayaa inaan ku caawinno deriskeennu inuu hagaajisto oo ka ilaashado hantidiisa iyo ganacsigiisa inay ka lunto ama ka khasaarto. Waa inaan hantida dariskeenna uga taxadarno sida aan uga taxadarno hantideenna oo kale. Waa inaan siinno talo wanaagsan oo caawinno. Falkan jacaylka xanbaarsanu wuu ballaadhan yahay oo waxaa ka mid noqon kara inaan u raadinno shaqo faa'iido leh, inaan u hagaajinno shaqadiisa, inaan ka caawinno in meheraddiisu ay korto, iwm. Taas inaan samayno waxaan u baahan nahay in Ruuxa Ilaah uu inagu jiro, waayo qalbigeenna dabiiciga ahu waa mid damaaci iyo masayr badan oo ma doonayo in dadka kale ay u guulaystaan si ka weyn sida aan u guulaysanno.

Inta badan sida aan u samayno ganacsigu waa si nafjeclaysi iyo cadaawad leh, oo dadku waxay doonaan faa'iido tood ah oo sidaasna waxay cidhiidhi ka geliyaan ama ka fadhiisiyaan dariskooda shaqadiisii ama ganacsigiisii. Loo shaqeeyaha iyo shaqeeyaha xidhiidhka ka dhexeeya wax wayn baa ka hagaagi lahaa haddii dhammaan lagu dadaali lahaa in la sameeyo sida uu ina farayo amarkanu.

Eebbe wuxuu rabaa inaan ku faraxno hodantinimada iyo guusha uu gaadho deriskeennu iyo inaan ku gargaarno inuu hodmo. Gargaarka aan gargaarayno deriskeenna, ma ahan inaan sharaf ka raadinno iyo faa'iido, laakiin waa inay ahaato mid aan ku doonayno wanaaggiisa oo kaliya. Jacaylka Masiixiyiintu "nafsaddiisa wax uma doondoono" (1Korintos 13;5). "Wax kasta oo aad doonaysaan in laydiin sameeyo, idinkuna sidaas oo kale u sameeya" (Matayos 7:12). Caruurta Ilaah waxay doonaan inay u jeclaadaan dadka sida ay u jecel yihiin naftooda.

Amarkanu Ilaah hortiisa wuxuu dhammaanteen ka dhigayaa dembiileyaal. Laakiin waxaa mahad leh Eebbaha u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix inuu u kaamil yeelo amarkan isagoo ah kafaaragudka dembiileyaasha oo qaaday gefkii iyo ciqaabtii xadgudubyada dembiileyaasha ee amarkan. "Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah idinkoo ah sida caruur la jecel yahay. Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa" (Efesos 5:1-2).

AMARKA SIDDEEDAAD

"Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin." Magaceenna iyo sumcaddeenna wanaagsanu waa hibo qaali ah oo aan ka hellay Eebbe. Marka nolosha laga reebo waa hantida labaad ee ugu weyn ee uu Eebbe adduunka inagu siiyay. Halkan wuxuu Eebbe innaga iyo deriskeennaba inaga ilaaliyay sharafdaro iyo been. Waa inaan ilaalinno oo xurmayno magaca iyo sharafta deriskeenna.

Eebbe wuxuu inaga xaaraameeyay inaan hadal been ah ka sheegno deriskeenna meel kasta oo aan joogno, haddii ay tahay maxkamad horteed iyo meel kasta oo kale oo bulshada dhexdeeda ah. Ilaah ma rabo inaan been ka sheegno ama aan u sheegno deriskeenna, mana ahan inaan runta qarinno si aan isaga wax u yeello. Eeg Maahmaahyadii 19:5. Inaan dadka faaninno oo afka ka sheegno ammaantooda iyadoo aanay daacad inaga ahayn waa khaa'innimo. Mana ahan inaan kashifno wax uu deriskeennu inagu qarsaday, ama wax sir ah oo aan ka hayno, kaasoo, marka la sheego, wax u dhimi kara sumcaddiisa ama waxyeelo kale u gaysan kara. "Kii sida mid xan badan u warwareegaa wuxuu daaha ka qaadaa waxyaalo qarsoon, laakiinse kii ruuxiisu aamin yahay xaal kuu qariyaa" (Maahmaahyadii 11:13). Ma ahan inaan xumaan ku xamanno deriskeenna, oo aan ka fidinno war been ah iyo kutirikuteen, ama xataa wax

run ah oo ku saabsan ceeb uu leeyahay. Ma ahan inaan sharafta ka qaadno, oo aan jabinno. Dariskeenna ma ahan inaan ku eedayno war aan sal lahayn oo aan la degdegno. Samaantii ayaan ka tagnay haddaan qaadanno oo rumaysanno xan shar ah oo ku saabsan deriskeenna. Marka uu Kitaabka Qudduusku leeyahay: "Cidna ha xukumina, idinkana laydinma xukumi doono. Ninna wax ha ku garaynina, idikana wax laydinkuma garayn doono" (Luukos 6:37), tanu kama hadlayso xukumidda walaal khaldan, taas oo aan samaynayno si waafaqsan doonista Eebbe; waxayse ka hadlaysaa xukumid ama eedayn lagu degdego oo taabanaysa qofka shakhsiyaddiisa ama sida uu u nool yahay. Waxaa kale oo uu Eebbe inaga xaaraantinimeeyay fikirada sharka ah ee ku lidka ah deriskeenna, in la male'awaalo shar iyadoo aan la hubin. Shakigu waa markaatiga beenta ah ee qalbiga. "Oo midkiinna yuusan qalbiga xumaan ugu fikirin deriskiisa" (Sekaryaah 8:17). Waana in aynaan qalbiga ku hayn qorshe ama shirqool ka dhan ah deriskeenna; oo dadka noocaas ahu "iyagu waxay uuraystaan belaayo, xumaanna way dhalaan, oo calooshooduna waxay diyaarisaa khiyaano." (Ayuub 15:35).

Haddii qof deriskaaga ah lagu og yahay khalad uu galay, Ciise ayaa inoo sheegay in tallaabada ugu horaysa ay tahay in loo tago qofkaas gefka sameeyay oo si jacayl ku jiro loogu qanciyo in uu oggolaado inuu khalad sameeyay oo loo horseedo inuu khaladkiisa isagu arko. Eeg Matayos 18:15.

Waa inaan diffaacno deriskeenna, oo halkiisa intaan istaagno aan gaashaan uga noqonno eedaymaha beenta ah. Laakiinse ma ahan inaan diffaacno dembi ama khalad run ah oo uu sameeyay. Waa inaan si wanaagsan wax uga sheegno deriskeenna innagoo ku ammaanayna tayadiisa wanaagsan iyo shaqadiisa fiican, inagoo aan ka tegayn runtu sida ay tahay. Marka wax run ah lagu eedeeyo dariskeenna, ama khalad uu galay lagu tilmaamo, waa in aynaan buunbuunin ama daboolin, laakiinse aan ugu faahfaahinno sida ugu wanaagsan ee aan karno. Waa in aynaan eedayn inagoo xumaan ula jeedna, laakiinse wixii suurtogal ah waa inaan ka dhaadhicinno inagoo isaga la jirna. Waa inaan ficilladiisa toostoosino oo u dhisno sida ugu wanaagsan ee aan karno, inagoo u macnaynayna hadba sida isaga dantu ugu jirto. Waa inaan diffaacno kuwa iyagoo maqan wax xun oo shar ah laga sheego. Eeg Maahmaahyadii 31:8, 9. Jacaylka dhabta ah ee Masiixiyiintu wuxuu qofka u horseedaa inuusan arkin, oo cafiyo dembiga qofka kale. Eeg 1Butros 4;8; 1Korintos 13:7. Jonatan wuxuu sameeyay siduu Eebbe doonay markuu si wanaagsan uga hadlay Daa'uud isagoo hor jooga Saa'uul, oo necbaa Daa'uud. (1Samuu'eel 19:4).

Dabcan amarkanu waa ka ugu badan ee sida ugu dhibka yar loo jabiyo mar kasta, sababta oo ah tixgelin badan lama siiyo. Laakiin dembiyada lidka ku ah amarkanu ma ahan waxa yar ee aan dhibaatada lahayn ee aan u malayno

inay yihiin. Ciise wuxuu ku sheegay kuwa beenaaleyaasha ahu inay yihiin caruurta ibliiska. Eeg Yooxanaa 8:44, 45. Wuxuuna rabaa inaan jeclaanno deriskeenna.

Ciise isagoo iska hadlaya isagu wuxuu yidhi: “Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaaddo xaggayguu ku yimaaddo maahee” (Yooxanaa 14:6). Haddii Ciise uu yahay Runta, waa in caruurtiisuna ay noqdaan, sida isagoo kale, kuwo run badan. “Oo midkiin waliba deriskiisa run ha kula hadlo” (Efesos 4:25). (Been ha isu sheegina, waayo, idinka waad iska xoorteen dabeecaddii hore iyo falimaheediiba, oo waxaad huwateen dabeecaddii cusbayd, taas oo loo cusboonaysiinayo aqoon sida ay tahay u ekaanta kan iyada abuuray” (Kolosay 3:9-10). “Bishimaha beenta sheega Rabbigu wuu karhaa, laakiinse runta kii ku shaqeeya wuu ku farxaa.” (Maahmaahyadii 12:22).

Amarkanu Ilaah hortiisa wuxuu dhammaanteen ka dhigayaa dembiileyaal. Laakiin waxaa mahad leh Eebbaha u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix in uu u kaamil yeelo amarkan isagoo ah kafaaragudka dembiileyaasha iyo inuu qaado dembigii iyo ciqaabtii xadgudubka dembiileyaasha ee amarkan. “Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah idinkoo ah sida caruur la jecel yahay. Jacayl ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa.” (Efesos 5:1-2).

AMARADA SAGAAL IYO TOBAN

“Waa inaanad damcin guriga deriskaaga.” “Waa inaanad damcin naagta deriskaaga, addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deiskaagu leeyahay oo dhan.” Labadan amar ee ugu dambeeya Eebbe wuxuu si gaar ah u timaamayaa qalbiga oo wuxuu inaga rabaa in qalbiyadeennu ay qudduus ahaadaan oo ka xor ahaadaan dareen kasta oo shar leh. Eebbe halkan wuxuu inagala hadlayaa falalkeenna dembiga leh iyo ku degdegidda sharka iyo damacyada qalbiga, kuwaas oo qofka u horseeda inuu ku sameeyo fal dembi ah feker ahaan, hadal ahaan iyo ficil ahaanba. Dembiga damacu waa doonis si dembi ah wax lagu doono; waa rabitaan shar, ama kacsi. Dadku sida badan doonista noocan ah uma arkaan wax dembi ah, sababta oo ah waxay ka fekeraan haddii aan doonis shar leh lagu samayn ficil ahaan, in aanay marna gaadhay heer ay dareemaan inay dembi faleen. Hase yeeshee, taasu waa fikir khalad ah. Eebbe wuxuu Ciise dartii, oo inaga furtay dembiga, inaga rabaa inaan yeelanno doonis qudduusan iyo jacaylka Eebbe oo kaliya iyo wax kasta oo wanaagsan inaan doono oo samayno.

Amarada sagaalaad iyo tobnaad way isu eg yihiin oo si wadajir ah ayaa loo tixgelin karaa. Labaduba waxay inaga xaaraamaynayaan damaca. Amarka sagaalaad wuxuu inaga xaaraamaynayaa damaca waxyaalo aan noole

ahayn; amarka tobnaad wuxuu inaga xaaraamaynayaa damaca noolaha, kaas oo lagu qaadan karo ama lagu kaxaysan karo qorshe sir ah.

"Damcid" macnaheedu waa rabid, in la lahaado doonis qotodheer oo loo boholyoobo wax, gaar ahaan wax uu leeyahay qof kaleeto. Dabcan khalad ma ahan in wax la doonoo ama la damco. Waxayse ku xidhan tahay waxa uu yahay iyo sababta loo doonayo. Waan doonaynaa hadiyadaha ruuxa ee Boqortooyada Eebbe (1korintos 12:31); Matayos 6:33-34). Waxaa kale oo aan damci karnaa waxyaalo aan la inaga xaaraamayn, sida xigmadda, cilmiga, awoodda, xirfad, iwm. Wax ceeb ah ma laha doonista ah in la helo shaqo wanaagsan, mushaaro badan, jago xafiiseed, aqoon korodhsi iyo wax badan oo ka mid ah waxyaalaha wanaagsan ee nolosha. Si daacad ah in loo helo oo loo yeesho hanti badan oo adduun, xattaa aad u badan, ma ahan iyaduna wax xun. Laakiin ma ahan inaan damacno waxyaalaha la inaga xaaraameeyay, ama inaga aan la inoogu talagalin.

Damaacinimada ah hunguri xumada iyo hunguri weynidu, waa khalad; waa doonis lagu raadinayo si kasta oo lagu helayo; waa doonis lagu raadinayo wax iyaadoo dhib loo gaysanayo dad kale; waa doonis lagu dhacayo ama lagu haysanayo si xaqdarro ah wax uu leeyahay qof kale; waa dareen xaasidnimo oo aan ka masayrayno guusha deriskeenna. Waa haqabbeel la'aanta qalbiga, ku qancid la'aan dhaqaalaha Eebbe uu nafteenna dhaqaaleeyo, waa xasil la'aan, waayo Eebbe ayaan ina siin waxyaalo aanu markii horeba inoogu talagelin innaga. Damaacigu ma ahan dembi u khaas ah ama lagu yaqaan hal dabaqad oo dadka ka mid ah; waase wax dadka oo dhan ka siman yahay. "Kooda ugu yar illaa kooda ugu weyn mid kood kastaaba wuxuu u go'ay damac xumaan" (Yeremyaah 6:13).

Damac xumidu waa hiddaha qof kasta oo sharciga Eebbe ugu xadgudba feker ahaan, hadal ahaan, iyo ficil ahaanba. Doonista sharka ayaa ka dambaysa fal kasta oo dil la geystay, sino, tuugo, nacayb, quudhiwaa, masayr, daacad daro, iwm. "Waxaa qalbiga ka soo baxa fikirada sharka leh iyo dilidda iyo sinada iyo wasmada xaaraanta ah iyo tuugonimada iyo maragga beenta ah iyo cayda" (Matayos 15:19). "Mid kasta waxaa jirraba damaciisa sharka ah isagoo la jiidanayo oo la sasabayo" (Yacquub 1:14).

Damaca dembiga ahu wuxuu ka dhashaa nafjeclaysiga oo waxaa kordhiya oo xoojiya fikirka ah in dadku ay u joogaan adduunka danta ah inay helaan, yeeshaan, oo ku raaxaystaan waxyaalaha adduunkan. Qofka damaaciga ahu xagga Eebbe marna taajir kama noqdo. Damaacinimadu waxay ku tahay liddi ruuxa Masiixa iyo jacaylka aan u qabayno deriskeenna. Waxay hallaysaa shakhsiyadda qofka, waxay burburisaa asxaanka walaalnimada, waxay dishaa deeqsinimada, waxay curyaamisaa shuqulkii

wanaagsanaa, oo waxay khalkhalisaa farxaddii. Sidaa darteed “iska ilaaliya damaacinimada oo dhan.” (Luukos 12:15).

Kan damaaciga ahu mar walba wuxuu raadin wax uu damaaciyo, xattaa haddii uu ku dhiman wuxuu samayn oo adeegsan khiyaano kasta. Dembiganu wuxuu sii weynaadaa gaar ahaan marka uu qofku helo wixii uu damcay isagoo “muujinaya inuu xaq ku helay,” taas oo macnaheedu yahay in uu dadka kale u tusayo inuu wax ku helay si sax ah oo uu xaq u leeyahay.

Haddaan nahay kuwii uu furtay Rabbigu waa inaan yeelanno doonis qudduusan. “Waa inaad qudduus ahaataan, waayo, anigoo ah Rabbiga Ilaahiinna ahuba qudduus baan ahay” (Laawiyiintii 19:2). Eeg Matayos 5:48. “Haddaba Rabbiga ku farxa, oo wuxuu ku siin doonaa waxa qalbigaagu doonayo” (Sabuurradii 37:4).

Dadka Ilaah waxay ku farxaan Ilaah doonistiisa iyo jidadkiisa, oo way u tukadaan isaga, oo way ku farxaan waxa uu Eebbe siiyo iyaga. “Haddaynu haysanno dhar iyo dhuuni, way inagu filnaan doonaan. Laakiin kuwa doonaya inay taajir noqdaan, waxay ku dhacaan duufsasho iyo dabin iyo damacyo badan oo nacasnimo ah waxyeellona leh, oo dadka ku hafiya baabi’in iyo halaag. Waayo, jacaylka lacagtu waa xididka xumaato oo idil, oo qaar intay hiigsanayeen ayay iimaankii ka ambadeen, oo waxaa muday tiiraanyo badan.” (1Timotiyos. 6:8-10)

Masiixiyiin haddaan nahay waa inaan raadinno in “midkiinba midka kale kalgacayl ha ugu adeego” (Galatiya 5:13). Rasuul Bawlos wuxuu muujiyay jacaylka iyo xiisaha uu u qabo dadka kale markuu u soo celiyay addoonkii ka baxsaday Filemon ee la odhan jiray Oneesimos, sida ku qoran warqaddii loo qoray Filemon. Jacaylka weyn ee Masiix inoo qabay aawadiis waa inaan u gargaarno deriskeenna oo aan ugu adeegno inaan u xafidno wixiisa, oo aan u ilaalinno hantidiisa sidii iyada oo aan innagu leenahay, oo aan ku boorino kuwa qoyskiisa ka midka ah iyo saaxiibadiisu inay daacad u ahaadaan isaga.

Sida dhammaan amarada kale oo dhan, labadan amar ee ugu dambeeyaana waxay Ilaahay hortiisa inaga dhigayaan dembiileyaal. Laakiin waxaa mahad leh Eebbaha u soo diray Wiilkiisa Ciise Masiix inuu kaamil yeelo amaradan isagoo noqday kafaaragudka dambiileyaasha oo qaaday gefkii iyo ciqaabtii xadgudubka dembiileyaasha ee amaradan. “Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah idinkoo ah sida caruur la jecel yahay. Jacay ku socda siduu Masiixuba idiin jeclaa.” (Efesos 5:1-2).

SIDEEN ISUGU ARAGNAA MURAAYADDA SHARCIGA?

Markaan tixgelinno Tobanka Amar waxay ina tusaysaa inaan nolosheenna u haysanno nidaam weyn. Nafteenna oo si daacad ah u qiimayno waxay ina tusaysaa natiijadan: waxaannu ku guuldaraysannay inaanu waafaqno sida uu naga rabo sharcigu. Xattaa qofka ugu Eebbe cabsida badanu waa inuu qirto inuu ku guuldaraystay inuu jeclaado Eebbe iyo inuu jeclaado dadka kaleba. Rasuul Bawlos waa inaan la nidhaahnaa dhammaanteen: “waxa wanaagsan oo aan doonay inaan falo, ma sameeyo, laakiinse waxa sharka ah oo aanan doonayn inaan falo, ayaan sameeyaa” (Rooma 7:19). Tan inaan qiranno way ku adag tahay dabeecaddeenna aadanaha, laakiin waa runta; lamana dafiri karo. Runtii “Sharciga ayaa lagu gartaa dembiga” (Rooma 3:20).

CUTUBKA 7
BADBAADO WAXAY KA TIMAADDAA EEBBE

Meel kasta qofka dabeecaddu wuxuu raadinayaa inuu sax ku noqdo waxa uu u yaqaan Ilaah hortiisa, oo wuxuuna isku hawlaa inuu taasna ku gaadho dadaalkiisa. Waxaa jira hal wax oo ay ku cataawaan dhammaan diimaha dadku samaystay – taas oo ah in badbaado lagu helo shaqo. Isla qummanaantu waa caadada dadka ee isticmaalka diinta. Dadka badidooda, xattaa qaar badan oo ku jira xayndaabka kaniisadda Masiixu, waxay u haystaan in jidka badbaadadu uu yahay in la sameeyo "falal wanaagsan" ama la raaco xeerka Dahabiga ah.

Sharciga Eebbe waa wanaag, oo wuxuu ina tusaa jidka kaamilka ah ee loo maro jannada. "Sharcigu waa qudduus, amaraduna waa qudduus, waana xaq, wuuna wanaagsan yahay" (Rooma 7:12). Oo "ninkii yeela xaqnimada sharcigu wuu ku noolaan doonaa iyaga" (Rooma 10:5). Ninkii dhallinyarada ahaa ee hodantinimada iyo madaxnimada lahaa, ee Ciise ula yimid su'aashii ahayd; "Maxaa wanaagsan oo aan sameeyaa inaan nolosha waligeed ah helo?" Ciise wuxuu ugu jawaabay: "Haddaad doonaysid inaad nolosha gashid, qaynuunada dhawr" (Matayos 19:17). Eeg Luukos 10:26-28. Dhab ahaantii, sharcigu wuxuu ina tusayaa jid kaamil ah oo lagu tago jannada, laakiin waa jid aanay dadku adeegsan karin. Sharcigu wuxuu dadka ugu ballanqaadayaa badbaado shuruudo aanay buuxin karayn dadku.

Sharcigu khalad kuma lahan in aynaan nafteenna ku badbaadin karin isaga. Khaladku waa mid aynu innagu leenahay, waayo ma buuxin karno heerka uu inaga rabo. Dembi badnida dadka ayaan suurto galinayn in lagu badbaado sharciga. Wanaag kasta oo aan isku dayno in aan samayno ma noqonayo mid uu aqbali karo Eebbe. Dembi badnida dadka wuxuu Kitaabka Qudduusku ka yidhi: "Inuusan ninna xaq ku noqon sharciga Ilaah hortiisa waa bayaan, waayo, kii xaq ahu rumaysad buu ku noolaan doonaa" (Galatiya 3:11). Haddii uu sharcigu inoo noqonayo jid aan ku gaadhno jannada, waa in loogu dhaqmo si kaamil ah. "In alla intii shuqullada sharciga isku hallaysaa, inkaar bay ku hoos jiraan; waayo, waxaa qoran, waa inkaaran yahay ku kasta oo aan ku sii soconnin inuu sameeyo wax kasta oo ku qoran kitaabka sharciga." (Galatiya 3:10).

MASIIXA AYAA INAGU BADBAADIYAY INUU ILAALIYO SHARCIGA

Badbaadadeennu waa inay ka timaaddo cid aan innaga ahayn, cid buuxin karta shuruudaha sharciga, oo u gudda xadgudubka uu dadku ku sameeyo sharciga si uu ka raalli noqon karo Eebbe. Badbaadadaas waxaan ku hellay Ciise Masiix. "Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay, ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyay oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno" (Falimaha Rasuullada 4:12). Ciise qudhiisa ayaa yidhi, "Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha; ninna Aabbaha uma yimaaddo, xaggayguu ku yimaaddo maahee" (Yooxanaa 14:6). Masiix ayaa inoo buuxiyay shuruudihii uu inaga rabay sharcigu, oo xadgudubyadeeniina inaga guday.

MAXAA KU XANBAARAY EEBBE INUU INA BADBAADIYO?

Shuqulka badbaadada ee Eebbe waxaa keenay jacaylkiisa aynaan u qalmin ee uu u qabo aadanaha. "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyay Wiilkiisa kaliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin, laakiinse uu lahaado nolosha waligeed ah" (Yooxanaa 3:16). "Inaguma uu badbaadin shuqullada xaqnimada oo aynu samaynay, laakiinse naxariistiisa aawadeed wuxuu inagu badbaadiyay nadiifinta dhalashadii labaad iyo cusboonaysiinta Ruuxa Qudduuska ah" (Tiitos 3:5). "Idinku waxaad ku badbaadeen nimco" (Efesos 2:8). Nimcada Eebbe waa Eebbe naxariistiisa, muujinta jacaylkiisa iyo wanaagga uu la rabo dadka, taas oo uu ugu dembidhaafo kuwa muta dhimashada waligeed ah. Nimcada Eebbe waxay mar walba ina heshaa innagoo baryootamayna oo waxay inaga tagtaa innaga oo qaamaysan.

BADBAADADU WAA XAQIIQO DHAMMAYSTIRAN

Xaqiiqada jacaylka Eebbe waxaan ka akhriyi karnaa Injiilka sida ay u qoreen Matayos, Markos, Luukos iyo Yooxanaa, oo soo bandhigay noloshii Masiixa iyo ujeedooyinkeedii. Waraaqihii Bawlos, Butros iyo Yooxanaa iyana mar kale ayay ka hadleen iyagoo si gaar ah loogu adeegsaday nolosha dadka.

Kitaabka Qudduusku wuxuu ina barayaa in Eebbe uu sameeyay wax kasta si uu u badbaadiyo dadka (Cibraaniyada 7:26-27) iyo in dadku aanay waxba ku kordhin karin badbaadadooda oo aan loogaba baahnayn. Badbaadadu gabi ahaanteedba waa deeq Eebbe oo lagu helayo iimaan. "Idinku waxaad ku badbaadeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin" (Efesos 2:8-9). Runtaas cajaa'ibta ah waxaa si hufan loogu

sheegay qorniinka marar badan. Badbaadadu waa xaqiiqo dhammaystiran. Waa run, waana la hubaa, "waana mid istaahila in la wada aqbalo." (1Timoteyos 1:15).

BADBAADADA WAY HELI KARAAN DADKA OO DHAMU

Hawsha madaxfurashada ee Masiixa dadka qaar u gaar ma ahan, ee waa mid dadka oo dhamu ay heli karaan. "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyay Wiilkiisa kaliya oo dhashay" (Yooxanaa 3:16). "Eebbe wuxuu doonayaa in dadka oo dhamu badbaado oo ay runa gartaan" (1Timoteyos 2:4). Masiixu waa kan qanaca u noqday dembiyadeenna, oo ma ahan kuweenna oo kaliya, laakiin sidoo kale dembiyada adduunka oo idil (1Yooxanaa 2:2). Madaxfurashada iyana waxbay ku lahaayeen kuwa ugu dambaysta lunsan, sababtuna waa rumaysad la'aantooda, sida aan ka aragno 2Butros 2:1.

EEBBE WUXUU YIDHAAHDO WAA DHAB

Eebbe mar walba waa ka dhab oo waa ka daacad dadka inuu badbaadiyo. Isagu ma sahlado halka ay cid walba ku dambayn. "Noloshaydaan ku dhaartaye inaanan innaba farxad ka helayn dhimashada sharrowga, laakiinse waxaan jeclahay in sharrowgu uu jidkiisa ka soo noqdo oo uu noolaado" (Yexesqeel 33:11). Markuu Ciise arkay magaalada Yeruusaalem oo qiimeeyay dembiga dadka iyo silica ku soo socda iyaga, wuu u baroortay (Luukos 19:41). Wuxuuna yidhi: "Yeruusaalemay, Yeruusaalemay, tan nabiyada dishay oo kuwa loo soo diray dhagxisooy! Intee baan marar badan jeclaaday inaan caruurtaada u soo ururiyo xattaa sida dooradu caruurteeda baalasheeda hoostooda ugu ururiso, laakiin idinku ma aydaan jeclayn!" (Matayos 23:37).

MAR KASTA WUU KARAA BADBAADIN

Nimcada Eebbe ee ku jirta Masiixu mar kasta way kartaa inay wax badbaadiso, mar kasta waa mid faa'iido leh; mar kasta waxay leedahay awood ay ku qanciso oo ku dhaqaajiso qalbiga oo uga hawlgasho aqbalidda deeqda nimcada. Awooddeeda inay dadka u horseeddo xagga Eebbe waa mid joogto ah. Illaa dhammaadka wakhtiga waxaa ku noolnahay "wakhti la aqbalay…maalinta badbaadinta." (2 Korintos 6:2).

DADKA OO DHAN MAXAA LOO BADBAADIN WAAYAY?

Sababta aan dadka qaar loo badbaadinayn ma ahan in Masiixu uusan awoodin, oo uusan rabin inuu badbaadiyo ama in Masiixu uusan badbaado dhan u fidinin dadka oo idil, laakiin waa iyaga oo diiday inay aqbalaan

nimcada loo fidiyay. Khaladku waa doonista khaldan ee dadka. Eeg Matayos 23:37, Falimaha Rasuullada 7:51. Haddii dadku halaagmo, iyaga ayaa is halaagay, oo dembiguna waligiiba wuu saaraan doonaa.

BADBAADO WAA TAN MASIIXA OO QUDHA

"Ilaah duniduu Masiixa kula heshiiyay" (2Korintos 5:19). Masiixu inuu naftiisa bixiyo ayuu dunida kula heshiisiiyay Eebbe, isagoo Eebbe ka maslaxay dembiyadii ay dadku faleen. "Oo naftiisii dadka oo dhan furashadooda u bixiyay" (1Timoteyo 2:6). "Oo isaguna wuxuu dembiya-deenna u yahay kafaarogudka; oo kuweenna oo kaliya uma aha ee waliba wuxuu u yahay dembiyada dunida oo dhan." (1Yooxanaa 2:2).

Eebbe Masiixa ayuu saaray xilka, oo Masiixuna isagoo ka raalli ah ayuu aqbalay in waajibkii dadka ee ahaa ilaalinta sharciga iyo sharcigu ciqaabta uu ku xukumayo xadgudubka, labadaba inuu dusha saarto. Masiixu wuxuu fuliyay sharcigii isagoo galaya halkii dadka. Eeg Galatiya 4:4-5. Masiixu wuxuu si aad ah ugu silcay ciqaabtii ay dadku ku mudan lahaayeen xadgudubka ay ku sameeyeen sharciga. Eeg Galatiya 3:13; 2Korintos 5:14; 1Butros 3:18.

Masiixa oo galay halkii dadku wuxuu isu dhiibay Eebbe, isagoo u qalmaya dembiyada dadka, taas oo ah daahirin u beddeshay nimco, cadhadii Eebbe u qabay dadka. Sidaa darteed, badbaado waxaan ku helaynaa Masiixa oo qudha.

MASIIXU WAA SHAKHSIYAD GAAR AH

Si uu badbaado inoogu helo innaga, Masiixu wuxuu yeeshay laba dabeecadood. Labadaa dabeecadood waa; tan rabbaaniga ah iyo tan aadamiga ah. Masiixu wuxuu lahaa dabeecad rabbaani ah, oo waligeed la sifo ah Aabbaha iyo Ruuxa Qudduuska ah; isagu waa Ilaaha daa'imka ah. Masiixu wuxuu yeeshay dabeecadda aadamiga markuu ka calool galay, ee ka dhashay, Maryan oo cadrad ah. Dabcigiisa aadamigu, wuxuu lahaa billow. Sidaa darteed, waxaan qiranaa in Ciise Masiix uu yahay Ilaah run ah, oo ka soo go'ay Aabbaha daa'imka ah, iyo sidoo kale qof run ah, oo ka dhashay Maryan oo cadrad ah.

Arrinka ku saabsan dabeecadda rabbaaniga ah ee Masiix, Kitaabka Qudduusku wuxuu leeyahay nabiyadii Axdigii Hore ayaa ku tilmaamay badbaadiyaha imanayaa inuu yahay mid ah Ilaah run ah. Eeg Ishacyaah 9:6. Wuxuu Masiixu ka sheegay naftiisa isagoo leh: "Aniga iyo Aabbuhu mid baannu nahay" (Yooxanaa 10:30). Qorniinku wuxuu ugu yeedhayaa Ciise magacyo rabbaani ah (1Yooxanaa 5:20, Yooxanaa 20:28; Matayos 17:5;

Rooma 9:5), dabeecado rabbaani ama leh tayo rabbaani ah (Yooxanaa 1:1-2; Cibraaniyada 1:3; Matayos 9:6; Yooxanaa 5:27), iyo sharaf iyo ammaan rabbaani ah, (Yooxanaa 5:23; Cibraaniyada 1:6; Muujintii 5:12-13).

Arrinka ku saabsan dabeecadda aadamiga ee Masiixa, wuxuu Kitaabka Qudduusku toos ugu sheegayaa Ciise inuu yahay qof (1Timoteyos 2:5), wuxuu ku sheegayaa inuu lahaa jidh iyo nafta aadanaha (Luukos 24:39; Matayos 26:38), wuxuu ku tilmaamayaa dareenka iyo ficillada aadanaha (Markos 4:38; Matayos 4:2; Yooxanaa 19:28; Yooxanaa 11:35; Matayos 26 iyo 27). Innaga oo ku salaynayna qorniinka waxaan ku adkaysanaynaa in Ciise uu yeeshay dabci run ah, oo dhab ah oo aadame, haddana waa inaan fiiro gaar ah siinaa waxyaabo cajaa'ib leh oo dabeecaddaas. Ciise uma dhalan sida dadka caadiga ah. Ciise wuxuu dhashay isagoo aan lahayn aabbe aadame ah, oo wuxuu ka dhashay cadrad ama gabadhii bikrada ahayd ee Maryan, isagoo ka dhashay xagga Ruuxa Qudduuska. Eeg Ishacyaaha 7:14; Matayo 1:23; Matayos 1:18; Luukos 1:35. Waxaa intaa dheer, Masiix wuxuu ahaa dembilaawe. Eeg Yooxanaa 8:40; 2Korintos 5:21; 1Butros 2:22; Cibraaniyada 7:26. Ciise shakhsi ahaantiisu ma uusan lahayn wax dembi ah, oo sidaa darteed, ma mudnayn dhimasho. Markuu saliibka korkiisa ugu dhintay dembiyadeenna aawadood, wuu dhintay sababta oo ah, wuu rabay inuu dhinto oo markaas ayuu rabay in uu dhinto.

Masiixa way ku midaysan yihiin dabeecadaha aadamiga iyo rabbaaniga ahu, labada dabeecadoodna iyagoo wadajira waxay sameeyeen shakhsi aan qaybsanayn oo aan qaybsami karin. Ma jiraan laba Masiix, ee waxaa jira oo kaliya hal Masiix, oo lahaa dabeecadda rabbaaniga ah ee daa'imka ah, oo ku darsaday dabeecad aadame tiisii rabbaaniga ahayd markii uu ka uuraystay Ruuxa Qudduuska oo ku beeray Maryan oo cadrad ah. Wadajirka labada dabci ee Masiixu lahaa, waxaa la yidhaahdaa "midowga shakhsi" ee labada dabeecadood, sababtoo ah, Masiixu wali wuu yahay oo ahaan doonaa hal shakhsi, hal jire. Midowga shakhsi waa arrin weyn oo qarsoon. Eeg Yooxanaa 1:14; 1Timoteyos 3:16; Kolosay 2:9.

BADBAADIYUHU WAA INUU AHAADO QOF RUN AH

Si uu u badbaadiyo dadka, waxaa lagama maarmaan ahayd in Masiixu uu sameeyo oo u silco waxa uu dadku samayn lahaa oo u silci lahaa; sidaasna waxay ahayd inuu qof noqdo si isaga oo ah kafaaragudka dadka uu u sameeyo wixii dadka. "Laakiin markii wakhtigii buuxsamay, Ilaah wuxuu soo diray Wiilkiisii, isagoo naag ka dhashay oo sharciga ku hoos dhashay, inuu furto kuwii sharciga ku hoos jiray inuu caruurtiisa inaga dhigo" (Galatiya 4:4-5). "Caruurtu waxay qayb ka heleen jidh iyo dhiig, taas aawadeed isaguna sidaas oo kale ayuu uga qaybqaatay, inuu dhimasho ku baabi'iyo kii xoogga

dhimashada lahaa, oo ah ibliiska.... Waayo, runtii ma uu qaadan suuradda malaa'igta, wuxuuse qaatay tan dhashii Ibraahim." (Cibraaniyada 2:14, 16)

BADBAADIYUHU WAA INUU AHAADO ILAAH RUN AH

Badbaadiyaha aadamaha waxaa laga rabaa inuu ahaado mid ka weyn qof bani aadam ah. Iskadaa cid kalee, qofka aadamaha ahu naftiisa xattaa uma buuxin karo shuruudaha sharciga. Xattaa qof wali ah, haddiiba uu jiro, wuxuu shuruudaha sharciga u buuxin karaa naftiisa oo kaliya, laakiin daacadnimadiisu waxba u tari mayso qof kale. Eeg Yexesqeel 18:20. Furashada naf waa mid qaali ah, oo u baahan wax badan, oo dadka isku daygooda ah inay is furtaan ama cid kale furtaan waligii mid dhammaan ma noqonayo. "Midkoodna walaalkiis ma furan karo; daraaddiisna Ilaah madaxfurasho uma siin karo, waayo furashada naftoodu waa qaali aad iyo aad, waligeedna kuma filna" (Sabuurradii 49:7-8).

Ilaah kaligii ayaan ku hoos jirin sharciga; sidaa darteed isaga oo kaliya ayaa awood u leh inuu wax ka qabto badbaadadeena. "Sida nin kaliya caasinimadiisa kuwo badan dembiileyaal looga dhigay, sidaas oo kalena nin kaliya addeeciddiisa ayaa kuwo badan xaq looga dhigi doonaa" (Rooma 5:19). Eebbe kaligii ayaa heshiis la dhigan kara dunida. Qiimaha badbaadinta iyo awooddii silica iyo dhimashada Maxiisu waxay ku jiraan xaqiiqada ah in Ciise ahaa oo walina yahay Ilaah, kaas oo sida dabeecadda aadamaha silcay oo u dhintay innaga darteen. Si uu u noqdo badbaadiyaheenna, Masiixu waa inuu ahaado Ilaah. Waa inuu ku lifaaqo miisanka buuxa ee culayska Ilaahnimadiisa, addeeciddiisa, siliciisa, iyo dhimashadiisa, sida qorniinka la inoogu sheegayo Galatiya 4:4-5 iyo Rooma 5:10. Isagoo arkaya dhimasho, waa inuu ahaado Ilaaha awoodda badan si uu u karo in dhimashadiisa uu kaga guulaysto dhimashada, oo uu mar kale soo sarekiciyo jidhkiisa ah macbudka (Yooxanaa 2:19, 21), oo uu mar kale helo noloshiisa (Yooxanaa 10:18).

Ciise Masiix uma dhiman sida dadka oo kale, laakiin dhimashadii waxaa ku weheliyay oo ku jiray difaaca dembiga, dhimashada, cadaabka iyo ciqaabta weligeed ah. Qorniinku wuxuu ku saleeyaa qiimaha madaxfurashada ee silica iyo dhimashada Masiixa xaqiiqada ah inaanu qof caadi ah ahayn, laakiinse uu yahay in Wiilkii Ilaah uu silcay oo dhintay (Rooma 5:10; 1Yooxanaa 1:7; Rooma 8:32). Sababta Ilaahnimadiisa oo kaliya ayuu Ciise inagu daahiriyay inaga.

MASIIXU WUU IS HOOSAYSIIYAY

Si uu u galo halkii uu dadku ku jiray ee sharciga hoostiisa ahayd, oo uu ugu buuxiyo iyaga xaqnimada oo idil, iyo si uu ugu silco dembigii iyo ciqaabtii uu dadku mutaystay dembigiisa aawadii, Masiixu waa inuu is

hoosaysiiyo oo sharciga is hoos dhigo. “Waad garanaysaan nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix in isagoo hodan ah uu aawadiin miskiin u noqday, inaad miskiinnimadiisa hodan ku noqotaan.” (2 Korintos 8:9)

Masiixa, Ilaah iyo qof ayaa ku midoobay hal shakhsi. Dabciga aadamaha ee Masiixa, oo Eebbe uu ku abuuray Maryan oo cadrad ah, ayaa wuxuu mucjisada Eebbe ku maray, oo gaadhay shakhiyadda Wiilka Ilaah. Tanu waa isu ekaysiinta. Natiijada yaabka leh iyo kalinimada midowga ee Ilaah iyo qof ku midoobay hal shakhsi kaliya (Masiix) waxaa la yidhaahdaa “midowga shakhsi”. Sababta midnimada Ilaah iyo qof ee Masiixa, wadajir dabeecado (tan rabbaaniga iyo tan aadamiga) ayaana yimid. Sidoo kale, waxaa soo baxay wadajir sifooyin. Muhiimadda ay leeyihiin dabeecadaha rabbaaniga iyo aadamiga ee Masiix, iyo wax kasta oo dabeecadahaasi ay sameeyaan ama ay u silcaan sida uu yahay jiritaankooda kala duwanu, waa kuwo la midaysan shakhiyadda Masiixa. Sidaas ayaana dabeecaddii aadame ee Masiix, iyadoo la midaysan kuna meelmaraysa wanaagga dabeecaddiisa rabbaniga ah, uu ku helay sharafta rabbinimada. Dabeecaddii aadame ee Masiix waxaa kor u qaaday tayo rabbaani ah, sida awood badnida, aqoon badnida, iyo dhammaan sifooyinka kale ee Ilaah. Dabeecaddiisa aadamuhu waxay wax la wadaagtaa awoodda rabbaaniga ah iyo dhammaan hodantinimada kale ee rabbaaniga ah.

Sida uu inoo iftiiminayo waxaa aan soo sheegnay oo idilu, maxaan ka fahmaynaa is hoosaysiinta Masiixa? Is hoosaysiinta Masiix waxay ka kooban tahay sidan: in Masiixu uu iska daayay, intuu dunida ku noolaa, inuu si buuxda u adeegsado sharaftiisa rabbaaniga ah ee uu lahaa dabcigiisii aadamigu kuna helay wanaagga la midoobidda dabcigiisa rabbaniga ah. Intuu dunida ku noolaa Masiix si buuxda uma uu adeegsan sifooyinkiisa la sheegay ee rabbaaniga ah. Gebi ahaanba rabbinimadiisii buuxday, ee ku jirtay Masiix jidhahaan, inteedii badnayd waa la qariyay oo dib loo hayay wakhtigii uu is hoosaysiiyay.

Wakhitigii uu calool galayay, xattaa markuu ku jiray caloosha Maryan, Masiixu wuxuu lahaa, sida dabeecaddiisa aadame oo kale, sharafta iyo sarraynta rabbinimo. Hase yeeshee, dhinac ayuu isaga dhigay oo sida uu Dr. Luther sharxay, wuxuu ku qariyay xaaladdiisii is hoosysiin oo mar walba ma uusan adeegsanayn, marka uu isagu doono oo kaliya maahee. Nin la adhan jiray Baa’iyer ayaa is hoosaysiinta u qeexay sidan: “Is hoosaysiinta Masiix waxay la xidhiidhaa dabeecaddiisa aadame oo waxay ka kooban tahay sidan, in Masiix uu illaa wakhti ka tegay isticmadlka buuxa ee boqornimadiisa rabbaaniga ah, kaas oo dabeecaddiisa aadame ay ku heshay midowga shakhsi ee xidhiidhka dabeecadda rabbaaniga ah.” Is hoosaysiintu ma ahayn mid iska yeelyeel ah, laakiin waxay ahayd muujinta isticmaalka boqornimadiisa

rabbaaniga ah ee sida buuxda ee joogtada ah loo siiyay dabeecadda aadame ee Masiixa. Maskaxdeenna si wanaagsan uguma garan karno sirta qarsoon ee la xidhiidha xaaladda is hoosaysiin ee Masiixa. Caqligeennu ma garan karo sida ay taasu ku suurto gashay, laakiin waxaan ku rumaysanaynaa inaga oo raacayna kuna kalsoon qorniinka.

Maxay tahay sababta uu Masiixu si buuxda ugu adeegsan waayay sifooyinkiisa rabbaaniga ah ee ay lahayd dabeecaddiisa aadamiga ah wakhtigii uu is hoosaysiiyay? Shaqadiisa ah madax furashada ayaa uga baahnayd isaga in, si uu u fuliyo qorshaha madaxfurashada ee rabbaaniga ah, uu inaga halkeenna sharciga hoos galo, oo innaga booskeenii ka silco oo dhinto (Galatiya 4:4, 5; Galatiya 3:130. Si uu inoogu kasbo madaxfurashadaa, Masiixu waa inuu ka tago inuu si buuxda u isticmaalo sifooyinkiisa, tayooyinkiisa, iyo hantidiisa rabbaniga ah. Isticmaal la'aantaas ayaa koritaankii aadaminimo ee Masiixa ka dhigtay suurtogal oo "suurto galisay inuu beddelkeenna noqdo sharciga hoostiisa. Markii soo bandhigidda hawshiisa madaxfurashada uu uga baahday oo kaliya (tusaale, inuu mucjisooyin sameeyo, si uu u muujiyo rabbinimadiisa, iwm), ayuu Masiixu isticmaalay qaar ka mid ah sifooyinkiisii rabbaaniga ahaa ee la siiyay dabeecaddiisa aadmiga intuu dunida ku noolaa.

Qorniinku wuxuu Filiboy 2:5-8 ku qeexayaa is hoosaysiinta, waxaana ka akhrinaynaa: "Fikirkaas oo Ciise Masiix ku jiray, idinkana ha idinku jiro, isagu wuxuu lahaa suuradda Ilaah, oo inuu la mid ahaado kuma uu tirin in taasu tahay boobis, laakiinse wuu ismadhiyay, oo wuxuu qaatay addoon suuraddiis, oo wuxuu noqday mid dad u eg, oo markuu nin u ekaaday, ayuu is hoosaysiiyay oo addeecay inuu dhinto, xataa inuu iskutallaabta ku dhinto." Masiix is hoosaysiintiisa waxay ahayd dhammaan sannadihii uu jidhka lahaa ee dadka la joogay, laga soo billaabo markuu ku beermay uurka cadrad Maryan illaa iyo markuu ku dhintay saliibka korkiisa, oo ahayd tii ugu waynayd is hoosaysiintiisa.

DANTA UU MASIIXU KA LAHAA IS HOOSAYSIINTA

Jacaylka uu Masiix u qabay dadka dambiileyaasha ah ayaa ku kalliftay inuu is hoosaysiiyo si uu uga furto dadka dembiga, dhimashada iyo cadaabka. Madaxfurashadu gabi ahaanba waxay ahayd innaga danteenna, waxaana kalifay jacaylka uu Masiix inoo qabo oo midkeenna uusan mudnayn. "Taasaynu jacaylka Ilaah ku garanaynaa, waayo, isagu naftiisuu u bixiyay aawadeen" (1Yooxanaa 3:16). "Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyay daraaday" (Galatiya2:20). "Jacayl ku socda, siduu Masiixuba idiin jeclaa, oo uu nafsaddiisii inoogu bixiyay inuu Ilaah u ahaado qurbaan iyo allabari oo uu ahaado caraf udgoon." (Efesos 5:2).

Is hoosaysiintii Masiix sidan ayaa loogu qeexay oo loogu qirtaa Qirashadii Rasuullada: “Oo ka uuraystay Ruuxa Qudduuska; oo ka dhashay cadrad Maryan; oo ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos; oo iskutallaabta lagu qodby, dhintay oo la aasay.” Kan waxaa mararka qaar lagu magacaabaa heerarka is hoosaysiintii Masiixa.

UURGALKII MASIIXA

Masiix wuxuu si mucjiso ah ugu uurgalay Maryan oo cadrad ah iyadoo uu hawshaas fuliyay Ruuxa Qudduusku. Qorniinku wuxuu ina barayaa in “Xooggii kan ugu sarreeya” (Luukos 1:35) Masiix, Wiilka Ilaah, uu ku helay jidhkiisa aadame iyo nafta isagoo ku jira uurka cadrad Maryan. Masiix caloolgalkiisa iyo dhalashadiisu waa kuwo is leh is hoosaysiintiisii inta ay ku salaysan yihiin hab hoose ee qof noqosho.

Ciise dhan kasta oo laga eegaba wuxuu la mid ahaa caruurta kale ee aadamaha, marka laga reebo in uusan dhalin aabbe aadamaha dhulkan ah iyo inuu ahaa qudduus. Yuusuf wuxuu ahaa aabbihii soo korsaday Masiixa. In kastoo hooyadii Maryan ay ahayd naag dembiile ah oo ay dhaleen waalidiin dembiileyaal ahu, haddana Ciise isagu ma uusan lahayn wax dembi ah, kii asalka ahaa iyo kan la dhaxlo midnaba.

Xaqiiqada ah in Wiilkii Ilaah uu ka helay dabeecadda aadamaha Maryan oo uu ku beeray Ruuxa Qudduusku waxay muujinaysaa dembi la’aanta dabeecadda aadame ee Masiixa. Waxayna ahayd shaqada Ruuxa Qudduuska inuu ka beero dabeecaddii dembiga lahayd ee cadrad Maryan, dabeecadda qudduusan ee Masiixa. Kii Masiixa, oo kii Masiixa oo kaliya, ayaa ahaa uuraysi ama uurgal gebi ahaanba nadiif ah. Markay malaa’igtu u sheegaysay Maryan in loo doortay inay noqoto hooyada Masiixa, waxay tidhi; “Ruuxa Qudduuska ayaa kugu soo degi doona, oo xooggii kan ugu sarreeya ayaa hoosiis kuu noqon doona, sidaas darteed, kan qudduuska ah oo kaa dhalan doona waxaa loogu yeedhi doonaa Wiilka Ilaah” (Luukos 1:35). Oo Yuusuf oo ay u doonanayd Maryan, malaa’igtu waxay ku tidhi: “Yuusuf, ina Daa’uudow, ha ka baqin inaad naagtaada Maryan qaadatid, waayo waxa ay uuraysatay ayaa Ruuxa Qudduuska ka yimid.” (Matayos 1: 20).

DHALASHADII MASIIXA

Qorniinku wuxuu ina barayaa in Masiixu uu ka dhashay Maryan oo cadrad ah, isagoo ah ilme aadame oo run ah. Dhalashadii Masiixu waxay ku qoran tahay Luukos 2:1-20 iyo Matayos 1:18-25.

SILICII IYO DHIMASHADII MASIIXA

Gabi ahaanba Masiixa noloshiisii dhulkan korikiisa uu ku noolaa wuxuu kala kulmay fakhri, quudhsi iyo dhibaatayn, wuxuuna wakhtigaas uu ku jiray is hoosaysiinta soo maray silic. Wuxuu la kulmay tabardarida iyo dhibaatada caadada u ah dadka, inkastoo isagu uusan dembi lahayn. Eeg Cibraaniyada 2:17; 4;15. Siliciisu wuxuu ku sii batay meelaha la yidhaahdo Getsemane iyo Golgota, oo wuxuu gaadhay heerkii ugu darnaa markuu ku dhawaaqay, isagoo iskutallabta ku qodban: "Elooy, Elooy, lama saakhtani? Kaas oo macnaheedu yahay, Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisay?" (Markos 15:34) Taasu waxay inoo qeexaysaa siliciisii ciqaabta iyo cadaabka.

Masiixu wuxuu ku dhintay geedka iskutallaabta ee habaaran, kaasoo uu ku xukumay Bontiyos Bilaatos kadib markuu si xun u canbaareeyay, ugu majaajilooday, u jidhdilay, oo u dhibaateeyay. Dhimashada Masiix waxay dhinaciisa ka ahayd mid uu raalli ka yahay (Yooxanaa 10:15, 17). Dhimashadiisu waxay ahayd dhab; naftiisiina way ka baxday jidhkiisa. Sheekada ku saabsan silicii iyo dhimashadii Masiix waxay Kitaabka Qudduuska kaga qoran tahay Matayos 26:36-27:50; Markos 11:32-15:37; Lukos 22:39-23:46; Yooxanaa 18:1-19:30.

AASKII MASIIXA

Jidhkii Masiixa waxaa lagu duugay qabri uu lahaa Yuusufkii reer Arimateeya. Kaas oo waydiistay Bilaatos in la siiyo jidhka, si uu u xabaalo. Jidhkii Masiixu wuxuu qabriga ku jiray illaa maalintii saddexaad, isagoo aan qudhmin. Naftii Masiixu waxay tagtay jannada (Luukos 23:43). Sheekada aaskii Masiixu waxay Kitaabka Qudduuska kaga qoran tahay Matayos 27:57 – 61; Markos 15:42-47; Luukos 23:50-56; Yooxanaa 19:38-42.

MASIIXA WAA LA SAREYSIIYAY

Sida hoosaysiintii, sidaas oo kale ayaa sareysiintun ay u saamaysay Masiix dabeecaddiisii aadame oo kaliya. Haddii xaaladda hoosaysiin ay ku jirtay in Masiixu uusan adeegsan boqornimadiisii rabbaaniga ahayd ee dabeecaddiisa aadame, xaaladda saraysiintiisuna waxay ku jirtaa inuu si buuxda u adeegsado boqornimadiisa rabbaaniga ah. Faraqa u dhexeeya Masiix xaaladdiisa hoosaysiin iyo xaaladdiisa sareysiin waa kan: adeegsiga boqornimadiisa rabbaniga ah ee markuu ku jiray xaaladda is hoosaysiintu way koobnayd, taas oo ku xidhnayd baahida shaqadiisii ahayd inuu madaxfurto dunida, iyadoo xaaladda sareysiinta uu si buuxda u adeegsaday, ugu hawlgalay ama u muujiyay boqornimadiisa rabbaaniga ah ee ku jirtay. Sida naftu ay uga dhex shaqayso jidhka oo idil oo dabkuna uu uga muuqdo bir kulayl la caddaatay, sidaas oo kaluu Masiix markuu ku jiray xaaladdiisa sareysiinta si buuxda, oo awood badan oo aan qarsoonayn u muujiyay

boqornmadiisa rabbaaniga ah, isagoo sidoo kale ku muujinaya si waafaqsan dabeecaddiisii aadmiga ahayd. (Tan inteeda badanu way qarsoonayd wakhtigii uu ku jiray xaaladda hoosaysiinta). Masiixu wuxuu galay ammaantiisii, sidaa darted hadda, isagoo ah Ilaah iyo waliba qof, wuu og yahay wax walba, wuu samayn karaa wax walba, wuu la jooga uunka oo idil, oo wuxuu cagihiisa hoostooda iyo gacmihiisa ku hayaa wax kasta oo ku jira samada iyo dhulka korkiisa iyo dhulka dhexdiisa, sida uu isaga qudhiisu ka markaatifuray qorniinka (Matayos 28:18, Yooxanaa 13:3; Efesos 4: 10). Baiyer ayaa haddana u sharxay xaaladda sareysiin, "waa tan uu Masiix, sida ay tahay dabeecaddiisa aadame, markuu dhinac isaga dhigay dhibaatadii jidhka, uu qaatay oo si buuxda ugu adeegsaday boqornimadiisii rabbaaniga ahayd."

Qorniinku wuxuu saraysiinta Masiix ku qeexay Filiboy 2:9-11, oo aan ka akhriyayno: "Haddaba sidaa daraaddeed Ilaah isaga (Masiix) aad buu u sareysiiyay, oo wuxuu isaga siiyay magaca magac kasta ka sareeya; in jilib kastoo ah waxyaalaha samada ku jira iyo waxyaalaha dhulka jooga iyo waxyaalaha dhulka ka hooseeyaaba, ay magaca Ciise u wada sujuudaan, iyo in carab kastaaba qirto in Ciise Masiix yahay Rabbiga in Ilaaha aabbaha ah lagu ammaano." (Ugu dambaysta, Maalinta qiyaamaha, carab kasta waxaa waajib ku noqon oo uu qiran in Ciise Masiix uu rabbi yahay; qaar kalena ay u samayn doonaan iyagoo ceebaysan oo cabsi la gariiraya.)

Sareysiintiisa, Masiix wuxuu si buuxda oo waafaqsan dabeecaddiisa aadame u adeegsaday boqornimadiisa rabbaaniga ah, taas oo si xaq ah oo habboon uu isagu u leeyahay, sababta oo ah midowga shakhsiyadeed ee labadiisa dabeecadood. Inuu waligii hooseeyo sida dabeedadiisii aadamuhu waxay ka soo horjeeddaa sifooyinka muhiimka ah ee Masiix, oo ah Ilaah – qof ah.

Xaaladda sareynta Masiix waxaa loogu qeexay oo loogu qirtaa Qirashadii Rasuullada (Tawxiidka) sidan: "wuxuu galay cadaab; maalintii saddexaad wuxuu ka sarekacay dhimashadii; wuxuu u dheelmaday jannada oo fadhiyaa gacanta midig ee Ilaaha Aabbaha qaadirka ah; halkaas ayuuna ka iman doonaa inuu xukumo kuwa nool iyo kuwii dhintayba." Kuwan waxaa mararka qaar lagu magacaabaa heerarka sareysiinta Masiix.

GALIDDII MASIIXA EE CADAABKA

Qorniinku wuxuu ina barayaa in Masiix, kadib markuu soo noolaaday isagoo qabriga ku jira (naftii ayaa ku soo noqotay jidhkii), uu u dhaadhacay xagga cadaabka, mana ahayn inuu ku silco, laakiin waxay ahayd inuu ku dhawaaqo, oo u muujiyo cadaaweyaashiisa, guushiisa. 1Butros 3:18-19 waxaan ka akhriyaynaa Masiix "xagga jidhka waa laga dilay, laakiinse xagga ruuxa waa laga nooleeyay. Ruuxii ayuu ku tegey oo wuxuu wacdiyay

ruuxyadii xabsigii ku jiray." Ma ogin xabsigaasu meesha uu ku yaallo, laakiin waa halka nafyaasha ama ruuxyada, kuwii ku caasiyay isaga wakhtigii ay dhulka ku noolaayeen, ay ku sugayaan maalinta xukunka ee qiyaamaha. Masiix kuwaas kuma uusan wacdin in ay toobad keenaan, taas oo aan ahayn suurtogal sida ay qabto Cibraaniyadda 9:27; laakiin wuxuu u wacdiyay isagoo isu muujinaya, inuu yahay kii ay diideen, oo ka guulaystay dhimashadii iyo cadaabkiiba. Sida ay taasu u dhacday ma ogin innagu. Cadaab u dhaadhiciddiisu dabcan waxay ahayd subaxdii Sarekicidda. Kitaabka Qudduusku waxba inoogama sheegayo sida uu cadaabka ugu dhaadhacay.

KA SAREKICIDDII MASIIXA EE KUWII DHINTAY

Qorniinku wuxuu inoo sheegayaa in Masiixu uu, maalintii saddexaad kadib dhimashadiisa, si guul leh uga sarekacay kuwii dhintay, oo uu isu muujiyay xertiisii isagoo nool. Sheekada sarekiciddii Masiixa waa laga helayaa afarta Injiil ee Kitaabka Qudduuska (Matayos 28; Markos 16; Luukos 24; Yooxanaa 20 iyo 21). Jidhka Masiixa ee sarekacay waa jidh ruuxi ah, kaas oo aan mar dambe hoostagayn sharciga iyo xaaladihii uu la lulmay markii hore; umana baahna cunto, nasasho, iwm.

MUHIIMADDA SAREKICIDDA MASIIXA

Sarekicidda Masiixu waxay si qeexan u muuninaysaa in Masiixu uu yahay cidda uu sheegay inuu yahay, taas oo ah, Wiilka Ilaah. Masiix "sarekiciddii uu ka sarekacay kuwii dhintay ay ku caddaysay inuu xagga ruuxa qudduusnimada yahay Wiilka Ilaah, oo xoog leh, oo ah Rabbigeenna Ciise Masiix" (Rooma 1:4). Ciise qudhiisu wuxuu sarekiciddiisa ku tilmaamay inay tahay xaqiijinta ugu dambaysa ee hawlihiisii rabbaaniga ahaa. Eeg Matayos 12:38-40. Sarekicidda Masiix waxay marag u tahay in diintii uu dadka barayay ay ahayd mid run ah oo rabbaani ah. Eeg Yooxanaa 7:16; Yooxanaa 8:28.

Sarekiciddii Masiix waxay marag qeexan u tahay in Ilaaha Aabbuhu uu aqbalay waaqdhaacinka uu Wiilkiisu u noqday la heshiinta dunida. Rasuul Bawlos ayaa yidhi: "Oo haddii aan Masiix la sarekicin, rumaysadkiinnu waa khasaare, oo wali dembiyadiinii ayaad ku jirtaan" (1Korintos 15:17). Rooma 4:25 waxaan ka akhriyaynaa: "Masiix waxaa loo bixiyay xadgudubkeenna aawadiis oo loo sarekiciyay inuu xaq inaga dhigo." Tan macnaheed waa in Masiix loo bixiyay inuu u dhinto dembiyadeenna iyo in sarekiciddiisu marag inoogu tahay in siliciisii iyo dhimashadiisii ay si dhab ah inooga gudeen dembiyadeennii iyo in Ilaah hortiisa si dhab ah la inoogu qiilbixiyay hawsha madaxfursho ee Masiix aawadeed. Sarekiciddii Masiix waxay dunida oo dhan

ku wargelinayasaa in ujeedadii dhimashadiisa la gaadhay, taas oo ah, badbaadadeenna.

Sarekiciddii Masiix waxay marag qeexan u tahay inay jirto sarekicinta kuwa dhintay (1Korintos 15:12, 16, 20) iyo in kuwa ramaystay Masiixu ay u soo sarekicidoonaan nolosha waligeed ah. Masiix ayaa yidhi: "Waan noolahay, taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan" (Yooxanaa 14:19). Waxaa kaloo uu yidhi: "Anigu waxaan ahay sarekicidda iyo nolosha. kii i rumaystaa, inkastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa. Ku kasta oo nool oo i rumaystaa weligii ma dhiman doono." (Yooxanaa 11:25, 26)

XERTIISII OO ARAGTAY MASIIXA SAREKACAY

Afartankii maalmood ee ka dambaysay sarekiciddiisa, Masiix lama uusan noolaan xertiisa siduu yeeli jiray saddexdii sannadood ee ka horaysay siliciisa iyo dhimashadiisa. Laakiin si isdabajoog ah ayuu ugu muuqday iyaga wakhtiyo iyo meelo kala duduwan, si uu ugu qanciyo xaqiiqada sarekiciddiisa, oo uu ugu bayaamiyo Qorniinka (Luukos 24:25, 44, 45), iyo inuu tilmaan dheeraad ah oo ku saabsan boqortooyada Ilaah siiyo iyo inuu iyaga oo xertiisa ah u diro hawlaha ay ka qaban lahaayeen dunida (Falimaha Rasuullada 1:3-8). "Isaga Ilaah baa maalintii saddexaad sarekiciyay, oo bayaan u muujiyay, uma muujin dadka oo dhan, laakiin wuxuu u muujiyay markhaatiyaashii Ilaah hore u doortay, xattaa annaga oo isaga wax la cunnay oo la cabnay markuu kuwii dhintay ka soo sarekacay dabadeed" (Falimaha Rasuullada 10:40, 41). Eeg 1Korintos 15:4-8.

DHEELMINTII MASIIXA EE JANNADA

Qorniinku wuxuu ina barayaa Masiix, isagoo leh dabcigiisii aadame, in uu si la arko oo muuqata jannada ugu aaday buurta Olifet afartan maalmood sarekiciddiisii ka dib, oo uu galay ammaanta Aabbihii isagoo inaga sii horeeya. Eeg Luukos 24:50-51; Falimaha Rasuullada 1:9-11. Jannadu waa rugta Aabbaha oo ay ku yaallaan guryo badanu, halkaas oo Masiix hawshiisii madaxfurasho aawadeed uu inooga diyaariyay innaga meel, meel aan isaga la joogno. Eeg Yooxanaa 14:2-3; Filiboy 1:23; Cibraaniyada 6:20. Isagoo Masiixa muuqiisii la arkayay uu ka tegay dhulkan, haddana si dhab ah oo run ah ayuu si aan la arkin inoola joogaa mar walba. Wuxuu yidhi: "Oo bal eega had iyo goor ayaan idinla joogaa xattaa illaa wakhtigu dhammaado." (Matayos 28:20).

MASIIXA OO FADHIYA EEBBE MIDIGTIISA

Qorniinku wuxuu ina barayaa Masiix, sidoo kale isagoo leh dabcigiisii aadame, in uu xukumo wax kasta oo ku hadheeyo awood rabbaani ah iyo

sarrayn. “Oo fadhiya gacanta midig ee Eebbe” waa hadal tilmaan ah, oo macnahiisu yahay inuu buuxiyay jago sharaf rabbaani ah leh “oo wuxuu isaga ka sareysiiyay madax kasta iyo amar kasta, iyo xoog kasta, iyo sayidnimo kasta, iyo magac kasta oo la magacaabay, mana aha wakhtigan oo kaliya, laakiise xataa kan imaanaya. Wax kastana wuxuu ka hoosaysiyay cagihiisa (Masiix)” (Efesos 1:21-22). Masiix waa sayidka ugu sareeya, oo uunka oo dhamu ay tahay in ay addeecaan.

Farxad wayn bay innaga inoo tahay inaan ogaanno in Masiixa oo leh dabcigiisii aadame uu joogo midigta Eebbe. Isaga oo ah nabigeennii sareeyay wuxuu dad u diraa in ay wacdiyaan Injiilka madaxfurashada. Eeg Efesos 4:10-12. Isaga oo ah wadaadkeenna sare iyo qareenkeenna Eebbe ayuu inoogu ergoodaa innaga. Eeg 1 Yooxanaa 2:1; Rooma 8:34. Isaga oo ah Boqorkeenna sareeya wuxuu maamulaa oo ilaaliyaa kaniisaddiisa, oo isaga oo ah madaxa kaniisadda wuxuu “u xukumaa dunida sida danta u ah kaniisaddiisa. Eeg Matayos 22:44; Sabuurradii 110:1. Wuxuu doono ha ahaadee, wax kasta wuxuu si wadajir ah ugu shaqeeyaa wanaagga Masiixiyiinta. Eeg Rooma 8:28-30. Waxaa suurtoowda in aynaan noloshan mar kasta garan sida ay waxyaalaha qaarkood faa’iido ugu noqon karaan kaniisadda Masiixa, laakiin daa’iimka ayaa muujin doona caaqilnimada daryeelka Eebbe.

MASIIX WUXUU U SOO NOQON INUU XUKUMO

Qorniinku wuxuu ina barayaa Masiix in uu soo noqon isagoo la arki oo ammaan leh. Xaqiiqada soo noqoshada Masiix waxaa lagu sii sheegay (Falimaha Rasuullada 1:11). Eeg Muujintii 1:7. Ma iman doono isagoo hooseeya, sidii uu ku yeelay Baytlaxam, laakiin wuxuu iman isagoo leh awood iyo ammaan aad u weyn. Eeg Matayos 25:31. Markuu imaanayo waxaa la soo sarekicin doonaa kuwii dhintay. Eeg Falimaha Rasuullada 10:42; 1Tesaloniika 4:15-16; Muujintii 20:13. Dunidan jirta way burburi doontaa si loo abuuro samo iyo dhul cusub. Eeg 2Butros 3:10. Ujeedada soo noqoshada labaad ee Masiix waa inuu dunida ku xukumo xaqnimada ku jirta Eraygiisa. Masiix wuxuu wax u xukumi doonaa si uu qof walba caddaalad buuxda u helayo. Maalinta xukunka Eebbaa asteeyay, laakiin dadku ma oga. Waxay u iman si kadis ah oo aan la filayn, “sida tuug oo kale” (2 Butros 3:10), iyo “sida hillaacu bari uga yimaado oo u ifiyo galbeed, sidaa oo kale ayaa imaatinka wiilka aadamuhu ahaan doona.” (Matayos 24:27).

XAFIISKA SADDEXLAABAN EE MASIIXA

Ujeedada hawshii madaxfurasho ee Masiixu waa inuu ina badbaadiyo wakhti iyo waligeedba si aan u ahaano oo u noolaanno innaga oo ah caruunrta Eebbe. Iyada oo kooban, hawsha Masiix waxay ahayd: “Wiilka Aadamuhu

wuxuu u yimid inuu badbaadsho kii lumay" (Matayos 18:11); "Ciise Masiix wuxuu dunida u yimid inuu badbaadiyo dembiileyaasha" (1 Timotiyos 1:15). Wax kasta oo uu Masiix sameeyay oo uu wali sameeyo, wuxuu u adeegayaa halkaa ujeeddo oo waxaa ku xanbaaray naxariista weyn iyo jacaylka uu Eebbe u qabo dadka. Sidaas ayayna hawsha Masiixu ku tahay xubin, taas oo leh hal ujeeddo oo qudha, oo ah badbaadada dadka.

Sida uu erayga "Masiix" (kii subkanaa) muujinayo, hawsha Masiixa, ah badbaadiyuhu, waxay leedahay saddex waji oo cayiman, kuwaas oo dhammaantood ku hawlanaa walina si firfircoon uga shaqeeya hawshiisa badbaadinta. Innagoo ku salaynayna Qorniinka waxaan dhahnaa Masiixu waa Nabigeenna, waa Wadaadkeenna, oo waa Boqorkeenna.

MASIIXA OO AH NABIGEENNA

Nabi waa mid u hadla cid kale. Nabiga Ilaah waa kan u hadla Ilaah, isagoo dadka u sheegaya oo u macnaynaya Erayga iyo doonista Ilaah; waa af-hayeenka Ilaah, wakiilka Ilaah, safiirka Ilaah. Waayadii Axdigii Hore, xafiiska nabigu wuu ka dhex jiray reer banii Israa'iil, waxaana ka mid ahaa: Muuse, Ishacyaah, Yeremyaah, Daanyeel iyo kuwo kale.

Masiixu waa NABI. Waxaana isaga hore looga sii sheegay, "Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu dhexdiinna idiinka kicin doonaa nabi." (Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15). Oo Luukos 13:33 Masiixu wuxuu isku sheegayaa inuu yahay nabi; oo kuwii raacayna waxay isaga u citiqaadeen "kii ahaa nin nabi ah oo xoog u lahaa wax falniin iyo hadal ah Ilaah iyo dadka hortooda." (Luukos 24:19). Masiixu wuxuu ahaa NABI isu muujiyay eray ahaan iyo ficil ahaanba inuu yahay Wiilka Ilaah iyo madaxfurka adduunka. Isagu wuu iska hadlay, oo isu hadlay.

Masiixu xafiiska nabinimadiisa kuma uusan muujin shakhsiyaddiisa oo kaliya intii uu jidhka lahaa ee dadka dhex joogay, laakiinse wali xafiiskaa wuxuu ku muujiyaa adeegga Eraygiisa ee maanta. Masiixu wuxuu xertiisa faray inay quruumaha oo idil baraan wixii uu iyaga ku amray. Eeg Matayos 28:19-20. Wuxuu Ciise yidhi, "Kan idin maqlaa waa i maqlaa" (Luukos 10: 16). Eeg Efesos 4:11-12. Mar kasta oo dadku ay sii wadaan inay baraan Eraygii Masiixa iyagoo aamin ah, taas oo laga rabo (Yooxanaa 8: 31). Haddaba, waa Masiixa qudhiisa kan iyaga kaga dhex shaqeeya xafiiskiisa nabinimo illaa maanta.

Mugga nabinimada Masiixa waxaa ka mid ah muujinta dhammaan doonista Ilaah: sharciga iyo Injiilka labadaba. Laakiin qaybta ugu muhiimsanu waa Injiilka, oo inoo sheegaya in Masiixu uu inagu badbaadiyay noloshiisa iyo dhimashadiisa. Xafiiska nabinimo ee Masiixa la'aantiis qofna ma ogaan

kareen nimcada Ilaah iyo macnaha noloshii iyo dhimashadii Masiixa. Eeg 1 Korintos 2: 8-11. Isaga oo ah Nabigeenna, Masiixu wuxuu ina ogaysiiyay oo ina siiyay wixii uu inoogu kasbay xafiiskiisa qaysnimo.

MASIIXA OO AH WADAADKEENNA SARE

Qays waa qof adeegsanaya tukasho, cibaado iyo waaqdhaac ujeedadoodu tahay inuu ku wanaajiyo xidhiidhka ka dhexeeya dadka iyo Ilaah. Wuxuu xidhiidh la sameeyaa Eebbe isagoo matalaya dadka. Qaysku dadka ayuu wakiil uga yahay Ilaah hortiisa. Waayadii Axdigii Hore xafiiska wadaadku wuu ka dhexjiray caruurta Israa'iil: waxaana ka mid ahaa qaysaskoodii Haaruun, Ceelii, Laawiyiintii, iyo kuwo kale. Qurbaanadii la bixin jiray waayadii Axdigii Hore ma aysan kasbayn cafiska dembiyada. Waxay ahaayen hooska waxyaabaha wanaagsan ee iman doona, oo waxay lahaayeen qiimo iyo awood la mid ah sawirka ay ka bixinayeen nafhurka Masiixa ee Kaalfari; waxayna ahaayeen tusaalayn.

Masiixu waa Qayskeenna Sare. Waxaa isaga laga qoray: "Wadaad Sare oo caynkan ahu waa inagu habboonaa, mid qudduus ah oo aan khiyaano iyo wasakh toona lahayn, oo dembiileyaasha ka soocan [afar siyaabood oo loo muujinayo dembi la'aanta Masiix] oo samooyinka laga sareysiiyay, [Masiix waa Ilaah run ah]; kan aan u baahnayn inuu maalin walba allabari u bixiyo sida wadaadadii sare [ee waayadii Axdigii Hore]' kolka hore dembiyadiisa aawadood, dabadeedna kuwa dadka aawadood [waayo waxay wadaadadu ahaayeen dembiilayaal sida dadka]; tan mar kaliya ayuu sameeyay markuu isbixiyay" (Cibraaniyada 7:26-27).

Hawshii madaxfurasha ee Masiix, iyo inuu naftiisa allabari ugu bixiyay saliibka korkiisa, midna tusaalayn uma ahayn allabari dambe oo mustaqbalka. Inuu naftiisa ugu bixiyay alabari ahaan isagoo ah Qayskeenna Sare waxay lahayd qiime, qiime aad u weyn. Markuu naftiisa bixiyay, Masiix wuxuu ahaa Qays iyo Allabari labadaba. Allabarinimadiisaas Masiixu wuxuu ugu kasbay dadka oo dhan madaxfurasho waligeed ah. Masiix "wuxuu dembiyadeena u yahay kafaarogudka; oo kuweenna oo kaliya uma aha ee waliba wuxuu u yahay dembiyada dunida oo dhan" (I Yooxanaa 2:2). Eeg Cibraaniyada 9:12; 10:14.

Hawsha Masiixa ee isagoo ah Qayskeenna Sare waxaa ka mid ah saddex wax: (1) wuxuu inoo dhammaystiray sharcigii. Taasna waxaa la yidhaahdaa addeecidda firfircoon ee Masiixa, sababtoo ah wuxuu si dhamays ah u sameeyay wixii sharciga edaabtu inooga rabay dhinacyada damaca, fikirka, hadalka iyo ficilka. (2) wuxuu u dhintay oo naftiisii allabari ahaan ugu bixiyay aawadeen. Taasna waxaa la yidhaahdaa addeecidda baarinimo ee Masiixa, sababta oo ah Masiix wuxuu qaaday, ama u silcay, dembiyadeennii

iyo ciqaabteennii isagoo ah kafaaragudka dembiileyaasha. (3) Masiix wali waa qareenkeenna xagga Ilaaha Aabbaha, isagoo inoo hadla maslaxadeena aawadeed. “Qof hadduu dembaado, waxaynu xagga Aabbaha ku leenahay dhexdhexaadiye, waana Ciise Masiix kan xaqa ah” (1Yooxanaa 2:1). Maadaama uu dhexdhexaadin buuxda inoogu sameeyay addeeciddiisa firfircoon iyo tan baarinimo, Masiixu wuxuu awoodaa in uu innaga darteen Ilaah hortiisa inooga dacwoodo.

Xafiiska Qaysnimo ee Masiix waa muhiim sababta oo ah, isagoo ah Wayskeenna, Masiixu wuxuu ficil ahaan inoogu kasbay innaga cafiska dembiyadeenna, nolol, iyo badbaado. Eeg Cibraaniyada 10:14, 18.

MASIIXA OO AH BOQORKEENNA

Boqor waa mid awood iyo amar u leh inuu xukumo waddan. Xukunku waa shaqada ugu muhiimsan ee xafiiskiisa. Waayadii Axdigii Hore xafiiska boqorku wuu ka dhex jiray reer banii Israa’iil, waxaana ka mid ahaa boqoradooda: Saa’uul, Daa’uud, Suleebaan, iyo kuwo kale.

Masiixuna, sidoo kale waa BOQOR. Laakiin ma ahan boqor adduun (Yooxanaa 18:36). Boqornimadiisa iyo boqortooyadiisu waa mid aad uga weyn mid kasta oo kale oo ka jirta dunidan korkeeda. Mar kasta oo laga hadlayo boqortooyada Masiix waa caadi in la tilmaamo boqortooyadiisa awoodda, boqortooyadiisa nimcada iyo boqortooyadiisa ammaanta.

Maadaama uu yahay Wiilka Eebbe ee daa’imka ah, Masiix waa Rabbiga wax walba; wuxuuna awood ku leeyahay jannada iyo dhulkaba (Matayos 28:18). Eeg Filiboy 2:9-11. Wax kasta oo jiraana waxay ku hoos jiraan cagihiisa (Efesos 1:22). Masiix wuxuu ku xukumaa boqortooyadaas awoodda sare ee kariimka ah, sidaasaana loogu yeedhaa boqortooyadiisa awoodda.

Haddaan si gaar ah u eegnana Masiixu waa boqorka iyo taliyaha kaniisaddiisa, oo ah Masiixiyiinta. Xagga Injiilka ayuuna ku guulaystaa kuwo raaca isaga (Yooxanaa 18:36, 37), oo rumaysta Eraygiisa qudduuska ah, oo ku noolaada nolol muuminnimo. Boqortooyadaas waxaa fidiya oo gaadhsiiya dadka, oo hortooda ku qirta magaca Masiix, oo ka sheekeeya jacaylkiisii Masiixiyiinta adduunka, waxaana tan loo yaqaannaa hawsha bishaaraynta (mission work). Sidaa darteed Masiixiyiinta oo dhamu waa muwaadiniinta boqortooyadaa Masiixa, waayo Masiixa ayaa xukuma qalbiyadooda, wuxuuna ka samaystay rugtiisa. Maadaama uu Masiixu ku xukumo iyaga jacayl iyo nimco, waxaa boqortooyadaa la yidhaahdaa boqortooyada nimcada ee Masiix. Boqortooyadaasi way jiri doontaa illaa wakhtigu dhammaado.

Masiixu sidoo kale waa boqorka ammaanta. Boqortooyada ammaantu ma ahan dhulkan kortkiisa ee waa jannada. Eeg 2 Timotiyos 4:18. Waxaan la yidhaahdaa boqortooyada jannada, oo Masiix uu ku haysto ammaan oo dhan (Yooxanaa 17:24), halkaas oo dhammaan inta si run ah u aaminsan Masiix, iyagoo dhimashada u sii maray ay gali doonaan boqortooyada jannada, oo sidoo kale ay ku ammaanmi doonaan (Rooma 8:18). Boqortooyadaasi ma yeelan doonto dhammaad.

Masiix boqortooyadiisa awoodda wuxuu u adeegsadaa sida danta u ah boqortooyadiisa nimcada, oo wuxuu u xukumaa boqortooyadiisa nimcada si uu inoogu diyaariyo boqortooyadiisa ammaanta. Eeg 1 Butros 1:3-5. Shaqada Masiix waa xubin, oo waxay ku wareegaysataa saddexdaas boqortooyo ee halka ujeeddo ee kaliya leh, taas oo ah badbaadada dadka.

SIDAY WAXAAS OO DHAMU INOO SAAMAYNAYAAN?

Masiix wuxuu rabaa inaan rumayno risaaladiisa oo aan aqbalno inuu yahay Rabbigeenna iyo Badbaadiyaheena. Maadaama uu ina madaxfurtay, waxaan nahay kuwo uu soo iibsaday oo isagu leeyahay (Efesos 1:14). “Idinku isma lihidin” (1 Korintos 6:19). Waxaa ina leh Eebbe. Sidaas awgeed, waa inaan u noolaanno Masiixa aawadii oo samaynno siduu raalli ka yahay. “Isagu wuxuu u dhintay dhammaan in kuwa noolu aanay u sii noolaan nafsaddooda laakiin ay u sii noolaadaan kan aawadood u dhintay oo u sarekacay” (2 Korintos 5:15). Masiixigu wuxuu odhanayaa sidii Bawlos: “Waxaa iskutallaabta laygula qodbay Masiixa, laakiin wali waan noolahay. Aniga ma aha kan nooli, laakin Masiix ayaa igu dhex nool, oo nolosha aan haatan jidhka ku dhex noolahay waxaan ku noolahay rumaysadka xagga Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyay daraadday” (Galatiya 2:20). Ku kasta oo si dhab ah u rumaysan inuu Masiix isaga leeyahay, wuxuu ku noolaan doonaa Ilaah hoostiisa xagga boqortooyada, oo wuxuu ugu adeegi doonaa Isaga xaqnimo, daacadnimo iyo barako waligeed ah.

CUTUBKA 8
SIDA AAN KU NOQONNO MASIIXI

"Waa wakhtigii aan noloshayda baal cusub u furi lahaa. Waa inaan hagaajiyo noloshayda." Hadallada kuwaas oo kale ah, waxaa ka muuqda sidii iyadoo qofku uu doonistiisa ku noqon karo Masiixi. Laakiin sidaas ma ahan. Marka sidaas loo hadlo, dadku waxa ay ka fekerayaan oo qudhu waa akhlaaqdooda sare, mase ahan mid sidaa u taabanaysa doonista qalbigooda. Masiixinimada macnaheedu waa ka weyn yahay aragtida duleed ee waxa saxda ah iyo asluubta. Asal ahaan iyo muhiimad ahaanba Masiixinimadu waa isbeddel qalbiga u jeediya xagga Eebbe, kaas oo ka muuqda sida uu qofku u nool yahay. Masiixinimadu waa in Eebbe la doorto. In kastaba ha la ekaateena ma jiraan doonis iyo rayi wax ka beddeli kara damaca qalbiga qofka dabiiciga ah.

QOFKA DABIICIGA AHU WAA MICIIN LAAWE

Qofna caqli kiis ah iyo awood tiis ah midna kuma rumayn karo, ugumana imaan karo Ciise Masiix. "Ninka nafta raacaa ma aqbalo waxyaalaha Ruuxa Ilaah, waayo, nacasnimo bay u yihiin, mana garan karo, maxaa yeelay, ruuxa ayaa lagu imtixaamaa" (1 Korintos 2:14). Qofka aan cusboonaan, kan aan Masiixiga ahayn, si kasta oo uu u wanaagsan yahay, wuxuu liddi ku yahay waxa ka yimid Eebbe ee badbaadada u ahaan lahaa. Umana arko inay wax macno ah ama qiime ah leeyihiin. Qiimaynta uu qofku siinayo waxyaalaha Eebbe waa inay ka timaaddo dhinaca ruuxa, waana wax adag in qofka qudhiisu uu gaadho qiimayntaas. Qofka dabiiciga ahu haba yaraatee wax ruuxi ah ma lahan, sidaa darteed qiimayntiisu waxay ku adkaysan in si macno darro ah loo sheego Injiilka.

Qorniinku wuxuu sheegayaa in dhammaanteen aan si dabiici ah u nahay kuwo indhola' oo dhintay, oo cadow u ah Eebbe. "Idinku waxaad ku dhimateen xadgudubyadiinna iyo dembiyadiinna" (Efesos 2:1). Damaca qofka dabiiciga ahu waa shar. Taasina waxay muujinaysaa inuu xagga Eebbe ka dhintay, xagga ruuxa ka dhintay, oo uusan awood u lahayn inuu sameeyo fal ruuxi ah. In loo tago Masiix oo la rumeeyo Isagu waa ficil ruuxi ah. "Malaha qalbiga dadku waa shar tan iyo yaraantiisa" (Billowgii 8:21). "Jidhka ka fikiriddiisu waa la col Ilaah." (Rooma 8:7) "Idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid" (Efesos 2:8).

Qodku sida uusan naftiisa u abuuri karin, sidaas oo kale isagu iimaanka ma keensan karo ama gacan kama gaysan karo inuu rumaysto.

RUUXA QUDUUSKA AYAA IIMAANKA SIIYA QOFKA

Ruuxa Qudduuska oo kaliya ayaa inaga dhigi kara inaan rumayno Masiix, oo inoo kasbi kara barakada madaxfurashada, taas oo Masiix uu inoogu guulaystay. “Oo aan ninna odhan karin, Ciise waa Rabbi, inuu Ruuxa Qudduuska ku hadlo mooyanne” (1Korintos 12:3).

Garashada ah in Ciise uu yahay madaxfurtaheenna waxaa ina siiya oo aan ku helnaa awoodda Ruuxa Qudduuska ah. Iimaanku waa “deeq Ilaah” (Efesos 2:9). “Laakiin waa laydinka maydhay, qudduus baa laydinka dhigay, xaq baa laydinkaga dhigay magaca Rabbi Ciise Masiix iyo Ruuxa Ilaaheenna” (1 Korintos 6:11). Waa la ina daahiriyay, oo qudduus la inaga dhigay Ilaah hortiisa, waxaa la inaga soo qaaday xaq wixii uu Masiix inoo sameeyay aawadii, taas oo uu Ruuxa Qudduusku kaga dhex shaqeeyay qalbiyadeenna.

SIDUU RUUXA QUDDUUSKU IIMAANKA U SIIYAA QOFKA?

Iimaanka waxaa qofka looga dhex shaqeeyaa xagga Injiilka, kaas oo barakada hawshii madaxfurasho ee Masiix la inagu ogaysiiyay oo lagu siiyay qofka.

Erayga Injiilka, kan qoran iyo kan lagu hadlaaba iyo karaamooyinka waxaa la yidhaahdaa ilaha nimcada, sababta oo ah nimcada Eebbe waxaa la inagu siiyay oo la inoogu soo bandhigay iyaga xaggooda. Marka hore Ilaah wuxuu u adeegsadaa sharciga si aan u ogaanno dembigeenna oo aan uga qoomamoono. “Sharciga ayaa lagu gartaa dembiga” (Rooma 3:20). Si aan u rumayno Masiix inaan ka helno dembidhaaf aawadeed, Ilaah wuxuu inoo adeegsadaa nimcadiisa. Rasuul Bawlos ayaa yidhi: “Ciise Masiix ayaan idinku dhalay xagga Injiilka” (1Korintos 4:15). Butros ayaa qoray: “Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba’aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba’ayn oo ah Erayga Ilaah oo nool oo waara” (1Butros 1:23).

Waxaa Masiixi la inagaga dhigay dhalasho ruuxi ah oo xagga Erayga Ilaah een baaba’ayn, kaas oo isagu nool oo leh awood nololsiin. “Haddaba rumaysadku wuxuu ka yimaaddaa maqlidda, maqlidduna waxay ka timaaddaa hadalka Masiixa.” (Rooma 10:17). Eeg Yooxanaa 17:20; Tiitos 3:3-7.

RUMAYSADKU KUMA YIMAADDO KHASAB

Sawirka la yidhaahdo “Iftiinkii Adduunka” oo uu sawiray (aslay) ninkii la odhan jiray Holman Hunt, wuxuu muujinayaa Masiixa oo habeenbadh jooga meel beer ah. Gacanta bidix wuxuu ku hayaa faynuus, oo

gacanta midigna wuxuu ku garaacayaa albaab si adag loo xidhay. Markii ugu horaysay ee sawirka la soo bandhigay, nin sawirada naqdiya ayaa yidhi, "Mr. Hunt, sawirku ma dhammaystirna. Albaabku ma lahan qataar kore." Ninkii sawirka sameeyay ayaana ugu jawaabay: "Albaabkanu waa kan qalbiga dadka –waxaana laga furi karaa dhinaca gudaha oo kaliya."

"Bal eeg, albaabkaan taaganahay oo garaacayaa; haddaba haddii nin codkayga maqlo oo albaabka iga furo, waan u soo galayaa, oo waan la cashayn, isna wuu ila cashayn." (Muujintii 3:20).

Rumaysadku khasab ma ahan. Masiixu si xoog ah kuma galo qof qalbigiisa. Rumaysadku cabsi kuma yimaaddo. Masiixu wuxuu qofka ku dhaqaajiyaa inuu qalbigiisa furo, marka uu qofku toobadkeeno oo laga cafiyo dembiyadiisa isagoo lagu wacdiyay magaca Masiixa. Eeg Luukos 24:47. Marka uu qofku "Maqlo codka Masiixa," Ilaah ayaa rumaysad siiya oo ka dhiga mid raalli ka ah oo raba inuu qalbigiisa furo. Waa Injiilka kan uu Eebbe u adeegsado awooddiisa saamaynta. Awoodda Ruuxa Qudduuska ayaa la socota wacdinta Injiilka. Sidaas daraadeed, waa Masiixa Kan Ruuxiisa kaga fura dhanka gudaha albaabka qalbiga qofka.

MACNAHA RUMAYSAD

"In Ilaah la rumeeyo" macnaheedu waa in la garto, oo si dhab ah loo aqbalo waxa uu Kitaabka Qudduusku ka sheegayo Ilaah, oo Isaga la aamino oo si kalsooni buuxda leh loogu tiirsanaado. Iimaan lagu badbaado waa aaminidda nimcada la inoogu yeedhay xagga Injiilka. Marka hore, waa lagama maarmaan inaan barano, oo ogaanno waxa aan rumaynayno. Iimaanka iyo Erayga Eebbe si weyn ayay isula xidhiidhaan. "Haddaba, rumaysadku wuxuu ka yimaaddaa maqlidda, maqlidduna waxay ka timaaddaa hadalka Masiix" (Rooma 10:17). Iimaan aan aqoon loo lahaynu waa wax aan suuroobin. Dhammaan inta jecel inay badbaadaan waa inay ogaadaan waxa uu Ilaah sameeyay si uu u badbaadiyo iyaga.

Tan kale, waa inaan aaminno dhammaan waxbaridda la xidhiidha badbaadadeenna, inagoo dareemayna inay ina caawinayaan oo faa'iido inoo yihiin. Iimaanku marnaba ma ahan cilmi iyo hanti aqooneed kaliya, laakiinse waa xaalad dareen oo qalbiga oo lagu daray ficil doonis. Iimaanku waa aqoon saamaysay qalbiga iyo doonista, taas oo na garansiisa, na siisana kalsooni inaan helnay nimco, xaqnimo iyo dembidhaaf xagga Masiix. Kalsoonidaas wuxuu Bawlos ka yidhi. "Waan garanayaa Kan aan rumaystay, oo waxaan aamisanahay inuu awoodo inuu dhawro wixii aan ku ammaanaystay illaa maalintaas." (2 Timoteyos 1:12)

Ciise wuxuu qeexay yeedhista Injiilka isagoo adeegsanaya dhawr misaal: casuumaddii cashadii waynayd (Luukos 14;16-17); casuumaddii arooska wiilka Boqorka. (Matayos 22:1-10).

QEEXIDDA ERAYBIXINTA

Shaqada uu Ruuxa Qudduusku inagaga dhigayo Masiixi waxaa la yidhaahdaa rumaysiin (baddalid) ama cusboonaysiin. Waxaa la yidhaahdaa rumaysiin (baddalid) sababtoo ah Ruuxa Qudduuku wuxuu inaga kaxeeyaa dembigii oo ina rumaysiiyaa badbaadiyaheennaa. Eeg Yeremyaah 31:18. Waxaa la yidhaahdaa "cusboonaysiin," ama "dhalasho cusub," sababtoo ah waxaa inagu dhalanaya nolol cusub oo ruuxi ah oo ka timid shaqada Ruuxa Qudduuska; waxaana "laynagu uumay Ciise Masiix" (Efesos 2:10), oo waxaan noqonay "uun cusub." (2 Korintos 5:17).

RUMAYSADKU WAA ISLA MARKIIBA

Dembiiluhu inuu u toobadkeeno Eebbe, taas oo ah rumaysadkiisu, waxay dhaqangashaa isla amminkaa uu ka soo noqdo, isagoo murugaysan, dembigii iyo isla-qummanaantii, ee uu aqbalo nimcada Eebbe ee isaga loogu yeedhay xagga Injiilka, ama marka uu rumaysto Injiilka. "Kuwo tiro badan oo rumaystay baa Rabbiga u soo jeestay" (Falimaha Rasuullada 11:21). Luter ayaa yidhi: "In Rabbiga loo soo jeedsado macnaheedu waa in la rumaysto in Masiix yahay dhexdhexaadiyaheenna, oo Isaga xaggiisa aan ka helayn nolosha waligeed ah." Rumaysadka qofku ma ahan inuu qofku isbeddel ka sameeyo habka uu u nool yahay ama uu naftiisa ku abuuro nooc dareen oo "diini" ah. Isla marka uu qofku rumeeyo Masiix, xattaa haddii iimaankiisu uu yahay mid aad u yar, rumaysadkiisu waa uu jiraa.

Qorniinku wuxuu ina barayaa inuusan qofku joogsan karin meel u dhaxaysa rumaysad iyo rumaysad la'aan. Wuxuu Qorniinku qabaa inay jiraan laba nooc oo dad, kuwo iimaan leh iyo kuwo aan iimaan lahayn, ama kuwo rumaystay iyo kuwo aan rumaysan. Isu diyaarinta rumaysadku wuu qaadan karaa muddo dheer ama gaaban, rumaysadkuse ma qaato wakhti. Kaliya marka laga eego dhinaca "isu diyaarinta rumaysadka" ayaa la odhan karaa rumaysadku wuxuu ku yimaadaa si tartiib. Si kastaba ha ahaatee, rumaysadka lafahaantiisu waa islamarkiiba, ee marnaba ma ahan hab daba dheeraada.

Marka qofka la siiyo billowga iimaanka ama rumaysadka, waxaa isla markiiba billowda halgan ka dhexeeya ruuxiisa iyo jidhkiisa, taas oo tilmaamaysa inuu ruux ahaan nool yahay ama rumaystay. Is khilaafkaasina ma yimaaddo dhaqdhaqaaqa doonista la'aantiis. Nimcada Eebbe aawadeedna waxaa la cusboonaysiiyay doonista rumaystaha, oo waxaa la siiyay awood cusub si uu ramaystuhu ugu tukado inuu helo iimaan adag oo lumin uus

mahayo fursad kasta oo ay ku korayaan iimaankiisa iyo aqoontiisa Eebbe. Innaga Masiixiyiinta ahu waa inaan si joogto ah u raadinno inaan noqonno rumaystayaal adag. “Isjirraba inaad iimaanka ka jirtaan iyo in kale, oo bal istijaabiya.” (2 Korintos 13:5).

MAXAA LOOGU SOO WADA JEEDSAN WAAYAY YEEDHISTA INJIILKA?

Dad badan maskaxdooda waxaa ku soo dhaca su’aasha ah: “Maxay dhammaan kuwa maqla yeedhista Injiilku u rumaysan waayeen?” “Dadka ma faraq baa u dhexeeya?” “Ma isku si buu Eebbe u arkaa dadka oo dhan?”

Wax farqi ahu uma dhexeeyo dadka; oo dhammaatoodna iyagoo siman uma qalmaan in ay helaa rumaysad iyo badbaado (2 Timotiyos 1:9), si isku mid ahna ma awoodaan inay iyagu rumaystaan, oo si dabiici ahna ma doonaan in ay helaan rumaysad. (1 Korintos 2:14; Efesos 2:1; Rooma 8:7; 1 Korintos 12:3)

Wax farqi ahu uma dhexeeyo sida uu Eebbe u arko dadka. Eebbe aad buu u rabaa inuu dadka oo dhan siiyo rumaysad iyo badbaado (1 Timoteyos 2:4), oo Isaga kaligii ayaa rumaysad siin kara (1 Korintos 12:3; Yeremyaah 31:18). Ruuxa Qudduusku wuu shaqeeyaa, isagoo raadinaya inuu rumaysad siiyo cid kasta oo lagu wacdiyo Injiilka.

Waxay u egtahay in la raacin karo in haddii isla nimcadaa Eebbe ay ka shaqayso meel kasta oo Injiilka laga wacdiyo, saamaytaasuna waxay keenaysaa: in dhammaan la rumaysan. In kastoo ay xaqiiqo tahay in nimcada Eebbe ee rumaysadka bixisa mar walba uu la jiro xoogga Eebbe oo dhan, haddana dadku wali waxay karaan inay hor istaagaan rumaysadkooda. “Idinku ma jeclidin” (Matayos 23:37). “Waligiinba Ruuxa Qudduuska ah waad hor joogsataan” (Falimaha Rasuullada 7:51). Hadduu Eebbe ugu shaqeeyo si degdeg ah rumaysad inuu siiyo dadka (iyadoo dhexdhexaadin aysan jirin), oo uu adeegsado awooddiisa, dadku iskama caabiyi karaan Eebbe. Hase yeeshee, dadku way iska caabiyi karaan marka uu Eebbe adeegsado ilo kale; oo wuxuu Eebbe adeegsadaana waa Eraygiisa marka uu dadka siinayo iimaanka. Taasina awoodda Eebbe kama dhigayso mid tabar daran ama aan wax tari karin.

Innagu xaq uma lihin inaan samaysanno ama diyaarsanno caqiido, innagoo ku salaynayna caqligeenna, laakiinse waa inaan fikir kasta oo keen ah ku xidhno addeecidda Masiixa (2 Korintos 10:5), oo innaga oo is hoosaysiinayna isu dhiibno xigmadda sare ee Eebbe. Sidaa ay tahayna, haddii uu qof u soo noqdo Eebbe oo rumaysto, taasu waa shaqada Ruuxa Qudduuska oo kaliya: laakiinse hadduu qof rumaysan waayo, taasu waa khalad uu qofka kaligii leeyahay. Intaas wixii dhaafsiisanna waa in aynaan waxba qiil u raadin.

RUMAYSADKU WUXUU BEDDELAA ARAGTIDA QOFKA EE XAGGA EEBBE IYO SHARCIGIISABA

Aaminidda Masiixu waxay beddeshaa aragtida qofka ee xagga Eebbe iyo sharcigiisaba. Marka qofka iimaankiisu sii koro ee sii adkaado, ee fahamkiisuna sii kordho, nimcada Eebbe aawadeed aragtidiisuna way sii wanaagsanaataa. Qofka dabiiciga ah "waxyaalaha ruuxu" waxay u yihiin "nacasnimo," laakiinse kan rumaysadka leh waxay u noqonayaan xigmad qaali ah oo Eebbe. Waxaa rumaystaha la siinayaa inuu jeclaysto hab nololeed Eebbe ka raalli noqdo. Qofka, oo si dabiici ah u leh maskax damaaci ah, oo u ah cadow Eebbe, wuxuu nimcada Eebbe ee uu ku helay rumaysadka ku noqdaa mid Eebbe jecel. Waxaa qalbigiisa ka buuxsama jacayl uu u qabo Eebbe iyo deriskiisaba. Taas aawadeed, mar hadduu dib u dhasho ama rumaysad yeesho, wuxuu samayn wax wanaagsan sida amarada Eebbe ay farayaan inuu sameeyo. Ilaah ayaa u abuura nolol ruuxi ah. Oo kuwa uu siiyo nolol ruuxi ahuna waxay samayn shuqullo wanaagsan. Aragtida toosan ee rumaystuhuna waxay ka soo baxdaa jacaylka Ilaah oo waa midhaha Ruuxa Ilaah ee ka dhex shaqayanaya isaga. Eebbe waa Ilaaha aan la arag ee ay ka soo burqadaan shuqullada wanaagsanu. Masiixiga runta ahu kuma faano shuqulladiisa wanaagsan oo ah asxaan la siiyay inuu sameeyo, wuxuuna og yahay awoodda Masiix iyo Eebbe ee isaga ku jiraa in ay karti u siiyeen inuu raaco tusaalihii Masiixa. "Innagu waxaynu nahay wixii uu sameeyay, oo waxaa laynoogu uumay Ciise Masiix shaqullada wanaagsan aawadood.' (Efesos 2:10).

RUMAYSADKU WUXUU BEDDELAA FALSAFADDA NOLOSHA EE QOFKA

Shakhsi waliba wuxuu leeyahay falsafad nololeed; taas oo ka kooban waxyaabaha dhaqdhaqaagiisa xukuma; waxay go'aamisaa aragtidiisa, waxay xukuntaa fikirkiisa, waxayna u cabbirtaa qiimayntiisa wax walba. Wax aan qalbigeenna ku hayno ayaa xukuma nooca qofka aynu nahay. "Isagu waxaa weeye siduu qalbiga kaga fikiro." (Maahmaahyadii 23:7).

Qofka Masiixiga ahu "waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax walba way cusboonaadeen' (2 Korintos 5;17). Ama sida uu wali Bawlos ku yidhi meel kale: "Nolosha aan haatan jidhka ku dhex noolahay waxaan ku noolahay rumaysadka xagga Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyay daraaday" (Galatiya 2;20). "Aniga waxaa nolosha ii ah Masiix, oo dhimashaduna waa ii faa'iido" (Filiboy 1:21). Aayadahaas waxaa lagu muujiyay falsafadda nolosha qofka Masiixiga ah. Ciise wuxuu u yimid inuu inaga furto dembiga, si aan u yeelanno ujeedada saxda ah ee nolosha.

Ciise ayaa yidhii: “Aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay badnaan u haystaan.” (Yooxanaa 10:10).

Waxaan sida ugu wanaagsan u nool nahay marka aan ku nool nahay doonista Eebbe. Falsafaddeenna nolosha ee Masiix waxay ku salaysan tahay saddex wax oo aasaasi ah: (1) in Eebbe wanaagsan yahay, oo uu jeclaaday dadka oo dembiile ah illaa xadka uu ka badbaadiyay cadaabka Ciise Masiix aawadii; (2) in Eebbe uu barnaamij ugu talagalay nolosheenna, kaas oo ah, inaan ammaanno Eebbe iyo inaan u raadinno kuwa kale Eebbe dartii, (3) in aan shaqada Eebbe ka dhigno muhiimadda ugu horraysa ee nolosheenna.

Falsafadda nolosha ee Masiixigu gebi ahaanba waa mid lagu dhaqmayo; waana nolol fudud oo caadi ah. Waxay keentaa farxad, waayo Rabbiga oo lala jiraa waa rayrayn. Qofku wuxuu la kulmaa wakhtiga ugu wanaagsan noloshiisa marka uu Masiixi noqdo.

CUTUBKA 9
CAFISKA DEMBIYADA

Dhammaan barakooyinka uu Eebbe ina siiyay, ma jiro wax xagga muhiimadda u dhigma cafiska dembiyada, ama u qiilbixinta dembiilaha ee xagga iimaanka aan ku xidhnayn fulinta sharciga. Maadaama dembigu uu yahay dhibaatada ugu weyn ee haysata dadka, cafiska dembiyaduna waa waxa ugu weyn ee dadku u baahan yahay. Cafiska dembiyadu waa xuddunta guud ahaanba caqiidada Masiixiyada, waayo waxaa ku dhisan gebi ahaanba jiritaanka diinta Masiixiyada.

Qof kasta oo kalsooni ku qaba wanaagga kiis ahu xiise uma qabayo cafiska dembiyada, taas oo Masiixiyadu ay ugu yeedhayso duni dembi miidhan ah. Diimaha oo dhan Masiixiyada mooyaane waxay baraan in qofku uu awoodo inuu isagu isa saxo Ilaah hortiisa, isagoo ficillo kuwiis ah samaynaya, iyo in aanu jirin dembidhaaf la isa siiyay.

Dembidhaafku waa ilaha iyo aasaaska dhammaan faa'iidooyinka iyo barakooyika uu qofku ka helo Eebbe. Kii hela dembidhaaf wax walba wuu helay. Qorniinku wuxuu "soo bandhigay dhamman shuqullada iyo hadiyada ruuxiga ahu inay yihiin natiijo ku timid dembidhaafka. Runtii "waxaa barakadaysan ninkii Rabbigu uusan dembi u tirinayn." (Rooma 4:8).

CAFINTA DEMBIYADU WAA ASXAAN EEBBE

Wadaadadii, in kastoo aanay rumaysan, waxay is waydiiyeen sa'aal sax ah: "Ayaa dembiyo cafiyi kara Ilaah kaliya maahee?" (Markos 2:7). Maadaama dembi uu yahay xadgudub lagu sameeyay doonista qudduusan ee Eebbe, cafinta dembiyaduna waa uun asxaan Ilaah laga helo. Eebbe ayaa soo dejiyay sharciga lagu xukumo asluubta dadka. Sharciga oo la jabiyaana mar kasta waa dembi. Eebbe oo sharcigiisii lagu xadgudbay kaligii ayaa cafiyi kara xadgudbaha. Markuu Eebbe cafiyo dembi, halkaas ayuu ku dhammaaday dembigii.

SHUQULLADA DADKU WAXBA MA TARAYAAN

Qofka dabiiciga ahu wuxuu cafiska dembiyadiisa ku raadiyaa dadaalkiisa iyo halgankiisa. Wuxuu u haystaa nacasnimo inuu ka hadlo dembidhaaf uusan shaqaysan oo ka yimid xagga Eebbe. Wuxuu aaminsan

yahay “tayo wanaag asluubeed’ ee qofka ama “guul xagga edaabta” oo qofku uu ku guulaysto in ay ugu yaraan wax ka tarayaan dembidhaafkiisa, haddiiba aysan ahayn waxa la iska rabo. Laakiin dadku waa khaldan yihiin.

Qorniinku wuxuu ina barayaa cafiska dembiyada in aan lagu helin shaqo uu qofku mar hore qabtay, ama wax uu qaban doono mustaqbalka. Cafiska deambiyadu kuma xidhna wax uu dadku sameeyay ama uu u qalmo. Gebi ahaanba wuu ka madaxbannaan yahay tayo ama “wanaag” ku jira qofka. Daacadnimada, samofalka, jacaylka, naxariista, asxaanka, saaxiibnimada, iyo waxa kale ee wanaag ah ee dadku sameeyo haba yaraatee waxba kama tarayaan in Eebbe laga helo dembidhaaf. Qorniinku wuxuu ka yidhi: “Waad ka soocan tihiin Masiix, kuwiina sharciga xaq ku noqon lahaayow; nimcadiina waad ka dhacdeen.” (Galatiya 5:4). Dembidhaafka waxaa lagu helay oo kaliya in sharcigii la baabi’iyay gebi ahaantii. Dembiiluhu Eebbe hortiisa isagu xaq iskama dhigi karo, oo sidaa aawadeed dembidhaaf isma siin karo. Oo maadaama aan wali wadanno jidh innaguna, sidoo kale, waxaa ina saameeya fikirka beenta ah ee ah in dembidhaaf lagu helayo shuqullada sharciga. Inaan raacno oo fulinno amaradu waxba inoo tari mayso. Dembidhaafku wuxuu noqon lahaa wax aan la hubin haddii ay daruuri noqon lahayd hal wax oo si dhamaystiran loo sameeyo si dembidhaaf loo helo.

DEMBIDHAAFKU WAA DEEQ EEBBE

“Idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga ramaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin” (Efesos 2;8-9). Ilaah wuxuu inoogu dembidhaafo ma ahan wax aan samaynay, laakiinse waa Ciise aawadiis, oo ah nimco aanay wax kale wehelin. Injiilku wuxuu inoogu yeedhayaa inaan, qaadanno dembidhaaf hadiyad ah. Eebbe wuxuu inoogu dembidhaafaa nimcadiisa iyo raxmaddiisa aanay waxba wehelin ee aynaan shaqaysan. “Iyagoo hadiyad ahaan xaq lagaga dhigay nimcadiisa xagga madaxfurashada Ciise Masiix ku furtay” (Rooma 3:24).

NAXARIIS AY SABABTAY SHAQADII MASIIXU

Eebbe wuxuu ugu naxariistay dadka oo dembiile ah Masiix iyo shaqadisii madaxfurasho aawadiis. “Wuxuu isaga (Masiix) oo aan dembi aqoonin ka dhigay (Eebbe) inuu dembi noqdo aawadeen, inaynu noqonno xaqnimada Ilaah ee ku jirta isaga” (2 Korintos 5:21). Markii uu nafhuray Masiix ayaa u keentay dhammaan dembidhaafkii ay u baahnaayeen. Eebbe Ciise kama dhigin dembiile, laakiin wuxuu ka dhigay dembi, taas oo ah, in Eebbe uu kor saaray Wiilkiisa xumaantii aan dhammaanteen falnay (Ishacyaah 53:6). Ciise wuxuu ahaa baraarka Ilaah ee qaaday dembiyadii adduunka

(Yooxanaa 1:29). Masiix oo ah Wiilka daa'imka ee Ilaah, wuxuu ka qaatay dabeecadda dadka jiritaankiisii rabbaaniga ahaa oo ku hoos noolaaday sharciga, kaas oo inagu xukumayay inaan dembiileyaal nahay. Oo innaga halkeenii ayuu sharcigii inoo buuxiyay, oo innaga halkeennii ayuu guday dhammaanteen dembiyadeenii isagoo u silcay dembigeennii iyo ciqaabteenniiba. Jacaylkii uu Eebee inoo qabay wuxuu fuulay hawsha uu Masiix inoo qabtay innaga.

MACNAHA DEMBIDHAAF

Dembidhaaf macnaheedu waa inuusan Eebbe inoo xisaabinayn xadgudubka aan ku samaynay Tobanka Amar ee xag damac, fikir, hadal, iyo ficilba. "Taasi waxaa weeye, Ilaah duniduu Masiix kula heshiiyay, isagoo aan dembiyadooda ku xisaabinayn, oo noo dhiibay hadalka heshiisnimada" (2 Korintos 5;19). "Rabbigu wuxuu leeyahay: Haatan kaalaya oo aynu wada fiirsannee. Inkastoo ay dembiyadiinnu guduudan yihiin, sida baraf cad oo kalay u caddaan doonaan, oo inkastoo ay cascas yihiin, sida suuf oo kalay ahaan doonaan" (Ishacyaah 1:18); taasu waa qeexid tilmaan u ah in dembiyada uu cafiyi doono Eebbe. "Daboolidda dembiyada" waa si kale oo dembidhaafka loo qeexay. "Waxaa barakadaysan kuwa xadgudubyadooda la cafiyay, oo dembiyadooda la daboolay" (Rooma 4:7). Halkii dembiyadeenna wuxuu Eebbe dhigay xaqnimadii badbaadiyaheenna Ciise Masiix.

DEMBIDHAAFKA LOO MARO INJIILKA

Dembidhaafka Eebbe kuma uusan xidhin "nuur inagu jira" oo gaar ah ama muujin qarsoon. Eebbe kuma shaqeeyo aamusnaan ama qaylada iyo buuqa suufinimada midkoodna. Waxaa jira siyaabo uu Eebbe u shaqeeyo. Waxaana ugu yeedhnaa ilaha nimcada, sababtoo ah waxay ina siiyaan nimcada iyo jacaylka Eebbe. Ilaha aan ka helno nimcada Eebbe waa erayga Injiilka, Baabtiiska iyo Cashadii Rabbiga. Mid kasta oo ilahan ka mid ah waxaan ka helnaa dembidhaafka buuxa ee uu ina siiyay Masiix. Xaqiijinta dembidhaadka ee siyaalaha kala duduwanu (akhrinta ama dhagaysiga Injiilka, Baabtiiska, Cashadii Rabbiga) wuxuu u kaamil yeelaa Masiixiyiinta baahidoodii. Masiix wuxuu yidhi dadku waxay "Igu rumaysanayaan hadalkooda (rasuulladii) aawadiis (Yooxanaa 17:20). Qorniinka wuxuu leeyahay dib ayaa la inoo cusboonaysiin doonaa (dhalasho kale oo xagga ruuxa) xagga Erayga iyo xagga Baabtiiska (1Butros 1:23; Tiitos 3:5); taas macnaheedu waa in dembiyadeenii la cafiyay. Injiilku astaan uma ahan dembidhaafka, laakiin waa la inoogu sheegay oo la inoogu ballanqaaday.

DEMBIDHAAFKA WAA LOO GADAY DHAMMAAN

"Ilaah duniduu Masiix kula heshiiyay" (2 Korintos 5:19). Masiix wuxuu dadka oo dhan u gaday dhammaan dembiyadooda. Haddii Injiilka hal qof uun uu ka reebi lahaa nimcada Eebbe iyo dembidhaafka, oo qofkaas nasiib daradu ku dhacdo magaciisa aan lagu qorin kitaabka, qofna ma uusan rumaysteen qoraalka Injiilka ee odhanaya in Eebbe nimco badan yahay oo isagu siinayo dembidhaaf. Eebbaa ku mahadsan in dembidhaafka uu u fidiyay dadka oo dhan. Heshiiska uu Eebbe inoo keenay waa arrin taarikhi ah, waa arrin dhammaaday mar hor, oo u yaalla dadka oo dhan. "Oo isagu (Masiix) wuxuu dembiyadeenna u yahay kafaarogudka, oo kuweenna oo kaliya uma ahan ee waliba wuxuu u yahay dembiyada dunida oo idil" (1 Yooxanaa 2:2).

UQALMIDDA SHAKHSIGU WAA XAGGA IIMAANKA

Qofku si uu u helo faa'iidada dembidhaafidda, waa in uu xagga iimaanka ka aqbalo ballanqaadka dembidhaafka ee ku jira fariinta Injiilka. Iimaanku waa waxa kaliya ee inoo haya dembidhaafkeenna. Waa deeq la inoogu fidiyay inaan aqballo. Dembidhaafka la inoogu deeqay iyo inaan ku aqballo iimaan waa kuwo isku xidhan, oo midub uu kan kale dalbayo. Waxaa iimaanka inoo horseeda Ruuxa Ilaah. Iimaanka aawadii ayuu muuminku adeegsadaa ballanqaadka guud ee dembidhaaf ee ku jira Injiilka. Eeg 1Timoteyos 2;6; Yooxanaa 1;29. Sidii Rasuul Bawlos qof kasta oo Masiixi ahu wuxuu ku dhawaaqaa: "Oo nolosha aan haatan jidhka ku dhex noolahay waxaan ku noolahay ramaysadka xagga Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyay daraadday" (Galatiya 2:20), oo Ayuubna waxaan la odhanaynaa: "Waan ogahay in kii i soo furtay nool yahay" (Ayuub 19;25). Iimaanka lagu helayo dembidhaafka dhan kastaba waa iimaan shakhsi ahaaneed. "Waxaa aaminsanahay cafiska dembiyada," ayuu qirtaa qofka Masiixiga ahu. Iimaanku waa aaladda uu qofka Masiixiga ahu ku hanto deeqda Eebbe ee dembidhaafka.

EEBBE U NOOLAANSHUHU WAA NATIIJADA DEMBIDHAAFKA

Nolosha Masiixinimadu waxay mar kasta u muuqataa inay tahay natiijada dembidhaafka oo kaliya. Ballanqaadka dembidhaafku wuxuu ka muuqdaa shuqullada wanaagsan ee Masiixiyiinta. Shuqulka wanaagsanu wuxuu dadka tusayaa oo markhaati ka yahay in qofku uu aqbalay dembidhaafka loogu fidiyay xagga Injiilka nimcada Eebbe aawadeed. Shuqulka wanaagsanu waa ka mahadnaqidda dembidhaafka lagu helay iimaanka. Butros ayaa taas ka hadlay: "Walalayaalow, aad ugu dadaala inaad xaqiijisaan in laydiin yeedhay oo laydin doortay" (2 Butros 1:10), wuxuu ula

jeeday in aan nolosheenna ku muujinno in aan aaminsan nahay dembidhaafka. Haddii si run ah loo aaminsan yahay dembidhaafka, waxaa hubanti ah in uu dabajoogo shuqulkooda wanaagsanu, waayo shuqulka wanaagsanu wuxuu ka yimaaddaa iimaanka. Kitaabka Rooma 5:1-5 wuxuu Rasuul Bawlos ku sheegay in rajada farxadda leh ee nolosha waligeed ah iyo dhibaatada oo loo samro ay yihiin natiijada dembidhaaka. Haddana: Dembidheefka uu ina siiyay Eebbe wuxuu inaga dhigayaa kuwo u dembidhaafa dadka kale. Eeg Matayos 6:12; Matayos 18:23-35. Haddana: iimaankeenna oo kaliya dembidhaafka aan ku hellay Masiix aawadii ayaa ka dhiga tukasho mid lagu tukado "magaca Masiixa." Haddana: inaan naqaanno dembidhaafku waxay ina siinaysaa rajo aan ku laabqabowno in aynaan ku waarayn dhimashada. Qorniinku wuxuu ina barayaa in dhammaan wanaagga Masiixiyiintu uu yahay natiijadii iyo saamayntii iimaanka oo ka dhigay kuwo u qalma dembidhaafka, oo lagu helay abaalka uu inoo galay Masiix oo kaliya.

WUXUU INOO HORSEEDAA BADBAADO DAA'IM AH

"Halkuu dembidhaaf jiro, waxaa kaloo jira nolol iyo badbaado" (Katekiiska yare ee Luter). Ballanqaadkii Masiix ee guriga jannadu wuxuu ku xidhan yahay dembidhaafka ay inoo kasabtay hawshii madaxfurasho ee Masiixu. Eeg Yooxanaa 3:16.

DUNIDA KU WACDI DEMBIDHAAFKA

Rasuulladii waxaa lagu amray inay ku fidiyaan dunida oo dhan warka ku saabsan dembidhaafka lagu helay Masiixa. Taas weeye ujeedada kaniisadda Masiix illaa dunidu dhammaato. Masiix ayaa yidhi: "In toobaddii iyo dembidhaafka magaciisa (Masiix) lagu wacdiyo quruumaha oo dhan' (Luukos 24:47). "Dunida oo dhan taga, oo uunka oo dhan Injiilka ku wacdiya. Kii rumaysta oo la baabtiisaa waa badbaadi doonaa, laakiin kii aan rumaysanin waa la xukumi doonaa" (Markos 16:15-16). Masiixiyiinta wuxuu Eebbe siiyay furayaasha boqortooyada jannada. Waa run yaab leh in dunida loo sheego in Eebbe uu qalbigiisa ka cafiyay dembiyada oo dhan, oo dembidhaafkana uu ku fidiyay Injiilkiisa, oo ah warka san ee badbaadada in dadku uu ku helayo xagga Masiix.

CUTUBKA 10
TUKASHADU WAA WADNAHA IIMAANKA

Tukashadu waa mid aan laga sooci karin nolosha ruuxiga ah ee caruurta Ilaah; waana wadnaha iimaankiisa. Mid kasta oo noqda ilmaha Ilaah wuu doonaa inuu la hadlo Aabihiisa jannada; wuuna tukadaa. "Waxaad hesheen ruux caruur idiinka dhigay, kan aynu ku qaylino, Aabbow" (Rooma 8:150. Tukashada ayuu qofka Masiixiga ahu ku aqoonsadaa kuna sharfaa Eebbe in uu yahay gargaarihiisa baahi kasta. Bawlos, markuu rumaystay ka dib, waxaa la arkay isagoo tukanaya, taas oo ahayd natiijada dabiiciga ah ee inuu helay badbaadiyaha. Qofka Masiixiga ahu wuxuu Eebbe ku caabudaa tukasho.

Tukashadu waa ficil diimeed. Guud ahaanna sida la qabo, waa dabiici waana caalami sida ay diintuba u tahay. Caalaminimadan tukashadu waa mid ka timid fikir ka dhashay qofka, oo ah in ay jirto cid sarraysa oo leh awood ay wax ku gargaarto ama ku burburiso, oo qofka la xisaabtami doonta. Haddaba wax kasta oo wata magaca tukasho ma raalli galinayo Eebbe. In Ilaah been ah loo tukado waa sanam caabudid. Tukashada Masiixiyiinta oo kaliya ayaa Eebbe raalli galisa, sababtoo ah Masiixiyiinta oo kaliya ayaa u tukada Eebbaha runta ah.

QAABKA TUKASHADA

Waxaan ku tukan karnaa erayo afka ah, oo aan ku heesno ama ku hadlo. Hase yeeshee, waxaa iyana tukasho noqon kara fikir, khalaawo iyo damacyo qalbiga ah. "Rabbiyow, xooggayga iyo bixiyahaygiiyow, erayada afkayga iyo fikirka qalbigaygu ha aheedeen kuwo hortaada lagu aqbalo" (Sabuurradii 19:14). "Rabbiyow, waad maqashay waxay kuwa is hoosaysiiyaan doonayaan" (Sabuurradii 10:17). Xatta marka aysan si joogto ah ugu hawllayn tukasho, Masiixiyiintu mar kasta waxay ku jiraan xaalad tukasho, sababta oo ah waxaa qalbigooda ka buuxa abaal ay u hayaan iyo aaminnimada Eebbe. Eeg Efesos 6:18; Rooma 8:26-27.

NUXURKA TUKASHADA MASIIXIYIINTA

Tukashadeenna waxaan Eebbe ku mahadinnaa oo ku ammaannaa barakooyinka uu ina siiyay, oo waxaan ku waydiisannaa waxyalaha aan u baahan nahay, jidh ahaan iyo naf ahaanba. "Waxba ha ka welwelina, laakiinse wax kastaba baryadiina Ilaah ku ogaysiiya tukasho iyo duco mahadnaqid la jirto." (Filiboy 4:6)

YAAN U TUKANAYNAA?

Waxaan u tukanaynaa Eebbaha runta ah oo kaliya, Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska, maadaama isaga oo kali ahu uu mudan yahay sharaftaas iyo maadaama isaga oo kali ahu uu awoodo oo doonayo inuu maqlo oo aqbalo tukashadeenna. Tukasho kasta oo kale oo aan loo tukan Ilaaha runta ah, si kasta oo loogu hadlo ama loogu fekero, waa nooc sanam caabudid oo lama aqbalo. Eeg 1Boqorradii 18:25-29. Awliyadu ma maqli karaan tukashadeenna (Ishacyaah 63:16), oo malaa'igtu ma mudna in la caabudo (Muujintii 22:8-9). Marka aan u tukanayno Ilaaha runta ah, looma baahna inaan sheegno saddexda axad ee Saddexanka, sababtoo ah waxay ku midaysan yihiin Ilaahnimo qudha.

AASAASKA TUKASHADA MASIIXITIINTA

Iimaanka jacaylka Eebbe eek u jira Ciise Masiix ayaa aasaas u ah tukashada Masiixiyiinta. Marka aan aaminno mudnaanta Badbaadiyaha, markaas oo kaliya ayay tukashadu taaban qalbiga Eebbe. Qofku wuxuu tukasho run ah Eebbe u tukan karaa, marka uu aaminaadda Masiixa kula yeesho xidhiidh sax ah oo toosan Eebbe.

"Sidaas daraadeed, innagoo xaq laynagaga dhigay rumaysad, nabad baynu xagga Ilaah ku haysannaa Rabbigeen Ciise Masiix, kan xaggiisa aynu rumaysad ku gallay nimcadan aynu dhex taagan nahay, oo waxaynu ku faraxnaa rajada ammaanta Ilaah." (Rooma 5:1-2) Eeg Rooma 10:14. Haddaba wuxuu yidhi Ciise: "Haddii aad wax uun waydiisataan Aabbaha, magacayga ayuu idinku siin doonaa." (Yooxanaa 16:23)

WAXA INAGU XANBAARA TUKASHADA

Inaan tukanno waxaa inagu xanbaara Eebbe amarkiisa iyo ballan qaadkiisa, innaga baahideenna iyo tan dariskeenna iyo abaalka aan uga hayno barakooyinka uu Eebbe ina siiyay. Maadaama uu qofka Masiixiga ahu la leeyahay Eebbe xidhiidh sida kan ilmuhu uu la leeyahay aabbihii oo kale, sababaha aan kor ku soo sheegnay ayaa si xor ah, oo farxad leh ugu dhaqaajin inuu caabudidiisa Eebbe ku muujiyo tukasho. Yeedhidda Eebbe ee nimcadu

waa “doondoona wajigayga” (Sabuurradii 27:8). Mar kalena, “Oo i bari maalinta dhibi jirto.” (Sabuurradii 50:15) Eebbe wuxuu ballanqaaday inuu ina maqlo. “Waydiista oo waa laydin siin doonaa; doon doona oo waad heli doontaan; garaaca oo waa laydinka furi doonaa; waayo, mid kasta oo waydiista waa la siiyaa, kii doonaana waa helaa, kii garaacana waa laga furi doonaa” (Matayos7:7-8) Eag Sabuurradii 145:18-19; Sabuurradii 50:15.

Dhibaatadeenna iyo baahideenna iyo tan deriskeennu waxay inagu xanbaartaa inaan tukanno. Inaan dhibkeenna Eebbe u sheegannaa ma ahan daciifnimo. Eeg Ishacyaah 26:16; Luukos 18:13. Sidoo kale waa inaan Eebbe ugu mahadnaqno waxa uu inoo sameeyay markaan u tukanayno iyo waliba marka aynaan u tukanba. Maadaama uu ina samato bixiyay, Eebbe wuxuu inaga rabaa inaan ammaanno Isaga. Eeg Luukos 17:15-18.

WAXA AYNU KU WAYDIISANAYNO TUKASHADA

Tukashada waxaynu ku waydiisan karnaa wax kasta oo saameeya ammaanta Eebbe iyo inaga iyo dariskeenna samaanteenna, kuwaas oo ah kuwo xagga ruuxa iyo kuwo baahideenna jidhahaaneed. Eeg Markos 11:24; Filiboy 4:6. Haddii aan rabno in tukasheenna la inooga jawaabo, waa in ay noqoto mid waafaqsan doonista Eebbe. “Oo tanu waa kalsoonaanta aynu isaga u qabno, taas oo ah haddaynu wax uun doonistiisa ku barino, Isagu wuu ina maqlaa.” (1Yooxanaa 5:14)

Marka aynu u tukanayno barakooyin xagga ruuxa ah, kuwaas oo daruuri u ah badbaadadeenna iyo inaan ku noolaanno nolol Masiixinimo, waxaan u baryaynaa si aan shuruud lahayn, ama innaga oo aan waxba reeban, sababta oo ah baryada noocaas ahu mar walba waa mid waafaqsan doonista Eebbe.

Marka aynu u tukanayno waxyaabo cayiman oo xagga dunida ah, oo Eebbe uusan si gaar ah inoogu ballanqaadin, waa inaan taas u dayno doonista iyo xigmadda Eebbe, sidaa darteedna waxaan arimahaas u tukanaynaa inagoo raacinayna shuruud, shuruudda oo ah in waxaasi uu inoo wanaagsan yahay innaga; in waxaasi uu ahaado sida doonista Ilaah tahay. Eeg Luukos 11: 13; Luukos 22:42.

SIDEE BAAN U TUKANAYNAA?

Waxaan tukanaynaa innagoo si adag u aaminsan Masiix inuu yahay kafaaragudkeenna, oo kalsooni ku qabna in isaga aawadii tukashadeenna looga jawaabi doono. Tani waxay u baahan tahay ficil laga fiirsaday, oo daacad ah; waa inaan ka fikirno waxa aan leenahay,oo waa inuu dhab inaga yahay waxa aan adhanaynaa. Waa inaan ku tukanno qalbi toobadkeen ah, innagoo “gacmo qudduus ah kor u qaadayna, oo aan cadho iyo muran lahayn.”

(1Timoteyos 2:8) Waa in aynaan yeelin in shaki uu sahwiyo tukashadeenna "laakiinse rumaysad ha ku baryo, isagoo shakiyaa wuxuu la mid yahay hirka badda oo dabayshu kaxayso oo rogrogto. Ninkaasu yuusan u malayn inuu Rabbiga wax ka heli doono." (Yacquub 1:6-7) Waa inaan si kalsooni leh Ilaah u abbaarno, waayo isaga ayaa inoo ballanqaaday inuu ina maqli. "Wax kasta oo aad tukasho ku baridaan idinkoo rumaysan waad heli doontaan." (Matayos 27:22). Eeg Yooxanaa 16:23.

TUKASHADA SUUBBAN WAA LA AQBALAA

Eebbe wuu aqbalaa oo ka jawaabaa tukasho kasta oo suubban, laakiinse wuxuu uga jawaabaa habkiisa iyo wakhtiga uu doono. Tukashadeenna waxaa suurtowda inaan mar kasta looga jawaabin sida aan u barino ama aan filayno, laakiin waxaa la hubaa in looga jawaabi sida inoo roon innaga. Tukashadii Rasuul Bawlos waxaa looga jawaabay sidii ugu wanaagsanayd ee danta isaga u ahayd. Eeg 2 Korintos 12:8-9. Ciise isla markiiba kama uusan jawaabin codsigii naagtii reer Kancaan (Sirofoneshiya), laakiin wuu u gargaaray. Eeg Matayos 15:22-28. Markaasaan u malaynaa in "wakhtigaas yar" uu Eebbe ina dayriyay oo uu "wajigiisii inaga qariyay" inaga, laakiin naxariis aan dhammaanayn ayuu ina siin doonaa innaga. (Ishacyaah 54:7-8) Sidaa darteed, waa in aynaan qalbijabin marka tukashadeenna aan dhakhso looga jawaabin, laakiin waa inaan sii wadno tukashada innagoo ku kalsoon, oo "tukashada wadideeda ku sii adkaysta" (Rooma 12:12); oo marka la gaadho wakhtigiisa, Eebbe wuu ka jawaabi tukashadeenna. Daahinta Eebbe ma ahan diidmo. Jawaabtiisu way ka duwanaan kartaa waxa aan maskaxda ku hayno, oo sida uu wakhtiga u nidaamsadaana wuu khilaafsanaan karaa keenna. Si kastaba ha ahaatee, Eebbe wuu ka Jawaabaa tukasho kasta oo suubban.

CIDDEEN U TUKANAYNAA

"Waxaan u tukanaynaa nafteenna iyo dhammaan dadka kale, xattaa kuwa cadowgeenna ah. "Sidaa daraaddeed ugu horraysta waxaan kugu waaninayaa inaad Ilaah u baridid, oo aad u tukatid, oo aad u ducaysid, oo aad ugu mahadnaqdid dadka oo dhan" (1Timotiyos 2:1). "Ilaah u barya kuwa idin caaya oo idin silciya." (Matayos18:13) Ibraahim wuxuu u tukaday magaaladii Sodom (Billowgii 18:23-32). Naagtii reer (Kancaan) Sirofoneshiya waxay u tukatay gabadheedii (Matayos 15: 22-28). Ciise wuxuu u tukaday cadowgiisii (Luukos 23:34); sidoo kale ayuu yeelay Istefanso. (Falimaha Rasuullada 7:60).

Ma ahan inaan u tukanno kuwii dhintay naftooda, maadaama uusan Eebbe inagu amrin middaas, oo uusan ballanqaadin inuu aqbali tukashadaas.

Tan kale, gebi ahaanba tukashada dadka dhintay loo tukado waxba tari mayso, sababta oo ah dhimashada kadib waxaa jira xukunka. Eeg Cibraaniyada 9:27.

KAALMADEENNA QARSOON

Waa asxaan inaan hello saaxiibbo innaga darteen tukasho u qushuuca oo Eebbe inoo barya. Muuse wuxuu u tukaday reer banu Israa'iil, oo Eebbe dembi ka galay. Marka aan fiirinno natiijadii tukashadii loo tukaday Israa'iil, waxaan arkaynaa awood aad u weyn oo ergayn. Cadhadii Ilaahna way ka baaqatay.

Innagu ma ogaan karno tukashada ergaynta ah ee saaxiibadeen inta ay barako inoo keentay ama ay inaga leexisay ciqaab iyo cadho. Ma jiro waajibaad kalgacal oo ka karaamo badan kan in aan u tukanno kuwa aan jecel nahay. Gaar ahaanna, haddaan u tukanno markay dembi falaan, in ay ka toobadkeenaan oo loo dembidhaafo. In aynaan iyaga Eebbe ugu ergoon waxay ka dhigan tahay inaan xidhnay jid weyn oo jacay iyo gargaar oo muhiim ah. Waa in aynaan marna illoobin deeqda weyn ee aan dadka walaalaheen ah ku siin karno inaan Eebbe iyaga dartood ula hadalno. Tukashadu, waa kaalmo xoog leh oo qarsoon.

GOOBAHA TUKASHADA

Tukashada ma ahan in lagu xidho dhisme khaas ah ama meelo loo haysto in ay qudduusan yihiin. Meel qudduusnaanteedu tukashadeenna ku kordhin mayso qiime ama xoog. Waa inaan ku tukanno meel kasta (1Timoteyos 2;8), gaar ahaan meel gaar inoo ah, taasi waa in aysan cidi inala joogin (Matayos 6:6). Masiix sida badan dadka wuu ka tegi jiray si uu kaligii Eebbe ugu tukado. (Luukos 5:16) Sidoo kale, waa inaan qoyska ku dhex tukanno, wakhtiyada cuntada, wakhtiyada cibaadada iyo cibaadaysiga dadweynaha. "Rabbigaan ku ammaani doonaa shirarka dhexdooda." (Sabuurradii 26:12) Eeg Falimaha Rasuullada 1:14; Falimaha Rasuullada 2:42.

Dhanka galbeed ee macbudka Yeruusaalem waxaa ku yaalla dhisme caan ah oo taariikhi ah oo dhererkiisu yahay 156 cagood, jooggiisuna yahay 59 cagood, oo loo yaqaanno meesha Baroordiiqda Yuhuudda. Galab kasta oo jimce ah, afarta galabnimo, waxaa halkaas isugu soo baxa dad badan oo Yuhuud ah oo, iyagoo ilmaynaya, ayay si qiiro leh ugu celceliyaan Sabuurka 79 iyo Baroorashadii Yeremyaah, oo waxay u tukadaan dibudhiska macbudka. Waa muuqaal ku taabanaya markaad aragto iyagoo ku tiirsan derbiga duqoobay, oo dhunkanaya, oo dhagaxa salaaxaya, mararka qaarna laba dhagax oo duqoobay dhexdooda ku riixaya gabal waraaq ah oo ay ku qoran yihiin dhaaro iyo sharadyo. Caadadaasi waxay si aan kala go' lahayn u soo jirtay qarniyo badan. Dadkaasu meeshoodii tukashada waxay siiyeen muhiimad gaar

ah, taas oo qudheedu ka soo horjeedda Qorniinka. Hase yeeshee, tan ugu daranu waa xaqiiqada ah inaanay weli oggolaan in Masiix uu yahay kan dembiyada furta.

QAABKA IYO WAKHTIYADA TUKASHADA

Kitaabka Qudduusku inooma sheegin qaab gaar ah oo loo adeegsan tukashada. Waayadii hore waxaa caado ahayd in gacmaha xagga samada loo taago. Sida badan gacmaha waan laabannaa oo madaxana foorarinnaa, ama waan jilbo joogsannaa, si aan u muujinno inaan raalli ka nahay innagoo is hoosaysiinayna oo aan u qalmin wax kasta oo Rabbiga wanaagsanu uu inoo garto inuu ina siiyo. Ma jirto meel uu Qorniinku inoo xadaynayo wakhtiyo tukasho. Marka uu Qorniinku leeyahay, "U tukada si aan kala joojin lahayn" (1 Tesaloniika 5:17), wuxuu ula jeedaan in mar kasta qalbigeenna ay ku jirto tukasho. Way fiican tahay in la caadaysto oo la yeesho wakhtiyo cayiman oo tukasho. Inaan tukanno marka aan toosno aroortii, marka aan seexanayno habeenkii, marka aan cuntada cunayno, marka aan go'aan ka gaadhayno xaalad adag, iwm., waa caado wanaagsan. Tukashadu waa in ay noqoto furaha maalintii iyo qufulka habeenkii.

QIIMAHA IYO AWOODDA TUKASHADA

Dadka qaar baa yidhaahda, qiimaha tukashadu waa mid uun ku kooban cilmi-nafsi ahaan oo waxay ka jirtaa oo kaliya maskaxda qofka tukanaya, iyadoo ka dhigaysa in uu dareemo in Ilaah u gargaari isaga. Hadda waa run in tukashadu ay ku leedahay saamayntaasi dhiirigelineed qalbiyadeenna mushkiladaysan. Laakiin sababta taasi keentay waa iyadoo Eebbe uu inoo ballanqaaday inuu tukashadeenna maqlayo. Eebbe "kuwa isaga ka cabsada waxay doonayaanba wuu siin doonaa, oo waliba qayladooda wuu maqli doonaa, wuuna badbaadin doonaa iyaga." (Sabuurradii 145:19) Sababtaas awgeedna "Nin xaq ah baryadiisa shaqaysa wax badan bay kartaa." (Yacquub 5:16). Tukashadu uma shaqayso sida daroogada obiyamka, taasoo aan wax kale tarayn in ay ka dejiso dhibaatada qalbiga qofka tukanaya mooyaane. Eebbe si ficil ah ayuu uga jawaabaa tukashada. Tukashada waxaan ugu qayshannaa Eebbaha nool, oo awooda, rabana inuu inoo gargaaro.

Tukashadu inooma qiilbixiso Eebbe hortiisa, maadaama ay tahay qayb ka mid ah nolosha qudduusan ee Masiixiyiinta. Tukasho waa shuqul aan samayno; oo ma jiro shuqul intaan samayno inoo qiilbixin kara Eebbe hortiisa. Waa koritaan ka yimaadda Masiixinimadeenna. Tukashadu waa ficil ay si xor ah oo farxad leh Masiixiyiintu ugu muujiyaan xidhiidhka ay la leeyihiin Eebbe. Tukashada waxba kagama shaqaysanno ama kagama kasbanno Eebbe. Tukashadu ma aha ilo lagu helo nimcada. Tukashadu waa asxaan barakaysan

oo Masiixiyiintu ay kula xidhiidhaan Eebbe. Waxaan isaseejinaynaa barakada Eebbe haddaan ka tagno asxaankaas la ina siiyay. "Mana lihidin, waayo, ma aad waydiisataan." (Yacquub 4:2) Haddii aan buuxinno shuruudaha tukasho ee uu Eebbe ina faray, waxaan Eebbe ka helaynaa jawaabta tukashadeenna.

TUKASHADII RABBIGA

Tukasho oo idil tan ugu wanaagsanu waa tukashadii Rabbiga oo uu ina baray Rabbiga qudhiisu (Matayos 6:9-13; Luukos 11:2-4). Tukashadan waxaa loo qaybin karaa saddex qaybood oo kala ah; hordhaca, toddobada baryo (tukasho) iyo gabagabada.

"*Aabbaheenna jannada ku jirow*." Tan waxaa loogu yeedhaa "albaabka dahabka ah ee tukashada." Innagoo ah sida caruurtiisa waa inaan Eebbe u hortagno si sahlan, oo leh kalsoonida caruurta oo kale, iimaan aan shaki lahayn, iyo hamuun aan u qabno jacaylkiisa. Aabbaheenna samada ku jiraa caruurtiisa u diidi mahayo wax leh wanaag dhab ah. Isaga awoodiisu xad ma laha, oo jacaylka uu inoo qabaana waa mid joogto ah. Eeg 1Yooxanaa 3:1; Efesos 3:20; Luukos 11:13.

"*Magacaagu qudduus ha ahaado*." "Qudduusnaan" macnaheedu waa sharfanaan, mudnaan, karaamayn." Halkan waxaan Eebbe waydiisanaynaa in magaciisa looga qaddariyo si qudduus ah innaga dhexdeenna xagga baridda Eraygiisa oo nadiif ah iyo nolol Eebbe ka cabsi leh. Waxaan Eebbe waydiisanaynaa in uu inoo siiyo awood si aan ficil iyo dhaqan kasta, oo dabeecaddeenna iyo saamaynteenna oo dhan, aan u rumaysnaano uguna noolaanno sida ay ahaan lahayd caruurtiisu. Eeg Matayos 5:16. Ha noqoto inaan sidaa u noolaanno si kuwa kale ay u awoodaan inay ka gartaan fikirkeenna iyo nolosheenna in aan nahay dadka Eebbe!

"*Boqortooyadaadu ha timaaddo*." Tukashadan waxaan Eebbe ka baryaynaa inuu qalbigeenna ka dhex shaqeeyo, inuu si buuxda u maamulo nolosheenna, oo wakhtigeedana uu inoo qaado Boqortooyadiisa Ammaanta ee jannada dhexdeeda. Eeg Kolosay 2:6. Waxaa kaloo aan u tukanaynaa in Eebbe uu boqortooyadiisa fidiyo oo ku soo daro ragga iyo dumarka iyo caruurta meel kasta jooga. Taasu waa tan loogu tukanayo hawlgalka. Eeg 2 Tesaloniika 3:1; Matayos 9:38; Falimaha Rasuullada 4:24-30

"*Doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada looga yeelo*." Doonista Eebbe ee nimcada iyo wanaaggu waa mid la xidhiidha badbaadadeenna iyo badbaadada kuwa kale. Tan aawadeedna magaciisu waa inuu qudduusnaada. Tukashadanu waxay koobaysaa in wax kasta oo Eebbe uu rabo inuu inoo sameeyo ay u samaysmaan si waafaqsan ballanqaadkiisii, iyo in wax kasta oo Eebbe uu rabo inaan samayno ama aynaan samayn ay u

dhacaan si waafaqsan doonistiisa, iyo inaan u dulqaadanno wax kasta oo inta aan nool nahay inooga yimaadda xagga xigmadda iyo jacaylka Eebbe. Halkan waxaan ku waydisannay inaan badbaadno (1Timoteyos 2:4), inaan ka tagno nafjeclaysiga oo intaan saliibka qaadanno isaga raacno (Matayos 16:24). Naga dhig kuwo illaa xadkaas awood iyo adkaysi u leh in ay diidaan talada sharka iyo doonista ibliiska, adduunka iyo rabidda jidhkeennaba. Eeg 1 Butros 5:8:9; 1Yooxanaa 2:15-17; Sabuurradii 119:35; 2 Korintos 12:9.

"*Kibis maalin nagu filan, maanta nasii*." Ducadan waxaan Eebbe ku waydiisanaynaa inuu ina siiyo waxa aan u baahannahay xagga jidhka iyo waxyaalaha kale ee daruuriga ah iyo qalabka isticmaalka adduunkan. Eebbe wuxuu rabaa inaan ku qanacsan nahay inaan haysanno wax inoogu filan baahideenna maalin walba. Waa inaan baranno casharka ah inaan si joogto ah ugu tiirsanaano Eebbe, waayo, waxaan ku noolnahay waa maalinta. Eeg Sabuurradii 145:15; Matayos 6:33-34; Maahmaahyadii 30:7-9; 1Timoteyos 6:8.

"*Oo naga cafi dembiyadeenna sidaannu u cafinay kuwa nagu dembaaba*." Qaybta hore ee tukashadanu ma adka in lagu ducaysto, waayo, maalin kasta aad ayaan u dembaabnaa, oo waxaan aad ugu baahan nahay dembidhafka Eebbe, kaas oo uu diyaar ula yahay dhammaan intii waydiisata iyagoo aaminsan hawshii Ciise ee madaxfurashada. Eeg Luukos 18:13; Luukos 15:21; Sabuurradii 19:12. Laakiin qaybta labaad ee tukashadanu ma fududa, waayo, jidhkeenna sharka luhu waa mid cuqdad iyo xumaan u qaada kuwa inagu sameeya gefka. Haddii jacaylka Eebbe uusan ina hagayn; cid ma cafiyayno. Markaan aragno dembidhaafka uu inoo sameeyo Eebbe; waxaan si naxariis leh ugu dembidhaafaynaa deriskeenna. U dembidhaafiddeenna kuwa kale waa midho ka dhashay dembidhaafka uu Eebbe ina siiyo. Dareenkaasu waa inuusan marnaba inaga maqnaan. Sidaas awgeedna, waa inaan Eebbe waydiisanno inaan yeelanno dareen wax u dembidhaafa oo ku wajahan dhammaan kuwa inagu dembaaba, iyo in aynaan cuqdad yeelan. Tukashadan, barakada iyo waajibku waa kuwo isku xidhan oo aan kala hadhi karin. Eebbe wuxuu ula jeedaa, in haddii aynaan u dembidhaafin kuwa inagu dembaaba, ay taasu markhaati u tahay in aynaan si dhab ah ruux ahaan uga toobadkeenin dembiyadeenna. Sidaa darteedna Eebbe innagana inaga cafiyi maayo dembiyadeenna. Eeg Matayos 18:21-22; Markos 11:25-26; Luukos 6:36-37; Efesos 4:32. Si aan ducadan sawir uga bixinno, waxaan soo qaadanaynaa misaal uu Ciise ku hadlay, oo ku saabsanaa, shaqaale sharlow ah oo shaqaale kale u cafin waayay dayn yar oo uu ku lahaa, iyadoo isla markaana uu boqorku doonayay inuu shaqaalahaa sharlowga ah u cafiyo dayn aad u badan (Matayos 18: 23-35) Marka laga tago inaan ducadan Eebbe ku waydiisanayno dembidhaaf, waxaa kaloo ay ina xusuusinaysaa inaan u dembidhaafno dadka kale.

"*Oo jirrabaadda ha noo kaxayn*." Halkan waxaan Eebbe ku waydiisanaynaa inuu xoog ina siiyo, oo uu ina dhawro markasta oo uu inagu yimaaddo damaca sharka luhu. Tan waxaa ku jira codsiga ah inaan innagu dhankeenna si wanaagsan isu xukunno, si aan uga taxadarno inaan ku dhacno waxyaabaha dembiga, iyo inaan iska ilaalinno munaasabadaheeda. Ku qanacsanaada inaad aaddaan meeshii waajibku idiinka yeedho oo kaliya, haddii aan halkaas jirrabaad kala kulanno, Eebe ayaa inooga gargaari sharka haddii aan isaga si doonis adag ugu waydiisanno tukasho. "Midna yuu odhanin kolkii la jirrabo, xagga Ilaah baa layga jirrabay. Waayo, Ilaah laguma jirrabo shar, isaguna midna ma jirrabo. Mid kasta waxaa jirraba damaciisa sharka ah, isagoo la jiidanayo oo la sasabayo." (Yacquub 1:13-14) "Rabbigu waa aamin; wuuna idin xoogayn doonaa, sharkana wuu idinka ilaalin doonaa. (2Tesaloniika 3:3) Eeg 1 Korintos 10:13; Efesos 6:13.

"*Laakiin sharka naga du*." Ducadan waxaan Eebbe ka baryaynaa inuu inaga dhawro dhammaan sharka kan jidhka iyo kan nafta iyo in uu wakhtigeeda jannada ina geeyo. Waxaan ka baryaynaa Eebbe geeri barakaysan, taas oo inaga samatobixin dhammaan sharka dadku uu ku dhaco dembiyadooda aawadood. Halkan waxaa loo tukanayaa in la gaadho ujeedada ugu weyn ee nolosha. Nolosha adduunku waa uun habeen dhax. Hoyga Masiixiyiintu waa jannada. Taas ayaynu raadinaynaa, oo damcaynaa, oo u tukanaynaa. "Oo Rabbigu wuu iga samatobixin doonaa shuqul kasta oo shar ah, oo wuxuu igu nabadgelin doonaa boqortooyadiisa jannada ah" (2 Timoteyos 4:18). "Anigu labada dhexdoodaan ku dhibaatoonayaa, oo waxaan jeclahay inaan tago oo Masiixa la joogo; waayo taasu aad bay iigu roon tahay." (Filiboy 1:23)

Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin. Gabagabadan waxaa lagu sheegay sababta aan Eebbe u waydiisanayno toddobada duco. Gargaarka dadku wuu ina khasaariyaa, laakiin Aabbaheenna jannadu waa boqorka waligii jira ee awoodda u leh inuu inooga jawaabo tukashadeenna, oo ay tahay kaligiis in la siiyo ammaanta iyo sharafta oo idil. "Aamiin" macnaheedu waa "sidaasay ahaani" ama "sidaas ha ahaato;" waxayna muujinaysaa sida adag ee aan u hubno Eebbe in uu aqbali ducooyinkaas.

CUTUBKA 11
MUUSIGGA NOLOSHA

Mar uu Sayid Michael Costa soo bandhigayay muusig ay u tumayeen muusigiistayaa badan, oo ay yeedhayeen boqollaal codad ahu, ayaa waxaa dhacday ninkii u afuufayay foodhida yar, oo meel gees fog ah fadhiyay, in uu is yidhi, "waxan oo shanqadh ah cidina taydan yar ka dhex maqli mayso," dabadeedna wuu iska daayay qalabkii uu afuufayay. Isla markiiba kii hagayay kooxdu wuu joojiyay shaqadii, oo gacmaha wadhfiyay, oo wax walbana way istaageen, oo markaasuu ku dhawaaqay, "Aaway foodhidii yarayd?" Dhegtii feejignayd maadaama aysan maqal codkii foodhida yar, muusiggii oo idil wuxuu u xumaaday aawadeed.

Kuwa raacay Ciise waxay ku leeyihiin qayb ay ka ciyaaraan muusigga nolosha. Intee in le'eg yaynu dareennaa, sida ninkaas foodhida yar afuufayay oo kale, innagoo is leh dadaalkeenna yar iyo tabarteennu waxba tari mahayaan, oo adeeggeenna la'aantiis ayay si wanaagsan u wadan karaan hawlahooda qoyska, bulshada iyo kaniisaddu. Markaana aan iska dayno inaan doorkeennii ciyaarno. Haddana waxaa jira mid dhagaysanaya. Illaa uu isagu inaga nasiyo hawsheenna, waxaan leenahay door aan ka qaadanno, oo isaguna uu waliba xiisaynayo.

Waxaa suurtowda in uusan ina saarayn xil wayn. Xilka aan haynaa wuxuu u muuqan karaa mid qiimo yar leh marka loo eego baaxadda nolosha Masiixiyada. Haddana dhammaan muusigga caalamka Eebbe waxaa macaaneeya oo hodan ka dhiga waa codadka wada jira ee ka imanaya shakhsiyaadka, isagoo mid kastaa isu arko in aanu muhiim ahayn, balse uu qiimo weyn leeyahay marka uu la safto dadka walaalihiisa ah.

Awooddeennu ha yaraato ama ha weynaatee, waxa miihiimka ahu waa inaan ugu adeegsanno inaan ku ammaanno Badbaadiyaheenna inta aan socotada ku joogno adduunkan. Natiijaduna waa nolol Eebbe ka raalli noqdo. Sida Sabuurkan aynu dhahno: "Qaynuunadaadu waxay ii ahaayeen heeso (habka aan u noolnahay) marki aan ku jiray gurigii aan socotada ku ahaa (intaan adduunka ku noolaa)" (Sabuurradii 119:54).

MASIIXIYIINTU WAA ADEEGEYAASHA EEBBE

Erayga “adeege” wuxuu si fiican u muujinayaa meesha uu Eebbe inagu meeleeyay xidhiidhka aan isaga la leenahay. Adeege waa mid wax lagu ammaaneeyay inuu xafido oo isticmaalo. Isagu ma lahan waxa lagu ammaaneeyay. Wuxuu u shaqeeyo gebi ahaanba waa danaha madaxdiisa. Adeeguhu waa mid xil saaran yahay oo madaxdiisa la wadaagga siduu ujeedooyinkiisa u fulin lahaa. Eebbe wuxuu rabaa inaan nolosheenna oo dhan u maamullo si waafaqsan doonistiisa iyo si heshiis la ah ruuxa iyo rabitaannada Masiixa. “Fikirkaas oo Ciise Masiix ku jiray; idinkana ha idinku jiro” (Filiboy 2:5). Adeegenimadu waa inaan nolosheenna oo dhan ku hawlanaano Eebbe dartii. Innagu isma lihin. Waxaa ina leh Eebbe.

Maadaama innaga Masiixiyiinta ahu aynu nahay qalabka Eebbe iyo caruurta Aabbaha jannada ku jira, Masiix wuxuu inagu yidhi. “Idinku waxaad tihiin cusbadii dhulka….Idinku waxaad tihiin iftiinkii dunida” (Matayos 5:13-14). Maadaama aan ku aqballay qalbigeenna oo dhan Sayid Ciise Masiix, waxaan Rasuul Bawlos la odhanaynaa: “Aniga waxaa nolosha ii ah Masiixa” (Filiboy 1:21). “Midkeenna naftiisa uma noola, midkeenna naftiisa uma dhinto. Waayo haddii aynu noolnahay, Rabbigaynu u nool nahay; oo haddii aynu dhimanana Rabbigaynu u dhimanynaa, sidaas daraaddeed haddii aynu nool nahay iyo haddii aynu dhimanoba, Rabbigaa ina leh” (Rooma 14: 7-8). Wax kastaba waa inaan u noolaano Rabbiga. “Haddaba haddaad wax cuntaan ama wax cabtaan, ama wax kasta aad samaysaan, dhammaan u wada sameeya Ilaah ammaantiisa” (1Korintos 10:31).

Addeegenimada Masiixigu waxay si wanaagsan u qeexaysaa nolosha Maxiixiga. Masiixiyiinta waxaa “Ka farxiya sharxiga Rabbiga” (Sabuurradii 1: 2). Maadaama ay jecel yihiin Eebbe, waxay doonaan inay sameeyaan wax Eebbe ka raalli noqdo. “Ilaahow, waxaan jeclahay inaan sameeyo doonistaada, haa, oo sharcigaagu wuxuu ku dhex jiraa qalbigayga” (Sabuurradii 40:8). Adeegenimada waxaa si sax ah loogu qeexay in ay tahay “dhaqanka diinta Masiixiyada.”

U ADEEGIDDA BULSHADA

Eebbe wuxuu qofka ka dhigay uun bulshaawi ah. Midkeenba kan kale wuxuu u yahay muhiim. Isku tiirsanaanteennu waxay la timid masuuliyado waaweyn. Eebbe wuu aqoonsaday masuuliyaddaasi oo sidaas darteed wuxuu ina faray amarkan: “U jeclaada deriskiinna sida naftiinna.”

Mid kasta oo inaga mid ah Eebbe wuxuu ugu talogalay meel cayiman iyo kaalintiisa saamayn. Qaybta labaad ee sharciga ayaa si faahfaahsan inoogu sheegaysa sidaan u muujinayno jacaylka deriskeenna. Rasuul Bawlos

ayaa ka hadlay adeegenimadeenna bulshada dhexdeeda. “Waxaa waajib la iigu leeyahay inaan wacdiyo Giriigga iyo Barbariyiinta, kuwa caqliga leh iyo kuwa garaadka la’ba” (Rooma 1: 14). Rooma 12 waxaa si qeexan oo cayiman tilmaan la inooga siiyay sidaan ula macaamilayno dadka kale. “Waxaynu isaga ka haysannaa qaynuunka, kaas oo ah, kii Ilaah jecel, walaalkiina ha jeclaado” (1 Yooxanaa 4:21).

DHAWRAYAASHA WAKHTIGEENNA

Maadaama aan nahay kuwo uu uumay Eebbe oo uu madaxfurtay Sayid Ciise Masiix, waa inaan Eebbe uga abaalcelinno sida aan u adeegsanno wakhtiga uu inoo qoondeeyay inta aan dunida joogno. Masiix waa Sayidka wakhtigeenna. Wakhtiga adduunku wuxuu hordhac u yahay aakhirada. Wakhtiga nolosheennu waa wakhti tijaabo ah, oo ay tahay inaan baranno inaan aqoonsanno Eebbe oo aan u noolaanno si waafaqsan doonistiisa. Masiixiyiintu waxay Eebbe ugu tukadaan: “Haddaba na bar inaanu tirinno maalmaha cimrigayaga, si aannu u helno qalbi xigmad leh.” (Sabuurradii 90:12) Wakhtigeenna oo idilu waa wakhti abuur. Waxaan si joogto ah u abuuraynaa fikirkeenna, hadalkeenna iyo ficilladeenna. “Kii jidhkiisa wax ku beertaa, wuxuu jidhka ka goosan doonaa qudhun; laakiin kii ruuxa wax ku beertaa, wuxuu ruuxa ka goosan doonaa nolol waligeed ah” (Galatiya 6:8) “Kii wax yar beeraa, wax yar buu goostaa; kii wax badan beeraana, wax badan buu goostaa” (2 Korintos 9:6). Nooca wax abuuriddeenna ayaa go’aamiya habka aan u adeegsanno wakhtigeenna; waxayna muujisaa inaan buuxinnay ujeedada Eebbe iyo in kale.

Wakhtigeenna inaan sida ugu wanaagsan u adeegsannaa waxay u baahan tahay qorshe wanaagsan. Qorshe wanaagsan wuxuu u baahan yahay si wanaagsan in la isugu dheellitiro waajibaadyada kala duwan ee nolosha; kuwaas oo dhammaantood u baahan in la siiyo meeshooda, mudnaantooda iyo dadaalkooda. Waa in si sax ah la isugu miisaamo waajibaadka ruuxiga ah iyo kuweenna kale ee dunida. Waa inuu jiro wakhti aan Eebbe caabudno, wakhti aan ku khalaawayno wanaagga Eebbe, wakhti tukasho, wakhtiaan ku khalaawayno wanaagga Eebbe, wakhti tukasho, wakhti adeegga kaniisadda, wakhti aan si shakhsi ah ugu shaqayno kaniisadda. “Horta doondoona boqortooyada Ilaah iyo xaqnimadiisa, oo waxaas oo dhan waa laydiinku dari doonaa” (Matayos 6: 33). Waa inuu jiro wakhti aan raadcayno baahida dunida iyo xirfadaheeda iyo waajibaadka iyaga la xidhiidha. Eeg Billowgii 2:15; 2 Tesaloniika 3:10. Waa inuu jiro wakhti nasiino iyo nafis. Uma fiicna qaansada inay mar walba laabnaato. Waa lagu tacaddiyay wakhtiga haddii shumaca labada dhinacba laga shido. “Haddaba ka digtoonaada sidaad u socotaan, oo ha u soconina sida kuwo aan caqli lahayn, laakiinse u socda sida kuwo caqli leh. Wakhtiga ka faa’iidaysta, maxaa yeelay maalmuhu shar bay leeyihiin”

(Efesos 5:15-160). Ciise ayaa inagu canaantay: “Shaqeeya inta ay maalin tahay; waayo waxaa iman habeenka oo aan ninna shaqayn karin.”

XEERARKA XUKUMA HANTI HELIDDEENNA

Qofka waxaa loo abuuray hawl. Deeqda maskaxeed iyo jidheed ee yaabka leh ee la siiyay markii la uumay, waxaa ugu talagalay Eebbe. “Wajigaagoo dhididsan baad wax cuni doontaa, illaa aad dhulka ku noqotid” (Billowgii 3: 19). Qofka noloshiisa dabiiciga ah waxaa waajib ugu leh inuu mashquulo oo ka shaqeeyo horumarka naftiisa, Eebbe iyo dadka kale. Sidaas darted, waa inaan iska ilaalinno nafjeclaysiga, kaasoo ah damac adayg xun oo uu inagu dhaliyo rabitaankeennii hore ee aadaminimo. Rabitaankeennu waa inuu ahaado mid ka yimaadda xeerarka adeegenimo ee Masiixiyada.

Jacaylkii Masiix ina jeclaaday aawadii, waa inaan innaguna dareen jacayl iyo caddaalad ku muujinno meheradaheenna iyo shaqooyinkeenna, oo waa inaan hanti ku kasbanno si sharaf iyo sumcad leh. Waa inaan qabanno hawlo faa’iido leh, waxtarna u leh bulshada, oo aan ku xisaabtanno rabitaankeenka iyo hibooyinkeenna, kuwaas oo uu Eebbe xigmaddiisa inagu siiyay.

Kitaabka Qudduuska kuma degsana xeerar cayimaya inta aan hanti yeelanayno. Ciise marnaba ma uusan saadin fakhri, mana uusan canbaarayn taajirnimada. Hase yeeshee, wuxuu digniin ka bixiyay khatarta ay leedahay taajirnimadu, maadaama uu ogaa in “jeclaysiga lacagtu ay tahay aasaaska sharka oo idil.” Waa inaan ku qanacno inaan haysanno wax inoogu filan baahideenna shakhsi inaan ku daboollo iyo fursadaheenna xagga adeegga. Laba wax waa inaan xusuusanno. Kan hore waa in shakhsigu uu ka muhiimsan yahay hantida; waan yeelan karnaa hanti, laakiin waa inaynaan oggolaan in hantidu ay ina yeelato. Kan labaadna, waa in waxa la yidhaahdo xuquuqda lahaanshaha hantidu uu yahay xigto oo kaliya; innaguna ma nihin kuwa rasmiga u leh. Xuquuqda uu inagu leeyahay Eebbe iyo tan dadka waa in la tixgeliyo oo lagu tashado. Eebbe wuxuu rabaa inuu marka hore ogaado sidaan ku hellay lacagta iyo hantida ka hor inta uusan ina waydiin sidaan u adeegsanayno. “Qof goortuu maal badnaado, noloshiisu kama timaaddo maalkuu leeyahay” (Luukos 12:15).

XEERAR XUKUMA ISTICMAALKA HANTIDEENNA

Dhab ahaantii way ka fududahay inaan hello lacag oo yeelanno maal, in maalka aan hellay aan u adeegsanno si xigmad leh. Kitaabka Qudduusku wuxuu leeyahay: “Rabbiga ku murway maalkaaga iyo midhaha ugu horeeya waxa kuu kordha oo dhan” (Maahmaahyadii 3:9). Isticmaalka maalkeenna waxaan ugu muujinnaa shakhsiyaddeenna, aragtideenna, nafta nolosheenna, si

la mid ah sida aan ugu muujinno hadalkeenna iyo ficilladeenna. Sida aan u muujinaa waxay noqon kartaa sida wanaagga ama sida xumaanta. Way hadashaa lacagtu; innaga ayayna inaga hadashaa. Qofka Masiixiga ahu wuxuu hantidiisa u adeegsadaa si muujinaysa inuu rumaysad helay. Wuxuuna aaminsan yahay in "sida mid waluba u helay hadiyad, idinku isu adeega, sida wakiillo wanaagsan oo helay nimcada Ilaah ee badan ee kala cayncaynka ah" (1Butros 4:10). Jacaylka Eebbe iyo dadku waa sida kaliya ee xaqa ah ee inagu xanbaari karta inaan si wanaagsan u maamullo lacagteenna iyo hantideenna. Eeg 2 Korintos 13:3. Si toos ah ama si dadbanba wax kasta waa inaan u adeegsanno sharfidda Eebbe.

TODDOBADA BAAHI EE NOLOSHA UGU WAAWEYN

Toddobada wax ee loo baahan yahay nolosha ee ugu muhiimsanu waa hoy, cunto, dhar, waxbarasho, meherad, dawlad, tamashle, iyo diinta. Toddobadaas baahiyood ayuu dhab ahaantii ku meeraystaa dhaqdhaqaaqa jinsiga aadanuhu. Baahiyahaa waxaaa loo kala saari karaa inay yihiin mid jidheed, mid maskaxeed iyo mid ruuxeed.

Inta ama illaa xadka aan hantideenna u adeegsanayno inaan qancinno toddobadaas baahiyoodi meelna kagama qorna Kitaabka Qudduuska. Arrimahan baahida loo qabo iyo hantida loo huro dadku way ku kala duwan yihiin. Waxayn ku xidhan tahay culayska dalabka. Waa inaan had iyo goor si wanaagsan u qiimayno, waana in aynaan aggolaan waxyaabaha raaxaysiga ah in loo tixgeliyo sidii daruuri oo kale.

Diinteennu waxay u qalantaa in la siiyo mudnaanta koowaad, sababta oo ah waa aasaaska baahideenna nolosha oo dhan. Eebbe ayaana sidaa inoogu sheegay sharciga, maadaama Amarka Koowaad uu aasaas u yahay amarada kale oo dhan. Qayb ka mid ah hantida qofka Masiixiga ahu waa in ay noqoto mid si toos ah loogu maamulo danaha diintiisa. Tanna waxaa ka mid ah adeegsiga waxa uu hibada u leeyahay, maadaama ay suurtowdo in ay faa'iido weyn leedahay. Waa inaan u adeegsanno kaniisadda danteenna aawadeed iyo inay barakadeedu saamayso kuwo kale oo aan u keennay. Sidaa aawadeed, waa inuu jiro dadaal joogto ah oo aan u gallo sidaan nolosheenna Masiixinimo u gaadhsiin lahayn heer ka sii sarreeya oo ka wanaagsan kan aan hadda ku sugan nahay.

SIDAAN RABNO IN AAN AHAANNO

Sida badan sababta aynu u kasbanno waxa yaru waa innaga oo aan si wanaagsan u abaabulin xirfaddeenna iyo hibadeenna. In aynaan gaadhin sida aan rabno, oo ay sababaan doonista, tabarta iyo iskudayga oo inagu yaru, waa tan sida badan keenta nolol aan midho dhalin. Sulaymaan ayaa inagu

guubaabiyay: “Wax alla wixii gacantaadu hesho inay samayso, xooggaaga oo dhan ku samee” (Wacdiyaha 9:10).

Mid ka mid ah shaybaarada magaalada Washington waxaa ku yaalla muraayad qoraxeed aad u weyn oo ballaceedu dhan yahay saddex cagood oo gudub ah. Waxayna ururisaa ilayska qoraxda ee ku dhaca dusheeda fidsan, oo waxay u dudaa ilayskaas hal bar oo dhawr cagood ka hoosaysa. Bartaas waxaa ka dhasha kulayl aad u badan, oo aan la cabbiri karin. Waxaasina waxaa sameeyay waa muraayad caadi ah oo saddex cagood ah oo lagu wajahay hal bar oo qudha. Hadduu kala firidhsan yahay way adkaan lahay in la dareemo fallaadhahaas qorraxdu, haddii la ururiyayse waxay dhalaaliyeen madoorsoome.

Wax kasta oo aan qabanayno waa inaan ku billowno magaca Rabbiga. Marka aan sidaa yeello oo tabarteenna aan isugu gayno hawsha gacanteenna ku jirta, waxaan samayn karnaa waxyaabo lala yaabo. Eebbe wuu barakayn dadaalkeenna haddii uu dadaal dhab ah yahay.

Sidaan rabno in aan ahaanno, tabari inagaga lumi mayso, laakiin, dhanka kale, waxaan dhab ahaantii helaynaa tabar. Run ahaan, waynu la yaabi doonaa waxa aan samayn karno, haddii aan dadaal dhab ah la nimaadno. Natiijadu ma noqon doonto guul in aan wax ka gaadhno oo kaliya, laakiin waxaa kaloon helaynaa isku-kalsooni iyo calool-adayg aan ku wajahno dhibaatooyinka iyo waajibaadka dheeriga ah ee nolosha.

EEBBE WUU ABAALMARIYAA ADEEGEYAASHA AAMINKA AH

Nolosha aaminka ah ee Masiixi adeege ahu, ma noqoto abaal la’aan. Aamin marka loo noqdo Eebbe, qof walba inta ay kartidiisu tahay, waan helaynaa abaalgudka nolosha adduunkan aan ugu adeegayno isaga, oo nolosha dambena waxaan nimcada Eebbe aawadeed dhaxlaynaa boqortooyada la inoogu diyaariyay jannada.

CUTUBKA 12
SHARCIGU WAA HAGAHA TASRIFKA MASIIXIGA

Damaca Masiixigu waa inuu sameeyo wax Eebbe raalli ka yahay. Wuu bartay oo ogaaday oo u bogay jacaylka Eebbe, oo sidaa awgeedna waxaa qalbigiisa ka buuxa jacaylka iyo xushmaynta Eebbe. "Waynu jecel nahay isaga, waayo, isagaa hore inoo jeclaaday" (1Yooxanaa 4:19). Isbeddelkaas qalbiga, oo sidoo kale la yidhaahdo "addeecidda cusub," wuxuu isu muujin doonaa isbeddel xagga tasrifka nolosha ah. Rumaysadka ku yimid Ruuxa Qudduuska ayaa cusboonaysiiya qalbiga qofka si uu markan uga tago dembiga oo uu shuqul wanaagsan ugu sameeyo Eebbe hortiisa. "Kuwa Ciise Masiix waxay iskutallaabta ku qodbeen jidhka iyo kacsigiisa xaaraanta ah iyo damacyadiisa sharka ah" (Galatiya 5:24). Qofka Masiixiga ah iimaankiisa ayaa ka celiya jirrabidda iyo sharka ibliiska (1 Butros 5:9). Oo inkastoo uu siyaabo badan dembi ugu dhaco, haddana uma oggolaado in dembigu uu isaga u taliyo (Rooma 6:12). Wuxuuna muujin isbeddelka wanaagsan ee ku dhacay qalbigiisa. "Innagu waxaynu nahay wixii uu sameeyay, oo waxaa laynoogu uumay Ciise Masiix shuqullada wanaagsan aawadood oo Ilaah hore ugu diyaariyay inaynu ku soconno" (Efesos 2:10). Inaynu ahaanno kuwo u qiiraysan shuqullada wanaagsan waxay ka mid ahayd ujeedooyinkii uu Masiix inoo furtay (Tiitos 2: 14) oo uu Ruuxa Qudduusku inoo siiyay rumaysadka. Maadaama aynu nahay kuwii uu Rabbigu madaxfurtay waa inaan nolosheenna ugu hibayno u adeegidda Eebbe innagoo u noolaanayna sida xaqa ah iyo qudduusnimo. "Maxaa yeelay, doonista Ilaah waxaa weeyaan inaad qudduus ahaataan" (1 Tesaloniika 4:3). Inaan yeello si waafaqsan Eebbe amaradiisu waa doonistiisa iyo waliba innaga asxaankeenna.

Haddii aan rabno inaan farxad iyo nabad ku hello diinteenna Masiixiga, waa inaan isu aragno inaan nahay shaqaalaha beerta Rabbiga. Dhammaanteen waxaa la inoogu yeedhay Boqortooyada Eebbe inaan ka shaqaynno. Kii nimcada Eebbe aawadeed raba inuu raad ku reebo carrada wakhtiga, waa inuu gashado kabaha shaqada.

WAX UUN U WANAAGSANOW

Waxaa jirtay sheeko ku saabsan wadaad aad u jeclaa inuu muujiyo siduu u xiisaynayo Eebbe isagoo sawir ku muujinaya bogagga kitaabka

Muujintii. Aad bay maskaxdiisu u mashquushay oo wuxuu iloobay masaakiintii iyo kuwii jirranaa ee cudurka daacuunku silcinayay ee dilayay. Markuu ugu dambaystii soo gaadhay inuu sawiro (aslo) wajiga Rabbiga oo ku dhex jira ammaanta soo noqoshadiisa labaad, gacantiisii waxaa ka guuray xirfaddii wax sawiridda. Wuxuu ka yaabay sababta ay taasi ku dhacday, oo markuu dib u fekeray, wuxuu gartay in sababtu ay tahay isagoo dayacay waajibkii ka saarnaa inuu dadka kale u adeego.

Arrintaas uu ogaadayna waxay ku kalliftay inuu is hoosaysiiyo, oo wadaadkii wuxuuba dhex galay kuwii bukay iyo kuwii dhimanayay, si uu baahidooda ugu adeego. Wuxuuna shaqeeyay isagoon daalayn, illaa isagii uu ku dhaco cudurkii masiibada ahaayu. Markaasuu dib ugu soo noqday qolkiisii yaraa, inta uusan dhiman ka hor si uu u dhamaystiro shaqadiisii uu jeclaa. Wuxuu jilbaha u dhigtay inuu u tukado gargaarka Eebbe, bal eeg, markaasuu arkay sawirkii oo ay dhammaystirtay malaa'igu.

Taasi waa uun sheeko male'awaal ah, laakiinse casharka ay ina siinaysaa waa mid u qalma inaan aad uga fekerno. Wadaadku wuu sawiri waayay wajiga Rabbiga maadaama uu dayacay kuwii u baahnaa adeeggiisa. Marnaba wajiga Rabbigu si quruxsan ugu sawirmimaayo nafteenna inta aan dayacayno adeegga jacaylka ku dhisan. Ma aha inaan dad wanaagsan noqonno oo kaliya, laakiinse waa inaan muujinno dhanka wanaagsan ee adeegga Masiixinimo. "Midkiinba midka kale kalgacayl ha ugu adeego" (Galatiya 5: 13). Waxay u baahan tahay adeeg in la buuxiyo heerka uu Masiix inaga rabo in aan gaadhno. Waa in aynaan noqon kuwo wanaagsan oo kaliya; waase in aan wax u wanaagsanaano– oo u wanaagsanaanno adeegga dadka walaalaheen ah ee u baahan jacaylkeenna. Waana in aan had iyo goor xusuusnaano inaan taas u samaynayno Masiixa aawadii, oo aan ku samaynayno magaciisa.

WAXAA LA RABAA WAX KA WEYN WAXA MUUQDA

Waa inaan kala soocno shaqada dadka hortiisa wax wanaagsan u muuqata iyo shaqada Eebbe hortiisa wanaagsan. Eebbe sida badan ma aqbalo waxa ay dadku u arkaan wax ammaan mudan, oo dadkuna badanaa way iska indhotiraan waxa Eebbe hortisa ku wanaagsan ee uu ka raalli yahay. Wax badan oo adduunkan u muuqda in uu wanaagsan yahay, wanaaggiisu waa uun muuqaalka, oo Eebbe uma tixgeliyo wanaag. "Dadku wuxuu fiiriyaa muuqashada dusha, Rabbiguse qalbiguu fiiriyaa" (1 Samuu'eel 16: 7) Doonista wanaagsan ee qalbiga ayaa go'aamisa ficil, sida ay qabaan amarrada Eebbe, in uu yahay mid uu Eebbe ka raalli yahay iyo in kale.

LABADA WAXYAABOOD EE LAGU QIIMEEYO SHUQUL WANAAGSAN

Si shuqulku uu u noqdo mid wanaagsan Eebbe hortiisa, waa in shuqulku uu waafaqo sharciga Eebbe, oo uu ka yimaaddo jacaylka Masiixinimo. Waa sharciga Eebbe oo kaliya waxa lagu qiimeeyo shaqada wanaagsan. "Haddaba waa in aad dhawrtaan oo u samaysaan sida Rabbiga Ilaahiinna ahu idinku amray. Waa inaydaan u leexan xagga midiga iyo xagga bidixda toona" (Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:32). "Waxaa barakadaysan ninkii aan ku socon talada kuwa sharka leh, oo aan istaagin jidka dembiilayaasha. Oo aan ku fadhiisan kursiga kuwa wax quudhsada. Laakiinse waxaa isaga ka farxiya Sharciga Rabbiga, oo habeen iyo maalinba sharcigiisuu ka fikiraa. Oo wuxuu ahaan doonaa sida geed lagu beeray durdurada biyaha agtooda, oo midhihiisa dhala xilligooda" (Sabuurradii 1:1-3). Nolosha Masiixiga waa in aysan u talin wax mugdi ku jiraa ama waxa ay dadka kale sameeyaan, laakiin waa inuu u taliyo waxa Eebbe hortiisa ku saxanu. "Si aan micno lahayn ayay ii caabudaan, iyagoo dadka wax ku baraya amarada dadka" (Matayos 15: 9). Waxa labaad ee lagu qiimeeyo shaqo wanaagsanu waa in ay shaqadu ku timid jacaylka Eebbe. Shuqullo loo sameeyay si waafaqsan sharcigu ma ahan shuqullo wanaagsan haddii loo sameeyay cabsi iyadoo la isku khasbayo ama in la fuliyo amarada oo kaliya ama loo sameeyay cabsi laga qabo cadaab aawadeed ama damac ah in lagu helo abaalgud. Sadaqadii iyo tukashadii Faarisiintu ma aysan raalligalin Eebbe sababtoo ah waxay ahaayeen kuwo ay ku raadinayaan ammaan dhalanteed ah iyo xaqnimo aan jirin. Eeg Matayos 6:1-5. "Waxaa wax tara rumaysadka ku shaqeeya jacayl" (Galatiya 5:6), oo "Jacaylku waa oofinta sharciga" (Rooma 13:10). Eeg Matayos 22:36-40; 1Yooxanaa 5:3.

SHUQULLADA WANAAGSAN EE CAWAANTA

Maadaama dareenka haboon ee qalbigu uu ka qabo Eebbe uu yahay midka go'aansha tayada iyo mugga shaqo wanaagsan, suurto gal ma aha qofka aan Masiixiga ahaynu inuu sameeyo shuqul xagga ruuxa wanaagsan Eebbe hortiisa. Shuqullada wanaagsan ee cawaantu, ama kuwa aan Masiixiyiinta ahaynu, waxay ku jiraan xagga xaqnimada dadka, ama dawladda. Dhinacaasna waxay ka mudan yihiin sharfid weyn, oo xaqnimada ay bulshada dhexdeeda ka sameeyaan aawadeed, Eebbe wuxuu kuwaas cawaamta ah nolosha dunidan kaga abaalmarin doonaa barako wakhti gaaban ah. Sharafta iyo qiimaha shuqullada wanaagsan ee kuwa aan Masiixiyiinta ahayn ee xagga bulshadu waa uun kuwo ku kooban boqortooyooyinka adduunka, oo xagga doonista Eebbana u jira inay ahaadaan sallaanka lagu dhisayo kaniisadda. Xaqnimada xagga bulshadu sidoo kale waa aasaaska wanaagga bulshada iyo dawladda (1 Timoteyos 2:1-2; Rooma 13:1-4). Laakiin qiimahooda xagga ruuxiga,

shuqullada kuwa aan Masiixiyiinta ahayn waxaa lagu tirin dembi in ay yihiin, sababta oo ah waxa keenay waa ammaan raadintooda. Si aan xad lahayn Qorniinku wuxuu ugu sheegay in cawaamtu ay yihiin kuwo dhintay xagga ruuxa (Efesos 2:1), oo laga dheereeyay nolosha Eebbe (Efesos 4:18) , oo aan rajo lahayn, inta ay dunida joogaanna aanay Ilaah lahayn (Efesos2:12), oo ay qaateen sanamyo dulli ahu (1 Korintos 12:2), oo qurbaankoodana uma sameeyaan Ilaah ee waxay u bixiyaan ibliisyada (1Korintos 10: 20). Shuqullada cawamtu waxay ku wanaagsan yihiin bulshada dhexdeeda, laakiinse ma laha qiime ruuxi ah. Tusaale: Qof shuuci ah oo isbistaal u dhisay in lagu daaweeyo caruurta masaakiintu wuxuu qabtay shaqo fiican. Laakiinse Eebbe hortiisa shaqo fiican kuma ahan, sababta oo ah ma jiro qof shuqul wanaagsan uu ku jiro illaa uu mar kale dhasho, ama uu noqdo Masiixi. "Oo rumaysad la'aantiis ma suurtowdo in isaga laga farxiyo" (Cibraaniyada 11:6). Dadka adduunku wuxuu dhahaa: "Macno ma laha waxa aad rumaysan tahay, waxaase la rabaa in aad si sax ah u noolaato. Waa qofka shuqulkiisa waxa muhiimka ahu ee ma ahan waxa uu qiranayo." Laakiinse wuxuu Kitaabka Qudduusku ina barayaa in nolosha uu Eebbe raalliga ka yahay ay tahay tan lagama maarmaanka ah ee ah inaan muujinno iimaankeenna aan aaminsan nahay Erayga Eebbe. Iimaanku waa mid ka shaqeeya qudduusnimada qalbiga iyo ficillo jacayl leh. Ciise wuxuu yidhi: "Xaqnimadiinnu haddaanay ka badnaan tan culimada iyo Faarisiinta, geliba maysaan boqortooyadii jannada" (Matayos 5: 20).

MASIIXIYIINTU MA AHAN KUWO KAAMIL YEELA SHARCIGA

Xattaa Masiixiyiintu sharciga Eebbe uma ilaalin karaan sida uu Eebbe rabo in loo xafido. Wali waxaa ku jira dabcigii sharka, kii laga dhaxlay Aadam, oo wax kasta oo ku yimaadda saamayntiisu waa shar iyo dembi miidhan. Rasuul Bawlos, oo Masiixi ahaa, wuxuu qirtay in uusan wali kaamil ahayn, laakiinse uu aad ugu dadaalayo inuu gaadho kaamilnimada uu Masiixu raba inuu lahaado (Filiboy 3:12). Eeg Rooma 7:14-23. Marka aan ku noolaanno Ruuxa oo kaliya ayaan ku socon karnaa Ruuxa (Galatiya 5:25). Dhammaaan shuqullada wanaagsan ee Masiixiyiinta waxaa wasakh u yeela dembiga, sababta oo ah, ha yaraato ama ha badnaatee waxaa ku qasan nafjeclaysiga jidhka, waxaana ku dhaqaajiya cabsi aan xushmo iyo jacayl lahayn. Hase yeeshee, Ciise aawadii xattaa qurbaanada ruuxiga ah ee aan kaamilka ahayn ee caruurta Ilaah wuu aqbalaa Eebbe. "Idinkuna sida dhagaxyo noolnool ayaa waxaa laydinka dhisayaa guri ruux ah inaad ahaataan wadaado qudduus ah, si aad xagga ruuxa uga bixisaan allabariyo uu Ilaah ku aqbalo Ciise Masiix." (1Butros 2:5)

DOONA INAAD WAX BARATAAN

Dad aad u badan oo buuxiyay gole aad u weyn ayaa waxaa soo hor istaagay nin dhallinyar oo muusigiiste ah. Kumannaan waji ayaa si xiise iyo xamaasad leh u soo eegayay. Ninkaa yar ee guulaystaha ahu wuxuu hor fadhiistay qalabkii muusigga, oo sidii isagoo sixray, dadkii aad uga farxiyay. Muusig qoranu ma hor oollin isaga, balse waxay farihiisu ugu dhacayeen qalabka si sahlan. Dadkii dhagaysanayay way jeclaysteen. "Waxaan jeclaan lahaa inaan sidaas oo kale u tumi karo!" Ayay qaar badanu iskula hadleen. Hase yeeshee, dadka badankoodu, ma aysan ku xisaabtamin saacadihii faraha badnaa ee uu baranayay ee uu laylinayay farihiisu siday u tumi lahaayeen qalabkaas, taas oo ah tan ka dhigtay inuu noqdo muusigiiste weyn.

Haddii uu rabo inuu koro oo horumar gaadho; doonista ah inuu waxbarto waa in ay noqoto gayb ka mid ah barnaamijka qof kasta oo Masiixi ah. Waa inaan kartideenna oo idil ku raadinno jidka jannada, oo aan si joogto ah isugu hawllo inaan horumarinno nolosheenna. Mar kasta waa suurto gal in horumar la sameeyo. Mar kasta sida aan nahay waan ka sii fiicnaan karnaa. Laakiin waa in aan doonno inaan korno.

Waa muhiim inaan hello tilmaan wanaagsan oo sax ah. Waa inaan wax ka baranno Eebbe, maadaama isaga oo kaliyu uu ina bari karo runta ay tahay inaan ku soconno. "Rabbiyow, jidkaaga i bar, oo anna runtaadaan ku socon doonaa. Qalbigayga mid ka dhig si aan magacaaga uga cabsado." (Sabuurradii 86:11)

SHUQUL WANAAGSANU ILLAA XADKEE LAGAMA MAARMAAN YAHAY

Shuqullada wanaagsanu muhiim uma ahan badbaadadeenna, maadaama "nin xaq ku noqdo rumaysadka ee uusan xaq ku noqon shuqullada sharciga" (Rooma 3:28). Hase yeeshee, shuqullada wanaagsanu waxay lagama maarmaan u yihiin inaan ku muujinno iimaanka qalbigeenna. "Waxaa wax tara rumaysadka ku shaqeeya jacayl" (Galatiya 5:6). "Rumaysadku haddaanu shuqullo lahayn keli ahaantiisu waa mayd" (Yacquub 2:17). "Iftiinkiinnu dadka hortiisa ha iftiimo, si ay shuqulladiinna wanaagsan u arkaan, oo ay Aabbihiinna jannada ku jira u ammaanaan" (Matayos 5:16). Masiix "nafsaddiisuu u bixiyay aawadeen, inuu dembi oo dhan inaga furto oo uu inaga dhigo dad daahirsan oo uu isagu leeyahay oo ku dadaalaya shuqullo wanaagsan" (Tiitos 2:14). Shuqullada wanaagsanu waa natiijada toobadda (Matayos 5:8), waana wax ka yimaadda iimaanka oo lagama maarmaan ah. "Kii igu jira oo anna aan ku jiro, kaasaa midho badan dhala, maxaa yeelay, la'aantay waxba ma samayn kartaan." (Yooxanaa 15:5)

ABAALGUD NIMCAYSAN AYUU EEBBE U BALLANQAADAY TASRIFKA MASIIXIGA

Eebbe wuxuu dhammaan kuwa isaga jecel ee ilaaliya amaradiisa ugu abaalgudi si nimcaysa, jidh ahaan iyo naf ahaanba. Qofka uu muraadkiisu yahay inuu shaqadiisa oo dhan u qabto si waafaqsan sharciga Eebbe, wuxuu raacay jidka ugu habboon ee uu halka ugu sarraysa ku gaadhi wanaag adduunka iyo aakhiroba. "Cibaadaysigu si walba waxtar buu u leeyahay isagoo ballan u leh nolosha haatan joogta iyo tan imanaysaba" (1 Timoteyos 4:8) . Sidaa darteed, wuxuu Eebbe yidhi: "Oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amaradayda xajiya" (Baxiniintii 20:6). Abaalgudkaasi, adduunkan wuxuu noqon karaa barako gaar ah oo si sahlan loo aqoonsado, ama hanuunin xagga nolosha ah, oo inkastoo lagayaabo inaan durba la arkin, natiijadeedu wuxuu noqon doonaa wanaaggeena. Eeg Wacdiyaha 11:1; Maahmaahyadii 19:17. Jannadana abaalgudkaasi waxaa ka mid ah sharaf heerkeedu aad u sarreeyo. "Jannada abaalgudkiinnu waa ku wayn yahay" (Matayos 5:12) "Waxaa laguu abaalgudi doonaa wakhtiga sarekicidda kuwa xaqa ah" (Luukos 14:14). Eeg Matayos 25:14-30; Luukos 19:12–26; 1Korintos 3:12-15. "Kii wax yar beeraa, wax yar buu goostaa, kii wax badan beeraana, wax badan buu goostaa" (2 Korintos 9:6). Dhammaan abaalgudyadaasu waa deeq uu Eebbe ina siiyay, oo la inagu siiyay addeeciddii kaamilka ahayd ee Masiix uu addeecay sharciga, taasoo innaga iimaanka leh la inagu aqbalay Eebbe hortiisa inaan xaq ku noqonno.

RAADKA WAARA

Sannado badan ka hor, wuxuu geed yar oo qurux badanu ka baxayay meel dooxo ah, dabaysha ayaana ruxaysay. Maalin ayuu geedkii jabay oo dhacay, isagoo aaminsan in aanay cidina xusuusan doonin wanaaggiisii iyo quruxdiisii. Sannado badan ka dib, nin jiyoolojiiste ah ayaa dubbihiisii qaatay oo duurka aaday isagoo raba inuu cilmibaadhis sameeyo. Jamal wayn ayuu jebiyay, oo lakabyadiisana wuxuu ka dhex helay muuqaalkii qaabka geedkii yaraa–caleen kasta, laan kasta, quruxdii yaabka lahayd ee caleemihiisa oo sidoodii uga muuqda dhinacyada dillaacii jamalka. Kaasu wuxuu ahaa geedkii yaraa ee sannado badan hortood baxay, ee jabay ee ku dhex dhacay dhirta aan laga sooci karin. Geedkaasu wuu baaba'ay, laakiin xusuustiisii way hadhay oo maanta ayaa la soo bandhigay.

Haddaba waa sidaa dhammaan sheekooyinka noolihii quruxda badnaa ee ka tagay dunidan iyagoo cadawsanaya Eebbe iyo dadkaba. Waxaana waaray magacyada tiro yar oo ka mid ah kuwii wanaagsanaa ee waxtarka lahaa jiil kasta. Intii badnayd ee kale waa la illoobaa. Dunidu wax yar ayay ka xusuusataa kuwii wax u tarya. Laakiin waxaa jirta meel naxariis kasta oo lagu

sameeyay magaca Masiixa, xataa midda yar, lagu kaydiyo oo lagu xusuusto. Meeshaa waxba kama lumaan; waxbana lama illoobo. Xuskaasu wuxuu ku jiraa nolol kale, oo maalin maalmaha ka mid ah waxqabad kasta iyo saamayn kasta iyo reedreeb kasta waa la muujin doonaa. Shuqulladii kuwa ay noloshoodu waxtarka waxay dhexda kaga xardhanaan doontaa jamalka daa'imka ah, halkaasoo indhahoo idilu ay ka arki doonaan waligood.

Fal kasta oo aan samayno wuxuu si uun ama qaab uun u saamayn nolosha iyo tasrifka kuwo kale. Si kasta ha u yaraado, balse wuxuu reebayaa raad waara.

AAN RAACNO

Tobanka Amar ayaa qofka Masiixiga ah ku haga nolol tusaale fiican ah. Waxayna ina tusaan hab nololeedka uu Eebbe raalliga ka yahay. Sidii rasuul Bawlos aynu dhahno "waan ku sii dadaalayaa inaan qabsado" (Filiboy 3:12), inagoo mar kasta ka sii wanaagsanaan sidii hore si aan u buuxinno shuruudaha sharciga. Marka aan fulin wayno, ee fulin wayno jacaylka uu ina faray sharcigu, aan eegno oo haddana eegno Kaalfari, meeshii Badbaadiyuhu qalbigiisii oo idil iyo naftiisii oo idil iyo maskaxdiisii oo idil uu inagu jeclaaday illaa heer dhimasho uu ku guday innaga dembiyadeennii. Marka aan sidaa yeello, waxaan Eebbe nimcadiisa ka helaynaa Ruuxiisa xaqiijinta ah in dembiyadeennii la inaga cafiyay, oo waxaan awood u helaynaa inaan nolosheenna u hagaajinno si waafaqsan doonista Aabbaheenna jannada. Marka jacaylka aan Eebbe u qabno uu fiican yahay, jacaylka aan innagu isu qabnaana wuu wanaagsanaan. Masiix wuxuu yidhi, "Anaa ah geedka canabka ah; idinna waxaad tihiin laamihii. Kii igu jira oo anna aan ku jiro, kaasaa midho badan dhala, maxaa yeelay la'aantay waxba ma samayn kartaan." (Yooxanaa 15:5) Haddaba aan si qushuuc leh ugu tukanno: "Igu kexee wadada amarradaada, waayo kaasaan ku farxaa" (Sabuurradii 119:35). Si aan Eebbe u jeclaanno si ka weyn wax kasta oo kale oo aan deriskeenna u jeclaanno sida nafteenna, waa in aan marka hore hello oo uu qalbigeenna galo jacaylka ina furtay ee Masiixu. Aynu mar walba u aragno Sharcigu, nuurka saliibka Masiixa aaawadii, in uu yahay kan inagu haga tasrifka (behavior) Masiixiyada.

CUTUBKA 13
DHIBAATADA IYO SALIIBKA MASIIXIGA

Midka mid ah dhibaatooyinka aan la xallin karin ee nolosha Masiixigu waa xaqiiqada ah, in dhinac, Masiixiyiintu iimaankooda xagga Masiixa ay ku raaxaystaan asxaan dhammays ah oo ay ka heleen Eebbe, iyadoo dhanka kalana uu Eebbe sugay asxaankiisaas dhan in aan lagu soo bandhigayn noloshan. Hoosayntii uu Masiix dabeecadda u lahaa intuu dunidan ku noolaa, taas oo kale ayaa dabeecad u noqon nolosha qofka Masiixiga ah. "Mar haddii Masiix jidhka ku xanuunsaday, idinkuna sidaas oo kale isu diyaariya, idinkoo isku maan ah" (1 Butros 4:1). Dhinac, wuxuu Qorniinku inoo sheegay Eebbe in uusan liddi ku ahayn Masiixiyiinta ee uu la jiro (Rooma 1: 12-13), in ay yihiin caruurta Ilaah iyo kuwa dhaxli nolosha waligeed ah (Yooxanaa 1:12-13; Galatiya 3:26; Rooma 8:18), in Malaa'igtu u adeegi iyaga (Cibraaniyada 1:14), iwm., oo dhanka kalena, Ciise wuxuu u sheegay caruurtiisa: "Mid uun hadduu doonayo inuu iga daba yimaaddo, ha is inkiro, iskutallaabtiisana (saliibkiisa) ha soo qaato oo ha i soo raaco" (Markos 8:34). Halkan Ciise wuxuu tilmaamayay waxyaabaha badan ee uusan ka baxsan karin qofka iimaanka leh ee dhex jooga duni dembi iyo dhib badan.

MAXAA AASAAS U AH SALIIBKA (ISKUTALLAABTA) MASIIXIGA?

"Dhab ahaantii saliibku wuxuu ka kooban yahay waxyaabaha dhibaateeya Masiixiyiinta, marka ay iimaankooda Masiixinimo ku nool yihiin dunidan" (F. Pieper). Saliibka ama Iskutallaabta Masiixiga waxaa loola jeedaa dhibaatada iyo silica wakhtigan (Rooma 8:18), taas oo innaga Masiixiyiinta ahu aan Masiix iyo Injiilka aawadood ugu samirno, waxaana ka mid ah; in aan u dulqaadanno af lagaadada, kajanka, ceebaynta, quudhsiga, in aan nafteenna ka xakamayno raaxada dembiga badan ee noloshan, iyo in aan silic ku mudanno iyo, in haddii loo baahdo, aan u dhimanno Ciise aawadii. "Kulli inta doonaysa in ay si cibaado leh Ciise Masiix ugu noolaadaan waa la silcin doonaa" (2 Timoteyos 3:12). "Haddii magaca Masiix aawadiis laydin caayo, waad barakaysan tihiin…. Haddii nin u xanuunsado sida isagoo Masiixi ah, yaanu ceebsan, laakiinse Ilaah ha ku ammaano magacan" (1Butros 4:14,16). "Kan doonaya inuu naftiisa badbaadiyo, wuu lumin doonaa, laakiin kan

naftiisa u lumiya aawaday iyo Injiilka aawadii, kaasaa badbaadi doona" (Markos 8:35). Eeg Yooxanaa 15:18-20; Matayos 5: 11-12. Halganka aan maalin walba kaga soo horjeedno dembiga (Rooma7:14-25) iyo iska caabiyidda jirrabaadda iyo damacyadeeda dembiga badan (Galatiya 5:24; Kolosay 3:5) ma ahan kuwa ugu yar yar ee saliibka innaga Masiixiyiinta ahu aan qaadnay. Sidoo kale quudhsiga, ceebaynta iyo dacaayadda xun ee dunida sharka luhu ay Masiixiyiinta dusha ka saarto waxay iyana ka mid yihiin saliibka Masiixiga.

Tusaale: Si uu qofku xirfaddiisa ama meheraddiisa dunidan u horumariyo, waxaa sida badan loo arkaa muhiim in laga mid noqdo ururo ama lagu xidhnaado kooxo aan maamuusin Masiixa, balse ceebaaya. Haddii aan ururadaa iyo dadkaa lagu xidhnaanna waxay u muuqataa in ay xidhmayaan albaabadii fursadaha lagu gaadhi lahaa horumarka. In qofku uu iskaga hadho horumarkii xagga adduunka ee ku xidhnaa shuruudahaas iyo xaaladahaasu waa saliib uu qofka Masiixiga ahu qaadi doono. Qofka Masiixiga ahu waa inuu markasta mudnaanta siiyo inuu daacad u ahaado Masiix si ka weyn wax kasta oo kale, oo haddii ay taasu keeni in ay guushu yaraato ama faa'iidadu yaraato xagga hantida adduunka, wali waa in qofka Masiixiga ahu uu ku qanco waxa uu haysto.

XIDHIIDHKA AAN GU'I KARIN EE MASIIXIYADA IYO SALIIBKA

Saliibka qaadidiisu si adag oo aan la goyn karin ayay ugu lammaan tahay Masiixiyada, si adag oo qofka diida inuu qaado saliibku uusan sheegan karin inuu yahay Masiixi. "Kan aan iskutallaabtiisa (Saliibkiisa) soo qaadan oo aan i soo raacin, ima istaahilo" (Matayos 10:38). Saliibku waa astaan lagama maarmaan u ah xerownimada Masiixiyada.

Hase yeeshee, tan macnaheedu ma ahan in Masiixigu uu saliib isasaaro ama uu saaro dad kale. Waa inuu taas u daayo Eebbe (1Butros 3:17; 1Butros 1:6), waayo Eebbe kaligiis ayaa og saliibka faa'iidada inoo leh, oo Eebbe oo kaliya ayaa bixiya xoogga loo baahan yahay in lagu qaado saliibka. (1Korintos 10:13)

Masiixi kastaa wuxuu leeyahay saliib isaga khaas u ah. Masiixiyiintu isku awood ma wada aha; waxay aad ugu kala duwan yihiin hibooyinka iyo xirfadaha ay leeyihiin. Sidoo kale, Masiixiyiintu way ku kala adag yihiin xagga iimaanka. Maadaama Eebbe uu ina siiyo hibooyinkeenna, wuu yaqaanaa mid kasta oo inaga mid ahu culayska saliibka uu qaadi karo. "Ilaah waa aamin, mana oggolaan doono in laydin jirrabo intaad karaysaan in ka badan, laakiin markii laydin jirrabo wuxuu samayn doonaa jid aad kaga baxsataan si aad u adkaysan kartaan" (1Korintos 10:13). Saliibkaagu haddii uu

yar yahay iyo haddii uu weyn yahayba, Eebbe adiga ayuu kuu qiyaasay saliibkaas.

XADHKO KALE OO LAGA TUMO

Magaalada Fiyeena, waxaa habeen, qaybo adadag oo ka mid ah muusiggii Biithoofen ka tumay nin kamnuujadka (maasiqo) tuma oo reer Norwey ah lana odhan jiray Ole Bull. Ninkaas oo halgankii uu yaraantiisii soo galay ay adkayd in gof kale uu ka soo gudbo, waxaa habeenkaas qalakii uu tumayay ka go'ay xadhiggii shanaad! Maxaad u malaynaysaa? Ole Bull miyuu joojiyay garaacistii? Maya, kaasu isaga am ahan. Wuu sii waday muusiggii adkaa ee uu tumayay isagoo ku tumaya saddex xadhig oo kaliya, oo waliba si macaan oo lala yaabo uga dhawaajinayay una dhaqdhaqaajinayay. Daawadayaashi farxad iyo xamaasad ayay la waasheen. Habeenkaas kadib wuxuu noqday nin caanbaxay oo la hubo.

Waynaanta nolosha Masiixinimadu waxay ku jirtaa in la adkaysto oo horay loo socdo xattaa haddii ay wax ku dhibaa kaa horyimaadaan. Yuusan jirin wakhti aan joogsanno oo gadaal eegnaa. Rabbigu wuu diiday in uu rasuul Bawlos ka qaado dhibkii ka haystay nolosha. Laakiin Bawlos wuu ku qancay oo bartay inuu dhibaatada ku xamilo si samir leh oo aan cabasho lahayn.

Dhammanteen waan luminay qaar ka mid ah waxyaalihii qaaliga ahaa ee nolosha, laakiin waa inaan adkaysanno oo ku dadaalno sida ugu wanaagsan ee aan farxad ku heli lahayn uguna adeegi lahayn waxa inoo soo hadhay ee aan haysanno. Oo mar walbana waxaa inoo soo hadha wax inagu filan. Waxaana wali jira xadhko kale oo aan ka tumi karno.

Waxaa suurtowda in ay qaar ka luntay lacagtii ay u kaydsadeen marka ay duqoobaan; qaar kalena waxaa lagayaabaa in ay waayeen caafimaadkoodii. Haddana waxaa dunida jira kuwo badan oo u dulqaatay culayska iyo xanuunka saaran korkooda, oo muusig weyn oo sharaf leh ka tumay xadhkihii u soo hadhay. Qof Eebbe uu la joogo, oo abaalgudkiisa nimcaduna yahay jannada, miyaanay ahayn inuu sidaa yeelo?

UJEEDADA IYO FAA'IIDADA SALIIBKA

Saliibku wuxuu xaqiijin u yahay Eebbe in uu inoo tixgeliyo sida caruurtiisii. "Oo haddaynu caruur nahay, haddaba waxaynu nahay kuwo wax dhaxla, kuwo Ilaah dhaxla oo Masiixa wax la dhaxla, haddii aynu isaga la xanuunsanno, in laynala ammaano isaga" (Rooma 8;17). Saliibku wuxuu ka mid yahay jidadka iyo siyaabaha uu Eebbe ugu hoggaamiyo Masiixiyiiinta in ay ka gudbaan dunidan oo galaan nolosha waligeed ah. Eeg Falimaha Rasuullada 14:22; 2 Koritos 4:17. Saliibku wuxuu inaga dhigaa kuwo

hooseeya Ilaah hortiisa (2 Korintos 12 :7). Wuxuu inoogu digaa inaan talo saarano oo isku hallayno nimcada Eebbe oo kaliya (2 Korintos 12:8-9). Sidaas awgeedna waxay dhaqaajisaa oo xoogaysaa iimaankeenna, waxay inagu xanbaartaa inaan tukanno, waxay burburisaa jidhka dembiga, oo guud ahaan waxay inoo jeedisaa xagga jannada iyo waxyaabaha daa imka ah.

Ujeedada saliibku waa inuu inagu waafajiyo suuradii Rabbiga jacayl (Yooxanaa 13:34), is hoosaysiin (Matayos 11:29), addeecidda Eebbe (Filiboy 2:5-8) u dulqaadashada dhibaatada (Cibraaniyada 12:2), iyo tukasho aan isku hallaynayno isaga (Matayos 26:42). Siduu Masiixuba ugu dhintay dembiyadeenna, oo uga soo sarekacay kuwii dhintay ammaanta Eebbe aawadeed, inaguna sidaas oo kale ayaa la inagu waafajin suurada Rabbiga in aan ku dhimannayo dembiga iyo inaan ku soconno cusboonaanta nolosha. (Rooma 6:4)

ARAGTIDA TOOSAN EE SALIIBKA

Qaadidda saliibka wuxuu jidhkeennu u arkaa culaab weyn. Waxaaba suurtowda in aan u malayno in uu Eebbe ina illoobay. Sidaas darteed, in kastoo dembiyadeenna saliibka lagu xukumay, Qorniinku wuxuu ina barayaa in uusan muujinayn cadhada Eebbe in ay inagu dhici, laakiinse wuxuu ina tusayaa jacaylka uu Eebbe inoo qabo. “Ka uu Rabbigu jecel yahay ayuu edbiyaa, wuuna karbaashaa ku kasta oo uu aqbalo” (Cibraaniyada 12:6). Eeg Cibraaniyada 12:7-10. Waxaa kale oo Qorniinku ina barayaa in marka aan u silicno qirashadeenna Masiix ee hadal iyo ficilba, uu saliibku inoo noqon markhaatiga Ruuxa Qudduuska in aan nahay kuwa Masiix, maadaama aan la kulmayno wixii Masiix iyo intii u markhaatifurtayba ay kala kulmeen dunidan. Qorniinku wuxuu inoo bayaaminayaa silica aan la kulanno wakhtigan, oo aan ku noqonayno sidii Masiixa, in uu inoo yahay deeqda ammaanta waligeed ah ee ina sugaysa (Rooma 8:17). Sidaa awgeedna waa inaan ku riyaaqno Eebbe in uu inoo adeegsaday saliibka si uu inoo waafajiyo waligeen suuradii Masiixa. “Taasu waa wixii laydiinku yeedhay, maxaa yeelay, Masiix baa idiin xanuusaday, oo wuxuu idinkaga tegay masaal inaad tallaabooyinkiisa raacdaan” (1Butros 2:21). Siduu Masiix ugu silcay dembiyadeenna, sidoo kale waa inaan u silicno Masiix aawadii (Filiboy 1:29). Waa inaan la dhimanno isaga si aan haddana isaga ula noolaanno; waa inaan la silicno isaga si aan haddana ula wadaagno xukunka isaga. (2 Timoteyos 2:11-12)

DHIBAATOOYINKA NOLOSHA

Sida badan Masiixiyiinta iyo kuwa aan rumaysadka lahaynuba waxay labaduba kala kulmaan noloshan silic, jirrabaad, dhibaatooyin, iyo rafaad isku nooc ah. Labaduba waa ay la kulmaan shil, labaduba waa ay la kulmaan

khasaare hanti adduun, labadaba waa loo qoonsan karaa ilihii nolol maalmeedkooda, labadaba waxaa curyaamin kara bukaan, labadaba waxaa ku habsan kara masiibo iyo nasiibdarro. Laakiin marka aan tan ka hadlayno, waxaa jira farqi muhiim ah oo u dhexeeya Masiixiyiinta iyo kuwa aan rumaysadka lahayn ee caruurta adduunkan.

Dhanka caruurta aan rumaysadka lahayn ee adduunka, dhibaatooyinka ku dhaca oo dhan waa in loo arkaa in ay yihiin ciqaab si toos ah uga timid Eebbe oo uu u ciqaabayo dembiyadoodii. Eeg Sabuurradii 7:11; Rooma 1:18.

Dhanka kalena, dhibaatooyinka Masiixiyiintu waa uun astaamaha jacaylka Ilaah. Ma ahan kuwo kadis ku yimid; ma ahan natiijo ka timid nasiibdarro. Waa lidka kuwaas, dhibaatadeennu waa mid uu Eebbe ina saaray oo uu isagu oggolaaday. Eebbe caruurtiisa ma dhibaateeyo ujeeddo la'aan. Dhibaatadu waxay ina xusuusisaa waynaanta iyo xumaanta dembiyadeenna oo waxay inoo horseeddaa toobadkeen joogto ah. Maadaama uu Eebbe dhibaatada u adeegsado in ay caruurtiisa ku abuurto is hoosaysiin iyo toobad, iyo Maadaama uu dhibaatooyinka ugu adeesado inuu ku imtixaamo iimaankooda si ay u yeeshaan dabeecado suuradii Masiix raaca, iyaguna, sidoo kale, waa qayb ka mid ah saliibka ay tahay in ay Masiixiyiintu qaadaan inta ay joogaan adduunkan. "Oo waxaynu og nahay in wax waliba wanaag ugu wada shaqeeyaan kuwa Ilaah jecel, xattaa kuwa qasdigiisa loogu yeedhay" (Rooma 8:28). Haddaba "edbintu wakhtiga la joogo uma eka mid lagu farxo, laakiin waxay u eg tahay mid caloolxumo leh, dabadeeto waxay kuwii lagu edbiyay u dhashaa midho nabad iyo xaqnimo ah" (Cibraaniyada 12:11). Mustaqbalka kan saliibka qaaday oo human nimcada Ilaah waa ammaan wax lala simaayu uusan jirin.

SIFAYN RUUXI AH

Maadaama jidka Masiixiga ee noloshu uu waligii ahaanayo midka saliibka, barakooyin waara ayaan ku helaynaa xagga dhibaatada. Mana jiro jid kale oo nimcada Eebbe aawadeed aan ku gaadhayno inaan xaqiijino Masiixa inaan kula jirayno ammaantiisa.

Xagga walxaha dunida waxaan ognahay waxyaabaha ugu qaalisan si waxtarkooda iyo qiimahooda ugu sareeya loo helo in ay u baahan yihiin si aad u adag in loogu hawshoodo. Dhoobo adagu waxay u baahan tahay qaabayn adag ka hor inta aan loo adeegsan hawl adag. Alwaaxu isagu wuxuu u baahan yahay oo kaliya qorid iyo aslid. Qalinku wuxuu u baahan yahay tumid, wax kalena sida badan uma baahna. Laakiin dahabka, kan ugu qaalisan biraha oo idil, wuxuu u baahan yahay in lagu dhalaaliyo foorno dab ah oo aad u kulul ka hor inta aan laga samayn shay u qalma boqor.

Sidoo kale halka ay ku dhammaan noloshu lama gaadhi karo illaa xanuun badan loo maro maahee. “Waa inaan dhibaato badan marno si aan u galno Boqortooyada Ilaah.” Ma nihin caruur kaamil ah; sidaa darteed waxaan u baahan nahay sixid. Dhibaatadu waxay ina siisaa fursad aan ku adeegsanno nimcooyinkeenna, waxay sii qoto dheeraysaa shaqada Masiixa ee inagu jirta, waxay aad inoogu sii haysaa Carshiga Nimcada, oo waxay inaga sii fogaysaa dunidan maanta. In aynaan haysan saliib aan qaadno waxay noqon lahayd nasiibdarro waarta. Casharrada Eebbe way u qalmaan qiime kasta oo ay tahay in aan ku baranno aad bayna uga wayna yihiin wax la dayaco. Ilmo kasta oo Ilaah Ayuub ha la yidhaahdo: “Oo markuu i tijaabiyo waxaan u soo bixi doonaa sida dahab oo kale.” (Ayuub 23:10)

CUTUBKA 14
KANIISADDA MASIIXIGA

In kastoo erayga “Kaniisad” looga adeegsado dhawr macne oo kala duduwan, waxaan halkan uga hadlaynaa macnihiisa quman ee saxda ah, kaasoo ah “Kaniisadda Masiixiga ee qudduusan, wadaagga awliyada.” Waxay ka kooban tahay dhammaan inta rumaysay Masiix. Hababka tilmaanta ah ee lagu adeegsaday Qorniinka si loo qeexo kaniisaddanu waxay muujinayaan in uu jiro xidhiidh hoose iyo wadaag ruuxi ah oo ka dhexeeya xubnaha kaniisadda iyo Eebbe. Eeg 1Timoteyos 3: 15; 1Butros 2:5-9; Efesos 2:19-21; Efesos 1:22-23. Si xidhiidhkaa dhaw ee shakhsi loola yeesho Eebbe waxaa loo baahan yahay in la rumaysto Masiix in uu yahay badbaadiyaheenna. “Kulligiin waxaad wiilashii Ilaah ku tihiin rumaysad idinkoo ku jira Ciise Masiix” (Galatiya 3:26) Qirashadii Rasuullada waxaa kaniisadda qudduusan ee Masiixiyada loogu yeedhay “wadaagga awliyada,” sababtoo ah waxaa iyaga loogu yeedhay Eebbe hortiisa in ay yihiin qudduusiin Ciise awaadiis, kaasoo xaqnimadiisa ku daboolay xaqdarradoodii.

TAYADA KANIISADDA MASIIXIGA

Waxaan kaniisaddan ku sheegnaa in ay tahay mid aan la arkin sababta oo ah qofna ma arki karo qof kale qalbigiisa si uu u ogaado in uu aaminsan yahay Masiix iyo in kale. Isagoo “Rabbigu uu yahay Masiix iyo in boqortooyadiisu aanay ku iman hab isasoo bandhigid oo muuqda, sababta oo ah waxay ku jirtaa qofka dhexdiisa.” (Luukos 17:20-21)

Waxaa jira hal kaniisadda Masiixiyad oo kaliya, taas oo ka kooban dhammaan inta Masiix aaminsan ee dunida. Ciise wuxuu yidhi, “waxaa jiri doona adhi kaliya iyo adhijir kaliya.” (Yooxanaa 10:16) Eeg Yooxanaa 11:52.

Maadaama ay xaqnimada Masiixu ahayd mid kaamil ah oo Masiixiyiintuna ay ku heleen rumaysad kaniisadda Masiixigu waa qudduus. “Siduu Masiix u jeclaaday kaniisadda ee uu nafsaddiisii u bixiyay iyada aawadeed, inuu qudduus ka dhigo oo ku nadiifiyo maydhidda biyaha xagga erayga, si uu kaniisadda isugu keeno iyadoo qurux badan, oo aan lahayn bar ama duudduub ama wax la mid ah; laakiinse inay ahaato mid qudduus ah oo aan iin lahayn” (Efesos 5:25-27). Sidoo kale Masiixiyiintu waxay aad u doonaan oo isku dhibaan inay ku noolaadaan nolol qudduus ah. Eeg 1Butros 2: 5; Rooma 12:1-2.

Kaniisaddu waa kaatolig ama caalami, sababta oo ah waxay isaga timaadaa quruun kasta oo ku nool qorraxda hoosteeda, meel kasta oo Injiilka la adeegsado; maadaama sida uu Eebbe ballanqaaday Eraygiisa aan loogu wacdiyayn si xun. Eeg Ishacyaah 55:10–11.

Kaniisaddu ma baaba'do. "Oo albaabadii Haadees (naartu) kama adkaan doonaan" (Matayos 16:18). Eeg Matayos 24:24; Yooxanaa 10:27–29; Rooma 11:2-5.

Xubinnimada kaniisaddan waa lagu badbaadaa. Masiix wuxuu yidhi: "Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaaddo, xaggayguu ku yimaaddo maahee." (Yooxanaa 14:6)

SIDEE KANIISADDA LAGU DHISAY?

Qorniinku wuxuu ku nuuxnuuxsaday in kaniisaddu qayb ahaan ama gebi ahaanba aysan ahayn shuqul dad, laakiinse gebi ahaanba ay tahay hawl iyo samays Eebbe. Eebbaa "gudcurka idiinka yeedhay oo idiinku yeedhay xagga nuurkiisa yaabka leh; idinku waagii hore dad ma ahayn, laakiinse haatan waxaad tihiin dadka Ilaah, idinku markii hore naxariis ma aydaan helin, laakiinse haatan naxariis baad hesheen." (1Butros 2:9–10)

Habka uu Eebbe u adeegsado kulminta iyo ilaalinta kaniisaddu waa Injiilka qaababkiisa oo dhan– Erayga iyo Karaamooyinka– sababta oo ah Injiilka oo kaliya ayaa abuura oo xafida iimaanka lagu badbaado. "Rumaysadku wuxuu ku yimadaa maqlidda, maqlidduna waxay ku timaaddaa hadalka Masiix" (Rooma 10:17). "Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah Erayga Ilaah, oo nool oo waara… haddaba kaasu waa Eraygii warka wanaagsanaa oo laydinku wacdiyay." (1Butros 1:23, 25)

Doorka uu qofku ku leeyahay dhisidda, fidinta, iyo ilaalinta kaniisaddu waa uun mid loo adeegsaday (1Korintos 3:5-10), inta ay karaan dadku waa in Injiilka boqortooyada lagu wacdiyo addunka oo dhan. (Markos 16: 15) Xeeladaha iyo qiyaasaha dadka ama adeegsiga awoodaha sharci dad ama dawlad ama midow iyo urur wacdiyayaal midna ma horumarin karo dhismaha kaniisadda, sababta oo ah kaniisaddu waa jameeco muminiin oo waxay ka dhalataa, ilaaliyana Injiilka oo kaliya.

JAMEECADA GOOB

Jameecada goob waa wadarta tirada kuwa qirtay in ay Masiixiyiin yihiin oo wadajir ugu kulma meel gaar ah. Laba wajiilayaal, muuqaal ahaan iska yeelyeela in ay Masiixi yihiin, ayaa laga dhex helayaa kaniisadda

muuqata, laakiin kuwaasu kama mid ahan kaniisadda runta ah. Eeg Matayos 13:47, 48; Matayos 22:11-12; 2 Timoteyos 3:15; Falimaha Rasuullada 5:1-11.

XAFIISKA FURAYAASHA

Masiix wuxuu kaniisaddiisa siiyay awood ruuxi ah, taas oon ugu yeedho "Xafiiska Furayaasha." Arrintanu waxay tilmaamaysaa in jannada lagu furo cafiska dembiyada, iyo in jannada la inooga xidho haysashada dembiyada. Ciise wuxuu yidhi: "Sida Aabbuhu ii soo diray ayaan anna idiin dirayaa.... Aqbala Ruuxa Qodduuska. Nin alla ninkaad dembiyadiisa cafidaan way cafiyan yihiin, nin alla ninkaad dembiyadiisa ku celisaan way ceshan yihiin" (Yooxanaa 20:21-23). "Waxaan ku siin doonaa furayaasha boqortooyada jannada, oo wax alla wixii aad dhulka ku xidho ayaa jannada ku xidhnaan doona, oo wax alla wixii aad dhulka ku furto ayaa jannada ku furnaan doona." (Matayos 16:19)

Xafiiska furayaashu waa awoodda, ama amarka, lagu wacdiyo Erayga Eebbe, lagu maamulo Karaamooyinka, iyo gaar ahaan awoodda cafinta ama ku celinta dembiyada. Masiixiyiinta, kuwa ka midka ah kaniisadda runta ah, Eebbe wuxuu ku yidhi: "Dunida oo dhan taga, oo uunka oo dhan Injiilka ku wacdiya" (Markos 16:15). "Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo kan Wiilka iyo kan Ruuxa Qudduuska. Oo bara in ay dhawraan wax walba oo aan idinku amray, oo bal eega had iyo goor ayaan idinla joogaa xatta ilaa wakhtigu dhammaado" (Matayos 28:19-20). "Runtii waxaan idinku leeyahay, wax alla wixii aad dhulka ku xidhaan ayaa jannada ku xidhnaan doona, oo wax alla wixii aad dhulka ku furtaan ayaa jannada ku furnaan doona" (Matayos 18:18).

Waa Erayga Ilaah waxa keliya ee lagu xukumo kaniisadda, waana waxa keliya ee ay ku shaqayn karto. Adeegsiga Erayga ee kaniisadda waxaa la yidhaahdaa "adeegga Erayga" (Falimaha Rasuullada 6:4). Sidaas awgeed kaniisaddu waxay bartaa dhammaan wixii uu amray Masiixu, wixii uu amray oo keliya.

Dembiyada kuwa toobadkeena waa la cafiyaa. Kuwa toobadkeena waa kuwa ka qoomamooda dembiyadii ay faleen ee rumaysan xagga Sayid Ciise Masiix in ay ku heleen cafiska dembiyadooda. Eeg Falimaha Rasuullada 3:19. Waxa loo baahan yahay waa natiijada toobadkeenidda taas oo ah nolosha dhabta ah ee Masiixiga. Eeg Matayos 3:8.

Dembiyada kuwa aan ka qoomamoon gefafkooda kuwaas oo ah, kuwa aan ka toobadkeenin xumaantii ay faleen oo aan rumaysan Ciise Masiix, waa lagu celinayaa illaa inta ay ka toobadkeenayaan. Toobadkeenid la'aantu waxay ka dhigaysaa in Ciise Masiix la rumaysto wax aan suurto gal ahay.

SIDAY KANIISADDU U ADEEGSATAA AWOODDA FURAYAASHA?

Maadaama mid kasta oo Masiixi ahu uu ka mid yahay "Wadaadada Boqorka" (Butros 2:9) oo sidaa derteedna uu leeyahay amarka Erayga, waa in qof kasta oo Masiixi ahu uu amarkaas u adeegsado si khaas ah, oo uu u xaqiijiyo dembiilaha toobadkeenka ah nimcada Ilaah iyo cafinta dembiyadiisa ee xagga Masiix, oo waa inuu u sheego kana aan toobadkeenin inaan dembiyadiisii laga cafiyin sababta oo ah toobadkeen la'aantiisa iyo iimaan la'aantiisa. Taasna waxaa loo samayn si caadi ah oo looma baahna in loo tago ama taageero laga raadsado urur kaniisadeed, jameeco, ama wadaad, si ay u noqoto mid dhaqangal ah. Luter wuxuu yidhi: "Inkastoo dhammaanteen aynaan lahayn xafiiska dadwaynaha iyo yeedhid (adeegidda bulshada), haddana qof kasta oo Masiixi ahu waa inuu waxbaro, tilmaamo, u digo, u qalbiqaboojiyo, kuna dhiirigeliyo deriskiisa Erayga Eebbe meel kasta iyo mar kasta oo uu la kalmo qof u baahan taas." Waxaa halkan taalla hawsha Xafiiska Furayaasha oo u baahan in loo qabto si ka weyn sidii hore oo dhan. Boqortooyada Eebbe ee dhulkuna way ku sii xoogaysan, oo nafaha aan u kasbayno jannaduna way ku sii badan.

Arrinta adeegga bulshada ee Xafiiska Furayaasha, jameecada Masiixiyiintu waxay u magacaabayaan qays, ama adeegaha bulshada ee Erayga, kaas oo isagoo matalaya jameecada ka hadla dembidheefka ama sheega cafiska dembiyada. Xafiiska adeegga bulshada iyo shaqadiisa waxaa la yiraahdaa "Bulshada," sababta loo yidhina ma ahan in mar walba bulshada loo soo bandhigayo, laakiinse waa in loo samaynayo danta bulshada oo lagu samaynayo amarka bulshada, kuwaas oo ah jameecad.

Xafiiska qaysku waa aasaas rabbaani ah. Eeg Falimaha Rasuullada 20:28, Efesos 4:10-12. Qaysasku waa in ay si adag ugu dhegaan Erayga Eebbe, iyagoo ku wacdinaya caqiidada nadiifta ah ee Injiilka oo u maamulaya karaamooyinka siduu Masiix u billaabay. Sidaasna waxay ka bixin oo inoo soo gudbin waxa uu Eebbe ballanqaaday oo inagu siiyo ilahaas nimcada, oo sidaa aawadeed waxay noqonayaan kuwo u jira oo loo hubo sidii isagoo Masiixa, ah Rabbigeennu, uu inoo sameeyay. Waxay leedahay xoog rabbaani ah iyo amar oo waa la hubaa laguna kalsoonaan karaa. Waa inaan addeecno waxa uu qaysku inaga barayo Erayga Masiix aawadii.

Masiixiyiinta waxaa loogu yeedhay in ay ugu tagaan qayskooda in ay si khaas ah ugu qirtaan dembiyadooda culayska ku haya maskaxdooda, si ay xagga qayska Eebbe uga helaan xaqiijin in dembiyadoodii laga cafiyay. Inkastoo aan arintan lagu sheegin Qorniinka, haddana waa hab wanaagsan, oo faa'iido badan u yeelan kara qofka Masiixiga ah. Sidoo kale waa in qaysaska

loogu tago talo bixinta xagga arrimaha ruuxiga (diiniga) ah. Waa in la inoo xaqiijiyo in qaysku aanu cidna u sheegayn wixii aan si gaar ah ugu qirannay innagoo ku kalsoon.

Sida badan habka cibaadaysiga bulshada waxaa ku jira qirashada dembiyada ee Eebbe hortiisa iyo ku dhawaaqista dembidhaafka, oo uu ku hadlo qaysku.

JAMEECADU SIDA AY KA YEELAYSO DEMBIILAYAASHA AAN TOOBADKEENIN

Maadaama uu dembigu ka mid yahay dabciga dadka, waxaa jameeco ku iman kara in mid ka mid ahu uu dembi ka galo bulshada. Haddii aan dembigaasi la xallinin, waa in qofkaa dembiilaha ah laga saaro jameecada Masiixiyiinta. Eeg 1Korintos 5:13. Tallaabadaas qofka lagaga saarayo jameecada waxaa la yidhaahdaa xidhiidhgoyn, taas oo macnaheedu yahay, in qofka laga saaray ama loo diido inuu ka mid ahaado wadaagga. Qofka waxaa xidhiidhka loogu goynayaa ma ahan dembiga uu galay, balse waa toobadkeenid la'aantiisa. Hase yeeshee, waa in aan lagu degdegin in dad laga caydhiyo jameecada. Oo halkii suurtogal ahna, waa in aan adeegsanno tallaabooyinka digniinaha ee ku qoran Kitaabka Qudduuska. Waxaana tilmaan la inagu siiyay Matayos 18:15-18. Dhereka wakhtiga tallaabooyinka edbinta ee kaniisaddu ma qorna, waxayse ku kala duwanaan hadba xaaladdu sida ay tahay. Ujeedaduse waa qofkii gefka sameeyay in dib loogu soo celiyo inuu si fiican u fahmo oo ku dhaqmo Erayga Eebbe; waana dulqaad in la muujiyo marka la saxayo walaal khaldamay.

Xidhiidhgoyntu ma ahan mid loola jeedo in lagu waxyeeleeyo aakhirada kan xidhiidhka loo gooyay, amase aargoosi, laakiinse waxaa loola jeedaa in naftiisu ay hesho badbaado; oo uu arko waynaanta dembigiisa kana toobadkeeno. Waxaa la rabaa in jameecadu ay ogaato in ay khasab tahay xidhiidhgoynta dembiilayaasha diida in ay toobadkeenaan, sababta oo ah Eebbe wuxuu ka rabaa Masiixiyiinta in ay iska soocaan kuwa aan u qalmin iyaga. Eeg 1Korintos 5. Jameecada Masiixiyiintu si farxad leh ayay u cafin oo ugu soo celin xubinnimadiisii jameecada kii hore loo xidhiidhgooyay ee ka toobadkeena dembigiisii.

ASXAANKA XUBINNIMADA KANIISADDA

Iyadoo ay tahay waajib uu Eebbe faray in ay Masiixiyiintu isu ururaan oo meel isugu tagaan iyagoo samaynaya jameeco, haddana waxaa taas loo sameeyaa oo kale in ay innaga asxaan inoo tahay. Barakooyinka laga helo xubinnimada kaniisaddu way badan yihiin. Si aan nolol buuxda oo Masiixinimo ugu noolaanno waxaan u baahan nahay kulanka Masiixiyiinta.

Xubnuhu waxay isugu tagaan jameecada Masiixiyiinta ee deegaankooda, si ay isugu dhisaan caqiidadii rasuullada iyo nabiyada. Waxaa la baraa Erayga Eebbe, waxaa la xusuusiyaa ballanqaadkii Eebbe iyo waajibaadkooda xag Eebbe iyo xagga dadka, noloshooda ayaa lagu saxaa, waxaa looga digaa khatarta dunidan, oo waxaa looga qalbiqaboojiyaa dhibaatadooda. Waxaa kaloo loogu biiraa jameeco Masiixiyiin adeeg in loo sameeyo dadkaasi wadajira. In kastoo ay run tahay adeegga ugu badan ee Masiixiyada in lagu sameeyo xidhiidhyada kale ee nolosha, ee ka madaxa bannaan jameecada (sida qoyska, beesha, ganacsiga), haddana wali waxaa jira waxyaabo sida ugu wanaagsan loogu samayn karo wadajirka. Jameecooyinka deegaan ee Masiixiyiintu waxay fursad inoo siiyaan inaan ka qaybqaadanno mashaariic waaweyn, oo xattaa caalami ah.

Ujeedada ugu weyn ee xubinnimada kaniisaddu waa in ay inaga caawiso jidkeenna jannada oo ay ina siiso fursad aan kuwo kale ku gargaarno. Iyada oo leh ujeedooyinkaas sare iyo mashaariicdaas sharafta leh, xubinnimada jameecada Masiixiyiinta deegaanku ma ahan mid la baryootamo, laakiinse waa mid la isu siiyo si sharaf iyo wanaag leh, runtiina sidaas way tahay.

CUTUBKA 15
KARAAMOOYINKA

Eebbe wuxuu caruurtiisa faray amarro ay tahay in ay ku fuliyaan kaniisadda dhexdeeda. Kuwaas waxaa la yidhaahdaa karaamooyinka.

Erayga "karaamo" lagama soo qaadan Kitaabka Qudduuska. Waxaase laga soo dhiraandhiriyay eray kale oo macnihiisu yahay "barakayn." Asal ahaan karaamo waxay muujinaysay dhaar ama axdi la galay, waxay ahayd dhaartii ciidamadii Roomanka, oo askarigu uu ku dhaaranayay in aanu daacad u noqonayn cid kale ee uu si buuxda ugu baari noqon boqorka Rooma. Kaniisaddii waagii billowga qofka weyn ee Masiixiga ah marka la Baabtiisayo wuxuu ku dhaaran jiray in uusan cisaynayn sanamyo iyo wax kale toona ee uu daacad u ahaan Masiixa, oo dhaartuna waxay u ahayd "Karaamadooda." Oo sidaasaa habkan mar kasta loogu adeegsan jiray baabtiiska. Markii dambana waxaa sidoo kale loo adeegsaday Cashadii Rabbiga.

Maadaama hadda ay jiraan dhawr macno oo la xidhiidha erayga "karaamo," waa inaan halkan si wanaagsan ugu sheegno sida aan u fahamsan nahay iyo sida aan u adeegsanno. Karaamo waxaan ka wadnaa fal qudduusan oo Eebbe, oo uu billaabay Eebbe, oo ay fulisay kaniisaddu, oo leh macnayaal muuqda oo la xidhiidha isticmaalka erayga Eebbe, kuwaas oo Eebbe uu inoogu fidiyo, inagu siiyo, oo inoogu asteeyay dembidhaafkii uu inoo kasbay Masiix. Karaamooyinku waxay inoo fidiyaan isla nimcada Eebbe iyo isla barakada la inoogu fidiyay Injiilka. Rumaynta in Masiixu yahay badbaadiyaheena ayaa loo baahan yahay si loo helo barakadaas. Waxaa jira laba si oo aan u qeexno karaamada: Karaamada Baabtiiska Qudduusan iyo Karaamada Waaqdhaacinka.

KARAAMADA BAABTIISKA QUDDUUSAN

Masiix ayaa billaabay Baabtiiska markuu yidhi: "Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo kan Wiilka iyo kan Ruuxa Qudduuska" (Matayos 28:19). Inkastoo xaqa iyo waajibka baabtiiska la siiyay dhammaanba kaniisadda, haddana caadi ahaan waxaa baabtiiska maamula qayska jameeco Masiixiyiin.

Walaxda duleed, ama waxa muuqda ee loo adeegsan baabtiisku waa biyo, sida aan ka arkayno erayga "baabtiis," oo macnihiisu yahay "biyo ku

daahirin." Sida Baabtiiska biyo loogu adeegsan kuma qorna Kitaabka Qudduuska, sidoo kale meesha iyo cadadka biyaha lama sheegin. Waxaase la samayn karaa in la mukhuuriyo (quusiyo), in lagu dul shubo, in loogu qubeeyo ama in lagu saydho.

Baabtiiska biyaha waxaa la raaciyaa "magaca Aabbaha iyo kan Wiilka iyo kan Ruuxa Qudduuska" (Matayos 28:19), oo macnaheedu yahay in aan xidhiidh axdi la gallay Eebbe oo aan qayb ka qaadanayno dhammaanba barakooyinka nimcadiisa. Baabtiiska "waxaa huwanaa Masiix." (Galatiya 3:27).

Sida Kitaabka Qudduusku uu qabo "quruumaha oo dhan" waa in la baabtiiso; waxaana ka mid ah ragga, haweenka iyo caruurta. Dadka waaweyn marka hore waa in wax la baro, dabadeedna la baabtiiso. Eeg Falimaha Rasuullada 2:41; Falimaha Rasuullada 8:26-40; Falimaha Rasuullada 10:47-48. Dadka waaweyn baabtiisku wuxuu siin oo ku xoojin nimcada Eebbe oo wuxuu sii adkayn iimaankooda. Caruurta waxaa la baabtiisi iyagoon waxba la sii barin. Wuxuuna baabtiisku ka dhigayaa kuwo ku dhashay kaniisadda Masiixa. Marka ay qaangaadh noqdaan ee wax fahmi karaan, waa in la baro Erayga Eebbe.

Baabtiiska Qudduusan Eebbe wuxuu inooga dhaqaa wixii dembi ah. Waxaa la inoo baabtiisaa "dembidhaafka aawadiis" (Falimaha Rasuullada 2:38). Eeg Markos 16:16; Falimaha Rasuullada 22:16; Efesos 5:26. Baabtiisku wuxuu inaga furtaa dhimashada waligeed ah (Rooma 6:3). Wuxuu ina siiyaana badbaado waligeed ah. "Baabtiiska hadda idinka badbaadiya." (1Butros 3:21)

Hadiyadda Baabtiiska Qudduusan waxaan ku aqballaa rumaysadkeena ballanqaadyada Erayga Eebbe. Biyo galin loo adeegsaday magaca Aabbaha iyo kan Wiilka iyo kan Ruuxa Qudduusku ma siiyaan qofka la baabtiisay barakada baabtiiska. Waxaase lagama maarmaan ah Iimaankeenna, aan aaminsan nahay Erayga Eebbe. Qofkii rumaysan ballanqaadka Eebbe ee ku jira Eraygiisa kaasaa hela barakada Eebbe ku bixiyo baabtiiska. "Kii rumaysta oo la baabtiisa waa badbaadi doonaa, laakiin kii aan rumaysan waa la xukumi doonaa" (Markos 16:16). Eeg Galatiya 3:26-27.

In kastoo qofka la baabtiiso hal mar oo qudha inta uu nool yahay oo dhan, haddana waa inuu macno inoo sameeyo maalin kasta oo nolosheena ka mid ah, oo waa inaan u adeegsanno si faa'iido inoo leh maalmaha nolosheenna oo idil. Qaar badanu intay illoobaan baabtiiskoodii ayay sidaa isaga lumiyaan qalbi-qaboojin iyo xoojin badan. Maalin walba inaan xusuusanno baabtiisku waxay xoojin rumaysadkeenna in dhammaan dembiyadeennii lagu cafiyay Masiixa, oo aynu nahay caruurta Eebbe. "Kulligiin waxaad caruurta Ilaah ku

tihiin rumaysad idinkoo ku jira Ciise Masiix. In alla intiinna lagu baabtiisay Masiix, waxaad huwateen Masiix." (Galatiya 3:26-27). Xusuusnaanta baabtiiskeennu waa inay inagu boorrido in aan iska caabbino dembiga aadanaha inagoo saliibka (iskutallaabta) ku qodbayna damacyadeenna sharka leh iyo kacsigeenna (Efesos 4:22; Galatiya 5:24), oo waa in ay inagu dhiirigelisaa inaan ku noolaanno xaqnimo iyo qudduusnaan (2 Korintos 5:17; Efesos 4:24; Rooma 6:4). Sidaa darteed baabtiisku waa inuu inoo yeesho macno wayn maalmaha nolosheenna oo dhan.

KARAAMADA WAAQDHAACINKA

Karaamadan oo loo yaqaanno Wadaagga Qudduusan ama Cashadii Rabbiga, waxaa billaabay Masiix fiidkii ka horeeyay dhimashadiisii Kalfari. Dhacdada sida ay ku billaabatay oo kooban waxay ku qoran tahayMatayos 26:26-28; Markos 14:22-24; Luukos 22:19-20; 1Korintos 11:23-25, waana sidan soo socota: "Rabbigeen Ciise Masiix, isla habeenkii la sirqoolay, wuxuu qaaday kibis; oo markuu mahadnaqay, intuu jajabiyay siiyay xertiisii, isagoo leh, qaata, oo cuna; kanu waa jidhkaygii, oo la idiin bixiyay. Sidan u sameeya inaad igu soo xusuusataan. Isla sidii oo kale ayuu cashada kadib qaaday koobkii, oo markuu mahadnaqay, iyagii siiyay, isagoo leh, ka cabba dhammaantiin; koobkanu waa axdiga cusub oo ku jira dhiiggayga, oo aawadiin loo daadiyay dembidhaafka aawadii. Sidan sameeya mar kasta oo aad ka cabbaysaan, si aad iigu soo xusuusataan Aniga." Si taasi waafaqsan wuxuu Dr. Martin Luter si xigmad leh ugu qeexay karaamada waaqdhaacinka sidan: "Waa jidhkii iyo dhiiggii runta ahaa ee Rabbigeen Ciise Masiix oo ku hoos jira kibista iyo koobka," si innaga ah Masiixiyiintu aan u cunno oo u cabno, waxaana inoo billaabay Masiix qudhiisa." (Eeg Kaatekiiska yar).

Walxaha muuqda, ee uu Ciise u adeegsaday, waxay ahaayeen kibis aan khamiir lahayn iyo khamrida canabka; sidoo kale innaguna waa inaan kuwaas ku isticmaallo. Waxaa ku weheliya kibista oo Masiix uu inagu siiyay jidhkiisii runta ahaa, oo waxaa isna ku weheliya khamrida canabka oo Masiix uu inagu siiyay dhiiggiisii runta ahaa. Innagu ma garan karno sida taasu ku dhici karto, laakiin waan rumaysan nahay sababtoo ah Masiix ayaa sidaas yidhi. Meel kalena wuxuu qorniinku ka hadlayaa wadaagga khamrida iyo dhiigga iyo wadaagga kibista iyo jidhka (1Korintos 10:16), taas oo si bayaan ah u tilmaamaysa in afar wax ay si dhab ah u jiraan, oo loogu qaybiyo, ayna u qaataan dhammaan wadaagayaashu. In la yidhaahdo kibistu waxay ka dhigan tahay, ama u taagan tahay ama muujin jidhkii, khariguna dhiiggii, waxay khilaafsan tahay Qorniinka. Sidoo kale waa khalad in la yidhaahdo kibista iyo khamriga waxaa loo baddalayaa jidhkii iyo dhiiggii Masiix. Eeg 1Korintos 11:26-28. Tan kale, ku jiridda jidhka iyo dhiigga Masiix ee karaamadanu ma muujinayso in iyaga la caabudo. Mana ahan inaan u qaadanno Cashadii

Rabbigu in ay tahay allabari kale, oo aan dhiig lahayn, oo loo samaynayo dembidhaafka kuwa nool iyo kuwii dhintayba. Masiix inuu naftiisii ku bixiyay saliibka "ayuu kaamil kaga dhigay waligood kuwa qudduus laga dhigay" (Cibraaniyada 10:14). Cashada Rabbigu waa hab la inoogu xaqiijinayo dembidhaafkeenna.

Dhammaan wadaagayaashu waa in ay ka qayb galaan cunidda iyo cabidda, waayo taasu waa qayb lagama maarmaar ah ee xuska Cashadii Rabbiga. Eeg 1Korintos 11:20-27. Masiix wuxuu ka yidhi karaamadan: "Tan u sameeya in aad igu soo xusuusataan." Gaar ahaan waa inaan xusuusanno saddex walxaad: (1) waa inaan u xusuusanno si murugo leh in dembiyadeenu ay daruuri ka dhigeen in badbaadiye allabari inoo ahu uu ku dhinto saliibka korkiisa, (2) waa inaan si iimaan run ah leh u soo xusuusanno in Ciise uu yahay midka keliya ee badhaadiyaha ah, ee si buuxda kafaarogud ugu noqday dembiyadeena Eebbe hortiisa; (3) waa inaan si qiiro leh u xusuusanno in aan noqonno dad nolol Eebbe ka cabsi leh ku nool. Ka qaybgalka Cashada Rabbiga waxaan ku muujinaynaa "Dhimashadii Rabbiga" (1Korintos 11:26), taas oo macnaheedu yahay inaan qirayno iimaankeenna aan aaminsan nahay dhimashadii uu inagu madaxfurtay Rabbigeena.

Masiixiyiintu si joogto ah ayay u qaadanayaan Cashadii Rabbiga. Waa doonista Rabbigeen in aan had iyo goor qaadanno, sida erayadii uu ku billaabay ay muujinayaan. Eeg 1Korintos 11:26. Waa in aan si joogto ah u qaadanno qurbaanka sababta oo ah waxaan doonaynaa inaan hello xaqiijinta ah in aan dembidhaaf helnay iyo in la ina siiyay nimcada Eebbe. Marka aan xaqiiqaysanno shar badnida qalbigeenna, sida ay dunidu sharka inoogu yeedhayso, iyo sida uu ibliisku u rabo inuu ina soo hujuumo, waxaan jeclaysanaynaa inaan badinno qaadashada wadaagga qudduusan si aan ugu xoojinno nafteenna oo dunidan aan iimaanka lahayn ugu noolaanno innaga oo muuminiin ah.

Cashada Rabbiga wuxuu Masiixu inoogu xaqiijiyay inaan dembidhaaf hellay. Cashada Rabbigu waa damaanad, maadaama uu Masiix u imanayo mid kasta oo wadaagayaasha ka mid ah oo uu ku odhan: "Waxaa lagu siiyay dhiigaygii oo waxaa laguu daadiyay dhiiggaygii si dembiyadaada loo cafiyo." Waxaa la inoo xaqiijiyay, in wixii uu Masiix sameeyay, uu u sameeyay innaga shakhsi ahaanteena, si aanay cid kale inoogu samayn karin. Si aan ugu qalanno inaan noqono martida miiska Rabbiga waxaa shardi ah inaan u rumaysanno Masiix inuu yahay kan shakhsi ahaanteenna inaga badbaadiya dembiga.

Si aan u noqonno kuwo istaahila wadaagga, wuxuu Rabbigu rasuul Bawlos inagu siiyay waano inaan si taxadar leh isu diyaarinno ka hor inta aynaan wadaagin. "Nin kastaa ha is imtixaano, oo sidaas kibista wax ha uga

cuno, oo koobka ha uga cabbo" (1Korintos 11:28). Waa inaan is imtixaanno si aan u hubsanno (1) inaan si dhab ah uga toobadkeennay dembiyadeennii, (2) inaan rumaysan nahay in Ciise Masiix uu yahay Badbaadiyaheenna, iyo (3) inaan leenahay ujeeddo dhab ah oo wanaagsan in gargaarka Ruuxa Qudduuska aan ku noolaanno mustaqbalka nolol waafaqsan tii Masiix. In qofku uusan doonayn ama karayn inuu naftiisa imtixaamo sida uu qabo eryga Eebbe waxay qofka ka dhigaysaa mid aan u qalmin ama istaahilin inuu ka qayb galo wadaagga. Kuwaas waxaa ka mid ah kuwa aan rumaysadka lahayn iyo kuwa aan toobadkeenin, kuwa colka abuuray ee aan ka noqonin, kuwa xumaan u qaba qof kale, iyo kuwa aan wali caqiidada si buuxda loo barin ee aan lahayn aqoon ku filan oo ay isku imtixaamaan. Waxaa kaloo ka mid ah kuwa iimaankoodu inaga duwan yahay, maadaama Cashada Rabbigu ay markhaati u tahay midnimada iimaanka. Eeg Rooma 16:17; 1Korintos 10:16-21.

Innaga Masiixiyiinta ahu waa inaan Cashada Rabbiga tagnaa innagoo ah dembiileyaal masaakiin ah oo og in aynaan is badbaadin karin. Waxaan tagaynaa innagoo qiranayna inaan dembaabnay fikir ahaan, hadal ahaan, iyo ficil ahaanba, oo aan mudannahay ciqaabta waligeed ah ee Eebbe. "Allabariyada Ilaah waa ruux is hoosaysiintiisa, Ilaahow, adigu quudhsan maysid qalbi hoosaysan oo qoomamaysan" (Sabuurradii 51:17). Oo waxaan ku tukanaynaa, "Eebbow ii naxariiso, aniga oo ah dembiile!"

Wax kasta oo kale waxaa ka muhiimsan in aan u kacno Cashada Rabbiga innagoo rumaysan Ciise Masiix. Ma jirto si kale oo macquul ah oo aan Eebbe ugu tegi karno inaan ugu tagno magaca Ciise mooyaane. Cabashadeenna ah in la ina aqbalo waa mid gebi ahaanba ku xidhan Masiix iyo abaalkiisa. Waxaan u kacaynaa innagoo aaminsan in dhiiggiisii daatay uu yahay rajadeenna keliya ee badbaadada. Waxaa kale oon rumaysan nahay in Ciise uu awoodo inuu fuliyo ballanqaadka uu ku sameeyay karaamadan.

Barakooyinka waaweyn ee la inagu siiyay Cashada Rabbiga waxaa kaloo la socda masuuliyado culus, kuwaas oo si taxadar leh aan u qaadayno. Waxaan u kacaynaa inaga oo rabna inaan u noolaanno mustaqbalka sidii Ciise oo kale. Taas macnaheedu waa inaan ku dadaalno inaan ka dheeraanno dembiga oo aan raacno jidka nolosha ee Eebbe. Toobadda iyo iimaanku waxay dhab yihiin oo keliya marka lagu daro damaca ah inaan saxno oo hagaajino nolosheenna.

Is imtixaamiddaasi waxay muhiimad weyn u leedahay faa'iidaystaha ka qaybqaadanaya Cashada Rabbiga, oo kii sidaa sameeyaana wuxuu seexan isagoo xaqiiqsaday in miiska wadaagidda uu Ciise ugu sheegayo: "Dembiyadaadii waa lagaa cafiyay adiga."

CUTUBKA 16
DHIMASHADA IYO NOLOSHA AAKHIRO

Masiixiyiintu waxay rajaynayaan mustaqbalka in ay dhaxal ku leeyihiin jannada; wayna og yihiin in ay jirto nolol middan dunida ka dambaysa. Rasuul Bawlos ayaa yidhi: "Haddaynu noloshan oo kaliya Masiix ka rajayn lahayn, waxaynu ahaan lahayn kuwa u liita dadka loo naxo oo idil" (1Korintos 15:19). In la aqbalo waxyaabaha ay Masiixiyadu barayso oo loo dadaalo danaha Masiixiyada iyadoo aanay jirin rajo mustaqbal, waa khasaare iyo riyo nacasnimo ah. Masiixiyadu waxay ku dhisan tahay noloshii, dhimashadii iyo sarekiciddii Masiixa, taas ayaana inoo xaqiijinaysa samaanteenna daa'imka ah ee xagga Eebbe. "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyay Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin, laakiinse uu lahaado nolosha waligeed ah" (Yooxanaa 3:16). Waxaa jirta nolol midda dunidan dabadeed.

Qofka dabiiciga ah waxaa ka maqan marag taageeraya inay jirto nololi dunidan dabadeed. Haddana wuxuu dareemayaa in jiritaanka garasho ee qofka iyo aqoonsigiisa shakhsiba ay sii jiri doonaan nolosha adduunkan kadib. Waxaanay inta badan diimuhu ka hadlaan nolol ka dambaysa qabriga. Haddii noloshu ay ku dhammaato qabriga, dunidanu waxay u ekaan lahayd duni aan macquul ahayn.

Waxaan markhaatifur ka haynaa qorayaashii loo waxyooday ee Kitaabka Qudduuska in ay jirto nololi halkan dabadeed. Markuu Ciise ka hadlayay Ilaaha Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub, kuwaas oo ka xijaabtay dunidan qarniyaal hortood, wuxuu ka sheegay Ilaahay inuu yahay Ilaaha kuwa nool. Eeg Luukos 20:28; Baxniintii 3:6. Halkaas waxaan ka arkaynaa in nafihii kuwii xaqa ahaa, ee wakhtiyada oo dhan, ay nool yihiin. Taasu waa run oo dhammaan kuwii rumaysadka lahaa ee wakhtiyada oo dhan way nool yihiin. Oo 1Butros 3:18-19 waxaan ka baranaynaa in nafihii dadkii wakhtigii ay ku noolaayeen dunidan daacaddarrada sameeyay ay iyana weli jiraan markay dunidan ka tageen ka dib; waxaana la yidhaahdaa "ruuxyada xabbisan." Aayado aan yarayn oo Kitaabka Qudduuska ayaa laga akhriyi karaa in Ciise uu ka hadlay nolol tan ka dambaysa, ama nolol dunida imaan doonta ah. Marar badan ayuu ka hadlay caruurtiisu inay dhaxli doonaan nolol

daa'im ah, iyo kuwa aan Eebbe aqoonu in ay yihiin kuwo ku socda jidka cadaabka weligiis ah.

Misaalka ninkii taajirka ahaa iyo Laasaros (Luukos 16:19-31) wuxuu ina barayaa in ay jirto nololi dunidan dabadeed, oo kuwa sharka leh iyo kuwa wanaagsan labadaba. Sheekada xukunka yowmul qiyaamaha (Matayos 25:31-46) waxay ina baraysaa nolol halkan dabadeed ah oo dadka dhan.

GEERIDA

Si aan u gallo nolosha tan dunidan ka dambaysa, waxaan sii maraynaa dhimasho. Dhimashadu waa tirtiranka nolosha dabiiciga ah. Ma ahan gebi ahaanba baaba'a ama dhammaadka qofka, laakiinse waa waayidda jidhka duleed ee dunidan, taas oo ku imaanaysa kala soocidda jidhka iyo nafta. Eeg 2 Butros 1:13-14. Waxaa ka akhiyaynaa Luukos 12:20 ninkii taajirka ahaa ee habeenkaas nafta laga rabay; naftiisu in ay ka tagto jidhkiisa, oo uu dhinto. Markuu Masiix dhintay, wuxuu "bixiyay ruuxii" (Matayos 27:50); jidhkiisii dhintay wuxuu ku hadhay saliibka iyadoo naftiisii ay gashay jannada. Dhimashada waxaa loogu qeexay Wacdiyaha 12:7 sidatan: "Markaasay ciiddu (jidhku) dhulka ku noqon siday horeba ahayd, oo ruuxuna ku noqon Ilaahii horeba siiyay." Sidaas daraadeed, dhimashada dunidanu waa kala soocidda jidhkii iyo naftii uu qofku lahaa.

SABABTA DHIMASHADA

Siduu ahaa nidaamkii abuuristu qofku kuma uusan hoos jirin dhimashad, maadaama uusan Eebbe u abuurin Aadam iyo Xaawo in ay dhintaan. Sidaa darteed, dadku si dabiici ah ayay uga khalkhalaan dhimashada. Dhimashadu waa qayb ka mid ah cabsiinta Eebbe ee inuu ciqaabi dembiga (Billowgii 2:17; Billowgii 3:19). Dhimashadu waxay dunida ku timid dembiga (Rooma 5:12). "Mushahaarada dembigu waa dhimasho" (Rooma 6:33). Eeg Yacquub 1:15.

Dembiga ku jira nolosha dadka oo dhan aawadeed, doonista Eebbe ayaan ku noolaanaynaa oo ku dhimanaynaa. "Dadka waxaad ku soo celisaa baaba." (Sabuurradii 90:3). Eebbe wuxuu ku soo afjaraa nolosha dadka siyaabo badan, waxyaabo kala duwan, iyo cimriyo kala geddisan. Hase yeeshee, wax kastaa sabab ha u noqdo dhimashada jidhka dadka e, dadka oo dhamu waxay u dhintaan sababta dembiyadooda. (Sabuurradii 90:7-9)

Maadaama dembigu uu yahay mid dadka oo dhamu uu ka siman yahay, sidoo kale ayaa dhimashadana looga siman yahay. Qofka, oo loo abuuray inuu noolaado, hadda wuxuu u dhashaa inuu dhinto; jidkiisa noloshuna wuxuu u hoggaamiyaa xagga qabriga. "Waxaa dadka looga dhigay

in ay mar dhintaan" (Cibraaniyada 9:27). "Sidaasaa dhimashadiina u gashay dadka oo dhan, waayo, waa la wada dembaabay" (Rooma 5:12). Kuwa wali nool marka uu Masiixu imanayo inuu dunida xukumo, kuwaasu ma dhiman doonaan. Eeg 1Korintos 15:51.

DHIMASHADU MA SOO AFJARTO JIRITAANKA QOFKA

Dhimashadu ma soo afjarto jiritaanka qofka. Dhimashada waxaa ku kala soocma jidhka iyo nafta. Jidhkii walaxda ahaayu wuu bololaa oo dib ugu noqdaa ciidda, carro ayuu ka yimid carrana wuu ku noqdaa (Billowgii 3:19; Wacdiyaha 3:20); sidaas ayuuna ahaan illaa laga gaadho maalinta ugu dambaysa.

Naftii jidhka laga qaaday, oo aan walax ahayn, ee ah ruux uu Eebbe abuuray, ma tirtirmayso oo kuma milmayso hawada; mana dhex galayso jiritaanka Eebbe. Iyadoo ah ruux la abuuray, oo Eebbe ugu deeqay inay waarto, naftu waxay u sii jiraysaa sidii shakhsi dhimashada jidhka ka dib. Kii dhanaciisa saliibka ku qodbanaa wuxuu Ciise ku yidhi: "Maanta fardowsa ayaad igula jiri doontaa" (Luukos 23:43), inkastoo ninkaas jidhkiisii meel lagu xabaalay maalintuu dhintay. Iyadoo jidhkii ninkii taajirka ahaa iyo Laasaros, ee ku jiray misaalka (Luukos 16:22-23) la xabaalay markay dhinteen, haddana nafahoodu way sii jireen. Rasuul Bawlos wuxuu sheegay in uu jeclaan lahaa inuu la joogo Masiixa (Filiboy 1:23); isagoo ka hadlayay inuu dunidan dhimasho kaga tago. Jiritaankaas soocan ee naftu wuxuu gaar ahaantiisa u sii jirayaa illaa inta laga gaadhayo maalinta ugu dambaysa oo dib loogu celin doono jidhkeedii (1 Boqorradii 17:22; Yooxanaa 5:28-29; Yooxanaa 11:24). Dhimashadu ma soo afjarto jiritaanka qorka.

XAGGAY TAGEEN NAFIHII KUWII DHINTAY?

Ciise wuxuu ku yidhi xadgudbihii toobadkeenay in marka uu dhinto naftiisu ay galayso jannada. Saacaddii uu dhimanayay Istefanos wuxuu yidhi: "Rabbi Ciisow, ruuxayga qaado" (Falimaha Rasuullada 7:59). Ku kastoo dhinta isagoo Rabbiga ku jira, taas oo ah, qof kasta oo dhinta isagoo Masiixi ah, wuu barakaysan yahay (Muujintii 14:13). Rasuul Bawlos wuxuu doonay "inuu u tago Masiix," oo wuxuu ku daray in taasu ay "aad ugaga roon tahay" isagu inuu ku sii jiro jidhka (Filiboy 1:23-24). Wuxuu 2 Korintos 5:8 ku yidhi rasuulku: "Waynu kalsoon nahay, oo waxaynu ka jecel nahay in aynu jidhka ka maqnaano oo aynu Rabbiga la joogno;" taas macnaheedu waa in nafahii jidhka laga qaaday ee Masiixiyiintu ay la nasanayaan Ciise. Sababtaas aawadeed, waxaan u tukanaynaa in ugu dambaysta, marka saacaddeennu ay

timaadda, in Eebbe “uu ina siiyo dhammaad barakaysan oo uu nimcadiisa inagaga kexeeyo murugadan xun oo xaggiisa jannada ina geeyo.”

Nafaha kuwa aan rumaysadka lahaynu way “xabbisan yihiin” (1Butros 3:19-20). Yuudas, markuu is dilay kadib, wuxuu tegay “Meeshiisii” (Falimaha Rasuullada 1:25). Misaalka ninkii taajirka ahaa iyo Laasaros wuxuu ina barayaa in xaaladda kuwa sharka luhu marka ay dhintaan ay tahay mid cadaaban. (Luukos 16:23)

Nafihii dhintayu waxay ku xayiraan jannada ama cadaabka illaa maalinta xukunka, marka ay dib ula midoobayaan jidhkoodii. Markaa kuwa rumaysadka luhu iyagoo jidh leh ayay Eebbe arkayaan (Ayuub 19:26), iyagoo kuwa aan rumaysadka lahayn jidh iyo nafba loo kaxayn doono cadaab waligiis ah. (Matayos 10:28).

FIKIRRO BEEN AH OO LA DIIDAY

Nafihii kuwii dhintayu kuma soo noqdaan dunidan si ay ula xidhiidhaan kuwa nool. Kuwii dhintayu innaga waxba inagama oga (Ishacyaah 63:16) oo xattaa loogu soo dirimaayo hawgal ah in ay si naxariis leh ugu digaan dembiilayaasha. (Luukos 16:27-29)

Nafuhu ma socdaalaan, sida ay sheegaan qaar aaminsan in qofka dhintay naftiisu ay u gudubto oo gasho jidh kale iyadoo ujeedadu ay tahay in la daahiriyo, oo ugu dambaystana ay ku noqoto Eebbe. Sida kuwa ku dooda ay sheegayaan, habkaas waxaa suurtogal ah inuu soo noqnoqdo dhawr jeer. Qorniinku ma sheegin in ay nafuhu u kala socdaalaan jidh dad kala duwan.

Sida uu Qorninku qabo, ma jiro waxa la yidhaahdo isu daahirinta jannadu, taasoo la leeyahay badbaadada dhamayska tiran ee ugu dambaysa waxay naftu ku gaadhaysaa in ay iyadu silicdo iyo in dadka dunida joogaa ay u soo tukadaan oo sadaqado aawadeed u bixiyaan. Caqiidada isu daahirintu (purgatory) waa mid been abuur ah, waayo waxay diidan tahay in abaalkii uu inoo galay Masiixu uu inagu filan yahay iyo in dembiyada la inooga saamaxo si xor ah oo dhammaystiran iimaankeenna Masiixa aawadii. Waxaa jira laba meelood oo kaliya; oo mid uun ay gali nafta baxdaayu. Eeg Matayos 7:13-14.

GOOMAA LA GO’AAMIYAA HALKA QOFKU KU DAMBAYN AAKHIRO

Halka uu ku dambayn waxaa la go’aamiyaa isla marka uu qofku dhintoba. Wakhtigaas waxaa dhammaaday fursaddii uu qofku ku aqbali lahaa nimcada Eebbe. Qofkii rumaysad lahaa wuu badbaadi, oo kii aan rumaysanina waa la xukumi (Markos 16:16). Dhimashada kadib ma jirayso fursad uu qofku wax kaga qabto xaaladdiisa, ma jirto fursad labaad, mana la siinayo nimco iyo

dembi dhaaf midna. “Nin shar luhu markuu dhinto wuxuu filanayay way baabi’i doontaa, oo xumaan falayaasha xujadooduna way baabadaa” (Maahmaahyadii 11:7). Inta aan dunida ku nool nahay waa “wakhti la aqbalay...waana maalintii badbaadinta” (2 Korintos 6:2). “Waxaa dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la xukumo” (Cibraaniyada 9:27). Eeg Yooxanaa 3:36; Yooxanaa 5:24; Muujintii 2:10; Muujintii 14:13.

NOLOSHA AAKHIRO IYO DABCIGA HABEENDHAXA AH EE DUNIDAN

Ciise wuxuu mar walba tilmaamayay nolosha tan ka dambaysa, oo wuxuu ku nuuxnuuxsaday dabciga habeendhaxa ah ee dunidan aan ku nool nahay. Ciise wuxuu Qorniinka ku yidhi, “Maal ha ku ursursanina dhulkan, meesha aboorka iyo miridhku ku baabi’inayaan, iyo meesha tuugaggu jabiyaan oo ka xadaan, laakiinse maal jannada ku ursursada, meesha aboorka iyo miridhku aanay ku baabi’in iyo meesha tuugaggu aysan jabin oo ka xadin” (Matayos 6:19-20). “Cirka iyo dhulku waa idlaan doonaan” (Lukos 21:33). “Xaalka dunidanu waa idlaanayaa” (1 Korintos 7:31). Masiixu wuxuu Matayos 24 kaga sii hadlay calaamadaha marka uu u soo noqonayo xukunka iyo dhammaadka dunidan.

Innagu ma ogin goorta ay dunidanu dhammaan, laakiin waxaan Qorniinka ka baranay in ay idlaanayso maalinta uu Masiixu u imaanayo inuu xukumo. Eeg Butros 3:4,10; Matayos 24:3.

Qorniinku si qeexan ugama hadlin adduunyo gaddoonka. Adduunyo gaddoonku wuxuu noqon karaa mid gebi ahaanba dunidu ku burburto ama mid intii ay burburto haddana lagu cusboonaysiiyo. Dadka qaar waxay aaminsan yihiin in gebi ahaanba jiritaanka dhulka iyo circa uu Eebbe burburin oo haddana abuuri doono dhul cusub iyo samo cusub. Qaar kalena waxay qabaan in qaabka, oo ah muuqaalka hadda ee dunidu uu baabi’i laakiin walxaha aasaasiga ahu aysan baaba’ayn; walxahaasna uu Eebbe u adeegsan inuu abuuro qaab kale oo cusub oo samo iyo dhul cusub. Innaga muhiim inooma ahan inaan ogaanno sida dunidanu u baabi’i doonto. Eeg Lukos 21:33; Cibraaniyada 1:10-12; Matayos 24:3; Ishacyaah 65:17; 1 Korintos 7:31; 2 Butros 3:11-13.

SAREKICINTA JIDHKA

Jiritaanka la xidhiidha jidhka iyo nafta ee nolosha tan ka dambaysaayu waxay muhiim ka dhigaysaa soo sarekicidda jidhka. Xaqiiqda ku saabsan soo sarekicidda jidhka waxa kaliya ee laga ogaan karaa waa Qorniinka, kaasoo si qeexan oo aan shaki ku jirin uga hadlaya arrinkaasi.

Rumaysadka Masiixu wuxuu wataa rajada ah inaan dhimashada ka soo sarekacno. Eeg Yooxanaa 11:25-26. Sarekiciddii Ciise Masiix uu ka sarekacay dhimashada maalinkii Iisterku waxay marag u tahay in jidhka la soo sarekicin. Eeg 1 Korintos 15:12-20.

Iyadoo ku salaysan Qorniinka wuxuu qof kasta oo Masiixi ahu qirtaa: "Waxaan rumaysanahay sarekicidda kuwii dhintay." "Waana inay jiri doonta sarekicidda kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahaynu ay soo sarekici doonaan" (Falimaha Rasuullada 24:15). Eeg Yooxanaa 5:28-29. Dad badan ayaa diida yeedhista Masiixu uu ugu yeedhay in ay toobadkeenaan inta ay dunida joogaan, laakiin maalinta xukunka marka uu ku dhawaaqo in la soo sarekaco dhammaan waa la addeeci doonaa. Eeg Muujintii 20:12-13. Isagoo ka hadlaya Masiixiyiinta oo kaliya wuxuu yidhi Ciise: "Maalinta u dambaysa waan soo sarekicin doonaa" (Yooxanaa 6:40). Eeg 1 Tesaloniika 4:16. Rasuul Bawlos wuxuu 1 Korintos 15 ku sheegay sarekiciddii Masiixu in ay inoo xaqiijinayso innaga sarekiciddeenna, oo sarekiciddaasu waxay dhici doontaa marka uu Masiixu u yimaaddo inuu dunida xukumo.

Marka uu Masiixu kuwii dhintay uga yeedho qabuuraha, kuwa markaas iyagu nool ee dunida jooga jidhkooda waa la dhalanrogi doonaa, oo dhiman mahayaan iyagu. Eeg 1 Korintos 15:51-52.

AQOONSIGA QOFKU WUU XAFIDNAAN DOONAA

Isla jidhkii dhintay ee qudhmay ayaa la soo celin doonaa, oo isla naftii ka baxday jidhku markii uu dhintay ayaa isla jidhkii ku soo noqon doonta oo gali doonta. Qofka wixii lagu aqoonsanayay oo dhan ayuu dib u yeelan doonaa marka la soo sarekiciyo. Ayuub ayaa yidhi: "Oo jidhkaygu wuxuu arki doonaa Ilaah… oo indhahaygu way fiirin doonaan, oo ma ahan kuwo mid kale" (Ayuub 19:26-27). Muuse iyo Eliyaaskii ka muuqday buurta Doorsoonku waxay ahaayeen isla Muusaha iyo Eliyaaska aa sheekadoodii ka akhrinay kutubta Axdigii Hore (Matayos 17:2-4). Masiixa soo sarekacayu wuxuu ahaa isla midkii ku dhintay saliibka (iskutallaabta) korkiisa (Luukos 24:39). Aqoonsiga shakhsiga waxaa la inagu baray Luukos 16:19-31. Ma jiro wax Eebbe ka horistaagi kara inuu naf kasta ku celiyo jidhkeedii.

XAALADDA JIDHKA EE AAKHIRO

Jidhka la soo sarekiciyay waxaa la siin doonaa sifooyin iyo tayooyin cusub, kuwaas oo waafaqsan dabciga iyo xaaladda markaa jirta. Oo maadaama uu si aan laga sooci karin ula midaysan yahay nafta oo aan dhimanayn, sidoo kale jidhkuna wuxuu noqon mid aan dhimanayn oo aan xumaanayn. Oo maadaama ay wixii hore baaba'een jidhka ma xukumi doonaan sharciga iyo xaaladihii xukumi jiray waagii hore ee nolosha dhulka. Hase yeeshee, dadka

jidhkoodu isku si uma wada noolaan doono. Kuwa sharka leh waxaa lagu xukumi doonaa ciqaab waligeed ah. Kuwa xaqa ahuna waxay heli doonaan badbaado daa'im ah oo waxay ku noolaan doonaan Eebbe agtiisa.

XUKUNKA UGU DAMBEEYA

Xukunka ugu dambeeyaa waa kan inoo horseeda nolosha tan ka dambaysa, oo ay dib ugu midoobayaan qofka jidhkiisii iyo naftiisii. Fikirka ah inuu jiro xukun dambe iyo ciqaab dambe ma ahan mid ka maqan diinta Masiixiyada. Waxaan sidoo kale tan, qaabab kala duwan ugu aragnaa qaar ka mid ah diimaha cawaanka. Eeg Rooma 2:15; Rooma 1:32. Xog lagu kalsoonaan karo oo ku saabsan xukunka ugu dambeeya waxaan ka heli karaynaa oo kaliya Qorniinka.

Maalinta ugu dambaysa waxaa soo bixi Masiixa (Matayos 25:31). Maalinta ugu dambaysaa waxay ku iman si kadis ah oo aan la filayn, "sida tuug oo kale" (2 Butros 3:10), iyo "sida hillaacu bari uga yimaaddo oo u ifiyo galbeed, sidaas oo kale ayaa imaatinka wiilka aadamuhu ahaan doonaa" (Matayos 24:27). Calaamado lagu garto marka uu soo dhaw yahay waxay ku qoran yihiin Matayos 24; Luukos 21; 2 Tesaloniika 2.

Masiixu wuxuu soo sarekicin doonaa kuwii dhintay (Yooxanaa 5:28-29), oo wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo (Falimaha Rasuullada 17:31; 2 Timoteyos 4:1), qof kastaa wuxuu heli doonaa caddaalad buuxda.

Goobta xukunka ugu dambeeya lama sii sheegin. Wiilka aadamuhu wuxuu ku iman doonaa daruuraha samada, oo wuxuu u soo diri doonaa malaa'igihiisu in ay u soo ururiyaan kuwa la doortay (Matayos 24:30-31) iyo quruumaha oo idil in hortiisa la geeyo (Matayos 25:31-32). Oo muminiinta markaas nool iyo kuwa la soo sarekiciyayba kor ayaa loo qaadi doonaa xagga daruuraha oo waxay sayidka kula kulmi doonaan hawada. (1 Tesaloniika 4:16-17)

Masiixa Ciise ayaa xaakinka noqon doona. Isla Ciisihii wakhti dhan yeeshay dabeecadda dadka, kii inagu madaxfurtay noloshiisii iyo dhimashadiisii, kii maalintii saddexaad ka sarekacay kuwii dhintay, ayaa xukumi doona dadka oo dhan. Ciise inuu "yahay kii Ilaah ka dhigay xaakinka kuwa nool iyo kuwa dhintayba" (Falimaha Rasuullada 10:42). Ilaah wuxuu Ciise "siiyay amar uu wax ku xukumo, maxaa yeelay waa wiilka aadamaha" (Yooxanaa 5:27). "Goortii wiilka aadamuhu ammaantiisa ku yimaaddo, isaga iyo malaa'igaha oo dhan, markaasuu carshiga ammaantiisa ku fadhiisan doonaa. Quruumaha oo dhan ayaa hortiisa lagu soo ururin doonaa, oo wuxuu u kala sooci doonaa mid mid sida adhijirku u kala sooco idaha iyo riyaha. Idaha wuxuu joojin doonaa midigtiisa, riyahana bidixdiisa" (Matayos 25:31-33). Si

loo xukumo waxay dhammaan dadku hor iman doonaan kursiga xukunka ee Masiixa. Ma jiri doono qof aan la arkaynu, mana jiri doonto cid ka baxsan doontaa. Sidoo kale malaa'igtii caasiday ayaa iyana la xukumi doonaa xukunkii ugu dambeeyay. (2 Butros 2:4; Matayos 8:29)

Sida ku qoran 1 Korintos 6:2-3 "kuwa rumaystay Masiixuna way ka qayb gali doonaan xukunka dunida." Sidaas ayayna kaamil ku tahay oo ku sugan tahay wadajirka muminiinta iyo Masiixa oo ah madaxooda, oo marka uu madaxu ammaantiisa xukunka ku yimaaddo, sidoo kale kuwa rumaystayuna waxay kala qayb qaadan doonaan hawshaas garsoor.

Darajada iyo xeerka xukunku waa kuwo waafaqsan dadka shuqulladoodii; "In qof kastaa helo siday ahaayeen waxyaalihii uu jidhka ku falay, ha ahaadeen wanaag ama share" (2 Korintos 5:10). Kuwa xaqa ah waxaa lagu xukumi oo kaliya si waafaqsan shuqulkoodii wanaagsanaa, sababta oo ah shuqulkaasu wuxuu markhaati u yahay iimaankoodii Masiixa; shuqulladii sharka ahaa ee kuwa iimaanka leh waxba laga soo qaadi mayo, waayo waa laga cafiyay (Miikaah 7:19). Kuwii aan xaqa ahayn waxaa lagu xukumi si waafaqsan wixii ay faleen, taas oo muujinaysa in aanay aaminin Masiixa iyo Injiilkiisa. Eeg Matayos 25:34-46. Waxaana muuqata inay tahay sidan, rumaynta ama rumayn la'aanta Injiilka ayaa ah midda lagaga go'aan qaadanayo. Haddii Masiixu uu wax ku xukumayo sharciga, ma jireen qof badbaado heli lahaa. "Rabbiyow, haddaad dembiyadayda u fiirsatid bal yaa istaagi doona Sayidoow?" (Sabuurradii 130:3). Masiixu wuxuu ku xukumi qof walba siduu ka yeelay Injiilka. "Hadalkaan ku hadlay baa xukumi doona isaga maalinta u dambaysa" (Yooxanaa 12:48), aayaddan waa inaan fahamno "hadal" waxaa loola jeedaa Injiilka, kaasoo dadku ay si iimaan leh ku aqbalaan ama iimaan darro ay ku diidaan. Arintaasna wuxuu rasuul Bawlos ka qoray: "Maalinta Ilaah waxyaalaha qarsoon ee dadka ku xukumi doono Ciise Masiix sida Injiilkaygu leeyahay" (Rooma 2:16). Masiixu wuxuu qof walba ku xukumi doonaa siduu shakhsigaasu u arkay Injiilkaas, hadduu ku aqbalay si iimaan leh iyo hadduu ku diiday iimaan la'aan. Eeg Markos 16:16; Yooxanaa 3:18; Yooxanaa 5:24; 2 Tesaloniika 1:7-10.

Maadaama ay aamineen Injiilka badbaadada ee xagga Masiixa, kuwa rumaystay lama xukumi doono, laakiinse waxay Eebbe hor tegi doonaan iyagoo loo qiil bixiyay. "Xukunku wuxuu u saameeyaa muminiinta si u yar sida uu u saameeyo malaa'igaha wanaagsan," ayuu yidhi Dr. Martin Luter. Eeg Yooxanaa 3:16-18; Yooxanaa 5:24. Shuqulladooda waa la sheegi doonaa (Matayos 25:35-40), loomase sheegi doono inay ku badbaadeen, laakiin waxaa loo sheegayaa inay muujiyaan iimaankoodii ay ku ahaayeen caruurta Ilaah. Shuqullada wanaagsanu waa midhaha la arko ee iimaanka aan muuqan.

Kuwa aan rumaysanin waxaa ku dhici inkaarta sharciga, sababta oo ah waxay diideen nimcada Eebbe eek u jirta Ciise Masiix ee hawl la'aanta la inagu siiyay Injiilka. Cadhada Eebbe ee ay ku mutaysteen dembiyadooda ayaa ku dhici doonta (Efesos 5:5-6). Maadaama aysan rumaysan Masiixa si ay dembidhaaf u helaan, waxay la dhimanayaan dembiyadoodii. "Haddaydaan rumaysan inaan Isagii ahay, dembiyadiinna ayaad ku dhiman doontaan." (Yooxanaa 8:24)

CADAAB WALIGIIS AH

Kuwa aan rumaysanin ee diiday badbaadada Masiixa, nolosha aakhiro waxay u ahaan mid ciqaab waligeed ah ay ku jiraan. Cadaabka iyo naartu ma ahan wax been ama dhalanteed ah, laakiinse waa wax dhab ah oo aad u xanuun badan. Matayos 18:8-9, Masiixu wuxuu ku sheegay naarta kulul ee waligeed ah. Rasuul Bawlos wuxuu qoray, "Waxaa lagu ciqaabi doonaa halaag waligiis ah, oo waxaa laga gooyn doonaa Rabbiga hortiisa iyo ammaanta xooggiisa" (2 Tesaloniika 1:9). Haddaba, marka maalinta aakhirka cadaab lagu xukumo, wuxuu ku odhan doonaa; "Kuwo yahow inkaaranu, iga taga oo gala dabka waligiis ah, kan ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaariyay," waana la fulin, oo isla markiiba lagu dhaqaaqi. Waayo Qorniinka ayaa odhanaya: "Kuwanuna waxay gali doonaan taqsiirta waligeed ah." (Matayos 25:41-46)

In qof cadaabka lagu tuuro macnaheedu waa in waligiisba la nacay, oo lagu ciqaabayo Eebbe hortiisa. Kan la cadaabay wuxuu ku jiri mugdiga dibadda, halkaas oo ay taallo baroor iyo ilko jiriqsi (Matayos 8:12), mugdiga dibadduna wuxuu ka dhigan yahay naar, waana meesha lidka ku ah guriga casuumadda oo isagu aad u nuuraya ahna jannada. Eeg Matayos 22:11-13. Kuwa lumay silicooda waxaa sii murugayn marka ay arkaan quruxda iyo sharafta lagu maamuusayo kuwa awliyada ah ee jannada ku jira (Luukos 13:28). Waxaa la silcin jidh iyo nafba oo gabi ahaanba Eebbe wuu dayrin (Matayos 10:28; Luukos 16:23-24). Silica cadaabku waa jimic la'aan, cadaabka lagama baxsan karo, silicaasuna ma dhammaanayo, waayo waa ciqaab waligeed ah (Matayos 25:46) iyo burbur waligiis ah (2 Tesaloniika 1:9) oo ah dab aan marna qaboobayn, oo silicaasina ma dhammaado (Markos 9:43-48). Cadaabka rajo ma taallo. Kuwa la cadaabay waxay ahaanayaan kuwo silicu leeyahay (Daanyeel 12:2) oo naca dhammaan jidhka. (Ishacyaah 66:24)

Iyadoo ciqaabta dhammaan kuwa cadaabka ku jira ay tahay mid joogto ah oo waligeed ah, haddana waxaa jira heerar kala duwan oo ciqaab. Xeerka guud eek u dhigan Luukos 12:47-48 wuxuu isna khuseeyaa kuwa lunsan eek u jira cadaabka, maadaama sida ay qabto Matayos 11:16-24 kuwa diiday Injiilkii lagu wacdiyay ay aad uga ciqaab badan yihiin kuwa aan

waligood maqlin. Eeg Matayos 10:14-15. Xukunku wuxuu waafaqsanaan doonaa hadba sidii fursad loogu helay maqlidda Injiilka. Hadba inta uu xilka qofku la'eg yahay ayay nimcaduna la'ekaanaysaa. Maalinta xukunka waxaas oo idil ayaa la qiimayn doonaa oo xukunkuna uu ku salaysnaan doonaa.

Juqraafi ahaan meesha uu cadaabku ku yaallo ma garanayno, laakiin waxaan og nahay in Eebbe uu caymay meel uu ku ciqaabi doono waligood kuwa cadaabka lagu xukumay. Taas waxaa marag ka ah hadallada badan ee Masiixu uu ka sheegay mawduuca xukunka waligiis ah.

Danta uu Qorniinku ka leeyahay inuu inoo sheego cadaabka iyo xukunku waa inuu inooga digo inaan ka cararno cadhada soo socota (Matayos 3:7-12) iyo inuu inagu canaanto inaan ka tukanno inaan ka samata baxno ciqaabtaas oo dhan iyo in aan joogsanno Wiilka Aadamaha hortiisa. (Luukos 21:36)

BADBAADO WALIGEED AH

Nimcada Eebbe aawadeed waa suutogal inaan hor istaagno Wiilka Aadamaha, Rabbigeenna Ciise Masiix, oo aan dhaxallo badbaado waligeed ah. Xaqiiqdan waxaa si bayaan ah la inoogu baray Qorniinka. "Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyay wiilkiisa kaliya oo dhashay in mid kasta oo Isaga rumaystaa uusan lumin, laakiinse uu lahaado nolosha waligeed ah" (Yooxanaa 3:16). Nolosha waligeed ahu waa hadiyad Eebbe (Rooma 6:23), oo uu Masiixu siiyo caruurtiisa (Yooxanaa 10:28). Iyaga wuxuu maalinta xukunka ku odhan doonaa: "Kaalaya, kuwa aabbahay barakadeeyayow oo dhaxla boqortooyada tan iyo aasaaskii dunida la idiin diyaar gareeyay" (Matayos 25:34), oo tanuna waxay socon tan iyo nolosha daa'imka ah. (Matayos 25:46)

Badbaadada waligeed ahu waa xaalad farxadeed oo ka dhalata farxadda kaamilka ah ee Eebbe hortiisa, taas oo haba yaraatee saamaynta sharku aanu wax carqalad ah u gaysan karin. Kitaabka Qudduusku si uu fikrad yar inooga siiyo ammaanta farxadda iyo wanaagga jannada, wuxuu adeegsaday habab iyo tilmaamo laga soo qaatay nolosha dhulkeenan. Hababkan iyo tilmaamahan waa in loo qaato tusaalayn, waayo waxaa loola jeedaa in fikir laga qaato quruxda meeshaas samada ku taalla. Sidaasna Kitaabka Qudduusku jannada wuxuu ku tilmaamayaa sidii aroos oo kale (Matayos 25:10; Muujintii 19:9), sidii casuumaad, sidii boqranaan (Luukos 22:30), sidii guri qolal badan leh (Yooxanaa 14:2). Sidoo kale Kitaabka Qudduusku wuxuu tusaale ku bixinayaa oo si faahfaahsan u qeexayaa Yeruusaalemta samada, magaalo sidii carwo oo kale ah oo saraysa (Muujintii 21:10-27), si fikirka ugu sareeya ee ugu wanaagsan la inooga siiyo waxyaalaha jannada, Kitaabka Qudduusku wuxuu tilmaan ahaan u adeegsaday waxyaabo aad loo xiiseeyo dunidan.

Waxaan ognahay in xaaladaha duleed ee aakhiro ay ka duwan yihiin kuwa maanta ee dunidan. Hay'adaha qaar daruuri iyo aasaasi u ah nolosha adduunkan, kama jiri doonaan nolosha aakhiro. Aakhiro guur kama jiro (Matayos 22:30), qoysas gaar gaar ahu kama jiraan, jinsiyado iyo quruumo kama jiraan. Ma jirto dawladu, ma jiraan xirfadaha dunidan ee baabi'inta dhibaatada iyo fulinta adeegyada daruuriga u ah nolosha (Muujintii 7:14-17). Halkaas kama jiraan kaniisado Masiixi ah iyo halgallada kaniisaddu sida aan adduunkan yeello hadda. Kuwa sharka luhu meel kulama noolaanayaan kuwa awliyada ah, oo wax dhib ahna uma gaysan karaan, waayo hadhuudhka waa laga haadin doonaa buunshaha (Matayos 13:30). Eeg Muujintii 22:15. Waxaan la noolaan doonnaa dad xaq ah oo la kaamil yeelay.

Xaaladda jidhkeennu sidan way ka duwanaan aakhiro. Innagu waxaan ahaanaynaa shakhsiyaadka aan hadda nahay, laakiin waa la ina baddali doonaa (1 Korintos 15:52). Waxaan yeelanaynaa jidh ruuxeed aan ku hoos jirin baahida iyo sharciga hadda ina xukuma. Waxaan noqonaynaa sida malaa'igta Eebbe (Matayos 22:30), kuwaas oo aan guursan lana guursan. Waxaan yeelanaynaa jidh aan kharaabayn oo ka xor ah wax kasta oo raad ama saamayn ku dembi. Waxaan yeelanaynaa jidh adag oo ka xor ah jileec, tabardarri, ceeb, naafo iyo galdaloollo kaleba. Waxaan yeelanaynaa jidh aan dhimanayn oo waaraya. Waxaan yeelanaynaa jidh ammaan leh, oo huwan qurux, sharaf, kaamilnimo iyo ammaan (1 Korintos 15:43). Eebbe "wuu beddeli doonaa jidhkeenaan jilicsan si uu ugu ekaysiiyo jidhkiisa (Masiix) ammaanta leh" (Filiboy 3:21). "Markaasaa kuwa xaqa ah (Masiixiyiintu) ku dhalaali doonaan boqortooyada Aabbahood sida qorraxdu u dhalaalayso" (Matayos 13:43).

Oo xagga nafahana waxaa si buuxda loogu soo celin doonaa suuradii Eebbe "Gacaliyayaalow, imminka waxaynu nahay caruurta Ilaah oo wali waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay in goortuu (Masiixu) muuqdo aynu noqon doonno sidiisa oo kale, waayo waynu arki doonaa Isagu sida uu yahay" (1 Yooxanaa 3:2). Oo dunida soo socota waxaan yeelan doonaa suurada Ilaah (Sabuurradii 17:15). Maadaama muuqa Eebbe uu ka kooban yahay aqoonta Eebbe ee quruxda badan iyo waliba xaqnimo iyo qudduusnaan dhab ah, sidaas daraadeed waxaan markaa "u garanaynaa sida la inoo gartay." Si buuxda ayaan u garanaynaa Eebbe, doonistiisa iyo jidadkiisa, waxaan fahmi doonaa wax hadda mugdi inagaga jiro. Oo dhammaan su'aalaheennii ha noqdaan kuwo ku saabsan waxyaabo inaga dahsoon iyo kuwo ku saabsan wixii shakhsi ahaan ina soo maray intaan dunida joognay labadaba si buuxda ayaa la inooga jawaabi doonaa (1 Korintos 13:9-12). Mana jiri doono dembi hore (kii Aadam) oo aan dhaxallay oo inagu jiri, ma jirto jirrabaad inagu hareeraysnaan, ma jiri doono dembi, murugo, caloolxumo (Muujintii 21:4). Waxaa jiri doona xaqnimo iyo qudduusnaan kaamil ah. Dadka jannada joogaa si buuxda ayay u waafaqi doonaan doonista Eebbe,

waxaa jira haqabtirnaan, qanacsanaan iyo nabad buuxda. Ma jiro qof awood u lahu inuu inaga qaado farxaddaas jannada. Ciise ayaa inoo ballanqaaday "nolosha waligeed ah" (Yooxanaa 3:16,36). Masiixa hortiisa "waxaa waligeed ah raaxo" (Sabuurradii 16:11). Kan sababay oo ay ka imanayaan waxaas oo rayrayn ahuna waa Eebbe, oo aan hortiisa ku noolaan doonno (Sabuurradii 16:11) oo waxaan u arki doonnaa sida uu yahay. (1 Yooxanaa 3:2)

Qorniinku wuxuu tilmaamayaa in iyadoo dhammaan awliyadu ay wadaagayaan farxadda isku midka ah ee jannada haddana, waxaa jira heerar ammaan oo kala duduwan. "Oo bal eeg anigu dhakhsaan u imanayaa," ayuu yidhi Masiixu, "oo abaalgud kaygiina waan wataa si aan nin walba ugu abaalgudo sida shuqulkiisu yahay" (Muujintii 22:12). Shuqullada wanaagsan midkoodana lama illaawi doono. Abaalgudkan nimcada leh waxaa la siin doonaa kuwii intay dunida ku noolaayeen iimaankooda ku muujiyay shuqullo wanaagsan xagga Rabbiga (Luukos 19:12-19; Daanyeel 12:3), oo waxyaabo badan oo wanaagsan u sameeyay dadka walaalahooda ah (Galatiya 6:8-9), oo u dhibaatooday Rabbiga aawadii (Matayos 5:11-12). Eeg 1 Korintos 3:11-15. "Kii wax yar beeraa, wax yar buu goostaa, kii wax badan beeraa wax badan buu goostaa" (2 Korintos 9:6). Halkaasna waxaan ka aragnaa in boqortooyada ammaanta ay jiraan heerar kala duduwan oo ammaan ahu. Dhammaan muminiintu, iyagoo aan loo eegin heerkooda ammaan, waxay gaar ahaantooda waligood u yeelanayaan badbaadada aakhiro ee Masiixu uu u kasbay iyaga. Dhinacaas marka laga eegana muminiinta oo dhamu way is ekaanayaan. Hase yeeshee, abaalgud nimco oo gaar ah oo qaab ammaan dheeraada ah ayuu inagu siinayaa Eebbe shuqulladii wanaagsanaa ee aan dunida ku samaynay inagoo ah caruurta daahirsan ee Eebbe. Haddii ay badan yihiin midhaheenna iimaanka ee intii aan dunida ku noolayn, aad ayay u waynaan heerka ammaanteenna jannaduna. Haddii ay yar yihiin midhaheenna iimaanka ee intii aan dunida ku noolayn, way yaraan heerka ammaanteenna jannaduna. Waynaanta ammaanteenuna ma noqon doonto mid laga masayro, laakiin waxay noqon wax ay ku farxaan muminiinta oo dhamu.

Meesha ay ku oolli doonaan samada iyo dhulka cusubu waa arrin aan hadda la sheegi karin. Waxaan dhihi karnaa, jannadu waa halka uu Eebbe isugu keen muujiyo Isagoo ku jira ammaantiisii oo aan qarsoonayn, oo aan u aragno Isaga fool ka fool. Meeshaasi halka ay noqon doontaa ma ahan wax innaga ina khuseeya. Balse aan ku dadaalno innagu sidii aan ku tegi lahayn meeshaas loo diyaariyay dadka Ilaah. (Cibraaniyada 4:9-11)

Caqiidada badbaadada daa'imka ahu saamayn muhiim ah ayay ku leedahay nolosheenna hadda, inkastoo xaqiiqsigeeda rasmiga ahu uu yahay nolosha aakhiro. Marka aynu halkan ku noolaanno iftiinka nolosha aakhiro, waxaan noqonaynaa kuwo Ilaah raalligaliya inta aan habeen-dhaxa u joogno

dunidan. Waa in aan wakhtigan nimcada ka toobadkeenno dembiyadeenna oo aan rumayno in Ciise Masiix uu yahay badbaadiyaheenna. Waa in aan ku adkaysanno iimaanka illaa dhammaadka wakhtiga. “Midka dulqaata oo iimaanka ku adkaysta illaa dhammaadka, kaas ayaa badbaadi doona” (Matayos 24:13). Waa in aynaan raacin jidadka dembiga badan ee dunidan, laakiin aan ku soconno jidadka Ilaah (Rooma 12:2). Waa in aan jeclaanno waxyaabaha xagga samada (Kolosay 3:2). Rajada aan ka qabno jannadu waxay inoo keeni dadaal badan oo xagga qudduusnaanta nolosha (2 Butros 3:13-14) iyo in aan maal ku kaydsanno jannada (Matayos 6:20). Si gaar ah waa in aan u xiisayno oo si joogto ah oo firfircoon uga shaqayno inaan Masiixa gaadhsiinno dadka oo dhan innagoo ku fidinayna Injiilkiisa dhammaan caruurta lunsan ee aadamaha (Markos 16:15). Marka aan ka fekerno jannada waxaan helaynaa farxad iyo rajo, oo ma jiro saliib ama dhibaato ina qalbijabin kartaayu, waayo waxaan ognahay, marka la ina jirrabo, muddo yar gudaheed waxaan helaynaa “taajka nolosha kan Ilaah u ballanqaaday kuwa Isaga jecel” (Yacquub 1:12). Rajada badbaadada waligeed ah ayaa qalbiyadeenna ka buuxisa geesinimo iyo farxad iyo rajo waaraysa haddaan nool nahay iyo haddaan dhimanoba. Oo sidii rasuul Bawlos waxaan tiigsanaynaa maalinta uu xaakinku, Badbaadiyaheenna Ciise Masiix, ina siin doono taajka xaqnimada. (2 Timoteyos 4:8)

CUTUBKA 17
WAXAAN GOOSTAY

Iftiinka aan ka helay waxa aan ka bartay Erayga Eebbe aawadiis, waxaan goostay inaan noqdo markhaatiga Masiixa, sida uu Rabbigaygu rabo inaan anigu noqdo. Wuxuu Qorniinku i baray aasaaska farxad run ah iyo nolol isku kalsooni leh. Masiix waxaan ka helay nabad, kalgacayl, aqoonsi iyo nolol ujeeddo leh. Si kuwa kale, iyana ay u bartaan in ay aqoonsadaa jacaylka Eebbe ee ku jira Ciise Masiix, oo ay ugu noqdaan markhaatifur Isaga, oo ay dunida ugu sheegaan, jannada Eebbana u galaan; waxaan goostay:

"Inaan markhaati ka ahay xaqiiqada ah inaan nabdoonaan ku helay Masiix, oo 'Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo' (Sabuurradii 23:1);

"Inaan markhaati ka ahay xaqiiqada ah inaan ku noolahay aqoonta jacaylka Eebbe, 'Masiix waa inoo dhintay, intaynu wali dembiilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyay' (Rooma 5:8);

"Inaan markhaati ka ahay xaqiiqada ah in Eebbe aqoosaday aniga iyo dhammaan dadka oo kulligeen aan muhiim ku nahay Isaga hortiisa, sida ka muuqata daryeelkiisa jacaylka leh iyo hawshiisa madaxfurasho ee xagga Masiix;

"Inaan markhaati ka ahay xaqiiqada ah in aanay jirin wax kale oo nolosha sidaa u wayneeya oo siiya ujeeddo iyo raali ahaansho si dhab ah loogu qanco sida iimaanka Eebbe iyo balanqaadyadiisa, 'Waayo waa Ilaah kan yidhi, iftiin ha ka ifo gudcur, kan qalbiyadeenna uga ifay inuu iftiinka aqoonta ammaanta Ilaah inagu siiyo Ciise Masiix wajigiisa." (2 Korintos 4:6).

"Haddaba Eebbow ii gargaar."